Kitaabka

Arkaanu al iimaani

tiirarka iimaanka iyo qaybihiisa

Waxaa dhigay

Dr. Xasanweli Sheekh Xuseen Cismaan

Kitaabka

Arkaanu al iimaani

tiirarka iimaanka iyo qaybihiisa

Waxaa dhigay

Dr. Xasanweli Sheekh Xuseen Cismaan

Bi Ismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Aaraarta dhigaha kitaabka

Al Bukhaarii wuxuu Amriiru Al Mu'miniina Abuu Xafs Cumar bin Al Khadh-dhaab ka wariyay inuu Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Innamaa al acmaalu bi al nniyaati, wa innamaa lu kulli imri'in maa nawaa"**, oo macnihiisu yahay: "Acmaasha waxaa la isaga ajar siiyaa waxa loo niyeeystay, qof walbana wuxuu leeyahay ajarka wuxuu niyeystay." (Al Bukhaarii: Xadiithka koowaad).

Al xamdu li Allaahi Rabbi al caalamiina, wa al th-thanaa'u li Allaahi, Wasallaa Allaahu Caalaa Sayyidinaa Muxammadin, wa Calaa Aalihi wa Saxbihi, wa Sallam tasliiman kathiiran.
Cilmiga lagama maarmaanka u ah qof kasta oo muslin ah waxaa ka mid ah inuu yaqaanno arkaamu al islaami iyo arkaanu al iimaani.
Waxaan ku farax sanahay inaan halkaan idiinku soo gudbiyo labadaas qodob oo muhimka ah, muslinkuna wada yaqaanno.
Waxaan Ilaahay ka baryayaa inuu anigana iga aqbalo, ajarka camalkaanna labada i dhashay iyo aniga na siiyo maalin ayan wiilal iyo maal toona wax tarayn qofka Ilaahay qalbi fiyow la hor yimaada mooyee. Waxaan Ilaahay ka baryayaa inuu cidda akhrisatana wax ku taro.
Wixii qalad ah oo ku jira waxay ka yimaadeen aniga iyo shaydaan, waxa suubanna Ilaahay Tacaalaa ayaa igu galladaystay.

Waxaa dhigay midka naxariista iyo dambi dhaafka Ilaahay faqiirka u ah

Dr. Xasanweli Sheekh Xuseen Cismaan
Winchester, Virginia, U.S.A.
Kowda bisha Shacbaan sanadka kun afar boqol sideed iyo labaatan Hijriga, una dhiganta afar iyo toban bisha Agoosto laba kun iyo toddoba.

Tusmada kitaabka

Mawduuca	Bogga
1. Tusmada kitaabka	3
2. Arkaanu al iimaani	6
3. Qaybaha iimaanku ka kooban yahay	6
4. Qaybaha iimaanka oo qalbiga lagu fuliyo	6
5. Qaybaha iimaanka oo carrabka lagu fuliyo	7
6. Qaybaha iimaanka oo jirka lagu fuliyo	7
7. Tiirka koowaad ee iimaanka	8
8. Magacda Ilaahay ee Suusuuban	8
9. Magacda Ilaahay ee Suusuuban oo Quraanka ku jira	8
10. Macnaha Magacda Ilaahay ee Suusuuban	9
11. Tiirka labaad ee iimaanku waa rumaynta malaa'igta	11
12. Malaa'igta	11
13. Xamalatu Al Carshi	17
14. Toddobada Samo	19
15. Samada koowaad	19
16. Samada labaad	20
17. Samada saddexaad	21
18. Samada afaraad	21
19. Samada shanaad	22
20. Samada lixaad	22
21. Samada toddobaad	23
22. Toddobada arli	23
23. Tiirka saddexaad ee iimaanka wa rumaynta Kutubta Ilaahay	24
24. Tiirka afaraad ee iimaanka waa rumaynta Rususha	25
25. Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam	25
26. Nabi Aadan Calayhissalaamu	29
27. Nabi Idriis Calayhissalaamu	70
28. Nabi Nuux Calayhissalaamu	71
29. Nabi Huud Calayhissalaamu	74
30. Nabi Saalix Calayhissalaamu	76
31. Nabi Ibraahiimu Al Khaliilu	79
32. Nabi Luudh Calayhissalaamu	92
33. Nabi Ismaaciil Calayhissalaamu	94
34. Nabi Isxaaq Calayhissalaamu	95
35. Nabi Yacquub Calayhissalaamu	95
36. Nabi Yuusuf Calayhissalaamu	98
37. Nabi Ayyuub Calayhissalaamu	99
38. Nabi Muuse Calayhissalaamu	100
39. Nabi Haaruun Calayhissalaamu	101
40. Nabi Shucayb Calayhissalaamu	101
41. Nabi Daauud Calayhissalaamu	101
42. Nabi Sulaymaan Calayhissalaamu	102
43. Nabi Zakariyyaa Calayhissalaamu	103

44. Nabi Yaxyaa Calayhissalaamu 104
45. Nabi Ciise Calayhissalaamu 105
46. Nabi Ilyaas Calayhissalaamu 166
47. Nabi Al Yasac Calayhissalaamu 167
48. Nabi Yuunus Calayhissalaamu 167
49. Tiirarka shanaad iyo 168
50. Tiirka lixaad ee iimaanka 168
51. Arkaanu Al Islaami/Tirarka islaamka 168
52. Taariikh nololeedka dhigaha kitaabkaan 169

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Arkaanu al iimaani/Tiirarka iimaanka

Tiirarka iimaanku waa lix waana kuwa soo socda:

Imaam Muslim wuxuu wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri inuu iimaanku yahay: **"An tu'mina bi Allaahi, wa malaa'ikatihi, wa kutubihi, wa Rusulihi, wa al yawmi al aakhiri, wa tu'mina bi al qadri khayrihi wa sharrihi.**" Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "iimaanku waa inaad rumaysid Ilaahay, iyo malaa'igtiisa, iyo kutubtiisa, iyo Rusushiisa, iyo maalinta aakhiro, iyo inaad rumaysid qadarka khayrkiisa iyo sharkiisaba." Waana Xadiithka sideedaad ee Saxiixu Muslim, markuu Jibriil Calayhissalaamu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wareysanayo.

Qaybaha iimaanku ka kooban yahay

Al Bukhaarii iyo Muslim waxay wariyeen inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Al iimaanu bidcun wa sabcuuna, aw bidcun wa sittuuna shucbatan, afdaluhaa qawlu laa ilaaha illaa Allaahu wa adnaahaa imaadhatu al athaa cani al dh-dhariiqi. Wa al xayaa'u shucbatun mina al iimaani."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "iimaanku wuxuu ka kooban yahay dhawr iyo toddobaatan qaybood ama dhawr iyo lixdan qaybood oo ay ugu sarreyso dhihidda laa ilaaha illaa Allaahu, ayana ugu hooseyso in dariiqa laga qaado waxa dadka dhibaya." Kanna waa lafdiga Muslim, waana Xadiithkiisa shan iyo soddonaad.

Kow: Qaybaha iimmanka qalbiga lagu fuliyo waana afar iyo labaatan qaybood

Kow. Rumaynta Ilaaha. Laba. Rumaynta malaa'igtiisa. Saddex. Rumaynta kutubtiisa. Afar. Rumaynta Rusushiisa. Shan. Rumaynta Qadarka, khayrkiisa iyo sharkiisaba. Lix. Rumaynta Maalinta Aakhiro iyo dhammaan waxa la xirira. Toddoba. Jacaylka Ilaahay oo ah inaad adeecdo wuxuu ku faray, kana hartid wuxuu kaa reebay. Sideed. Ilaahay daraadiis wax loo jeclaado, loona naco. Sagaal. Jacaylka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Toban. Weyneynta Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo ku sallintiisaba. Kow iyo toban. Ikhlaaska caqiidada iyo camalkaba iyo in is tustuska munaafaqnimada laga fogaado. Labo iyo toban. In la tawbad keeno. Saddex iyo toban. Ilaahay in laga cabsado. Afar iyo toban. Rajaynta raxmada Ilaahay adduun iyo aakhiraba. Shan iyo toban. Ku shukrinta Ilaahay, oo ah mahdcelintiisa iyo adeeciddiisa. Lix iyo toban. Oofinta heshiiyada iyo ballanka. Toddoba iyo toban. Sabirka, oo ah adkeysiga. Sideed iyo toban. Xukunka Ilaahay oo raalli lagu noqdo. Sagaal iyo toban. Ilaahay oo la talo saarto. Labaatan. Dadka oo loo naxariisto. Kow iyo labaatan. Isla weyni iyo

kibir la'aanta. Labo iyo labaatan. Xaasidnimada oo laga tago. Saddex iyo labaatan. Nacaybka oo laga tago. Afar iyo labaatan. Carada oo laga tago.

Laba: Qaybaha iimaanka carrabka lagu fuliyo waana toddoba qaybood

(Kow) Tawxiidka, oo ah shahaadada oo lagu dhawaaqo. (Laba) Akhrinta Quraanka. (Saddex) Barashada cilmiga. (Afar) Baridda cilmiga. (Shan) Alle bariga, oo ah ducaysiga. (Lix) Thikriga, oo ah xusidda Ilaahay. (Toddoba) Ka fogaanshaha ku hadlidda hadal aan waxtar lahayn, oo aadan ajar ku heleyn.

Saddex: Qaybaha iimaanka xubnaha jirka lagu meelmariyo waana sideed iyo soddon qaybood

(Kow) Is daahirinta iyo najaasada oo laga fogaado. (Laba) Asturidda ama qarinta cawrada. (Saddex) Tukashada salaadda fardiga ah iyo midda sunnada ahba. (Afar) Bixinta zakada. (Shan) Xoraynta addoommada. (Lix) Deeqsinnimada. (Toddoba) Soomidda bisha soonqaad iyo soonka sunnada ahba. (Sideed) Gudashada fardiga xajka. (Sagaal) Gudashada Cumrada. (Toban) Ku dawaafka Kacbada. (Kow iyo toban) Masjid dhexdiisa oo lagu ictikaafo. (Laba iyo toban) Baadi goobka laylatu Al Qadri. (Saddex iyo toban) La cararidda Diinta daraadeed. (Afar iyo toban) Oofinta natharka. (Shan iyo toban) Ku dadaalidda kordhinta iimaanka. (Lix iyo toban) Bixinta kafaaro gudyada. (Toddoba iyo toban) Guursashada oo la isku ilaaliyo. (Sideed iyo toban) Caruurta oo xaqqooda loo oofiyo. (Sagaal iyo toban) Labada waalid oo baarri loo ahaado. (Labaatan) Caruurtaada oo wax la baro, lana rabbeeyo oo la koriyo. (Kow iyo labaatan) Riximkaaga oo la xiriiriyo, waana qaraabadaada. (Labo iyo labaatan) Addoommadu inay kuwa leh u hoggan samaan, kuwaanna ay u turaan. (Saddex iyo labaatan) Haddaad xil bulshadeed qaadid inaad caddaalad fashid. (Afar iyo labaatan) Raacidda meeshay muslimiintu u badan yihiin. (Shan iyo labaatan) Madaxda muslimiinta oo la adeeco. (Lix iyo labaatan) Dadka is khilaafsan oo la heshiisiiyo. (Toddoba iyo labaatan) Ku dhaqanka waxa suuban oo la iska kaashado. (Sideed iyo labaatan) Xuduudda Ilaahay oo la oogo. (Sagaal iyo labaatan) Jihaadka. (Soddon) Amaanada oo la oofiyo. (Kow iyo soddon) Dayn dadka la siiyo, lana gudo. (Laba iyo soddon) Dariska oo la karaameeyo. (Saddex iyo soddon) Dadka oo si suuban loola dhaqmo, ayna ka mid tahay maalka oo si xalaal ah loo kasbo, si xaq ahna lagu bixiyo. (Afar iyo soddon) Qofka ku salaama oo isagana la salaamo. (Shan iyo soddon) Qofka hindhisa oo loo duceeyo. (Lix iyo soddon) Dadka in dhibkaaga laga reebo oo aadan dhibin. (Toddoba iyo soddon) Cayaaraha oo laga fogaado. (Sideed iyo soddon) Dariiqa oo waxa dadka dhiba laga qaado.

Tiirka koowaad ee iimaanku waa rumaynta Ilaahay

Qaybta ugu horreysa iimanka waa inaad jiritaanka Ilaahay qiratid.

Magacda Ilaahay ee Suuban

Ilaahay wuxuu leeyahay sagaal iyo sagaashan Magac oo Suuban, uuna ugu horreeyo **ALLAAHU.** Waxaa Abuu Hurayrah wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Lillaahi tiscatun wa tiscuuna isman, mi'atun illaa waaxidatan. Laa yaxfathuhaa axadun illaa dakhala al jannata. WaHwa Witrun yuxibbu al witra."** Xadiith macnihiisu waxaa weeye: "Ilaahay wuxuu leeyahay sagaashan iyo sagaal Magac, Boqol mid dhimman, mana jiro qof xifdiyah ee waa illaa kii Jaanada gala, Isaguna waa Witir, oo ah Mid keli ah, Witirkuuna jecelyahay" Waana Xadiithka lix kun afar boqol iyo toban ee Fatxu Al Baarii bi Sharxi Saxiixi Al Bukhaari, Baabka sideed iyo lixdanaad. Riwaayad kale ee isla Abuu Hurayrah waxay warisay inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"inna Lillaahi tiscatan wa tisciina Isman, mi'atan illaa waaxidan man axsaahaa dakhala al jannata."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeyey: "Ilaahay wuxuu leeyahay sagaal iyo sagaashan Magac, boqol mid dhimman. Qofka wada xafida jannaduu gelayaa". Riwaayadda Ibnu Abii Cumarna waxay leedahay: **"man axsaahaa"**, oo macnihiisu yahay: "Qofka xifdiya jannaduu gelayaa". Xifthiya waxaa weeye: Kow. Qofka korka ka barta, ama Labo. Inta kulligood akhriya, kaddib Ilaahay ku barya oo wediista wuxuu doonayo, ama Saddex. Macnohhoda garta oo ku dhaqma, oo markuu wax u baahan yahay xusuusta inuu Ilaahay yahay Allaahu, Midka Rizqiga Bixiya, Midka dambiga Dhaafa, Midka Naxariista, iyo Sifooyinkiisa kale oo idil. Xadiithka laba kun lix boqol iyo toddoba iyo toddobaatan ee Saxiixu Muslim bi Sharxi Al Nawawii." Ilaahay Magacdiisu intaas way ka badan yihiin oo tiradooda Ilaahay keli ayaa yaqaanna, ee Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku sheegay hal Xadiith inuu Ilaahay Tacaalaa sagaal iyo sagaashankaan Magac leeyahay, ee ma aha magac kale ma laha.

Magacda Suusuuban ee Ilaahay oo dhammaantood Quraanka ku jira

(Kow) **Allaahu**. (Labo) **Al Rraxmaanu**. (Saddex) **Al Rraxiimu**. (Afar) **Al Maliku**. (Shan) **Al Qudduusu**. (Lix) **Al Ssalaamu**. (Toddoba) **Al Mu'minu**. (Sideed) **Al Muhayminu**. (Sagaal) **Al Caziizu**. (Toban) **Al Jabbaaru**. (Kow iyo toban) **Al Mutakabbiru**. (Labo iyo toban) **Al Khaaliqu**. (Saddex iyo toban) **Al Baari'u**. (Afar iyo toban) **Al Musawwiru**. (Shan iyo toban) **Al Ghaffaaru**. (Lix iyo toban) **Al Qahhaaru**. (Toddoba iyo toban) **Al Ttawwaabu**. (Sideed iyo toban) **Al Wahhaabu**. (Sagaal iyo toban) **Al Khallaaqu**. (Labaatan) **Al Rrazzaaqu**. (Kow iyo labaatan) . **Al Fattaaxu**. (Labo iyo labaatan) **Al Caliimu**. (Saddex iyo labaatan) **Al Xaliimu**. (Afar iyo labaatan) **Al Cathiimu**. (Shan iyo labaatan) **Al Waasicu**. (lix iyo labaatan) **Al Xakiimu**. (Toddoba iypo labaatan) **Al Xayyu**. (Sideed iyo labaatan) **Al**

Qayyuumu. (Sagaal iyo labaatan) **Al Ssamiicu**. (Soddon) **Al Basiiru**. (Kow iyo soddon) **Al Lladhiifu**. (Labo iyo soddon) **Al Khabiiru**. (Saddex iyo soddon) **Al Caliyyu**. (Afar iyo soddon) **Al Kabiiru**. (Shan iyo soddon) **Al Muxiidhu**. (Lix iyo soddon) **Al Qadiiru**. (Toddoba iyo soddon) **Al Mawlaa**. (Sideed iyo soddon) **Al Nnasiiru**. (Sagaal iyo soddon) **Al Kariimu**. (Afartan) **Al Rraqiibu**. (Kow iyo afartan) **Al Qariibu**. (Labo iyo afartan) **Al Mujiibu**. (Saddex iyo afartan) **Al Wakiilu**. (Afar iyo afartan) **Al Xasiibu**. (Shan iyo afartan) **Al Xafiithu**. (lix iyo afartan) **Al Muqiitu**. (Toddoba iyo afartan) **Al Waduudu**. (Sideed iyo afartan) **Al Majiidu**. (Sagaal iyo afartan) **Al Waarithu**. (Konton) **Al Sh-shahiidu**. (Kow iyo konton) **Al Waliyyu**. (Labo iyo konton) **Al Xamiidu**. (Saddex iyo konton). **Al Xaqqu**. (Afar iyo konton) **Al Mubiinu**. (Shan iyo konton) **Al Qawiyyu**. (Lix iyo konton) **Al Matiinu**. (Toddoba iyo konton) **Al Ghaniyyu**. (Sideed iyo konton) **Al Maaliku**. (Sagaal iyo konton) **Al Sh-shadiidu**. (Lixdan) **Al Qaadiru**. (Kow iyo lixdan) **Al Muqtadiru**. (Labo iyo lixdan) **Al Qaahiru**. (Saddex iyo lixdan) **Al Kaafiyu**. (Afar iyo lixdan) **Al Sh-shaakiru**. (Shan iyo lixdan) **Al Mustacaanu**. (Lix iyo lixdan) **Al Faadhiru**. (Toddoba iyo lixdan) **Al Badiicu**. (Sideed iyo lixdan) **Al Ghaafiru**. (Sagaal iyo lixdan) **Al Awwalu**. (Toddobaatan) **Al Aakhiru**. (Kow iyo toddobaatan)
Al Th-thaahiru. (Labo iyo toddobaatan) **Al Baadhinu**. (Saddex iyo toddobaatan) **Al Kafiilu**. (Afar iyo toddobaatan) **Al Ghaalibu**. (Shan iyo toddobaatan) **Al Xakamu**. (Lix iyo toddobaatan) **Al Caalimu**. (Toddoba iyo toddobaatan) **Al Rrafiicu**. (Sideed iyo toddobaatan) **Al Xaafithu**. (Sagaal iyo toddobaatan) **Al Muntaqimu**. (Sideetan) **Al Qaa'imu**. (Kow iyo sideetan) **Al Muxyii**. (Labo iyo sideetan) **Al Jaamicu**. (Saddex iyo sideetan) **Al Maliiku**. (Afar iyo sideetan) **Al Mutacaalii**. (Shan iyo sideetan) **Al Nnuuru**. (Lix iyo sideetan) **Al Haadii**. (Toddoba iyo sideetan) **Al Ghafuuru**. (Sideed iyo sideetan) **Al Sh-shakuuru**. (Sagaal iyo sideetan) **Al Cafuwwu**. (Sagaashan) **Al Rra'uufu**. (Kow iyo sagaashan) **Al Akramu**. (labo iyo sagaashan) **Al Aclaa**. (Saddex iyo sagaashan) **Al Barru**. (Afar iyo sagaashan) **Al Xafiyyu**. (Shan iyo sagaashan) **Al Rrabbu**. (Lix iyo sagaashan) **Al Ilaahu**. (Toddoba iyo sagaashan) **Al Waaxidu**. (Sideed iyo sagaashan) **Al Axadu**. (Sagaal iyo sagaashan) **Al Ssamadu Allathii lam Yalid wa lam Yuulad wa lam Yakun lahu kufuwan Axad."**

Magacdaas Suusuuban macnohoodu waxaa weeye:

Kow. Allaahu. Laba. Midka Naxariista guud naxariista. Saddex. Midka Naxariista gaarka ah muslimiinta u naxariista. Afar. Boqorka runta ah. Shan. Al Qudduus oo ah Midka Daahirka ah. Lix. Nabad geliye. Toddoba. Midka mu'miniinta cathaabtiisa ka nabad geliya. Sideed. Midka khalqigiisa dusha ka ilaaliya oo acmaashooda u jeeda. Sagaal. Midka lagama adkaadaha ah. Toban. Cathiimka wayn ah. Kow ito toban. Midka axad kasta oo kale iskala weyn. Labo iyo toban. Midka wax abuura oo qadara. Saddex iyo toban. Midka waxaan hore u jirin abuura oo ahaysiiya. Afar iyo toban. Midka suuradeeya addoommadiisa iyo waxay ku kala duwan yihiin. Shan iyo toban. Midka

dambi dhaafka badan. Lix iyo toban. Midka wax walba ka adag oo qahra. Toddoba iyo toban. Midka tawbad aqbalka badan. Sideed iyo toban. Midka wax badan hibeeya. Sagaal iyo toban. Midka khalqiga dabadiisba abuura khalqi kale. Labaatan. Midka rizqiga bixiya. Kow iyo labaatan. Midka khalqiga kala xukuma. Labo iyo labaatan. Midka wax walba cilmi u leh. Saddex iyo labaatan. Midka turidda badan. Afar iyo labaatan. Midka wayn oo wax ka wayni ayan jirin. Shan iyo labaatan. Midka waasaca deeqsiga ah. Lix iyo labaatan. Midka xikmada miiran ah. Toddoba iyo labaatan. Midka nool oo daa'im ah oo weligiis noolaanaya oo aan dhimanayn. Sideed iyo labaatan. Midka wax maamula oo umuuraha oo idil u quma. Sagaal iyo labaatan. Midka wax walba maqla. Soddon. Midka wax walba u jeeda. Kow iyo soddon. Midka addoommadiisa u jilicsan. Labo iyo soddon. Midka xoog ogaalka ah oo addoommadiisa ka warqaba. Saddex iyo soddon. Midka addoommadiisa oo idil ka sarreeya. Afar iyo soddon. Midka wayn. Shan iyo soddon. Midka wax walba hareereeya oo ogsoon. Lix iyo soddon. Midka awoodda leh, wax walbana kara. Toddoba iyo soddon. Midka Gargaaraha, hiilliya ah. Sideed iyo soddon. Midka wax taakuleeya oo libta bixiya. Sagaal iyo soddon. Midka deeqsiga ah. Afartan. Midka ilaaliyaha ah oo wax walba u jeeda. Kow iyo afartan. Midka mu'miniinta u dhow. Labo iyo afartan. Midka ducada aqbala, ahna waxa la weydiisto. Saddex iyo afartan. Midka umuurta loo wakiisho oo la talo saarto. Afar iyo afartan. Midka addoomaadiisa xisaabiya, abaal mariyana. Shan iyo afartan. Midka acmaasha xafida, kana abaal mariya. Lix iyo afartan. Midka khalqigiisa quudiya, qof walbana siiya intuu u qadaray. Toddoba iyo afartan. Midka mu'miniinta jecel, ayaguna ay jecel yihiin. Sideed iyo afartan. Midka Kariimka ah, Deeqsiga, sharftana leh. Sagaal iyo afartan. Midka wax walba dhaxla, oo markay khalqigiisu dhintaan Isagaa haraya. Konton. Midka Shaahidka ah, oo goob joogga ah. Kow iyo konton. Midka la magan galo oo arrimaha dadka maamula oo u gargaara. Labo iyo konto. Midka falkiisa lagu xamdiyo, oo la mahdiyo. Saddex iyo konton. Midka runta ah oo Ilaaha runta ah ah. Afar iyo konton. Midka xaqqa caddeeya. Shan iyo konton. Midka xoogga badan oo axad kasta ka xoog badan. Lix iyo konton. Midka xoogga iyo Qudrada ku xeel dheer. Toddoba iyo konton. Midka hodanka ah oo aan waxba u baahnayn. Sideed iyo konton. Midka hantay, oo ah Boqorka addoomihiisa iyo wixii sheegta. Sagaal iyo konton. Midka adag oo xoogga badan. Lixdan. Midka wax walba kara. Kow iyo lixdan. Midka wuxuu doono awooda oo meel marin kara. Labo iyo lixdan. Midka wax qahra oo qof walbana ka korreeya. Saddex iyo lixdan. Midka kaafiya, oo ku filan wakiilnimada. Afar iyo lixdan. Midka addoommadiisa cilmiga uu u leeyahay ku abaal mariya. Shan iyo lixdan. Midka la kaalmaysto. Lix iyo lixdan. Midka abuura oo hindisa adduunka. Toddoba iyo lixdan. Midka Abuura wuxuu doono isagoon ka fiirsanaynin nashqad horay u jirtay. Sideed iyo lixdan. Midka Danbiga dhaafa oo daboola. Sagaal iyo lixdan. Midka Koowaad oo isagaa weligiis jiri jiray. Toddobaatan. Midka markay wax walba halaagmaan jiri doona oo haraya. Kow iyo toddobaatan. Midka wax walba ka adag oo ka koreeya. Labo iyo toddobaatan. Midka wax walba cilmi u leh. Saddex iyo toddobaatan. Midka marag u ah oofinta iyo damiintaba. Afar iyo toddobaatan.

Midka adkaada oo wuxuu rabo meel maria. Shan iyo toddobaatan. Midka Xaakim ah. Lix iyo toddobaatan. Midka wax walba ogsoon oo ayan waxna ka qarsanayn. Toddoba iyo toddobaatan. Darajooyinka Anbiyada iyo Rususha kor ka yeela. Sideed iyo toddobaatan. Midka ugu khayrka badan inta wax xifdisa. Sagaal iyo toddobaatan. Midka aargoosta. Sideetan. Midka u taagan oo u quma maamulida khalqigiisa. Kow iyo sideetan. Midka soo nooleeya waxa dhintay. Labo iyo sideetan. midka kulmiya kuwii hore iyo kuwa dambe. Saddex iyo sideetan. Midka ah Boqor awood leh. Afar iyo sideetan. Midka shay kasta uga kormaray qudradiisa, waa kartidiisee. Shan iyo sideetan. Midka Nuurka ah. Lix iyo sideetan. Midka Tawxiidka ku hanuuniya cidduu doono. Toddoba iyo sideetan. Midka danbi dhaafida ku xeel dheer. Sideed iyo sideetan. Midka adoomihiisa camalkooda yar raali ka noqda. Sagaal iyo sideetan. Midka danbiyada mu'miniinta cafiya. Sagaashan. Midka ah Naxariiste, addoommadiisana u tura. Kow iyo sagaashan. Midka u dul qaata jahliga adoomadiisa. Labo iyo sagaashan. Midka sareeya oo koreeya. Saddex iyo sagaashan. Midka Al Llatiifu ah, addoommadiisa u ujilicsan, una naxariista. Afar iyo sagaashan. Midka adoomadiisa u tura oo ducadooda aqbala. Shan iyo sagaashan. Midka iska leh oo koriya adoomadiisa. Lix iyo sagaashan. Ilaah. Toddoba iyo sagaashan. Midka Mid kali ah. Sideed iyo sagaashan. Midka kaliga ah. Sagaal iyo sagaashan. Midka loo soo qasdo, Midka aan wax dhalin, Isagana aan la dhalin, axad isaga u dhigma oo la mid ahna uusan jirin Cazza Wa Jalla."

Tiirka labaad waa rumaynta Malaa'igta

Tiirka labaad ee iimaanku waa inaad rumaysid Malaa'igta. Malaa'igta qaar ka mid ah ayaa magacdooda Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Quraanka noogu sheegay, sida Jibriil, Miikaala, Maalik, Raqiib, Catiid. Malaa'igtu waa fara badan tahay, annaguna ma arki karno, ayaguse waa na arkaan, tiradoodana Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, keli ah ayaa og. Malaa'igtu awaamirta Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, ayay fuliyaan, amarkiisana ma diidaan, cunno ma cunaan, isma guursdaan oo caruurna ma dhalaan, waxaana laga abuuray Nuur.

Malaa'igta

Al Zarqaanii wuxuu yiri: "Malaa'igtu waa kuwa makhluuqaadka ugu fara badan. Muslim wuxuu wariyay inuu Ilaahay, Tabaaraka wa Tacaalaa, yiri: **"Khalaqtu Al Malaa'ikata min nuurin",** oo ah: 'Waxaan ka abuuray Malaa'igta nuur." Abu Al Shaykhna wuxuu Cikrimah ka wariyay inuu Ilaahay Tacaalaa yiri: **"Khalaqtu Al Malaa'ikata min nuuri Al Cizzati",** oo ah "Malaa'igta waxaan ka abuuray nuurka Cizzada". Abuu Al Shaykh wuxuu kaloo Yaziid bin Ruumaan ka wariyay inay soo gaartay in Malaa'igta laga abuuray Ruuxa Ilaahay. Erayga Malak wuxuu ka yimid Al Mal'aku oo ah risaalada ama warqadda ama dhambaalka, oo waxay Carabtu tiraahdaa "alikhii ilaa fulaani" oo macneheedu yahay "iga gaarsii hebel". Asalka

erayguna waa alikhii. Malagguna Ilaahay ciduu u diro ayuu wax ka gaarsiiyaa. Sidaas waxaa ku fasiray Al Qaamuusu Al Muxiidhu. Intuu Ilaahay abuuray waxaa ugu tiro badan Malaa'igta. Malaa'igtu waxay ku sugan yihiin Samaawaatka iyo arlada iyo badaha. Malaa'igtu labo ayay u qaybsan yihiin: (Kow) Qayb ay hawshooduba tahay in cibaadeystaan, oo taasba loo abuuray. (Laba) Qayb marna cibaadeysaneysa, hawlo kale oo loo dirana ay u dheer tahay,oo markayan mid hayn midda kale ku mashquulsan. Qaybta koowaad waxaa kaloo ka mid ah toddobaatan kun oo Malag oo maaalin walba Al Baytu Al Macmuuri, oo ah Guri Kacbadoo kale ah oo Samada toddobaad ku yaalla oo Kacbada korkeeda ku beegan, ku tukata oo aan mar dambe kusoo laabanayn. Waana maalin walba. Wuxuu Al Bayhaqii iyo Abuu Al Shaykhi iyo ghayrkoodba. wariyeen inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Inna li Allaahi malaa'ikatan tarcadu faraa'isuhum min makhaafatiHi, maa minhum min malakin yaqdharu min caynihi damcatun illaa waqacat malakan qaa'iman yusabbixu, wa malaa'ikatun sujuudun munthu khalaqa Allaahu Al Ssamaawaati wa al arda, lam yarfacuu ru'uusahum, wa laa yarfacuunahaa ilaa yawmi al qiyaamati, wa malaa'ikatun rukuucun lam yarfacuu ru'uusahum wa la yarfacuunahaa ilaa yawmi al qiyaamati, wa sufuufan lam yansarifuu can masaafihim, wa laa yansarifuuna canhaa ilaa yawmi al qiyaamati. Fa ithaa kaana Yawmu Al Qiyaamati tajallaa lahum Rabbuhum Cazza wa Jalla, fa natharuu llayhi, wa qaaluu: "Subxaanaka, maa cabadnaaka kamaa yanbaghii laKa."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Ilaahay wuxuu leeyahay Malaa'ig ay daqayadoodu cabsidiisa ay la dubaaxiyaan, uusanna jirin mid ayaga ka mid ah ee hadday dhibic boohina kasoo dhacdo ishiisa ay dhacayso ayadoo ah Malag taagan oo tasbiixsanaya; iyo Malaa'ig sujuudsan tan iyo markuu Ilaahay abuuray Samaawaatka iyo arliga, aanna madaxdooda sare usoo qaadin, aanna. soo qaadeyn ilaa Yawmu Al Qiyaamaha; iyo Malaa'ig rukuucsan oo aan madaxdooda kor usoo qaadin aanna soo qaadayn ilaa Yawmu Al Qiyaamaha, iyo Malaa'ig safan oo aan safafkooda ka bixin, aanna ka baxayn ilaa Maalinta Qiyaame. Markaasey Markay ahaato Maalinta Qiyaame ayuu Rabbigood Cazza wa Jalla isu muujinayaa oo ay arkayaan oo fiirinayaan, waxayna yiraahdaan: "Subxaanaka, kuuma aanan caabudin sidii kuu habbooneyd oo aad lahayd." Waxaa jirta **Malaa'ig Dhirta** u xilsaaran, siduu Abuu Al Shaykhi u wariyay, inuu Nabi Muxammad, Sallallaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Laysa min khalqi Allaahi akthara mina Al Malaa'ikati. Maa min shay'in yanbutu illaa wa Malakun muwaakulun bihaa**", oo macnihiisu yahay: "Ma jiro khalqiga Ilaahay wax ka tiro badan Malaa'igta. Ma jiro shay dhulka kasoo dhasha ee waa kan illaa leh Malag loo wakiishay." Waxaa jirta **Malaa'ig Arzaaqda** u xilsaaran, siduu Al Xaakim u wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallallaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Inna li Allaahi Malaa'ikatan muwakkaliina bi arzaaqi Aadama, qaala lahum: "ayyamaa cabdun wajadtumuuhu jacala al hamma hamman waaxidan fa daminuu rizqahu Al Ssamaawaati wa Al Arda wa banii Aadama. Wa ayyamaa cabdun wajadtumuuhu dhalaba: fa in taxarraa al sidqa fa dhiibuu lahu wa yassaruu, wa in tacaddaa thaalika fa khalluu baynahu wa bayna maa**

yuriidu, thumma laa yanaalu fawqa al darajati allatii katabtuhaa lahu." Xadiithka oo uu isaguna Al Tarmathii Al Nawaadiri ku wariyay macnihiisu waxaa weeye: "Ilaahay wuxuu leeyahay Malaa'ig u xilsaaran arzaaqda Aadan, wuxuuna ku yiri: "addoonkaad heshaan isagoo hammigiisa oo ah wuxuu doonayo mid keli ah ka dhigay, waxaad rizqigiisa u kafaalo saartaan Samaawaatka iyo arliga iyo banii Aadan. Addoonkaadse heshaan isagoo rizqigiisa doonanaya, hadduu si suuban ku doonto u wanaajiya una sahla, hadduuse xad gudbo isaga iyo wuxuu doonayo isaga dhex baxa, isagoon heleyn darajo ka korreysa middaan u qoray." Waxaa jirta **Malaa'igta Ilaalada ah,** siduu Ilaahay Aayadaha toba iyo kow iyo tobnaad ee Suuratu Al Infidhaar ku yiri: **"Wa inna calaykum la xaafithiina**(10)**Kiraaman kaatibiina**(11)**"** oo macnohoodu yahay: "Malaa'ig ayaan idin ilaalineysa(10) Oo sharaf lef waxna dhigaya(1l)". Waxaana la yiri qof kasta waxaa ka ilaalisa, labo Malag xagga midigta iyo xagga bidixda. Waxaa kaloo la yiri waa afar Malag, oo labana ay habeenkii yihiin, labana maalintii. Waxaa kaloo la yiri inuu Malag shanaad zaa'id ku yahay, kanoo aan habeen iyo maalin midna ka tegin. Waxaa Cuthmaan, Allaha raalli ka noqdee, laga wariyay inuu yiri: "waxaan iri: "Rasuulka llaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, meeqa Malag ayaa addonka la jirta?" Wuxuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Malakun can yamiinika calaa xasanaatika, wa huwa amiinun calaa allathi cala al sh-shimaali. Fa ithaa camalta xasanatan kataba cashran, wa ithaa camalta sayyi'atan qaala allathii calaa al shimaali li allathii calaa al yamiini: "Aktubu?" Qaala: "laa, lacallahu yastaghfiru." Fa ithaa qaala thalaathan qaala: "nacam, araxanaa Allaahu minhu, fa bi'sa al qariinu, maa aqalla muraaqabatahu li Allaahi Tacaalaa, wa aqalla istixyaa'ahu mina Allaahi", yaquulu Allaahu "Maa yalfithu min qawlin illaa ladayhi Raqiibun Catiidun". Wa Malakaani min bayni yadayka wa min khalfika, yaquulu Allaahu "Lahu mucaqqibaatun min bayni yadayhi wa min khalfihi yaxfathuunaha min amri Allaahi", wa Malakun qaabidun calaa naasiyatika: fa ithaa tawaadacta li Allaahi rafacaka, wa ithaa tajabbarta calaa Allaahi qasamaka. Wa Malakaani calaa shafatayka yaxfathaani calayka illaa Al Ssalaata calaa Al Nabiyyi, wa Malakun qaa'imun calaa caynayka. Fa haa'ulaa'i casharatun yubdaluuna, li anna Malaa'ikata al llayli siwaa al nnahaari. Fa haa'ulaai cishruuna Malakan calaa kulli aadamiyyin".** Xadiithka oo uu Ibnu Jariir Al Dhabarii wariyay macnihiisu waxaa weeye: "Malag midigtaada ah oo xasanaatkaaga aad fashid u xilsaaran, madaxna u ah midka bidixdaada ah. Marka markaad camal suuban sameysid wuxuu dhigaa toban xasano. Haddaad camal xun oo dambi ah samaysidna, midka bidixdaada ahi wuxuu midka midigta ah ku yiraahdaa: "Ma dhigaa?" Wuxuu leyahay: "Maya, waaba intaasoo oo uu istighfaarsado oo uu dambi dhaafid weydiistee." Markuu sidaas saddex goor ugu jawaabo, ayuu wuxuu ku yiraahdaa: "Haa, dhig, Allaha nooga raaxceyeee, waana mid lagu lammaansanaado oo xune, inuu Ilaahay fiirinayana oo uu u jeedo markuu waxaas xun sameynayana aan dan badan ka lahayne, llaahayna aan ka xishooneyne". Ilaahay wuxuu leeyahay (waana Aayadda sideed iyo tobnaad ee Suuratu Qaaf): **"Maa yalfithu min qawlin illaa ladayhi Raqiibun**

Catiidun(18)**"** oo macneheedu yahay: ”Wax kastoo lagu hadlo waxaa la jooga Raqiib iyo Catiid oo dhigaya(18)". Iyo laba Malag oo hortaada iyo gadaashaada ah, oo Ilaahay wuxuu leeyahay (waana Aayadda kow iyo tobnaad ee Suuratu Al Racdi): **"Lahu mucaqqibaatun min bayni yadayhi wa min khalfihi yaxfathuunahu min amri Allaahi**(11)**"** oo macneheedu yahay: "Wuxuuna leeyahay (ruux kasta) kuwo isku beddela (oo Malaa’ig ah) oo hortiisa iyo gadaashiisa ah, kuna dhawra amarka Ilaahay(11)". Iyo Malag foodaada haya: haddaad marka Ilaahay isu jejebisid kor ayuu kuu qaadayaa, haddaadse Ilaahay iska kibrisid wuu ku jebinayaa. Iyo labo Malag oo bashimahaaga ah ilaalinayana ku sallintaada Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Iyo Malag taagan afkaaga oo ka ilaalinaya inay abeeso iyo halaq afkaaga galaan. Iyo labo Malag oo indhahaaga ah. Intaasi waa toban la beddelayo, ayadoo ayan Malaa'igta habeenku ahayn Malaa'igta maalinta. Marka kuwaasi waa labaatan Malag oo qof kasta oo aadami ah korkiisa ah." Abuu Daauudd wuxuu kitaabka Al Qadar, Al Dhabraanina iyo ghayrkoodba ay wariyeen inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Wukkila bi al mu’miniina sittuuna wa thalaathu mi'atin malakin yadfacuuna maa lam yaqdir calayhi",** oo macnihiisu yahay: "Waxaa loo wakiishay mu'min kasta saddex boqol iyo lixdan Malag oo ilaalinaya, kana celinaya waxaan loo qadarin." Waxaa isaguna jira **Malagga Masawiridda** cunugga Aadan u wakiilan. Wuxuu Muslim wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallallaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Ithaa marra bi al nnudhfati thnataani wa arbacuuna laylatin, bacatha Allaaahu ilayhaa Malakan, fa sawwarahaa wa kahalaqa samcahaa wa basarahaa wa jildahaa wa shaxmahaa wa cithaamahaa",** oo macnihiise yahay: "Markay dbibicda minka ku xasishay labo iyo afartaan habeen ka gudbaan, Ilaahay wuxuu usoo diraa Malag, markaasuu (qofkaas) masawiraa, oo uu maqalkiisaa abuuraa iyo araggiisa iyo haraggiisa iyo xayrtiisa iyo lafahiisaba". Al Dhabraanina riwaayadiisu waxay warisay: **"Inna al nnudhfata ithaa istaqarrat fii al rraximi, fa madaa lahaa arbacuuna yawman, jaa'a malaku al rraximi, fa sawwara cathamahu wa laxmahu wa damahu wa shacrahu wa basharahu",** oo macnihiisu yahay: "Markay dhibicdu minka ku sugnaato, oo ay afartan maalmood kasoo wareegaan, waxaa yimaada Malagga minka u wakiilan, markaasuu wuxuu masawiraa lafihiisa iyo hilibkiisa iyo dhiiggiisa iyo timihiisa iyo haraggiisa." Malaggaanna waa mid kale oo aan ahayn **Malagga Cunuggaas** uurka ku jira u xil saaran: Abuu Al Shaykh wuxuu sanad adag Ibnu Cabbaas uga wariyay inuu yiri: "Cunuggaas minka ku jira waxaa u wakiilan Malag, oo markay hooyadiis seexato oo ay dhinaca dhulka dhigto, cunuggaas madaxiisa ayuu kor u qaada, haddii kale dhiigga ayuu ku hafan lahaa." Waxaa jira ayaguna **Malaa'ig daruuraha** dhexdooda kusoo dega, oo u duwa markaas meesha la amro, siduu u wariyay Xadiith marfuuc ah ee uu wariyay Abuu Al Shaykh. Waxaa ayaguna jira **Malaa'igta Jicmaha Dhigta** dadka Masjidka yimaada, siday u wariyeen Al Bukhaarii iyo Muslim iyo Axmad, inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"ithaa kaana yawmu Al Jumucati kaana calaa kulli baabin min abwaabi al masjidi malaa'ikatun yaktubuuna al nnaasa calaa qadari manaazilihim al awwalu fa al**

awwalu. Fa ithaa jalasa al imaamu dhawuu al ssuxufa, wa jaa'uu yastamicuuna al thikra", oo macnihiisu yahay: "Markay maalinta jimcaha ah tahay, waxaa albaab walba ee masjidka ah malaa'ig dhigaysa dadka oo mid walba meeshiisa dhigeysa, siday usoo kala horreeyeen. Markuu imaamku fariisto waraaqohooda way duubaan, waxayna yimaadaan si ay thikriga (Khudbada Jimcaha) u dhegeystaan". Wuxuuna Imaam Axmad Abuu Hurayrah Abii Saciid ka wariyay inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"ithaa kaana yawmu al jumucati qacadat al malaa'ikatu calaa abwaabi al masjidi, yaktubuuna man jaa'a mina al nnaasi calaa qadari manaazilihim, fa rajulun qadama juzuuran aw rajulun qadama baqaratan, wa rajulun qadama shaatan, wa rajulun qadama dijaajatan, wa rajulun qadama cusfuuran, wa rajulun qadama baydatan. Fa ithaa athana al mu'ath-thinu wa jalasa al imaamu calaa al minbari dhuwuu al ssuxufa, wa dakhaluu al masjida yastamicuuna al thikra",** oo macnihiisu yahay: "Markay maalinta jimcaha ah tahay, ayay malaa'igtu waxay fariisataa albaabbada masjidka ayagoo ku qoraya dadka imaanaya qof walba meeshiisa (waa siday u soo kala horeeyeeen ayay u kala ajar badan yihiin): waxaana nini keenay rati ama sac (waa wax badan ayuu khudbada kasoo hormaray), ninna wuxuu keenay ceesaan, ninna wuxuu keenay dijaajad, ninna wuxuu keenay shimbir, ninna wuxuu keenay (kulligood waa sadaqo ahaan ayaa laga wadaa) ukun. Markaasay markuu mu'athinku aathaamo, imaamkuna uu minbarka ku fariisto, ayay waraaqohooda (ay wax ku dhigayeen) duubaan, ayna masjika galaan, ayna thikrga (waa khubdaddee) dhegeystaan." Waxaa ayaguna jira **Malaa'igta Jannada maamusha, oo ah Ridwaanu** iyo inta isaga raacsan, iyo **Malaa'igta Naarta maamusha, oo ah Maaliku** iyo isaga inta raacsan, ayadoo uuba Ilaahay Suuratu Al Mudath-thir Aayaddeeda soddonaad ku yiri: **"Calayhaa tiscata cashara**(30)**",** oo macneheedu yahay: "Waxaana korjooga sagaal iyo toban(30)". Tirada maamulayaasheedana Ilaahay keli ah ayaa ogsoon. Waxaa kaloo jira ayaguna **Ma1aa'igta Mucaqqibbatka ah** oo is daba marta, siday Imaam Maalik iyo Al Bukhaarii iyo Muslim uga wariyeen Abuu Hurayrah inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Yatacaaqabuuna fiikum malaa'ikatun bi al llayli wa malaa'ikatun bi al nnahaari, wa yajtamicuuna fii salaati al Fajri wa salaati al Casri. Thumma yacruju allathiina ya'tuu fiikum, fa yas'aluhum wa Huwa Aclamu: "Kayfa taraktum cibaadii?" fa yaquuluuna: "Taraknaahum wa hum yusallnuna, wa aateynaahum wa hum yusalluuna",** oo macnehiisu yahay: "Waxaa isu kiin dhaafaya malaa'igta habeenka iyo malaa'igta maalinta, waxayna ku kulmaan salaadda subax iyo salaadda casar. Markaasey kuwii hore idiinku yimid Samada kor u tafayaan. Markaasuu (Ilaahay) waydiinayaa, Isagaana uga cilmi leh: "Sidee baad addoommadeyda uga soo tagtaan?" Markaasey waxay leeyihiin: ”Waxaan kasoo tagnay ayagoo salaad tukanaya, waxaanna u tagnay ayagoo salaad tukanaya". Ibnu Xibbaan wuxuu yiri: "Waxaa Xadiithkaan ku sugan daliil cad inay Malaa’igta habeenku soo degato ayadoo uu dadku salaadda casar ku jiro, oo ay markaas ay Malaa'igta maalintu ay daba marto oo ay Samada tafto. Waxaa ayaguna, jira **Ma1aa’igta Aamiin** tiraahda markuu kan tukanayo Quranka akhriyo, siday uga wariyeen Maalik

iyo Al Bukhaarii iyo ghayrkoodba Abuu Hurayrah, inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Ithaa qaala al imaamu "Wa laa al daalliina" fa quuluu "Aamiin", fa innahu man waafaqa qaw1uhu qawla al malaa'ikata ghufira lahu maa taqaddama min thanbihi",** oo macnihiisu yahay: "Markuu imaamku isagoo Faataxada akhrinaya yiraahdo "Wa laa al daalliina" (oo ah Aayadda todoobaad ee Faataxada, macneheeduna yahay "aanna ahayn kuwa lunsan") waxaad tiraahdaan "Aamiin", maxaa yeelay midka hadalkiisaasi waafaqo hadalka malaa'igta (oo ayaguna Aamin leh) waxaa loo dhaafa dambigiisa inta hormartay". Malaa'igtaanna ma aha kuwa ilaalada ah, oo sidaasaa loo yiri riwaayad kale: **"lthaa waafaqa qaw1uhu qawla ahli Al Ssamaa'i'** oo macnehiisu yahay: "hadduu hadalkiisu hadalka, ehelu Samada waafaqo". Waxaa kaloo la yiri: Waa isla Malaa'igta ilaalada. ah, oo markay ayagu Aamiin yiraahdaan ayay Malaa'igta ayaga ka korreysaa ayaguna Aamiin leeyihiin oo ay sidaas kuwaba kuwa uga korreeya Aamiin u leeyihiin ilaa ay ehelu Samada gaarto. Waxaa ayaguna jirta **Malaa'igta Rabbanaa wa Laka Al Xamdu** tiraahda, siday u wariyeen Maalik iyo Al Bukharii iyo Muslim inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Ithaa qaala al imaamu Samica Allaahu liman xamidahu fa quuluu Rabbanaa laKa al xamdu, fa innahu man waafaqa qaw1uhu qawla al malaa'ikati ghufira lahu maa taqaddama min thanbihi",** oo macnihiisu yahay: "Markuu imaamku yiraahdo Samica Allaahu liman xamidahu waxaad tiraahdaan: Rabbanaa Laka al xamdu, ayadoo kan hadalkiisu ku beegmo oo uu waafaqo hadalka Malaa'igta waxaa loo dhaafaa wixii horreeyey ee dambigiisa ah." Waxaa ayaguna jira **Malaa'igta u duceysa kan Salaadda sugaya,** siday Maalik iyo Axmad iyo Al Bukhaarii iyo Muslim ay Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uga wariyeen inuu yiri: **"al malaa'ikatu tusalli calaa axadikum maa daama fii musallaahu allathii sallaa fiihi maa lam yaxdith: "Allaahumma ighfir lahu, Allaahumma arxamhu",** oo macnehiisuu yahay: "malaa'igtu way u deceysaa axadkiinba intuu ku sugan yahay bartuu ku tukaday haddayan ama intayan waysadu ka burin, waxayna tiraahdaa: "Ilaahayow dambigiisa dhaaf, Ilaahayow u naxariiso". Riwaayad kalena waxay Abuu Daauud iyo Al Nasaaii iyo Axmad ku ziyaadiyeen "**aw yaquuma",** kaddib Axdatha oo ah intayan weysado ka burin ama uusan bartaas sare uga kicin. Waxaa ayagung jira **Malaa'igta lacanadda haweenta gogosha ninkeeda ka guurtay,** oo ah midda intuu isu doonay isu diiday, siday u wariyeen Al Bukhaarii iyo Muslim iyo Axmad, inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yiri: **"ithaa baatat al mar'atu haajarat firaasha zawjihaa, lacanathaa al malaa'ikatu xattaa tusbixa",** oo macnihiisu yahay: "hadday haweentu ka guurto gogosha ninkeeda, ahna intuu isu doonay ay diido, waxaa lacnadda Malaa'igta ilaa ay ka. waabariisato, oo Ilaahay ka baryeysa inuu raxmadiisa ka fogeeyo". Riwaayadda Muslim wuxuu ku sheegay erayadaan: **"lacanathaa malaa'ikatu allathiina fii Al Ssamaa'i",** oo macneheedu yahay: "Waxa lacnadda malaa'igta Samada dhexdeeda ah". Malaa'igtu intaasoo, idil wax badan ayay kasii badantahay, oo intaani waa tusaale ahaan oo keli, sida Malaa'igta qorraxda u xil saaran, kuwa dabeysha u xil saaran, kuwa roobka u xil saaran,

kuwa Qabriga Al Musdhafaa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u xil saaran, malaa'igta ummaddiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, salaantooda gaarsiisa, iyo kuwo kale oo badanba.

Xamalatu Al Carshi

Ilaahay wuxuu abuuray malaa'igta ah Xamalatu Al Carshi , oo ah kuwa Carshiga xambaarsan, ahna sideed Malag oo suuradda ama ekaanshaha Al Awcaalu leh oo ah orgiyada buuraha dushooda ku nool ah, siday eraygaas, u fasireen Al Nihaayah ee Ibnu Al Athiir iyo Lisaanu Al Carab, siday u wariyeen Abuu Yaclaa iyo Ibnu Marduwayh iyo Ibnu Khuzaymah iyo Al Xaakim oo saxiix ka dhigay, iyo ghayrkoodba, ayna ka wariyeen Al Cabbaas oo uu Xadiithku isaga ku egyahay, Allaha raalli ka noqdee. Ibnu Jariirna wuxuu ibnu Zayd oo Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la xiriiriyay isagoo uu Xadiithku mursal yahay, inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Yaxmiluhu al yawma arbacatun wa yawma al qiyaamati thamaaniyatun** ", oo macneheedu yahay: "Waxaa (Carshiga) xambaarsan maanta afar (malag), maalinta qiyaamana sideed (malag)." Ibnu Jariir iyo ghayrkiisba waxay kaloo Ibnu Cabbaas ka wariyeen in Aayadda toddoba iyo tobnaad ee Suuratu Al Xaaqqah macneheedu yahay: "Waa sideed saf oo Malaa'ig ah, oo tiradooda uusan aqoon Ilaahay mooyee." Aayadduna waxaa weeyey: **"Wa Yaxmilu Carsha Rabbika fawqahum yawma'ithin thamaaniyatun**(17)**",** oo macneheedu yabay: "Carshiga Rabbigaana waxaa korkooda ku xambaaraya Maalintaas sideed Malag(17)." Malaa'igta Samada toddobaad dhexdeeda ah waa malaa'igta Al Muqarrabuuna, kuwa la soo dhoweeyey, kuwa acmaasha ku dhiga uurka kutubbada, khayraatkana ilaaliya. Samada toddobaad korkeeda waxaa ah malaa'igta la yiraahdo **Xamalatu Al Carshi Al Karuubiyuuna,** kuwa Carshiga Rabbi xambaarsan. Mid walba oo Xamalatu Al Carshi ka mid ah wuxuu leeyahay wajiyo kala duwan, iyo indho kala duwan oo uu intasba jirkiisa ku leeyahay. Cabdu Al Razzaaq iyo ibnu Al Munthir iyo ghayrkooduba waxay Wahab ka wariyeen inuu yiri: "Xamalu Al Carshi waa afar, oo Malag kasta oo ayaga ka mid ihi wuxuu leeyahay afar waji iyo afar baal: labo baal xagga wajigiisa ayay yihiin inuusan Carshiga fiirin oo uu markaas suuxo ama dhintaba, iyo laba baal oo uu ku duulo. Afartaas Malag lugohoodu waxay ku suran yihiin arligaan. Mid walboo ayaga ka mid ahna wuxuu leeyahay waji dibi iyo waji libaax iyo waji dad iyo waji gorgor. Afartaas malag ma ayan laha hadal aan ahayn: "Subbuuxun Qudduusun, Allaahu Al Qawiyyu, mala'at Cathamatuhu Al Ssamaawaati wa al arda" oo macnheedu yahay: "Subbuuxun Qudduusun Ilaahay waa Midka Xooga badan oo ay Weynaantiisu buuxisay Samaawaatka iyo arliga." Abuu Shaykh wuxuu ku ziyaadiyey oo uu Wahab ka wariyay: "Malag ayaga ka mid ihi wuxuu leeyahay suuradda dad, wuxuuna ugu shafeeca qaada Banii Aadamka arzaaqdooda. Malagna wuxuu leeyahay suuradda gorgor, wuxuuna ugu shafeeco qaadaa shimbiraha arzaaqdooda. Malagna wuxuu leeyahay suuradda Nuurka, wuxuuna ugu shafeeco qaada bahaa'imka arzaaqdooda. Malagna wuxuu leeyahay suuradda libaax,wuxuuna ugu shafeeco qaada

dugaagga arzaaqdooda. Afartaas Malag markay Carshiga xambaaraan jilbohooda ayay hoos ugu dhacaan Cathiimnimada Ilaahay daraadeed. Markaasaa waxaa loo laqaniyaa oo ay yiraahdaan: laa xawla wa laa quwwata illaa bi Allaahi, oo ah ma ay jirto xeelo iyo itaal inuu ka yimaado Ilaahay mooyee. Marka sidaas yiraahdaan ayay kor u istaagaan oo ay cagohooda ku istaagan. Cuthmaan bin Saciid Al Daarimii wuxuu ibnu Cabbaas ka wariyay inuu yiri: "Xamalatu Al Carshi waxay leeyihiin geeso leh canqawyo (waa meelo buuran, oo soo kuusan) oo la mid ah canqawayada geesaha lo'duurka. Mid walba oo ayaga ka mid ah inta u dhexeysa reys ma gaadhadiisa ilaa canqawgiisa waxaa loo socdaalaa shan boqol oo sano. Inta u dhexeysa foodda sankiisa ilaa kalxantiisana waa safar shan boqol oo sano ah. Inta u dhexeysa kalxantiisa ilaa dacasha dhegtiisana shan boqol oo sano." Malaa'igtaas cod dheer ayay ku tahliilsanayaan, ayagoo Carshiga xaggiisa fiirinaya, aanna joojineyn tahliisha (tahliil waa in la yiraahdaa laa ilaaha illaa Allaahu). Hadduu malag ayaga ka mid ihi ballkiisa arligaan usoo diro hal riish oo baalkiisa ka mid ah ayaa aduunkaan oo idil dabooli lahaa. Tiradoodana Ilaahay keli ayaa og. Ihnu Al Munthir iyo abuu Al Shaykh iyo al Bayhaqii oo kitaabkiisa Al Shicbi ku wariyay, waxayna kulligood ka wariyeen Haaruun bin Riyaab inuu yiri: "Xamalatu Al Carshi waa sideed, madaxdooduna waxay yihiin Carshiga agtiisa xagga Samada Toddobaad, cagohooduna waxay yihiin toddobada arli kan ugu hooseeya, waxayna leeyihiin geeso la mid ah geesaha orgiyada buuraha dushooda ku nool. Inta u dhexeysa salka geeska midkood ilaa foodda uu geesku ku dhammaado waxaa loo safraa shan boqol oo sano. Sideedaas Malag waxay cod qurxoon oo sahal ah isugu jawaabaan oo ay yiraahdaan, ayadoo ay afar ka mid ihi tiraahdo: "Subxaanaka Allaahumma wa bi xamdiKa calaa xilmiKa bacda cilmiKa", oo macneheedu yahay: "Subxaanaka, Ilaahayow iyo xamdigaaga, kuna salaysan turiddaada kaddib cilmigaaga". Markaasay afarta kale tiraahdaa: "Subxaanaka wa bi xamdiKa calaa cafwiKa bacda qudratiKa", oo macneheedu yahay: "Subxaanaka Ilaahayow iyo xamdigaaga, sidaad u cafidid adigoo awood leh kaddib". Waxaa hadalkaas ka muuqata inay malaa'igtaasi adduunkaan joogaan, waxaase ibnu Zayd ka wariyay inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Yaxmiluhu al yawma arbacatun, wa yawma al qiyaamati thamaaniyatun",** oo macnihiisu yahay: "Maanta waxaa xambaarsan afar, maalinta qiyaamena sideed." Abu Al Shaykhna wuxuu Wahab ka wariyay inuu yiri: "Xamalatu Al Carshi maanta waa afar, markay tahay maalinta qiyaamane waxaa lagu xoojiyaa afar kale." Ibnu Jariir, iyo ibnu Al Munthir iyo Ibnu iyo ibnu abii Xaatim waxay ibnu Cabbaas ka wariyeen inuu hadalka Ilaahay ee ku xusan Aayadda toddoba iyo toban ee Suuratu Al Xaaqah, oo ah: **"Wa Yaxmilu Carsha Rabbika fawqahum yawma'ithin thamaaniyatun**(17)", oo macneheedu yahay: "Carshiga Rabbigaana waxaa korkooda ku xambaaraya maalintaas sideed malag(17)." inuu macneheedu yabay sideed saf oo Malaa'ig ah, tiradoodana uusan axad aan Ilaahay aqoon."

Toddobada Samo

Maxay Samaawaatku ka samaysan yihinn? Malaa'igta degganna waa kuwee? Samo kasta waa dhismo la mid ah dhismaha arligaan, oo leh dhul iyo buuro iyo bado iyo wabiyo iyo dhir iyo malaa'ig deggan iyo wuxuu Ilaahay ogyahay. Bal marka aan mid wax uga tilmaanno.

Samada Koowaad

Waxaa la wariyay inay Samada nasoo xigta oo la yiraahdo Al **Samaa'u Al Ddunyaa,** oo macneheedu yahay Samada dhow ama Samada hooseysa, ay ka sameysan tahay **biyo iyo dukhaan oo ah uumi**. Waaba ayada uu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Aayadda kow iyo tobnaad ee Suuratu Fussilat ku yiri: " **Thumma istawaa ilaa Al Samaa'i wa hiya dukhaanun**(11)**",** oo macneheedu yahay: "Markaas kaddib ayuu u qasday Samada ayadoo uumi ah(11)". Wuxuu Cuthmaan bin Saciid Al Daarimii Cabdu Allaahi ibnu Cumar ka wariyay inuu yiri: "Markuu Ilaahay doonay inuu ashyaada abuuro, ayadoo uu Carshigiisuna biyo korkooda yahay, ayanna Samo jirin, wuxuu abuuray dabaysha oo uu markaas ku salliday oo uu ku diray biyaha. Markaasey biyihii ruxmeen oo ay hirar yeesheen, tiirarkiisana ay saameysay. Markaasaa waxaa biyaha kasoo baxay (Kow) uumi iyo (Laba) dhoobo iyo (Saddex)) dumaa' ama daadxoor. Markaasuu uumigu inta kor u kacay sare ahaaday oo uu batay oo koray: markaasuu wuxuu ka abuuray **Samada.** Dhoobadana wuxuu ka abuuray **toddobada arli.** Dumaa'dana ama daadxoorka, oo ah waxaa biyaha socda kor heehaaba oo ah ama geedo ama caleemo baaliyoobay ama xumbo iyo wixii la midka ah, wuxuu ka abuuray **buuraha."** Ibnu Al Munthir iyo ibnu Jariir waxay Cabdu Allaahi ibnu Mascuud ka wariyeen, iyo dad kale oo saxaabada ka mid ahba in markuu Ilaahay doonay inuu khalqiga abuuro uu biyaha uumi kasoo saaray. Markaasuu uumigu biyaha ka kor maray oo uu ka sare maray: sare maridda waxaa af Carbiga lagu yiraahdaa samaa. Markaasuu wuxuu u bixiyay Samaa'a. Samadaan waxaa ku sugaan dhexdeeda Malaa'ig laga abuuray biyo iyo riix oo dabayl ah, uuna madax u yahay malag la yiraahdo **Al Rracdu,** ahna malagga u xilsaaran **daruuraha iyo roobka.** Waxay Axmad iyo Al Tarmathii iyo Al Nasaaii ka wariyeen Ibnu Cabbaas Xadiith saxiix ah, uuna ku yiri: "Yuhuud ayaa waxay u timid Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxayna tiri: "Waxaad noo sheegtaa wuxuu yahay Al Rracdu, oo ah unkadka la maqlo markuu roob da'ayo?" Wuxuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"malakun min malaa'ikati Allaahi muwakkalun bi al ssaxaabi, bi yadihi mikhraaqun min naarin yazjaru bihi al ssaxaaba, yasuuquhu xaythu amara Allaahu".** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Waa malag ka mid ah malaa'igta Ilaahay oo u xilsaaran daruuraha, gacantiisana uu ku jiro shaabuug dab ah oo uu ku kaxeynayo, kuna canaananayo kuna reebayo daruuraha, uuna u kexeynayo meeshuu Ilaahay amray." Waxay yiraahdeen: "Hadaba muxuu yahay dhawaaqaan aan maqalno?" Wuxuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Sawtuhu",** oo ah "Waa codkiisa". Waxay yiraahdeen: "Run ayaad

sheegtay". Malag Al Rracdu iyo malaa'igtaan uu madaxda u yahay waxay leeyihiin: "Subxaana Thii Al Mulki wa Al Malakuuti", oo macneheedu yahay: "Waxaa ceeb iyo naaqusnimo iyo baahi iyo xumaan oo idil ka nazahan oo ka fiyow oo ka hufan Midka Boqortooyada iyo Malakuutka iska leh".
Waxaa kaloo ibnu Cabbaas laga wariyay inuu yiri: "Al Rracdu waa malag daruuraha Tasbiix ku kaxeeya, sida uu ninka geela u heesaya uu geela heeskiisa ugu wado". Sidaas ayuu gacantiisana karbaash dab ah ku sitaa uu daruuraha ku kaxeynayo, afkiisana markuu kaxeynayo uu tasbiix ku wadaa. Jaabir waxaa laga wariyay in Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, laga wareystay dhalashada daruuraha, oo uu markaas yiri: **"inna malakan muwakkalun bi al ssaxaabi yalummu al qaasiyata wa laxama al daaniyata, fii yadihi mikhraaqun, fa ithaa rafaca bariqat, wa ithaa zajara racadat, wa ithaa daraba saciqat** (saad)". Xadiithka manihiisu waxaa weeye: "malag daruuraha loo xil saaray wuxuu kulminayaa kuwa daruuraha fog, wuxuuna ku laxaamadayaa kuwa dhow. Gacantiisa waxaa ku jira shaabuug: hadduu kor u qaado waa hillaaceysaa, hadduu reebo oo uu canaantana way unkadaysaa, hadduu ku dhuftana waxay dhalineysaa biriq." Cumar bin Bijaad wuxuu wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"ismu al ssaxaabi cinda Allaahi Al Canaanu, wa Al Rracdu malakun, wa al barqu dharfu malakin yuqaalu lahu Ruuqiilu".** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Ilaahay agtiisa daruuraha waxaa lagu magacaabaa Al Canaanu. Al Racduna waa malag. Hillaacuna waa isha malag la yiraahdo Ruuqiil." Xadiithkaan iyo midka ka horreyaba waxaa wariyay ibnu Marduwayh. Abuu Al Shayk wuxuu wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:**"khalaqa Allaahu Al Ssamaa'a al Ddunyaa, fa jacalahaa saqfan maxfuuthan, wa jacala fiihaa xarasan shadiidan wa shuhuban, saakinuhaa mina al malaa'ikati uuluu ajnixatin mathnaa wa thalaatha wa rubaaca fii suurati al baqari, mithla cadadi al nnujuumi, laa yaftaruuna mina al tasbiixi wa al tahliili wa al takbiiri."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Ilaahay wuxuu abuuray Samadaan dhow, markaasuu wuxuu arliga uga dhigay saqaf ilaaliya, wuxuu dhexdeeda yeelay askar ilaalisa oo xoog badan iyo dambaaburo holcaya. Malaa'igta degganna waxay leedahay labo ama saddex ama afar baal, waxayna leeyihiin suuradda ama muuqaalka lo'da, tiradooduna waxay la mid tahay tirada xiddigaha, mana ay joojinayaan. oo ma goynayaan tasbiixda. (oo ah inay yiraahdaan Subxaana Allaahi), iyo tahliisha (oo ah inay yiraahdaan laa ilaaha illaa Allaahu) iyo takbiirta (oo ah inay yiraahdaan Allaahu Akbaru)".

Samada Labaad

Samada labaadi waxay ka sameysan tahay **marmar cad,** siday u wariyeen ibnu Raahiweyh iyo Abii Al Shaykh iyo Al Dhabraanii iyo ghayrkoodba, ugana wariyeen Anas iyo inay Samadaas dhexdeeda ku sugan yihiin malaa'ig noocyo kala duwan ah, lehna sifooyin kala duwan, kuna mashquulsan cibaadooyinka kala duwan oo la amray. Malaa'igtaani cod dheer ayey waxay ku leeyihiin: "Subxaana Thii Al Cizzati wa Al Jabaruuti" oo macneheedu

yahay: "Subxaanaha Midka Cizzada u saaxiibka oo lagama adkaadaha ah, xooggana badan, wax walbana. kara". Tirada malaa'igta Samadaan labaad deggan waxay la mid tahay dhibcaha roobka oo kale, waxayna leeyihiin suuradda gorgorka, ma daalaan, mana joojiyaan ammaanta Ilaahay, mana seexdaan. Samadaan labaad ayay daruuruhu kasoo askumaan, markaasey, kuwaas caabudidda ku mashquulsan hoostooda kasoo baxaan, markaasey hawada Samadaan ku faafaan. Waxaana la socota malaa'ig u duwaya xagga la amro, kuwaasoo codkoodu tasbiix yahay, boohintooduna cabsiin.

Samada Saddexaad

Samada saddexaad waxay ka samaysan tahay **bir**, waxaana dhexdeeda ku sugan Malaa'ig baalal leh iyo wajiyo kala duwan, oo uu muuqaalkoodu kala duwan yahay, codad dheerna ku tasbiixsanaya oo oranaya: "Subxaanaka Allaahumma, Anta Al Xayyu Allathii laa tamuutu" oo macneheedu yahay: "Subxaanaka Ilaahayow: Adigu waxaad tahay Midka Nool oo aadan dhimanayn." Malaa'igtaani waxay u taagan tahay safaf, sida ayagoo ah dhismo la isku dhejiyay, uusanna midkood aqoon nooca midka ku xigah, cabsi ay Ilaahay ka qabaan daraadeed, uusanna midkood midka kale wajigissa dhuganayn ilaa maalinta qiyaame. Malaa'igta Samadaan saddexaad deggan tiradoodu waxay la mid tahay tirada bacaadka, muuqaalkooduna waa suuradda basharka dadka Banii Aadanka oo kale, habeen iyo maalinba la xasharinayo.

Samada Afaraad

Samada afaraad waxay ka samaysan tahay **nuxaas,** waxaana dhexdeeda ah malaa'ig ka tira badan kuwa ah Samada saddexaad dhexdeeda. Sidaas ayay Sama walba ka Malaa'ig badan tahay midda ka hooseysa oo ku xigta. Malaa'igta Samadaan afaraad way taagan yihiin, waana. rukuucsan yihiin waana sujuudsan yihiin, kuna mashquul sanyihiin cibaadooyin kala duwan. Ilaahay mid ayaga ka mid ah ayuu wuxuu u dirsadaa. amar umuurtiisa ka mid ah, markaasuu malaggu tegeyaa oo uu soo qabanayaa waxaas loo diray, kaddibna uu soo noqonayaa, isagoo aan aqoon malagga dhiniciisa xiga, ayna u sabab tahay sida adag oo qotada dheer oo ay u cibaadeysanayaan, ayagoo leh: "Subbuuxun Qudduusun Rabbunaa Al Rraxmaanu Allathii laa ilaaha illaah Huwa" oo macneheedu yahay: "Waa nazahanyahay waana ka daahir xumaan iyo ceeb kasta Rabbigeen Al Rraxmaanu, Midka uusan jirin ilaah aan Isaga ahayn". Tirada malaa'igta Samadaan afaraad deggan waxay la mid tahay tirada caleemaha geedaha oo kale, waxayna u safan yihiin ayagoo garbaha isku haya, suuraddooduna ay tahay midda Xuuru Al Ciini oo kale, ayna yihiin qaar rukuucsan iyo kuwo sujuudsan, ayagoo ay wajiyadoodu birqayaan, kuna tasbiixsanaya inta u dhexeysa toddobada Samo iyo toddobada arli.

Samada Shanaad

Samada shanaad waxay ka samaysan tahay **qalin** ama fiddo, malaa'igta dhexdeeda ahna way ka badan yihiin malaa'igta afarta Samo oo kale oo la isku daray, wayna rukuucsan yihiin, sujuudsan yihiin, ayagoo aan indhohooda kor u qaadeyn ilaa maalinta qiyaame. Marka la gaaro maalinta qiyaame waxay oranayaan: "Rabbigeenow, kuma aanan caabudin sidaad xaqqa u lahayd", oo sidaas ayay gaabinta ay gaabiyeen uga cudur daaranayaan, muujinayaanna Waynaantiisa iyo siduu ugu nicmeeyey, ayadoo uusanna axadna awoodin inuu Ilaahay ugu shukriyo si u dhigantah nicmada uu siiyey oo uu ugu nicmeeyey. Tirada malaa'igtaan Samada shanaad waxay ka badan tahay tirada khalqiga intiisa kale oo idil, suuraddoodana waa suuradda dadka Banii Aadanka ah. Malaa'igtaan waxaa ka mid ah Al Kiraamu Al Bararati iyo Al Culamaa'u Al Safarati, oo ah kuwa ku xusan Aayadaha shan iyo toban iyo lix iyo toban ee Suuratu Cabasa: **"Bi aydii Safaratin**(15)**Kiraami bararatin**(16)**"** oo macnohoodu yahay: "Oo ay gacanta ku hayaan malaa'ig wax qorta(15)Sharafna leh oo baarri ah(16)".

Samada Lixaad

Samada lixaadi waxay ka samaysan tahay **dahab,** waxaana dhexdeeda ah jundiga waa askarata Ilaahay ee wayn, ahna malaa'igta la yiraahdo **Al Karuubiyuuna.** Al Xulaymii wuxuu yiri: "Waa malaa'igta cathaabta oo magacoodu wuxuu ka yimid Al karbu oo ah kurbada." Al Qaamuusna wuxuu wariyay: "Al Karuubiyuuna waa madaxda malaa'igta, waxaana ka mid ah **Jibriil iyo Miikaa'iil iyo Israafiil,** waana kuwa Ilaahay dhoweeyey, oo eraygu wuxuu ka yimid karaba oo, macneheedu yahay waa dhoweeyey." Tirada Malaa'igtaan Ilaahay Tacaalaa keliya ayaa ogsoon, waxaana u madax ah malag leh toddobaatan kun oo jundi ama askari, oo mid walba oo ayagaas ka mid ihi uu isaguna leeyahay toddobaatan kun oo jundi. Malaa'igtaani waa kuwa uu Ilaahay umuurtiisa ehelka adduunkaan usoo dirsado. Codad dheer ayay ku tasbiixsadaan kuna tahliishadaan. Ibnu Al Munthir wuxuu ibnu Cumar ka wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: " **Al Malaa'ikatu cashara ajzaa'in, tiscatu ajzaa'in Al Karuubiyuuna allathiina yusabbixuuna al llayla wa al nnahaara, la yaftaruuna. Wa juz'un qad wukkiluu bi khazaanati kulli shay'in wa maa fii Al Ssamaa'i wadcu ihaabin illaa fiihi malakun saajidun, aw malakun raakicun".** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Malaa'igtu waa toban qaybood, oo sagaal qaybood waa Al Karuubiyuuna, kuwa habeen iyo maalinba tasbiixsada oo aan joojin. Iyo qayb tobanaad oo loo wakiishay oo loo xilsaaray maamulka iyo adeegga shay kulligiis. Mana jirto Samada dhexdeeda saan ama sar , oo ah haragga xoolaha, in le'eg oo waa illaa meesha uu ku sugan yahay malag sujuudsan ama malag rukuucsan." Malaa'igta Samadaan lixaad dhexdeeda ahi waa Xizbu Allaahi Al Ghaalibu wa Jundu Allaahi Al Acthami, oo ah xizbiga Ilaahay oo mar walba adkaada iyo jundiga Ilaahay ee wayn. Suuradooduna waa fardaha calaamdaysan (oo wajiga iyo lugaha midabka cad ku leh).

Samada Toddobaad

Samadaan toddobaadi waxay ka samaysan tahay xabbad **yaaquut** ah oo guduudan, malaa'igta dhexdeeda ahna way ka tira badan yihiin kuwii hore loo soo sheegay, waxaana u madax ah malag horjooge u ah toddoba boqol oo kun oo malag, ayna ka mid yihiin askar tiradoodu ay dhibcaha roobka Samada la mid yihiin iyo ciidda arliga iyo bacaadka iyo quruuruxa iyo caleenta geedaha iyo tirada shay' kasta oo lagu abuuray Samaawaatka iyo arligaba. Ilaahayna wuxuu maalin walba abuuraa wixii uu doono, waana Isagaba yiri: **"Wa maa yaclamu junuuda Rabbika illaa Huwa**(31)**"** oo ah Aayadda kow iyo soddonaad ee Suuratu Al Mudath-thir, oo macneheedu yahay: "Wax og junuudda Rabbigaa oo aan Isaga ahaynna ma jiro(31)". Malaa'igta Samadaan toddobaad dhexdeeda ah waa malaa'igta Al Muqarrabuuna, kuwa la soo dhoweeyey, kuwa acmaasha ku dhiga uurka kutubbada, khayraatkana ilaaliya. Samada toddobaad korkeeda waxaa ah malaa'igta la yiraahdo **Xamalatu Al Carshi Al Karuubiiyuuna,** kuwa Carshiga Rabbi xambaarsan.

Toddobada arli

Ilaahay Tacaalaa wuxuu abuuray toddobada arli, kuwaanoo Samaawaatka hortood la abuuray, siduu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa ugu qeexay Aayadaha sagaalaad ilaa laba iyo tobnaad ee Suuratu Fussilat, uuna ku yiri: **"Qul a'innakum la takfuruuna bi Allathii khalaqa al arda fii yawmayni wa tajcaluuna laHu andaadan: Thaalika Rabbu Al Caalamiina**(9)**Wa jacala fiihaa rawaasiya min fawqihaa wa baaraka fiihaa wa qaddara fiihaa aqwaatahaa fii arbacati ayyaamin sawaa'an lil ssaa'iliina**(10)**Thumma istawaa ilaa Al Ssamaa'i wa hiya dukhaanun fa qaala lahaa wa lil ardi: "a'atiyaa dhawcan aw karhan qaalataa aataynaa dhaa'iciina"**(11)**Fa qadaahunna sabca Samaawaatin fii yawmayni wa awxaa fii kulli Samaa'in amrahaa wa zayyannaa Al Ssamaa'a al ddunyaa bi masaabiixa wa xifthan thaalika taqdiiru Al Caziizi Al Caliimi**(12)**".** Aayadaha macnohoodu waxaa weeye: "Waxaad. tiraahdaa (Nabiyow Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) idinku ma waxaad ku kufrineysaan Midka ku abuuray arliga laba maalmood, oo aad u yeeleysaan kuwo la mid ah? Kaasi waa Rabbiga Caalamiinta(9)Wuxuuna yeelay arliga dhexdiisa buuro wuxuuna barakeeyey dhexdiisa, una qaddaray cunnadiisa afar maalmood, ayadoo ay u simantahay dadka weydiin(10)Markaasuu u qasday Samada oo uumi ah kuna yiri: "Cirka iyo arliga ahaada, adinkoo adeecsan ama la khasbay", waxayna yiraahdeen: "waan nimid annagoo adeecsan"(11)Markaasuu wuxuu ka abuuray cirka toddoba Samo laba maalmood dhexdooda, wuxuuna faray Samo kasta amarkeeda, waxaanna ku qurxinnay Samada dhow misbaaxyo, waana ilaalinnay, taasina waa qadaridda Midka Adkaada oo wax walba u Cilmi leh(12)."

Tirada arligana wuxuu Cazza wa Jalla Aayadda labo iyo tobnaad ee Suuratu Al Dhalaaq noogu sheegay: **"Allaahu Allathii khalaqa sabca Samaawaatin wa mina al ardi mithlahunna**(12)**".** Aayadda macneheeduwaxaa weeye:

"Ilaahay waa Kan abuuray toddobo Samo, arligana tiradaas oo kale". Lixda arli oo kale waxay kasii kala hooseeyaan midkaan aan annagu korkiisa ku nool nahay. Wa al xamdu li Allaahi.

Tiirka saddexaad ee iimaanka waa rumaynta Kutubta Ilaahay

Tiirka saddexaad ee iimaanku waa inaad rumaysid Kutubta Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, uu soo dejiyay oo idil, ayna ka mid yihiin Quraanka Kariimka ah oo Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, lagu soo dejiyay saddex iyo toban sano Hijrada horteed isagoo jooga Makkah, Injiil oo Nabi Ciise, Calayhissalaamu , qiyaas laba kun oo sano ka hor lagu soo dejiyay isagoo Falasdhiin jooga , Tawraadda oo Nabi Muuse, Calayhissalaamu, lagu soo dejiyay kun iyo toddoba boqol oo sano ka hor dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhim Wasallam, isagoo jooga dalka Masar, Zabuur, oo Nabi Daauud, Calayhissalaam, lagu soo dejiyay kun iyo shan boqol iyo toddobaatan sano ka hor dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, isagoo joogah dalka Falasdhiin, iyo Suxuftii Nabi Ibraahiim, Calayhissalaatu Wassalaamu, lagu soo dejiyay saddex kun iyo afar boqol iyo toddobaatan sano ka hor dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, isagoo joogah dalalka Ciraaq, Siiriya, Falasdhiin, Masar iyo Makkah al-Mukarramah.

Al Zarqaanii wuxuu sharxu Al Laduniyyah ee Al Qasdhalaani ku wariyay oo yiri: "Axmad iyo ibnu Jariir iyo Al Dhabraanii iyo Al Bayhaqii waxay Waatilah ka wariyeen inuu Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"unzilat Suxufu Ibraahiima fii awwali laylatin min Ramadaana, wa unzilat Al Ttawraatu li sittin madiina min Ramadaana, wa unzila Al Injiilu li thalaathi cashratin khalat min Ramadaana, wa unzila Al Zzabuuru li thamaani cashratin khalat min Ramadaana, wa anzala Allaahu Al Qur'aana li arbaci wa cishriina khalat min Ramadaana."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Suxufta Ibraahiim waxaa lasoo dejiyay habeenka ugu horreeya ee Ramadaan, Tawraaddana waxaa lasoo dejiyay markay lix habeen ka gudubeen Ramadaan, Injiilkana waxaa la soo dejiyay markay saddex iyo toban habeen ka gudbeen Ramadaan, Zabuurna waxaa lasoo dejiyay markay sideed iyo toban habeen ka gudbeen Ramadaan, Ilaahayna wuxuu Quraanka soo dejiyay markay afar iyo labataan habeen ka gudbeen Ramadaan."

Al Xaafith ibnu Xajar Al Casqalaanii wuxuu Fatxu Al Baarii ku yiri: "Xadiithkaan wuxuu ku dabbaqan yahay Hadalkiiisa Tacaalaa: **"Shahru Ramadaana allathii unzila fiihi Al Qur'aanu**(185)**"**(waana Aayadda boqol shan iyo sideetan ee Suuratu Al Baqarah) oo macneheedu yahay: "Bisha Ramadaan oo dhexdeeda lagu soo dejiyay Quraanka(185)." iyo Hadalkiisa**: "Innaa anzalnaahu fii laylati Al Qadri**(1)**"** (waana Aayadda koowaad ee Suuratu Al Qadri) oo macneheedu yahay: "Annagaana soo dejinnay (Quraanka) habeenka laylatu Al Qadri(1).", waxayna ixtimaalaysaa inay laylatu Al Qadri sanadkaas ahayd habeenkaas oo uu Quraanka oo dhan jumlo ahaan loo soo dejiyay Samada Al Ddunyaa ee dhow, markaas kaddibna

subaxa afar iyo labaatanaad arligaan loo soo dejiyay inta hore ee Suuratu Al Calaq: "Iqra'a bismi Rabbika" (ilaa shanta Aayadood oo ugu horreeya)."
Waa intaas warka Al Zarqaanii oo ku xusan kitaabkiisa mujalladka koowaad bogga saddex boqol sideed iyo sideetan. Kutubbo kalena way wariyeen.

Tiirka afaraad ee iimaanka waa rumaynta Rususha Ilaahay

Tiirka afaraad ee iimaanku waa inaad rumaysid Rususha Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, uu soo diray oo idil. Tirada Rususha Ilaahay soo diray waxaa la wariyay inay yihiin saddex boqol saddex iyo toban Rasuul. Al Qurdhubii wuxuu tafsiirkiisa Aayadda boqol shan iyo lixdan ee Suuratu Al Nisaa'I ku yiri: "Abuu Tharr Al Ghifaariyyu wuxuu yiri: "waxaan iri; "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, meeqay ahaayeen Anbiyadu iyo meeqay ahaayeen Rusushu?" Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"kaanati Al Anbiyaa'u mi'atu alfin wa arbacata wa cishriina alfi Nabiyyin wa kaana Al Mursaluuna thalaathu mi'atin wa thalaathata cashrin."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Anbiyadu waxay ahayeen boqol kun iyo afar iyo labaatan kun , Rusushuna waxay ahaayeen saddex boqol iyo saddex iyo toban." Al Qurdhubii wuxuu yiri: "Xadiithkaan ayaa ugu saxiixsan inta arrinkaan laga wariyay, waxaana wariyay Al Ujariyyu iyo Abuu Xaatim Al Bastiyyi kuna wariyay Musnadkiisa saxiixa ah.
Rusushaas uu soo diray, Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, qaarkood magacdooda Quraanka ayuu noogu sheegay, waxayna yihiin afar iyo labaatanka soo socda.

(Kow) Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam

Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calyhi Wasallam, una dhashay Banuu Haashim ee ah Quraysh ee Carabta ah, oo la soo diray qiyaas kun iyo afar boqol iyo afartan sano ka hor, loona soo diray caalamiintoo idil oo ah jinniga iyo insiga o idil. Markaasaa inta rumeysay Risaaladiisa sidda Midnimada Ilaahay, Nabinnimadiisa, Quraanka iyo intuu xagga Ilaahay kala yimidba oo raacdayna waxaa la yiraahdaa muslimiin waxayna gelayaan jannada waana ummaddiisa, inta Risaaladiisa, Midnimada Ilaahay, Nabinnimadiisa, Quraanka iyo intuu xagga Ilaahay kala yimidba diidayna waxaa la yiraahdaa gaalo, magac kasta ayagu ha isku bixiyaane, waxayna gelayaan naarta, ummaddiisana kama mid ah. Wuxuuna Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam ku dhashay oo laga soo diray Makkah Al Mukarramah, wuxuuna u haajiray oo uu ilaa hadana deggan yahay Al Madiinah Al Munawwarah.
Siirada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo laga soo tarjumay kitaabka "Kitaabu al sh-shajarati Al Nabawiyyati fii Nasabi Khayri Al Bariyyati, Sallaa Allaahu Calayhi wa calaa Aalihi Wasallam, uuna fiiriyay oo uu dhammaystiray Al Imaamu Jamaalu Al Ddini Yuusuf bin Xasan bin Cabdi Al Haadii Al Maqdisiyyi, al macruufu bin ibni Al Mubrad, oo noolaa inta u dhexeysay sideed boqo iyo afartan ilaa sagaal boqol iyo sagaal Hijriga. Magaca Kitaabka macnihiisu waxaa weeye Kitaabka geedka Nabiga, Sallaa

Allaahu Calayhi Wasallam, geedkaasoo ah geedka nasabka khayru al bariyyah oo ah int uu Ilaahay abuuray midka ugu khayr badan. Ibnu Al Mibrad qoyskiisa waxaa la yiraahdaa Banuu Qudaamah nasabkooduna wuxuu galaa oo ku dhammaadaa Saalim bin Cumar bin Al Khdh-dhaab, Allaha raalli ka noqdee. Kaddib waxaa dhawr sano ka hor kitaabkaan hadana hubiyay oo xaqiijiyay oo faallo ku daray shiikha la yiraahdo Muxyii Al Ddini Mistuu oo ku daabacay magaalada Dimishiq ee dalka Suuriya kun afar boqol afar iyo tobanka Hijriga, una dhiganta kun sagaal boqol saddex iyo sagaashanka. Muxyii Al Ddiini Mistuu waa isla sheekha sharxay oo ka qayb qaatay sharaxa afartanka Xadiith ee Imaamu Al Nawawii soona saaray kitaabka la yiraahdo Al Waafii fii sharxi al arbaciina Al Nawawiyyah oo ay wada dhigeen isaga iyo Doktoor Musdhafaa Al Bughaa, ahna kitaab aad u qiimo badan oo guri walba oo muslin ah looga baahan yahay. Kitaabkana waxaan kasoo qaadannay inta soo socota:

"Waa Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi wa Sallam tasliiman kathiiran. Nabi Muxammad, Salla llaahu Calayhi Wasallam, wuxuu dhashay caamu al fiili, sanadka maroodiga maalin isniin ah oo ay laba iyo toban habeen ka gudbeen bisha Rabiicu Al Awwal. Aabihiis, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa la oofsaday isagoo laba bilood jira. Waxaa kaloo la yiri waxaa la oofsaday isagoo Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam markaas hooyadiis uurkeeda ku jira. Waxaa nuujisay Xaliima bintu Abii Thu'ayb Al Ssacdiyyah, wuxuuna agteeda ku sugnaaday, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo uu reer Banii Sacd la sugnaaa oo la degganaa afar sano, waxayna hooyadiis u soo celisay marka qalbigiisa inta la soo bixiyay la dhanbalay, waxaana halkaas ku jirta qisada labadii malag oo u timid Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam oo uurkiisa dhanbashay. Hooyadiis waxay u kexeysay Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Al Madiinah ayadoo booqanaysa reer abtigiis. Markaasaa waxaa lagu oofsaday tuulada la yiraahdo Al Abwaa' ayadoo Makkah kusoo noqonaysa oo ku soo soscota. Markaas Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu jiraa lix sano iyo saddex bilood iyo toban maalmod. Qabrigeeduna halkaas ayuu ku yaalla oo la yaqaannaa, caanna uu ku yahay. Marka hooyadiis la duugay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa soo qaaday Ummu Ayman oo Makkah keentay, shan maalmood kaddib marka hooyadiis la oofsaday. Cabdu Al Mudh-dhalib waxaa la oofsaday isagoo Sallaa Allaahu Calayhi Wasalam Nabigu uu sideed sano jiro. Awoowihiis Cabdu Al Mudh-dhalib wuxuu kala dardaarmay wiilkiisa Abuu Dhaalib, kaasoo uu goob joog la ahaa dagaalka Xarba Al fijjaari, isagoo markaas, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, labaatan sano jira, waxaana kaloo la yiri intaas ka yar ayuu jiray. Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam adeerkiis Abuu Dhaalib u raacay Shaam, waana dalka Suuriya maanta la yiraahdo isagoo laba iyo toban sano jira. Wuxuu kaloo Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Shaam ugu safray isagoo hoggaaminaya safar ganacsi oo ay leedahay Khadiijah bintu Khuwaylid, Allaha raalli ka noqdee, isaguna uu markaas shan iyo labaatan sano jiro. Waxaana safarkaas la socday addoon ay Khadiijah leedahay oo magaciisa Maysarah la yiraahdo. Laba bilood iyo ayaamo safarkaas dabadiis ayuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam

Khadiijah guursaday. Kacbada ayaa dib loo dhisay isagoo Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam shan iyo sodoon sano jira, Qurayshna waxay raalli ku noqotay xukunkiisa sida Xajaru Al Aswaadka meeshiisa dib loogu celin lahaa. Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa jiniiga iyo insigaba loo soo diray isago afartan sano jira. Adeerkiis Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Abuu Dhaalib waxaa la oofsaday isagoo uu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kontonkii sano ku dhowaaday. Khadiijana waxaa la oofsaday saddex maalmood Abuu Dhaalib dabadiis. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu sanadkaas ku magacaabay Caamu Al Xuzni oo ah sanadka tiiraanyada, aydoo uu Abuu Dhaalib ka ilaalin jiray kuwa dhibaya oo dhibaatada la doonaya markuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam dariiqa usoo baxo oo uu magaalada joogo oo uu gurigiisa kasoo baxo, Khadiijana way rumayn jirtay markuu gurigiisa usoo noqdo kaddib markii dariiqyada lagu beeniyay, waxayna ka bogsiin jirtay oo ay ka daawayn jirtay oo ay kasii jeedin jirtay waxa lagu falo, waxayna tiraahdaa: "run ahaan, xaq ahaan adigu waxaad tahay Rasuulka Ilaahay", Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wa calaa Aalihi al dhayyibiina al dh-dhaahiriina wa radiya Allaahu cani al ttabiciina waa taabici al ttabiciina bi ixsaanin ilaa yawmi al diini, oo ah isaga iyo qoyskiisa, qoyskiisaas dhayyibiinta fiican ah oo daahirka ah, Ilaahyna raalli ha ka noqdo kuwii raacay oo taabiciinta ahaa iyo taabiciinta kuwii raacay oo ayaga ka dambeeyey oo ku raacay wanaagga ilaa yawmu al qiyaamaha, oo dadka raacay oo dhan Allaha raalli ka noqdo.

Waxaa Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam loo dheelmiyay Baytu Al Maqdis isagoo al buraaq saaran, Samaawaatkana waxaa kor loogu qaaday, waana micraajkee oo micraaj macnihiisu waxaa weeye kor u bixidda isaga ruuxiisa iyo jirkiisaba isagoo soo jeeda oo aan hurdin isla habeenkaas Baytu Al Maqdis loo dheelmiyay. Habeenkaasna wuxuu ku beegan yahay hal sano iyo nus kaddib markuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Makkah kusoo noqday ayadoo uu saddex bilood kaddib marka Khadiijah la oofsaday uu magaalada Al Dh-dhaa'if u baxay, kaddibna uu Makkah kusoo noqday, Allaha Khadiijah raalli ka noqdee. Kaddibna Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuu haajiray oo wuxuu ka haajiray Makkah oo u haajiray Al Madiinah isagoo ay la socdaan saaxiibkiis Abuu Bakar Al Siddiiqu iyo Caamir bin Fuhayrah, Allaha raalli ka noqdee, iyo Cabdu Allaahi bin Urayqadh. Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam firaashkiisa ama gogoshiisa Makkah uga soo tegay Calii, Allaha raalli ka noqdee, si uu dadka lahaa dib ugu celiyo wadiicooyiin ama amaanooyin isaga Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam lagu ammaanaystay oo agtiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam la dhigtay, daymana uu bixiyo, kaddibna uu ka daba tago. Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam hijrooday isagoo cumrigiisu saddex iyo konton sano (oo gaw ah) yahay. Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Al Madiinah soo galay maalin isniin ah oo ay laba iyo toban habeen ka gudbeen bisha Rabiicu Al Awwal, maalintaasoo taariikhda laga bilaabo, kaddibna bisha Muxarram loo xawilay oo ah bisha koowaad ee sanadka islaamka. Waxaa Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam lagu oofsaday Al Madiinah, kaddib markuu ku sugnaaday oo uu degganaa toban sano iyo laba bilood. Makkana wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam ku

sugnaa saddex iyo toban sano. Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam adduunkaan ka tegay maalin isniin ah oo dayaxa bisha Rabiicu Al Awwal uu muuqday ee sanadka afar iyo lixdanaad ee caamu al fiili, hijradana ay kasoo wareegeen kow iyo toban sano, isaguna uu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam saddex iyo lixdan sano iyo saddex bilood jiro (kutubbada kalena waxay wariyeen inuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam saddex iyo lixdan sano oo gaw ah jiray). Waxaa Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam lagu duugay guriga Caa'ishah, Allaha raalli ka noqdo siiyana waxay ayaduna raalli ku noqotee, waxaana dhaqay Calii bin Abii Dhaalib iyo Al Fadlu bin Al Cabbaas kaasoo, waa Caliye, laabtiisa kusoo qabtay Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Al Cabbaasna uu biyaha ku shubayo isagoo uu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam dharkiisa qabo, oo aan dharkiisa laga siibin. Waxaa Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam ku tukaday Jibriil Calayhissalaamu oo tujinaya malaa'igta Ilaahay Cazza wa Jalla. Kaddibna waxaa ku tukaday Ehelu Baytkiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam oo ah qoyskiisa. Kaddibna waxaa ku tukaday dadka oo kooxo kooxo ugu tukaday. Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu duulay sagaal iyo toban ghazwo, waxaa kaloo la yiri lix iyo labaatan duullaan. Duullaannada uu isaga laftiisu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam gacantiisa ku dagaallamayna waxaa weeye sagaal ghazwo. Al Madiinah kama uusan soo xajjiyin Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam waxaa ahayn xajjatu al wadaaci ee sanadka tobanaad ee hijrada ahaa. Waxaa Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam la duugay habeen arbaco ah, oo ah maalinta saddexaad ee maalinta la oofsaday Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, maalintaas la oofsadayna ay tahay maalin isniin ah. Waxaa Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam ku tukaday Al Cabbaas iyo Calii oo reer Banii Haashim hoggaaminaya. Kaddib waxaa soo galay Muhaajiriinta iyo Ansaarta kaddibna dadka, oo qofna uusan salaaddaas imaam qof kale ugu noqon, oo qof walba isagaa salaaddiisa tukanaya oo imaam ma jirin. Kaddibna waxaa soo galay haweenka, kaddibna caruurta. Maalintaas waxay la mid ahayd yawmu al qiyaamaha marka la fiiriyo xagga dhibaatadeeda iyo naxdinta iyo boohinta Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam loo booyayey, oo tegiddiisa laga naxay oo ay tegiddiisu dadka wax wayn ku ahayd." Waa intaas warka kitaabkaas.

Al Qasdhalaanii wuxuu ku yiri bogga afar boqol toddoba iyo soddon ee mujalladka koowaa ee sharaxiisa Al Laduniyyah: "Wuxuu ibnu Caadil ku xusay tafsiirkiisa inuu Jibriil, Calayhissalaamu, Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kusoo degay **afar iyo labaatan kun oo jeer**. Aadanna wuxuu kusoo degay laba iyo toban goor, Idriisna afar goor, Nuuxna konton goor, Ibraahiimna laba iyo afartan goor, Muusana afar boqol oo goor, Ciisana toban goor. Sidaas ayuu yiri Allaha u naxariistee!" Al Zarqaanii wuxuu intaas ku daray oo uu yiri: "Al Xaafithu Al Daymii wuxuu ku kordhiyey, siduu uga soo guuriyey ardaygiisa Al Shamsu Al Tataa'ii fii Sharxi Al Risaalah: "Yacquubna afar goor, Ayyuubna saddex goor." Waxaana halkaas ka cad inayan tiro kale soo gaarin oo Anbiyada kale ku saabsan."

(Laba) Nabi Aadan

Nabi Aadan, Calayhissalaamu, oo noolaa qiyaas shan kun iyo shan boqol iyo toddobaatan sano ka hor dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Nabi iyo Rasuulna u ahaa dhashiisa. Isagaana dadkoo idil dhalay.
Al Dhabarii, iyo ghayrkiisba, wuxuu kitaabkiisa taariikhda Mujalladka koowaad bogga laba iyo lixdan ilaa afar iyo lixdan ku yiri: "Markuu Ilaahay Tacaalaa doonay inuu Aadan abuuro ayuu malaa'igtiisa u sheegay, wuxuuna ku yiri: **"Innii jaacilun fii al ardi khaliifatan**(30)**"**, ahna Aayadda soddonaad ee Suuratu Al Baqarah oo macneheedu yahay: "Anigu waxaan abuurayaa khaliifo arliga camirah, oo ay dhashiisu facba faca kale uga dambeeyo(30)." Markaasay waxay ku yiraahdeen: **"a tajcalu fiihaa man yufsidu fiihaa wa yasfiku al ddimaa'a wa naxnu nusabbixu bi xamdika wa nuqaddisu laka qaala inni aclamu maa laa taclamuuna**(30)**"** oo ah isla Aayaddaas oo macneheeduna yahay: "ma waxaad arliga dhexdiisa yeeleysaa mid fasaadiya, oo fasaad waxaa la yiraahdaa diididda iyo khilaafidda awaamirta Ilaahay, dhiigna ku daadsha? Annaguna Adiga xamdigaagaan ku tasbiixsanna oo ku hufnaa, kuna waynaynnaa! Wuxuu yiri: "Anigu waxaan ogahay wax aydnaan adinku ogayn(30)", oo ku saabsan Ibliis. Markaasuu Ilaahay wuxuu arliga u diray Jibriil Calayhissalaamu inuu uga keeno dhoobo uu Aadan ka abuuro. Markaasuu dhulku wuxuu ku yiri, markuu damcay inuu dhoobo ka qaado: "Ilaahay ayaan kaa magan galay inaad jirkayga wax ka naaqusisid, aadna i fool xumaysid oo aad meel iiga dhacdid." Markaasuu ka gaddoomay isagoo aan waxba ka qaadin, wuxuuna Ilaahay Tacaalaa ku yiri: "Rabbiyow, dhulku adiguu ku magan galay, markaasaan magan geliyay." Markaasuu Miikaa'iil soo diray, oo uu dhulku isagana Ilaahay ka magan galay. Markaasuu ka gaddoomay, uuna yiri wax la mid ah wuxuu Jibriil yiri oo kale. Markaasuu soo diray Malaku Al Mawti, oo uu dhulku Ilaahay ka magan galay. Markaasuu malaguu wuxuu yiri: "aniguna Ilaahay ayaan ka magan galay inaan laabto anigoo aan amarkiisa fulin." Markaasuu dhulka wajigiisa kore wuxuu ka qaaday dhoobo, kamana uusan qaadin meel keli ah, ee wuxuu ka qaaday meelo kala duwan oo wuxuu qaaday oo isku daray dhoobo guduudan, mid cad, mid madaw. Taas ayaana u sabab ah inuu banuu aadanka midabyadiisu u kala duwan yihiin. Wuxuu ka qaaday arliga macaan iyo midka cusbada leh, midka carfoon iyo midda qurmoon, midda fiican iyo midda xunba. Taas ayaana u sabab ah inay dadku kala duwan yihiin. Aadan waxaa magacaas loogu bixiyay in laga abuuray adiimi al ardi oo ah wajiga arliga oo adiim la yiraahdo." Dhoobadaas biyo ayaa lagu qasay. Markaasuu Ilaahay labadiisa gacnood ku sameeyey oo uu markaas Aadan isagoo dhoobo qallashay oo dhoob oo kale noqotay ah, intaan nafta la gelin horteed wuxuu yiillay afartan habeen (afartan sanana waa la wariyay). Markaasuu Ibliis soo maraa oo uu lugtiisa ku dhuftaa, markaasuu jirka dhoobka ahi dhawaaqaa. Kaddibna intuu afka ka galo ayuu dabadiisa ka baxaa, oo uu dabadiisa ka galaa afkiisana uga baxaa, kaddibna uu ku yiraahdaa dhoobadaas qallashay: "waxba ma ihid! Mana ogi waxa laguu abuuray. Haddii awood la ii kaa siiyana waan ku halaagayaa, haddii adiga awood la ii kaa siiyana waan ku

caasiyayaa oo amarkaaga diidayaa!" Waaba tuu Ilaahay Tacaalaa Aayadaha sagaal iyo soddonaad iyo afartanaad ee Suuratu Al Xijri ku yiri: **"Qaala Rabbi bimaa aghwaytanii la uzayyinanna lahum fii al ardi wa la ughwinnahum ajmaciina**(39)**Illaa cibaadaka minhum al mukhlasiina**(40)**."** Aayadaha macneheedu waxaa weeye: "ibliis wuxuu yiri: "Rabbiyow i baadiyayntaada darteed arliga dhexdiisa ayaan u qurxinayaa, waana wada luminayaa dhammaantood(39)Intaan ka ahayn addoomaadaada si dhab ah kuu caabuda mooyee(40)." Wuxuu kaloo Ilaahay Aayadda laba iyo lixdan ee Suuratu Al Israa'i ku yiri: **"Qaala ara'aytaka haathaa allathii karramta calayya la'in akh-khartanii ilaa yawmi al qiyaamati la axtanikanna thurriyatahu illaa qaliilan**(62)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "ibliis wuxuu yiri: "bal ka warran midkaan aad aniga iga karaamaysay, oo iga sharaftay oo iga kor marisay, haddaad dib ii dhigtid oo aadan i dilin ilaa maalinta qiyaame, xididdada ayaan baadinnimo ugu siibayaa baadiyeen dhashiisa, in yar mooyee(62)."

Xadiithka Al Tarmathii ee Aadan

Al Tarmathii wuxuu wariyay Xadiithkaan Aadan ku saabsan, inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Lammaa khalaqa Allaahu Aadama jacala thaalika al nnuura fii thahrihi fa kaana yalmacu fii jabiinihi fa yaghlibu calaa saa'ira nuurihi, thumma rafacahu Allaahu Tacaalaa calaa sariiri mamlikatihi wa xamalahu calaa aknaafi malaa'ikatihi wa amarahum fa dhaafuu bihi fii Al Ssamaawaati li yaraa cajaa'iba Malakuutihi".** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Ilaahay Tacaalaa markuu Aadan abuuray wuxuu nuurkaas ku kaydiyay -waana nuurka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam-dhabarkiisa. Markaasuu wuxuu nuurkaasi ahaa, xooggiisa daraadiis, midka ka hillaaca oo ka kaaha wajigiisa. Markaasuu nuurkaasu ka xoog batay oo ka iftiin batay nuurka kale ee jirka Aadan, ama nuurarka kaleba oo uu Ilaahay ku abuuray Aadan ghayrkiis, sida nuurka Anbiyada kale oo idil. Kaddibna Ilaahay Tacaalaa kor ayuu ugu qaaday sariirta Boqortooyadiisa, wuxuuna ku qaaday garbaha Malaa'igtiisa, uuna amray, markaasey kula soo dawaafeen Samaawaatka, si uu u arko cajaaibka Boqortooyadiisa"

Al Tarmathii wuxuu kaloo wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: "Lammaa akmala Allaahu khalqa Aadama rafacahu calaa aknaafi Jibriila wa Miikaa'iila wa Israafiila wa Cazraa'iila calaa sariirin min thahabin aw yaaquutin axmara lahu tisca mi'atin qaa'imatin, fa qaala: "Dhuufuu bihi fii Samaawaatii li yaraa cajaa'ibahaa. Thumma amarahum an yuxawwiluu wujuuhahum ilaa Al Carshi li yasjuduu qibaalatahu. Fa facaluu, wa li thaalika yaxmilu janaazata awlaadihi arbacatun. " Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Markuu Ilaahay kaamilay abuuridda Aadan ayuu ku kaydiyay nuurkaas, oo ah nuurka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dhabarkiisa, oo ah dhabarka Aadan. Markaasuu nuurkaasu xoogga iftiinkiisa ka hillaacayey wajigiisa, oo uu markaas ka

xoog batay inta kale oo nuurarkiisa ah, ha ahaado nuurka Aadan oo jirkiisa ku sugnaa, ama nuurarka kale oo idil oo Aadan ghayrkiis lagu abuuray, sida nuurarka Anbiyadoo kale. Markaasuu markuu kaamilay abuuridda Aadan wuxuu ku qaaday Jibriil iyo Miikaa'iil iyo lsraafiil iyo Cazraa'iil, isagoo saaran sariir dahab laga sameeyey ama yaaquut guduudan oo sagaal boqol oo lugood leh. Markaasuu wuxuu yiri: "Kusoo dawaafiya, oo soo mariya, Samaawaatkeyga, si uu cajaa'ibteeda iyo la yaabkeeda ku dhex suganba usoo arko." Kaddibna wuxuu amray inay wajiyadooda u jeediyaan xagga Carshiga, oo ay xaggiisa u sujuudaan. Markaasey yeeleen. Taas ayaana u sabab ah in janaazada dhashiisa ay afar qof qaadaan." Sariirtaas uu Aadan saarnaa waxay ayagu (waa Malaa'igtee) dhexdooda ku magaaci jireen "Sariirta Boqortooyada". Caalinka Xadiithka sharxayna wuxuu yiri: "Kor u qaadiddu waa sarbeeb uu macnihiisu yahay oo tilmaameysa sarreynta makaanka sare loogu qaaday iyo waynaantiisaba, oo markaasuu wuxuu xaaladdiisa uu ahaa ka dhigay sida xaaladda qof sariir korkeeda ahaaday, oo markaas lagula soo dawaafay jihooyin aan la caddayn. Marka asalku waa xaqiiqada". Kaddibna wuxuu ku qaaday garbaha Malaa'igtiisa, Malaa'igtiisa ayuuna amray markaasey kula soo dawaafeen Samaawaatkiisa, si uu Adan u arko la yaabka iyo waynaanta Boqortooyadiisa."

Kacb Al Axbaar ayaa la weydiiyay: "Intee goor ayay Malaa'igtu Aadan Samaawaatka kula soo dhawaaftay?" Wuxuu yiri: "Saddex goor, oo marka ugu horreysana wuxuu saarnaa sariirta ah "Sariiru Al Karami" (oo ah sariirta karaamada ama karaameynta), marka labaadna isagoo saaran baalasha Malaa'igta, marka saddexaadna isagoo saaran faraska la yiraahdo Al Farasu Al Maymuunu, oo ka sameysan miskiga noociisu yahay Al Misku Al Athfaru, lehna labo baal oo ka sameysan luul iyo murjaan, ayadoo uu Jibriil hoggaankeeda hayo, Miikaa'iilna uu xagga midigta ka yahay, Israafiilna xagga bidixda. Markaasey kula soo dhawaafeen Samaawaadka oo idil, isagoo isaguna salaamaya Malaa'igta ka ahaata xagga midigta iyo kuwa ka ahaada xagga bidixdiisa, uuna leeyahay: "Al Ssalaamu Calaykum wa Raxmatu Allaahi wa Barakaatuhu", ay ayaguna intaasoo kale ugu jawaabayaan. Markaasaa waxaa Aadan lagu yiri: **"Haathihi taxiyyatuka wa taxiyyatu thurriyataka ilaa Yawmu Al Qiyaamati",** oo macneheedu yahay: "Tani waa salaantaada iyo salaanta dhashaada ilaa Yawmul Qiyaamaha".

Ruuxa iyo ku sugnaantiisa jirka Aadan

Jacfar bin Muxammad wuxuu yiri: "Ruuxu wuxuu ku sugnaa madaxa Aadan boqol sano, oo ah inta laabta ka korreysa, laabtiisana wuxuu ku sugnaa boqol sano, oo ah inta lugaha ka korreysa; labadiisa lugoodna wuxuu ku sugnaa boqol sano, oo ah inta laabta ka hooseysa oo ay calooshu ka mid tahay". Muraadka laga leeyahay tirooyinkaas waa badin zamankaas iyo mudadiisa la badinayo, tanoo aan diideyn in mudada u dhexeysa bilowga abuuriddiisa ilaa usoo degiddiisa arligaan ay tahay saddex boqol iyo sideetan sano." Sidaasoo kale waxaa isaguna yiri ibnu Jariir, oo mudadaas

afar bilood ka dhimay. Ibnu Jariir ghayrkiisna waxay yiraahdeen: "Mudadu intaas wax badan ayay ka badantahay." Shiikhuna wuxuu isku kallifay inuu helo wax is waafajiya tirada uu sheegay iyo midda uu Jacfar sheegay, wuxuuna yiri: "Tiradaasi waxay ku saleysan tahay in mudada uu Adan dhoobo ahaa ay ahayd intuusan Jannada gelin ka hor, ama in laga soo saaray Jannada maalinta ku xigta marka abuuriddiisa dhexdeeda lagu bilaabay, abuuriddiisuna ayan kaamilimin muddo dheer kaddib mooyee. Waxaana jirta inuusan Jacfar qabin aragtida Ibnu Jariir, uusanna taas raalli ku ahayn, ayadoo uu Ibnu Cabbaas yiri: "Wuxuu Adan Jannada dhexdeeda ku sugnaaday shan boqol oo sano." Waxaa kaloo, la yiri: "Intaasoo kale, waa shan boqol oo sanee, ayay Malaa'igtu sujuuddooda ku sugnaayeen, ka badanna waa la yiri." Sidaas ayay u jiraan aragtiyo kala duwan, waxaana habboon in midkood la raajixiyo, mase ay habboona in lagu madax adkaado in aragtiyadaas la mideeyo oo xagga caqliga laga banneeyo."

Sida Aadan magacda loo baray

Jacfar bin Muxammad wuxuu yiri: "Kaddib Ilaahay Tacaalaa wuxuu baray magacda dhammaan waxa makhluuqaadka ah oo la abuuray." Sideebuu Ilaahay u baray? Waxaa la yiri: wuu ku ilhaamiyay, ama Aadan dhexdiisuu cilmiga lagama maarmaanka ah ku abuuray, ama caqligiisa iyo maskaxdiisa ayuu ku ganay, ama Malaa'ig loo xilsaaray ayaa bartay. Imaam Al Qurdhubii wuxuu yiri: "waxaa baray Jibriil." Wakiic wuxuu Tafsiirkiisa uga wariyay ibnu Cabbaas inuu hadalka Ilaahay oo ku xusan Aayadda kow iyo soddonaad ee Suuratu Al Baqarah oo ah: **"Wa callama Aadama al asmaa'a kullahaa**(31)**"** oo macneheedu yahay "Wuxuuna baray Aadan magacyada dhammaan(31)" ka yiri: "Wuxuu baray shay walba kulligiis xattaa xeerada ama baaquliga iyo dhuusada."

Malaa'igta sujuudda lagu amray

Kaddib Ilaahay wuxuu amray Malaa'igta inay u sujuudaan. Malaa'igtaasi, sida uu eraygu mid guud u yahay, waa dhammaantood, ayadoo aan midkoodna lagu gooni yeelin. Ama waa Malaa'igta arliga, ama waa Ibliis iyo inta Malaa'igta ah oo isaga kala qayb gashay la dagaallanka Jinniga, ayadoo uu Ilaahay Tacaalaa markii hore ayaga arligaan dejiyay, markaasey dhexdiisa fasaad ka rideen. Markaasuu Ilaahay Tacaalaa wuxuu u diray ciidan Malaa'ig ah oo uu Ibliis hoggaaminayo. Markaasey laayeen oo ay Jasiiradaha iyo buuraha dushooda ku takooreen intoodii ka hartay. Malaa'igtana waxaa la amray inay u sujuudaan Aadan kaddib markuu Ilaahay cilmiga siiyay. Markaasuu Malaa'igta weydiiyay, markay aqoon weydeyna uu isagu magacda shay walba sheegay, oo Ilaahay sidaas kusoo saaray deeqda uu Malaa'igta dheer yahay, ayna ayaga waajib ku noqotay korkooda inay isaga u adeegaan, taasoo uu ku mutaystay cilmiga uu dheer yahay. Sidaas ayayna Aayadaha Suuratu Al Baqarah. u kala hormarinayaa dhacdooyinkaas. Waxaa kaloo la yiri: waxayba u sujuudeen horeba marka

Aadan ruuxa lagu afuufay, siday u muuqato Aayadda sagaal iyo labaatanaad ee Suuratu Al Xijri. Imaamka dhigay kitaabka Siirada ah ee la yiraahdo Taariikhu Al Khamiisi iyo ibnu Caqiil waxay yiraahdeen fa'da ku jirta Aayadda ee faqacuu waaba daba marin iyo dib u dhigid muddo kaddib, kaddib marka ruuxa lagu afuufay. "Markaasey sujuudeen intaan Ibliis ka ahayn oo diiday. Markaasuu Ilaahay Tacaalaa Naxariistiisa ka eryay, kana fogeeyey Jannadiisa, taasoo ah dullayn adduun iyo Aakhiraba, kaddib markuu ka mid ahaa koox Malaa'ig ah oo la yiraahdo Al Jinnu, sida laga wariyay Ibnu Cabbaas iyo Ibnu Mascuud iyo ghayrkoodba. Al Qurdhubii wuxuu sheegay inuu Jamhuurku (waana culummada intooda badane) ay sidaas qabaan, Al Nawawina uu saxiix ka dhigay inaan la warin in ayaga ghayrkooda la amray inay sujuudaan, oo soociddaas laga reebay Ibliis inay sujuudeen isaga mooyee, waa Malaa'igtaas sujuudda la amray. Qaalli Cayaadna wuxuu yiri: "Culummada intooda badani waxay leeyihiin inuusan Ibliis il biriqsina Malaa'igta uga mid noqon, uuna isagu yahay asalka ay Jinnigu ka farcameen, sida uu insigu Aadan uga farcamay oo kale, uuse ka mid ahaa jinniga ay Malaa'igtu ka adkaatay oo ay laysay, oo uu markaas Malag isaga soo qafaalay isagoo yar, oo uu Samada la aaday." Sidaas ayuuna Al Sayyuudhii raajixay, in Malaa'igta oo idil la amray, oo ay wada sujuudeen, sida ay Axaadiithtu kusoo aroortay." Hadalka Al Nawawii oo ah inaan la warin in ghayrkood sujuudda la amrayna waxaa diiday warinta ibnu Caqiil oo, Tafsiirkiisa ku diiday iyo Taariikhu Al Khamiisi oo wariyay in Malaa'igta iyo caalanka oo idil markaas la amray, laakiinse hadalka amarka ah ayaga Malaa'igta ah loo jeediyay, oo lagu gooni yeelay, ayagoo waqtigaas khalqiga ugu sharaf badnaa, inta kalena ay ayaga raacsan yihiin."

Sujuudda

Waxaa la isku khilaafay sida ay Malaa'igtu u sujuudeen, intooda badanna waxay yiraahdeen: waa amar Malaa'igta lagu amray inay wajiyadooda dhulka dhigaan, sida sujuuddeenna markaan tukaneynno Salaadda, oo af ahaan iyo sharci ahaanba taas ayaa sujuud la yiraahdaa, sidayna u tilmaameyso Aayadda sagaal iyo labaatanaad ee Suuratu Al Xijri: **"Fa qacuu lahu saajidiina**(29)**"** oo macneheedu yahay: "Ugu dhaca sujuud(29)".

Waxaa kaloo Ubayya iyo ibnu Cabbaas laga wariyay inay sujuuddaasu ahayd Al Inxinaa'u oo ah dhabarka oo hore loo soo laabo, ayanse ahayn ayadoo dhulka lagu sujuudo, sida la yeelo marka madaxda waaweyn lala kulmo oo dhabarka hore loo soo laabo. Qolana waxay tiri inay sujuuddaasi tahay is dullayn iyo hoggaansan, ayadoo uu Ilaahay Malaa'igta Aadan iyo dhashiisa ugu sakharay soo dejinta iyo soo di'inta roobka iyo ilaalinta raadkooda iyo dhigidda acmaashooda iyo la koriddeeda ayagoo sida Samada. Sujuudda ay Aadan u sujuudeenna waxay ahayd sujuud waynayn iyo salaamid iyo muujin deeqdiisa iyo u hoggaansanaan iyo adeecid amarka Ilaahay, mana ayan ahayn sujuudid cibaado iyo addoonsi, ayadoo, ayan cibaado u sugnaan Ilaahay Tacaalaa mooyee, lana mid ah sujuudday ay

Yuusuf walaalihiis isaga laftiisa u sujuudeen. Kan loo sujuudayaana run ahaantana waa Ilaahay Tacaalaa, Aadanna waa Qiblada oo kale, sida markaan tukaneynno aan Kacbada Qibladeenna ah ugu jeesanno, laakiinse aan Ilaahay u sujuudeynno. Qataadana wuxuu yiri: "Sujuuddaasi waxay ahayd khidmo ama adeegid Ilaahay iyo xurmayn Aadan la xurmeynayo, sida Salaadda Janaazada oo kale ay cibaado Ilaahay u tahay, isla markaasna duco maytka loo ducaynayo." Al Xasan wuxuu yiri: "Sax waxaa ah inay sujuuddaasi salaan Aadan gooni ahaan loo salaamayay, oo hadday cibaado Ilaahay ahaan lahayd, Aadanna uu Qiblo ahaan lahaa, Ibliis iskalama kibreen oo iskalama weynaadeen." Aragtidaasna waa fiiro loogu noqdaa, oo Al Qurdhubii wuxuu sheegay in la isku waafaqsanyahay inayan sujuudid cibaadeysi ahayn, taasoo mamnuuc ah (in Aadan cibaadeysi loogu sujuudo), oo isla weynaantiisa uu Ibliis sujuudidda ka kibray oo uu iskala weynaaday waxaa weeye inuusan isagu Qiblo ahayn, malayn uu u malaynayo inuu Aadan iyo ghayrkiisba uu wax dheer yahay oo ka sarreeyo." Al Shacbiyyuna wuxuu yiri: "Hadalka Ilaahay oo ku. xusan Aayadda afar iyo soddonaad ee Suuratu Al Baqarah oo ah: **"Usjuduu li Aadama**(34)**"** oo macneheedu yahay: "U sujuuda Aadan(34)" macneheedu waxaa weeye sida loo yiraahdo "wuxuu u tukaday Qiblada" waxaa diidaya in la yiraahdo "Qiblada xaggeeda ayuu u tukaday", ee ayada lafteeda uma tukan, oo waa Sallaa ilaa al Qiblati ee ma aha Sallaa lahaa."

Waxaa laga wariyay Jacfar Al Saadiqu ahna ibnu Muxammad Al Baaqir bin Cali bin Al Xusayn bin Calii bin Abii Dhaalib, Allaha dhammaantood raalli ka noqdee, koofaartaasna loogu bixiyay runlownimadiisa, kana mid ahaa madaxda Ahlu Al Baytka ee waqtigiisa, dhashayna sanadka Hijriga ee sideetan ama saddex iyo sideetan, la oofsadayna sanadka boqol iyo sideed iyo afartan, una dhigay Ehelu Baytka kitaab harag lagu dhigay oo ay ku dhigan yihiin waxay cilmigiisa, uga baahnaayeen, iyo waxa ahaan doona ilaa Yawmul Qiyaamaha, inuu yiri: "Wuxuu ahaa kan ugu horreeya oo Aadan u sujuuday Jibriil, kaddibna Mikaa'iil, kaddibna Israafiil, waxaana ku xigay Cazraa'iil (oo ah Malakul Mawtka qabta arwaaxda oo idil kuwa Jinniga iyo Insiga iyo bahaa'inta xoolaha ah iyo makhluuqaatka oo idil)".

Malaku Al Mawti

Malakul Mawtku waa Malagga qabta, arwaaxda oo idil kuwa Jinniga iyo Insiga iyo bahaa'inta xoolaha ah iyo makhluuqaatka oo idil. Nin baa wuxuu Imaam Maalik weydiiyay: "Xasharaadtka ruuxooda ma waxaa qabtah Malakul Mawtka?" Markaasuu Imaam Maalik cabbaar aamusnaa oo uu fakarayey, kaddibna wuxuu yiri: "Naf ma leeyihiin?" Wuxuu ninkii yiri: "Haa" Imaam Maalik wuxuu markaas yiri: "Hadaba Malaku al Mawti ayaa ruuxooda qabanaya, oo nafta ka qaadaya. Ilaahay ayaana oofsada nafta markay dhimaneyso". Imaam Maalik wuxuu daliil ka dhigtay Aayadda labo iyo afartanaad ee Suuratu Al Zumar oo oraneysa: **"Allaahu yatawaffaa al anfusa xiina mawtihaa**(42)**",** oo, macneheedu yahay: "Ilaahay ayaa oofsada nafta markay dhimaneyso(42)". Waxaa wariyay Al Khadhiibu,

waxaana ayyida Xadiithka kale oo ay wariyeen Al Dhabraanii iyo Ibnu Mandah iyo abuu Nucaym, oo oranaya inuu Malag Cazraa'iil Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku yiri: ”Wa Allaahi haddaan doonayo inaan qabto ruuxa kaneeco, ma karo jeer uu Ilaahay ithmo qabashadeeda."

Qaybta kale ee Xadiithka Sujuudda

"Afartaas Malag kaddibna waxaa sujuuday Al Malaa'ikatu Al Muqarrabuuna, oo ah Malaa'igta Ilaahay soo dhoweeyey". Sidoo kale Wahab bin Munabbih wuxuu yiri: "Kan ugu horreeyey oo Aadan u sujuuda wuxuu ahaa Jibriil, markaasuu Ilaahay ku karaameeyey inuu Anbiyada Waxyiga usoo dejiyo, gaar ahaan Sayyidka Mursaliinta Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Waxaa ku xigay oo Aadan u sujuuday Miikkaa'iil, kaddibna Israafiil, kaddibna Cazraa'iil, kaddibna Malaa'igta intooda kale. Waxaa laga wariyay Abii Al Xasan Al Naqqaash inuu kan ugu horreeyey oo sujuuda uu ahaa Israafiil. Waxaa isaguna sidaas oo kale wariyay ibnu abii Xaatim, oo ka wariyay Damrah iyo Al Salafii oo ay wariyeen inuu Cumar bin Cabu Al Caziiz, Allaha raalli ka. noqdee, yiri: "Taas daraadeed -oo ah inuu Israafiil ahaa midka ugu horreeya oo Aadan u sujuuda- wuxuu Ilaahay abaal marin uga dhigay inuu ka adeego xagga Al Llawxu Al Maxfuuthu", oo ah inuu akhristo oo uu daalacdo waxa ku dhigan, uuna ku tasarrufo adeeggiisa, isagoo tusaale ahaan waxa ku dhigan kasoo guuriya oo Malaa'igta u gudbiya." Waxaa kaloo la yiri: Markuu wajigiisa sujuudda kasoo qaaday, ayaa waxaa u muuqday Quraanka oo idil oo wajigiisa ku dhigan, karaameyn lagu karaameynayo hormaridda uu fulinta amarka Ilaahay u hormaray. Al Azraqii wuxuu yiri: "Riwaayaddaan inuu Israafiil ahaa midka ugu horreeyey oo sujuuday waxay khilaafsan tahay midda laga wariyay Jacfar oo ah inuu Jibriil ahaa midka ugu hor sujuuday. Sheekheenna ayaana is waafajiyoo yiri: ficil ahaan kan ugu horreeyey oo sujuuday wuxuu ahaa Israafiil, kanse ugu horreeyey fulinta amarka Ilaahay wuxuu ahaa Jibriil", wuxuuna yiri: "Waxaa dhici karta in sababta ay mar u wada sujuudi waayeen inay tahay in kooda ugu hor sujuuda uu ishaarada u garatay in isaga marka hore toos loola hadlayo". Labadaas riwaayadoodna in la is waafajiyo hakad iyo fiiro ayaa ku jira.

Waxaa Ibnu Cabbaas laga wariyay inuu yiri: "Inta Aadan loo sujuudsanaa waxay ahayd maalinta jimce laga bilaabo markay qorraxdu beerka Samada ka iilatay ilaa casarka", waana inta mudadaas u dhigantah haddii maalmaha adduunka loo fiiriyo, oo waxaan shaki ku jirin in Aadan la abuuray saacadda ugu dambeysa ee maalinta jimcaha ah, oo la mid ah kun sano ee adduunkaan."

Abuuridda Xaawo

Cabdu Allaahi ibnu Cabbaas oo Xadiithkiisa sii wada wuxuu yiri: "Aadan kaddib wuxuu Ilaahay Tacaalaa Aadan u abuuray haweentiisa Xawwaa', uuna ka abuuray feer ka mid ah feerihiisa saabkiisa bidix." Taas

macneheedu waxaa weeye: waxaa feertaas Xaawo looga soo dhex saaray sida ay lafta timirta marka la abuuro geed timireed uu uga soo baxo oo kale. Meesha ay feertaasi Aadan uga tiilayna waxaa la geliyay hilib. Al Qurdhubii wuxuu yiri: "Waxaa loo qaadan karaa inay taas macneheedu tahay in feer laga abuuray, oo feertuna way qalloocan tahay, sidaas ayay ayaduna u qalloocan tahay." Waxaa feertaas laga abuuray isagoo uu Adan hurdo, si uusan xanuun u dareemin; xanuunkuna wuxuu ninka u dumaa oo uu jeceyl u geliyaa haweenta, siduu Al Qurdhubii iyo ghayrkiisba ay yiraahdeen. Xaawo waxaa Xawwaa' loogu bixiyay ayadoo qof nool laga abuuray, oo Xawwaa' macneheedu waa tii nooleyd. Al Qurdhubii wuxuu sheegay inuu ahaa Aadan midka magacaas u bixiyay, oo markuu hurdada kasoo kacay oo uu arkay ayadoo madixiisa fadhida ayuu wuxuu weydiiyay: ”Yaad tahay?" Waxay tiri: "Haweentaada." Wuxuu yiri: ”Oo maxaa laguu abuuray?" Waxay tiri: "Inaad igu xasishid, aniguna aan kugu xasilo". Markaasey Malaa'igtu waxay dooneen inay Aadan cilmigiisa ku imtixaanaan, waxayna yiraahdeen: "Middaanna waa tuma?" Wuxuu yiri: "Waa imra'ah, oo ah waa haweeney". Waxay yiraahdeen: "Magaceeduna waa maxay?" Wuxuu yiri: "Xawwaa"'. Waxay yiraahdeen: "Oo maxaad imra’ah u tiri?" Wuxuu yiri: "Maxaa yeelay waxaa laga soo qaatay oo abuuray imri'un, oo ah nin". Waxay yiraahdeen: "Maxaad Xawwaa' ugu bixisay?" Wuxuu yiri: "Maxaa yeelay waxaa laga abuuray qof nool. "

Kitaabka Fatxu Al Baarii bi sharxi Saxiixi Al Bukhaarii-na wuxuu sheegay in Xawwaa'a, oo uu mad saaranyahay, loogu bixiyay ayadoo hooyada shay' kulligiis ah.

"Markaasuu markuu hurdada kasoo kacay oo uu arkay ayuu xasilay, uuna degay, ayada xaggeeduuna u iishay, ayadoo uu Ilaahay Tacaalaa ku ilhaamiyay."

Meesha Xaawo lagu abuuray

Waxaa la isku khilaafay in Xaawo Jannada dhexdeeda lagu abuuray iyo in kale. Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Waxaa la abuuray ka hor intuusan Aadan Jannada gelin, waxaana u daliil ah Aayadda shan iyo soddonaad ee Suuratu Al Baqarah, oo Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa ku yiri: **"Wa qulnaa yaa Aadamu askun anta wa zawjuka Al Jannata**(35)**",** oo macneheedu yahay: "Waxaanna niri: Aadanow deg adiga iyo haweentaaduba Jannada(35)." Sidaas ayaana Ibnu Cabbaas looga wariyay, sidaas ayuuna Al Sayyuudhii ku sugay kitaabkiisa Al Tawshiix. Waxaa kaloo la yiri: bal waxaa lagu abuuray Jannada dhexdeeda, kaddib markuu Aadan Jannada galay, ayadoo marka Jannada la dejiyay uu dhexdeeda ku socday isagoo cidlooday oo wehel doon ah. Markaasuu markuu seexday ayada feertiisa gaaban laga abuuray ee saabkiisa bidixeed, si uu ugu xasilo, uuna u weheshado. Markaasuu markuu hurdada kasoo baraarugay arkay, uuna ku yiri: "Yaad tahay?" Waxay tiri: "Haweeney laga abuuray feertaada, si aad iigu xasishid, aniguna aan kugu xasilo." Sidaas waxaa yiri ibnu Cabbaas iyo Ibnu Mascuud iyo ghayrkoodba. oo saxaabada ka mid ah, intaas ayayna kusoo koobeen Al Qurdhubii iyo Al Khaazin. Ibnu Cuqayl wuxuu yiri: "taas

ayaa loo nisbeeyey mufassiriinta intooda badan, sidaas ayaana loo yiri: Ilaahay ku yiri Aadan: **"Wa qulnaa yaa Aadamu askun anta wa zawjuka Al jannata",** oo macneheedu yahay: "Waxaanna niri: "Aadanow deg adiga iyo haweentaaduba Jannada", kaddib markuu ayada abuuray, ayagoo ay labadooduba Jannada ku dhex jiraan." Waxaa kaloo la yiri: wuxuu Ilaahay sidaas yiri ka hor intuusan Xaawo abuurin, hadalkuna wuxuu u socdaa ayada oo aan jirin, laakiin Cilmiga Ilaahay ku sugan.

Meherka Xaawo: Salliga Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam

"Markaasuu xaggeeda gacanta u taagay -isagoo doonaya inuu la gogol galo, amaba uu ku macaansado la gogolgelid la'aanba-, markaasey Malaa'igtu waxay tiri: "Mah yaa Aadamu", oo ah "ka joogso Aadanow". Wuxuu yiri: "Maxaan uga joogsanayaa ayadooba uu ayada Ilaahay aniga ii abuuray?" taasoo uu Ilaahay u ilhaamiyay, ama cilmiga lagama maarmaanka ah ah, ama uu ayadaba ka ogaaday markay u sheegtay in isaga loo abuuray. Markaasey waxay yiraahdeen: "Ka joogso, oo ha taaban jeer aad meherkeeda bixisid." Wuxuu yiri: "Meherkeeduna waa maxay?" Waxay yiraahdeen: "Waa inaad Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku sallidaa saddex goor". Waxaana halkaas ka cad inay Malaa'igtu arrinkaas ku ogaadeen ayadoo loo waxyooday.

Al Callaamah abuu Al Faraj Cabdu Al Raxmaan bin Cali, al xaafith, al Bakrii Al Siddiiqii oo ah dhasha Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, saaxiibkiisa ghaarka Abuu Bakar Al Siddii Allaha raalli ka noqde, al Baghdaadii, al Xanbalii, loona yaqaanno Ibnu Al Jawzii, al waacith, oo dhigay kutubbo, funuunta oo idil ku saabsan, waa qaybaha kala duwan ee cilmiga Diintee,, oo uu al xaafith (ibnu Xajar Al Casqalaanii) kitaabkiisa taariikhda uga yiri: "ma ogi qof allafay oo dhigay wuxuu allafay oo kale, kana gaaray wacthinta waa waanintee makaankuu ka gaaray, waxaana la yiri: majaalistiisa qaarkood waxaa kasoo qayb galay oo yimid boqol kun oo qof, waxaana gole joog ka ahaa boqorro iyo waiziirro iyo Khulafaa', wuxuuna isagoo minbarka saaran yiri: "Waxaan farteyda ku dhigay kun mujallad", waxaana gacanteyda ku tawbad keenay boqol kun oo nin, waxaana gacanteyda ku islaamay labaatan kun oo qof, wuxuuna dhintay maalin jimce ah ee bisha Ramadaan ay saddex tahay ee sanadka shan boqol iyo toddoba iyo sagaashan. "Waxaa Ibnu Al Jawziyyi loogu bixiyay oo loogu koofaaray ayadoo uu gurigooda dhexdiisa geedka jawzku ku yiillay. Intaasuu warka Al Xaafith ibnu Xajar ku egyahay. Ibnu Al Jawziyyi-gaani ma aha midka boqol sano ka dambeeyey oo ahaa Shamsu Al Diin abuu Cabdu Allaahi Muxammad bin Abii Bakar bin Ayyuub ibnu Sacad bin Xurayz Al Zarciyyu oo loogu bixiyay isagoo tuulada Zarc ee Xawraan ka tirsan ee dalka Suuriya, looguna bixiyay Ibnu Al Jawziyyah isagoo loo nisbeeyey Dugsiga Dimishiq ku yiillay oo uu aasaasay Muxii Al Diin abuu Al Maxaasin Yuusuf bin Cabdu Al Raxmaan bin Cali Al Jawzii, loona yiqiinna Al Madarisatu Al Jawziyyah, taasoo uu Ibnu Al Qayyin aabihiis madax ama agaasime ka ahaa, eraygaasoo afka Carabiga Qayyim lagu

yiraahdo: marka ibnu Al Qayyim macneheedu waxaa weeye wiilka uu agaasimuhu dhalay.
Ibnu Al Jawzii abuu al Faraj wuxuu kitaabkiisa Sulwatu al Axzaani -oo macneheedu yahay "Daawada xuzniga ama calool xumida, murugta iyo tiiraanyada qaadda", takhaatiirtuna waxay daawadaas u yaqaannaan -siduu Al Raazii Mukhtaaru Al Sixaax ku yiri: Al Mufarrixu oo ah kan faraxa geliya- ku yiri: "Markuu Aadan Xaawo doonay oo uu dalbay, ayay ayaduna meher weydiisatay oo ay ka dalbatay, ayadoo hadalka Malaa'igta maqashay, ama lagu ilhaamiyay, ama cilmi aqoontiisu ay lagama maarmaan tahay u lahayd. Markaasuu Aadan wuxuu yiri: "Maxaan siiyaa?" Markaasuu Ilaahay wuxuu ku yiri, isagoo u waxyooday ama toosba ugu yiri: **"Yaa Aadamu salli calaa Xabiibii Muxammad bin Cabdi Allaahi cishriina marratin"** oo macneheedu yahay: "Meher ahaan u sii oo ku salli midkaan jeclahay Muxammad bin Cabdu Allaahi labaatan goor." Waxaad mooddaa inuu Aadan Ilaahay Tacaalaa weydiistay caddayn dheeri ah, kaddib markay Malaa'igtu ku tiri inuu saddex goor Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku salliyo, taasoo meherka Xaawo ah. Markaasuu Ilaahay Tacaalaa weydiiyay wuxuu siiyo, tanoo aan diidayn waxay Malaa’igtu ku tiri inuu siiyo. Ama isagaaba u gartay inay taasi Malaa'igtu ijtihaadkooda ku gaareen oo uu markaas amarka. Ilaahay doonay. Tiro yar oo la sheegayna ma diideyso tiro ka badan inay ahayd. Waxaaba kaloo dhici karta inuu hadalka Malaa'igtu ayaga ka yimid, ujeedadiisuna ay tahay inuu Aadan iyo Xaawo sidaas jacayl ku dhexmaro isku xira, amarka llaahayna, oo ahaa labaatan salli uu ahaa markuu damcay inuu Xaawo u dhowaado sida warkaba ka muuqata. Sidaas ayuu meherka Xaawo wuxuu ahaa saddex iyo labaatan salli ee Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Waxaa saxiix ah inuu salligu meher noqon karo, ayadoo markuu Aadan (ama. nin kastaba) salliga ku dhawaaqay isagoo meherkeeda ula dan leh, ajarka salligaas waxaa iska leh Xaawo. Isla markaasna faaiidada salligaas isagana way u sugnaaneysaa, ujeedada meherkuna ayaduu u noqonayaa oo u sugnaanayaa.
Markaassuu Aadan amarka la faray yeelay oo uu fuliyay, isagoo Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, saddex iyo labaatan goor ku salliyay. Riwaayad kalena waxay leedahay: "Markuu Aadan Xaawo gacanta u taagay isagoo doonaya, ayay Malaa’igtu waxay tiri: "Mah yaa Aadamu", oo ah "dib u joogso Aadanow, jeer aad nikaaxsatid". Markaasuu Ilaahay ku nikaaxay, khudbana uu jeediyay oo uu yiri: **"Al Xamdu Lillaahi, wa Al Cathamatu izaarii, wa al Kibriyaa'u ridaa'ii, wa al khalqu kulluhum cabiidii wa imaa'ii. Ash-haduu yaa Malaaikatii wa Xamalata Carshii wa sukaanu Samaawaatii Annii zawwajtu Xawaa'a amatii cabdii Aadama, badiicu qudhratii, wa saniicu yadii calaa sadaaqin Taqdiisii wa Tasbixii wa Tahliilii. Yaa Aadamu askun anta wa zawjuka Al jannata wa kulaa minhaa raghadan xaythu shi'tumaa wa laa taqrabaa haathihi al sh-shajarata fa takuunaa mina al th-thaalimiina",** oo macneheedu yahay: "Al Xamdu Lillaahi, waynaantuna waa go'ayga, kibirkuna waa garba saarteyda, khalqiguna kulligood waa addoommadeyda,

rag iyo haweenba. Markhaati ka noqda Malaa'igteydey, iyo Malaa’igta ah kuwa Carshiga Xambaarsanow iyo kuwa Samaawaatkeyga degganow inaan addoonteyda Xaawo u guuriyey addoonkeyga Aadan, meherkeeduna uu yahay Taqdiisii oo ah weyneynteyda iyo dahiriddeyda, iyo Tasbiixdeyda iyo inuu yiraahdo Laa ilaaha illaa Allaahu. Aadanow deg adiga iyo haweentaaduba Jannada, kana cuna xaggeeda cunno shifo iyo waasac ah meeshaad doontaan, hana u dhowaanina geedkaan, oo aad markaas ka mid noqotaan thaalimiinta." Riwaayaddaanna waxaa wariyay kitaabka Taariikhu Al Khamiisi. Runtana Rabbi ayaa og.

Geedka laga reebay

Kaddib Ilaahay Tacaalaa wuxuu Aadan iyo Xaawo u banneeyey nicmooyinka Jannada, wuxuuna ku yiri: "Aadanow adiga iyo haweentaadu Jannada dega". Al Qurdhubii wuxuu yiri: "Hadalkaas, Ilaahay wuxuu kaloo tilmaamayaa inay Jannada ka bixi doonaan, maxaa yeelay degiddu milkin ma aha, ee muddo ayay soconeysaa, kaddibna way go'aysaa, oo sidaas ayay geliddooda Jannadu waxay u ahayd gelid degideed ee ma ayan ahayn gelid thawaab iyo ajar siin oo aan go'ayn ee waareysa."
Ibnu Cadhiyyah wuxuu yiri: "digidda looga digayo inayan geedkaas u dhowaan oo lagu yiri: "Laa taqrabaa haathihi al shajarata" waxay daliil u tahay inayan degidda Jannada ku waareyn, ayadoo qofka ku waaraya aan waxba loo diidin, waxna lagu amrin, waxna laga reebin." Markaasuu Ilaahay ka reebay geedka la yiraahdo Al Xindhatu, ahna geedka mirihiisa burka laga sameeyo, siday yiraahdeen Ibnu Cabbaas iyo Al Xasan iyo Cadhiyyah iyo Qataadah iyo Al Qurathii iyo Muxaarib iyo Muqaatil. Wahab wuxuu yiri: waana geedka uu Ilaahay adduunkaan ka yeelay rizqiga dhashiisa (Aadan, oo ay rootiga ka iyo cunnada ka dhigtaan). Xabbad kasta oo miraha geedkaasna waxay le'ekeyd kellida lo'da, malabkana way ka macaanayd, saliidana ka jilicsanayd. Waxaa kaloo la yiri: waxaa laga reebay geedka canabka, siday u yiraahdeen ibnu Mascuud iyo ibnu Jubayr iyo Al Siddiyyu iyo Jacdah bin Hubayrah, waxayna yiraahdeen: taas ayaa u sabab ah in ubadkiisa khamrada xaaraan looga dhigay. Waxaa kaloo la yiri: wuxuu ahaa geedka tiinka, siduu u yiri Qataadah iyo ibnu Jariij, ayna saxaabada qaarkood ka wariyeen. Al Suhaylii wuxuu yiri: "Taas ayaa u sabab ah in markuu qof ku riyoodo isagoo cunaya miraha geedka. tiinka lagu fasiro shallayti iyo qoomamo, siduu Aadan uga shallaayey oo uu u qoomamooday kaddib markuu cunay". Waxaana Calii laga wariyay inuu ahaa geedka kafuurka. Al Diinwarii wuxuu yiri: wuxuu ahaa geedka cilmiga, cilmiga khayrka iyo cilmiga sharka oo uu qofka cunaa uu wax walba. ogaado. Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: wuxuu ahaa geedka al xanthal. Abuu Maalik wuxuu yiri: wuxuu ahaa geed timireedka. Waxaa kaloo la yiri: wuxuu ahaa geed qofkii ka cuna uu wax ahaysiinayo. Intaasoo idil in kaloo ka badan oo ka duwanna waa la yiri. Ibnu Cadhiyyah wuxu-u yiri: "ma jiro Xadiith intaas midkoodna xoojinaya oo uu salka ku hayo. Sida toosanna waxay tahay in la ictiqaado inuu Ilaahay Aadan ka reebay geed, markaasuu amarkaas khilaafay oo uu ka

cunay." Abuu Nasr Al Qushayrii wuxuu yiri: "Aabahay wuxuu oran jiray: waxaan guud ahaan ognahay inuu ahaa geedka mixnada, waa imtixaankee." Ibnu Jariir wuxuu yiri: "waxaa habboon inaanba la tilmaamin geedkaas, ayadoo ogaantiisu ay tahay cilmi aan waxtar lahayn, in jaahil laga yahay oo aan la aqooninna waa jahli aan dhibaato geysanayn. " Al Ssuyuudhii wuxuu yiri: "Waxaa la yiraahdaa in geedkaas waxtar ku sugan yahay haddaan niraahno, inuu ahaa geedka canabka, maxaa yeelay waxaa ku sugan tilmaan inay khamradu tahay hooyada inta xun oo idil (sidduu Cabdu Allaahi ibnu Cumar u wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Al Khamru ummuu al khabaa'ithi"** oo ah "Khamradu waa hooyada waxa xun"). Marka ka fogee (waa khamradee) si ayan adduunkaan oo lagu cabo u reebin oo ayan hor istaagin in Aakhirada lagu cabbo, haddaan dhimasho horteed laga tawbad keenin, sida Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, looga wariyay.

Xaasidnimada Ibiiis

Markay intaasoo nicmo ah ay Aadan iyo Xaawo isugu darsantay, oo la siiyay, ayuu Ibliis xasday. Al Thaclabii wuxuu yiri: Ibnu Cabbaas waxaa laga wariyay inuu Ibliis magaciisu afka Saryaaniga ku ahaa Cazaaziil, afka Carabigana Al Xaarithu ama al Xarthu, waxaana Ibliis loogu bixiyay quusashada uu Raxmada Ilaahay ka quustay, oo erayga Ibliis wuxuu ka yimid al ya'su oo macnihiisu yahay quusasho. Xaasidnimo waxaa la yiraahdo inuu qofi doono in nicmooyinka uu Ilaahay qof kale siiyay uu waayo oo ay ka zuulaan, waana isugu mid midka wax xasdayaa inay nicmooyinkaas isaga u soo wareegaan iyo in kale, oo qasadkiisu waxaa weeye inuu kaas la siiyay uu waayaa. Marka xaasidku wuxuu rabaa inuu isagu Ilaahay u taliyo oo uu maamulo, isagoo doonaya inuu isagana nicmooyinkaas siiyo inta kalena uu qadiyo. Waxay Abuu Daauud iyo ibnu Maajah ka kala wariyeen Abuu Hurayrah iyo Anas inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: "**Al xasadu ya'kulu al xasanaata kamaa ta'kulu al naaru al xadhaba"** oo macnihiisu yahay: "Xaasidnimadu waxay qofka xaasidka ah xasanaadkiisa (waa ajarka salaaddiisa iyo zakadiisa iyo soonkiisa iyo xajkiisa iyo acmaashiisa kaloo idil) u cuntaa si la mid ah siduu dabku qoryaha u cuno oo kale."

Sidaas ayuu Ibliis wuxuu ku ahaa midka khalqiga. ugu horreeyey oo wax xasda, kibrana oo xaqqa iskala weynaada. Al Qurdhubii wuxuu yiri: "sababta kibirkiisu waxay ahayd isagoo madax u ahaa Malaa'igta Samaa'u al dunyaa, oo ah Samada noogu soo xigta oo toddobada Samo ugu hooseysa iyo suldaankeeda iyo suldaanka arligaba, wuxuuna ahaa Malaa’igta kooda ugu ijtihaad badan, uguna cilmi badan, wuxuuna maamuli jiray inta Samada iyo arliga u dhexeysa. Markaasuu wuxuu isku arkay inuu madax yahay, uuna cathiim wayn yahay. Taas ayaana u geysey inuu kibro. Markaasuu Ilaahy caasiyay oo uu amarkiisa diiday. Markaasuu Ilaahay masakhay oo uu dhalan rogay oo uu shaydaan ka dhigay la fogeeyey. Sidaas daraadeed ayuu hadduu gafka iyo dambiga ninka ka dhaca uu kibir ka yimid, ninkaas ka rajo

beel, haddayse caasinnimo iyo amar diido ka timidna ka rajo qab." Waxaa kaloo la yiri: Ibliis wuxuu Ilaahay caabuday sideetan kun oo sano, waxaana la siiyay madaxtinnimada iyo al khazaanatu oo ah ilaalinta Jannada, ayadoo loogu xarig dheereynayo, si la mid ah sida munaafiqiinta adduunkaanba Ashahaadada loo siiyey oo ay u ashahaataan sida muslimiinta oo kale, iyo si la mid ah sida loo siiyay Balcamu bin Baacuuraa'a, oo magaca wayn oo Ilaahay oo wixii lagu waydiisto uu bixiyo darafka carrabkiisa loo saaray oo kale, kaddibna uu gaaloobay oo uu shaydhaan u raacay.

Balcamu bin Baacuuraa'a

Wuxuu Imaam Al Baghawii Tafsiirkiisa Aayadda boqol iyo shan iyo toddobaatanaad ku wariyay, sida tafaasiirta kaleba, qisada Balcamu bin Baacuuraa'a. Qisadiisuna waxay ahayd sidatan, sida looga wariyay Cabdu Allaahi ibnu Cabbaas, Allaha isaga iyo aabihiisba raalli ka noqdee: wuxuu u dhashay reer Banii Israa'iil. Calii bin Dhalxah, Allaaha raalli ka noqdee, wuxuu yiri: wuxuu u dhashay qabiilka carbeed ee la yiraahdo Kancaaniyyiinta degina jiray magaalada Jabbaariinta, oo ah Qudus ee arliga Falasdhiin. Qisada ninkaas, siday u wariycen ibnu Cabbaas iyo ibnu Isxaaq iyo Al Siddiyyi (oo isaguna ah saaxibu Tafsiir) iyo ghayrkoodba waxay ahayd sidatan: Nabi Muuse, Calayhissalaamu, markuu u kacay la dagaallanka jabbaariinta wuxuu ku degey arliga Banii Kancaan ee ka tirsan arliga Shaam. Markaasaa waxaa Balcam u yimid tolkiis. Balcam wuxuu yiqiinnay oo uu Ilaahay hore u baray **Ismu Allaahi Al Acthamu,** Magaca Ilaahay oo Wayn, oo haddii lagu baryo waxaas laga baryay uu siiyo qofkii ka baryay. Tolkiis waxay Balcam ku yiraahdeen: "Muuse waa nin xoog badan, wuxuuna wataa ciidan fara badan, wuxuuna u yimid inuu beledkeenna naga saaro, uuna na dilo, uuna reer Banii Israa'iil siiyo. Adiguna waxaad tahay nin ducadiisa la aqbalo. Marka intaad baxdid Ilaahay ka bari inuu naga celiyo". Markaasuu wuxuu yiri: "Hoogee, maxaad leedihiin! Muuse waa Nabi Ilaahay, waxaana la socda Malaa'ig iyo Mu'miniin. Sidee baan marka u habaaraa, anigoo Ilaahay ka ogsoon waxaan ka ogsoonahay, oo haddaan habaaro uu adduunkeyga iyo Aakhiradeyduba i seegayaan oo aan waayayo". Markaasey ku noqnoqdeen oo ay baryada inuu habaaro ku celceliyeen oo ku badiyeen. Markaasuu wuxuu yiri: "ii kaadiya waxaan ka amar qaadanayaa Rabbigeeye", oo caadadiisa ayaaa waxay ahayd inuusan Ilaahay baryin jeer uu ka amar qaato, amarkaasoo markuu seexdo isagoo hurda riyo ahaan lagu siin jiray. Markaasuu Ilaahy amar weydiistay inuu Muuse iyo Banii Israa'iil habaaro. Markaasaa isagoo hurda waxaa lagu amray inuusan habaarin. Markaasuu wuxuu tolkiis ku yiri: "Rabbigay ayaan amar weydiistay waxaana la iga reebay inaan habaaro." Markaasey hadiyad siiyeen, isaguna uu aqbalay oo qaatay. Markaasey hadana dib u weydiisteen inuu Muuse iyo dadkiisa habaaro, wuxuuna ku yiri: "ii kaadiya aan Rabbigay ka amar qaatee". Markaasuu Rabbigiis amar waydiistay. Markaasaan waxba loo waxyoon. Markaasey waxay tolkiis ku yiraahdeen: "Rabbigaa hadduu kahan lahaa inaad habaarto wuu kaa reebi lahaa, siduu

markii horeba kaaga reebay". Markaasey ku celceliyeen oo ay isu jejebiyeen ilaa ay ka fitneeyaan, oo isaguna fitnoobay. Markaasuu dameerad fuulay, uuna u kacay xagga buur magaceeda la yiraahdo Xasaan oo uu dusheeda ka arko degmada reer Banii Israa'iil oo hoostiisa ah. Dameeraddii markay in aan badnaynba la socotay ayay istaagtay, oo inay hore u socoto diiday. Markaasuu intuu kasoo degay garaacay ilaa uu dhiig ka keenay. Markaasay dameeraddu
kacday, isaguna uu fuulay. Intayan wax badan la soconba hadana way istaagtay. Markaasuu sidii hore oo kale uu hadana ku falay. Markaasey kacday, isaguna uu fuulay. Intayan wax badanba la socon ayay hadana. istaagtay. Markaasuu garaacay ilaa uu ka xanuujiyo. Markaasuu Ilaahay dameeradda u ithmay inay hadasho, oo intay la hadasho ay xujjadana ku rogto, waxayna ku tiri: "Isjir oo is ilaali Balcamow! Xaggeebaad u socotaa? Soo ma aad aragtid Malaa'igta horteyda ah oo dhinaca aad ii wadid iga soo celineysa? Ma waxaad iila socotaa Nabiga Ilaahay iyo Mu'miniinta oo aad dooneysaa inaad habaartid?" Hadalkeedaasu ujeedadiisa uu lahaa dib ugama celin, wuu sii socday, Ilaahayna uu dameeradda u idmay inay sii wado. Marka dusha Buurta Xasaan la timid ayuu Balcam Nabi Muuse iyo Banii Israa'iil habaaray. Eray kasta oo habaar ah oo carrabkiisa kasoo baxana wuxuu Ilaahay u duway isaga tolkiis, eray kasta oo khayr ah oo uu carrabkiisa isaga tolkiis ugu Alle baryana wuxuu Ilaahay u duway reer Bani Israa'iil. Markaasey waxay tolkfis ku yiraahdeen: "Balcamow, ma ogsoon tahay waxaad sameyneysid, oo ayagana khayr ayaad ugu duceyneysaa annagana waa na habaareysaaye?" Markaasuu wuxuu yiri: "Taasi waa mid aanan waxba ka qaban karin, waana shay uu Ilaahay wato". Markaasuu carrabkiisu soo dhacay oo uu laabtiisa kusoo dhacay, wuxuuna ku yiri: "Hadda adduunkayga iyo Aakhiradeyduba waan waayey, mana uusan harin waxaan ahayn makri falid iyo xiilad waxaan ahayn. Marka waan idiin makri falayaa oo qorshe xun ayaan idiin dejinayaa, xiiladna waan idiin abaabulayaa, ee haweenkiinna qurxiya, dhar qurxoon iyo waxay haweenku isku qurxiyaan u labbisa, waxaadna u dhiibtaan badeecadaha la gado, kaddibna waxaad u dirtaan degmada reer Banii Israaiil si ay usoo gadaan. Waxaadna haweenka amartaan inayan midkoodna nafteeda u diidin nin doonaya, maxaa yeelay haduu nin ayaga ka mid ihi zinaysto, ayagoo idil waa la idiinka filnaanayaa". Markaasey sidaas yeeleen. Markay haweenkii xerada ciidanka Banii Israa'iil galeen, haweeney kancaaniyiinta ka. mid ah, oo magacecdana la yiraahdo Kastaa bintu Suur, ayaa waxay ag martay nin madaxda. reer Banii Israa'iil ka mid ah oo la yiraahdo, Zumraa bin Shaluum, madaxna u ah qabiilka Shamcuun bin Yacquub. Markaasuu usoo kacay oo uu gacanta ku dhegay, oo intuu fiiriyay quruxdeedu ay cajabisay. Markaasuu inta soo waday wuxuu dul keenay Nabi Muuse, Calayhisalaamu, wuxuuna yiri: “Waxaan ku wadaa inaad oran doontid inay tani xaaraan iga tahay?" Wuxuu Muuse ku yiri: "Haa, xaaraan ayay kaa tahay ee ha u dhowaan". Zumraa wuxuu yiri: "Wa Allaahi inaanan amarkaas kugu adheeceyn", oo intuu haweentii khaymaddiisa la galay ayuu la gogol galay. Markaasuu Ilaahay isla markiiba wuxuu reer Banii Israa'iil kusoo diray

daacuun. Ninka la yiraahdo Finxaas bin al Cayzaar (ama Ilayaacaazir) bin Haaruun wuxuu ahaa midka u xilsaaran amarka Muuse, wuxuuna. ahaa nin la siiyay jir wayn iyo xoog, mana uusan joogin oo wuu maqnaa markuu Zumraa bin Shaluum falay wuxuu falay, wuxuuna soo laabtay isagoo uu dhaacuunku reer Banii Israa'iil faro xun ku hayo. Markaasaa wixii dhacay loo sheegay. Markaasuu inta warankiisa qaatay, kaasoo kulligiis bir ahaa, wuxuu ugu galay khaymadday ku jireen, dul tegeyna ayagoo isla hurda. Markaasuu warankiisa labadoodaba ka dusiyay oo uu wada suray, uuna khaymadda kasoo baxay ayagoo waranka ku suran. Markaasuu Samada kor ugu qaaday, isagoo waranka garabka ku qabtay, suxulkiisana sinta ku tiiriyay, warankana garkiisa ku tiiriyay. Finxaas wuxuu ahaa curadka Al Cayzar. Isagoo xaaladdaas ku sigan ayuuna wuxuu yiri: "llaahayow, taas oo kale ayaan ku falnaa kan Adiga ku caasiya". Markaasaa daacuunkii laga qaaday reer Banii Israa'iil. Daacuunku wuxuu reer Banii Israaiil ka dilay inta u dhexeysa marka uu Zumraa haweenta Kancaaniyadda ah la gogol galay ilaa uu labadoodaba uu Finxaas ka dilo toddobaatan kun oo qof, oo saacad maalin ah gudeheeda ku dhintay. Taas ayaa u sabab ah in dhasha Finxaas ay reer Banii Israa'iil neef kasta oo ay qashaan ka siiyaan haraggiisa iyo garabkiisa iyo qalkiisaba, tiirinta uu warankiisa ugu tiiriyay sintiisa iyo inuu garabkiisa ku qabtay iyo inuu garkiisa ku tiiriyay. Waxay kaloo siiyaan waxa ugu horreeya oo maalkooda ah oo ay kasbaan iyo naftoodaba, isagoo uu Finxaas ahaa curadka ama wiilka ugu horreeya ee Al Cayzar. Balcam ayay kusoo degatay Aayadda boqol iyo shan iyo toddobaatanaad ee Suuratu Al Acraaf. Intaas ayuu warka Imaam Al Baghawii ku egyahay. Aayadda boqol iyo shan iyo toddobaatanaad ee Suuratu Al Acraaf waxay leedahay: **"Wa atlu calayhim naba'a allathii aataynaahu Aayaatinaa fa ansalakha minhaa fa atbacahu al shaydhaanu fa kaana mina al ghaawiina**(175)**",** oo macneheedu yahay: "Ku akhri korkooda warka kii aan siinnay Aayaatkeenna, oo markaas ka dhex siibtay, shaydaanna uu raacay isaga, noqdayna kuwa baadida ah oo lumay(175)".

Intuu ibliis Ilaahay caabudayey

Sidaas ayay Ibliis madaxtinnimada iyo kibirku naftiisa u galeen oo ay ugu sugnaadeen, kuna xasileen. Ibnu Cabbaas wuxuu yiri: "Ibliis wuxuu u arkay inuu isagu ka sarreeyey oo uu ka deeqtoonaa Malaa'igta, oo sidaasuu u yiri: "Anigaa isaga (waa Aadane) ka khayr badan". Al Qurdhubii wuxuu sheegay inuu Ibliis Ilaahay sideetan kun oo sano caabudayey. Kitaabka Muntahaa al Nuquuli wuxuu wariyay inuu Ibliis sagaal kun oo sano Ilaahay caabudayey. Kitaabka Taariikhu Al Khamiisina inuu Ibliis Ilaahay lababoqo1 iyo afartan kun oo sano caabudayey, Samaawaatka toddobada ah iyo arliyada toddobada ahna ayan ku harin taako la cabbiro ee waa illaa kii ku sujuuday.

Ibliis oo albaabka Jannada yimid

Markaasuu Ibliis wuxuu yimid albaabka Jannada, isagoo isu soo yeelay muuqaalka oday saddex boqol oo sano, oo sanooyinka adduunkaan ah, wax caabudayey. Halkaas ayuu wuxuu ku dhawray qof Jannada kasoo baxa oo uu Aadan ka wareysto. Markaasaa waxaa soo baxay shinbirka la yiraahdo Al Dhaawuusu, oo ah shinbir dhulka ku nool oo aan duulin diiqa dooradana ka wayn, qurux badan oo ay baalashiisu midabyo kala duwan oo qurux badan leeyihiin, lehna sayn baalal ka samaysan oo dheer oo uu markuu cayaarayo ama uu faanayo uu sida babbiska oo kale u fidiyo oo uu sare u qaado. Markaasuu Ibliis wuxuu ku yiri: "Xaggee baad ka timid?" Wuxuu shinbirkii yiri: “Waxaan ka imid beerta iyo Jannada Aadan". Ibliis wuxuu yiri: “Warkiisa i sii". Wuxuu yiri: "Wuxuu ku sugan yahay xaaladda ugu fiican iyo nolosha ugu fiican. Jannada dhexdceda ayuu daal la'aan iyo farax ku nool yahay, annaguna waxaan ka mid nahay kuwa u adeega". Ibliis wuxuu yiri: "Intaad Jannada i gelisid ma ii geyn kartaa?" Shinbirkii wuxuu yiri: "Oo adigu kumaad tahay?" Wuxuu yiri: "Waxaan ka mid ahay Malaa’igta la yiraahdo Al Karuubiyyiina, waxaanna u sidaa naseexo iyo waano". Shinbirkii wuxuu yiri: "Hadaba waxaad u tagtaa Malagga Ridwaan oo Jannada maamula, kaasoo aan qofna waano iyo naseexo ka reebeyn." Ibliis wuxuu yiri: "Waxaan doonayaa inaan ayaga ka qariyo." Shinbirkii wuxuu yiri: "Qarintu ma noqoto naseexo iyo waano." Ibliis wuxuu yiri: "Annagu haddaan madaxda Al Karuubiyyiina nahay sirta ma sheegno. Marka haddaad Jannada i gelisid sidaan ku leeyahay waxaan ku barayaa duco aadan dabadeed duqoobeyn oo aadan cirroole noqonayn waligaana." Shinbirkii wuxuu yiri: "Ma karo inaan Jannada ku geliyo, waxaanse kuu tilmaamayaa abeesada". Markaasey abeesadu Jannada uga soo baxday, waxayna Ibliis ku tiri markuu waydiistay inay Jannada geliso: "Sidee baan kuu geliyaa ayadoo uusan Ridwaan ii oggolaanaynin?" Wuxuu ku yiri: "Anigu waxaan isu rogayaa oo aan noqonayaa riix oo ah dabayl, marka waxaad i gelisaa miciyahaaga dhexdooda". Markaasey abeesadii sidaas yeeshay, kaddibna ay afkeeda isku aaburtay oo xirtay. Markaasuu Ibliis wuxuu ku yiri, kaddib markay Jannada sidaas ku gelisay: “Waxaad u tagtaa " Shajaratu al Birri " geedka baarrinnimada. Markaasey yeeshay oo ay geedkaas agtiisa tagtay. Xeeladdaas ayuu Ibliis albaabka Jannada uga galay. Markaassu Aadan iyo Xaawo u yimid, wuxuuna ag istaagay geedka Baarrinnimada, wuxuuna ku heesay cuudka la fuufo isagoo abeesada afkeeda ku dhex jira. Markaasey Aadan iyo Xaawo abeesada u yimaadeen oo ay heesta cuudka dhegeysteen (cuudku waa al mizmaaru), ayagoo u maleynaya inay abeesadu heeseyso. Markaasuu Ibliis wuxuu labadooda ku yiri: "Soo dhowaada", ayaguna waxay yiraahdeen: "Waa nalaga reebay u dhowaanshaha geedkaan". Markaasuu Ibliis booyay, uuna baroortay baroorasho labadoodaba calool xumeysey. Sidaas ayuu Ibliis wuxuu ku ahaa kan ugu horrecya oo baroorta (waa baroortayna waxaa afka carabiga lagu yiraa naaxa). Markaasey labadooduba waxay ku yiraabdeen, amaba uu Aadan keligiis ku yiri: "Maxaa kaa boohinaya?" Ibliis wuxuu yiri: “Waxaan

la booyayaa anigoo labadiinna daraadeed u barooranaya, sababtuna waxay tahay inaad dhimaneysaan, oo aad nicmooyinkaan seegeysaan, aadna waayeysaan." Markaasey waxay labadoodu ku yiraahdeen: "Oo dhimasho maxay tahay?" Wuxuu yiri: "Waxaa idinka tegeya ruuxa iyo itaalka, xubnuhuna dhaqdhaqaaq ma yeelanayaan, ishana arag u hari mayo, dhegtana wax maqal ahi u hari mayo." Markaasuu hadalkaas naftooda wax geliyay, oo ay markaas kurboodeen. Markaasuu Ibliis, lacnadda Ilaahay korkiisa ha ahaatee, wuxuu yiri, siday noo sheegtay Aayadda boqol iyo labaatanaad ee Suuratu Dhaahaa: **"Yaa Aadamu hal adulluka calaa shajarati al khuldi wa mulkin laa yablaa**?(120)" oo macneheedu yahay: "Aadanow, ma ku tusiyaa geedka waaridda iyo xukun aan gaboobeyn?(120)" Haddaad taas dooneysid, ayuu yiri, "geedkaan ka cun". Markaasey waxay labadoodu yiraahdeen: "Cunidda, geedkaan waa nalaga reebay". Markaasuu Ibliis wuxuu yiri, siday noo sheegtay Aayadda labaatanaad ee Suuratu Al Acraaf. **"Maa nahaakumaa Rabbukumaa can haathihi al shajarati illaa an takuunaa malakayni aw takuunaa mina al khaalidiina**(20)**",** oo macneheedu yahay: "Idiinkama reebin Rabbigiin geedkaan waxaan ahayn inaydnaan noqon laba Malag ama aad ahaataan kuwa waara(20)." Ibliis wuxuuna labadoodaba ugu dhaartay inuu naseex u yahay waaninaya. Waxaa kaloo la yiri inay labadoodu Ilaahay ku dhaariyeen inuu yahay mid u naseexeynaya, markaasuu u dhaartay. Sidaas ayuu Ibliis wuxuu ku yahay kan ugu horreeya oo been ku dhaartay, iyo midka ugu horreeya oo wax khayaanay. Markuu Ilaahay ugu dhaartay ayuu wuxuu ku yiri: "Kiinneebaa cunidda geedka ku hormaraya oo kan kale gacanta sare ka yeelanaya?" Markaasey Xaawo xabbad miraha geedka ka cuntay, kaddibna ay Aadan u qurxisay oo ay u faanisay ilaa uu isaguna ka cuno, waxayna u keentay saddex xabbo,waxayna tiri: "Aniga xabbad ayaan ka cunay wayna dhadhan macaanayd, wax dhibaato ahna, igama ayan soo gaarin". Markaasuu Aadan dib uga joogsaday cuniddeedda, uuna sugay boqol sano, oo uusan cunin. Markaas kaddib ayuu ayadu xabbadahay haysay ka qaatay oo uu xabbad afka gashaday. Intuusan xabbaddaas uu afka gashaday dhadhankeedu dhuuntiisaba gaarin, xabbadda jirmigeeduna uusan uurkiisaba gaarin ayaa waxaa madaxiisa ka duulay taajkiisa u saarnaa oo ay ku dheehnaayeen luul iyo yaaquut iyo jawharado, waxaana loogu dhawaaqay oo lagu yiri: "Aadanow, khasaaradaada iyo murugtaadu way dheeraanayaan". Isla markaasba waxaa hoostooda ka siibtay sariirtay saarnaayeen, oo sariirtu waxay labadooda ku tiri: “Waxaan ka xishoonayaa Ilaahay inaan kuwa amarkiisa diiday sariir u noqdo". Waxaa kaloo, Aadan iyo Xaawo isla markaasba ka siibmay dugaagada ama jijimaha dhudhummada u surnaa iyo kuwa lugaha u surnaaba, kuwaanoo afka carabiga khalkhaal lagu yiraahdo, waxaana ka duulay suumankay xirnaayeen oo jawharaduhu ku dheehnaayeen. Waxaa kaloo labadoodaba laga siibay dharka ximaayeen. Aadan wuxuu labbisnaa toddoba boqol oo go', amarkooduna wuxuu noqday sida la ogyahay.

Aadan iyo Xaawo waxay geedka uga cuneen ayagoo malaynayey inuusan axadna ku dhiirranayn inuu Ilaahay been ugu dhaarto, siduu Subxaanahu wa

Tacaalaa quluubtooda ugu waynaa daraadeed. Waxaaba intaas dheer inaan beenba la aqoon waxay tahay. Waxaa intaas oo idil ka muuqata iyo siday noo sheegtay Aayadda kow iyo labaatanaad ee Suuratu Al Acraaf, inuu Ibliis Aadan iyo Xaawo afka iyo si toos ah ugala hadlay. Waxaa kaloo la yiri: "Bal wuu waswaasiyay, wuxuuna ku baadiyeeyey awoodda uu Ilaahay siiyay, siduu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yiri: **"Inna al shaydhaana yajrii min ibni Aadama majrii al ddammi",** oo macneheedu yahay: "Shadaanku wuxuu uga socdaa dhasha Aadan meeshuu dhiiggu uga socda, (waa xididdadee)". Waxaase la isku khilaafay siduu Ibliis Aadan iyo Xaawo ku gaaray, kaddib markii isaga Samada laga soo eryay, ayadoo siday noo sheegtay Aayadda afar iyo soddonaad ee Suuratu Al Xijri: **"Qaala fa akhruj minhaa fa innaka rajiimun**(34)**",** oo macneheedu yahay: "Wuxuu yiri: "Ka bax xaggeeda adigu waxaad tahay mid la rajmiyaye (34), (oo sida zaaniyiinta muxsinka ah dhagax lagu rajmiyo oo loola dhaco ayaa Ibliis waxaa lagu rajmiyaa markuu Samada u dhowaado oo loola dhacaa shiilo dab ah oo ololaya, taasoo aan habeenkii Samada ku aragno). Waxaa la yiri: waxa laga reebay Ibliis waa gelidda Jannada ee waswaasidda lagama reebin, ayadoo ibtilo iyo imtixaan ah. Waxaa kaloo la wariyay inuu isku deyey inuu Jannada galo oo ay markaas Malaa'igta ilaalineysa ka reebtay, kaddibna uu galay isagoo abeesada afkeeda ku dhex jira. Waxaa kaloo la yiri: Jannada ma uusan gelin kaddib inta laga soo saaray. Ak Xasan wuxuu yiri: "Ibliis wuxuu arkay Aadan iyo Xaawo oo Jannada albaabkeeda taagan oo kasoo baxaya". Waxaa kaloo la yiri: Ibliis isagoo adduunkaan jooga ayuu inta Samada u dhowaado ayuu labadooda la hadli jiray. Waxaa kaloo la yiri: wuxuu istaagay Jannada albaabkeeda markaasuu u yeeray. Waxaa kaloo la yiri: arliga isagoo jooga ayuu u dhawaaqay, markaasey maqleen ayagoo Jannada ku jira. Al Sayuudhii wuxuu yiri: "Midda laga wariyay Cabdu Allaahi ibnu Mascuud iyo Cabdu Allaahi ibnu Cabbaas iyo Abii Al Caaliyah iyo Wahab iyo Munabbih iyo Muxammad bin Qays waxaa weeye inuu Jannada ku galay isagoo abeesada afkeeda ku dhex jira, uuna sidaas si toos ah labadooda kula hadlay, siduu raggaas uga wariyay Ibnu Jariir, isagoo aan ragga wariyay midna ka xusin iyo silsiladda lagu wariyay midna, in kastoo silsiladda warisay la'aanteedu ayan inuu warku jiro diidayn."

Wada hadalka Ilaahay Tacaala iyo Aadan

Markuu Aadan geedkii laga reebay u dhowaanshihiisaba ka cunay, ayuu Ilaahay Tacaalaa la hadlay, wuxuuna ku yiri isagoo canaananaya, imtixaanayana: "**Yaa Aadamu alam yakun fii maa abaxtu laka mina Al Jannati manduuxatan can haathihi al sh-shajarati?"** oo macneheedu yahay: "Aadanow, soo ma ayan ahayn waxaan kaaga banneeyey Jannada dhexdeeda kuwo waasic ah oo kaa kaafiya geedkaan?" Aadan wuxuu yiri: "Haa Rabbiyow, waxaanna ku dhaartay Cizzadaadee, laakiin waxaan u maleeyey inuusan axadna Adiga been ugu dhaaraneyn, oo taasaa igu xambaartay inaan ka cuno". Ilaahay wuxuu yiri: **"Wa Cizzatii wa Jalaalii**

la ahbidhannaka ilaa al ardi, laa tanaalu al caysha illaa kaddan'', oo macneheedu yahay: "Waxaan ku dhaartay Cizzadeyda iyo Jaliilnimadeyda oo ah Waynaanteyda, waxaan kuu dejinayaa arliga, halkaasoo aadan cayshka ku kasbanayn si dhib badan oo daal miiran ah mooyee". Markaasuu Adan is jejebiyay oo uu is dulleeyey oo uu cudurdaartay. Markaasuu Ilaahay Tacaalaa wuxuu yiri: **''Laa yujaawirunii man casaanii. Ukhruj** ", oo macneheedu yahay: "Daris ila noqon mayo mid i caasiyay oo amarkeyga diiday ee ka bax." Markaasuu Aadan wuxuu xaqqa Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Ilaahay ku waydiistay inuu u dambi dhaafo. Markaasuu Ilaahy Tacaalaa wuxuu yiri: **''Qad ghafartu laka bi xaqqihi, wa laakin laa yujaawirunii man casaanii'',** oo macneheedu yahay: "Xaqqiisa ayaan kuugu dambi dhaafay, laakin ilama darsayo qof amarkayga diiday."

Soo degashada Aadan

Markaasuu Aadan booyay, kaddibna u sagootiyay kulli inta Jannada ku jirta oo idil, ilaa heer ay geedeheedu la booyeen intaan geedka cuudka la shito ahayn. Markaasaa geedka cuudka waxaa la weydiiyay: "Adigu booyi meysid miyaa?" Wuxuu yiri: "Ma caasi ayaan u oyaa?" Markaasaa loo dhawaaqay geedkaas oo lagu yiri: **''Kamaa cathamta amranaa cathamnaaka, wa laakin hayya'naaka lil ixraaqi'',** oo macneheedu yahay: "Sidaad amarkeenna u weyneysey ayaan kuu weyneynnay, laakiin waxaan kuu habeynnay gubidda." Geedka cuudku wuxuu yiri: "Tanna waa maxay?" Waxaa lagu yiri: " **Anta cath-thamtanaa fa kathaalika yucath-thimuunaka, laakin lam yaxtariq qalbuka li muxibbiinaa, fa li thaalika yaxriquunaka'',** oo macneheedu yahay: "Adigu waad na weyneysay, sidaas oo kale ayay ayaguna kuu weyneynayaan. Laakiin qalbigaagu uma uusan guban midkaan jecleyn (Aadan). Sidaas daraadeed ayay kuu gubayaan". Aadan markuu albaabka Jannada yimid ayuu mid labadiisa lugood ka mid ah albaabka kasoo saaray oo uu dhigay, wuxuuna yiri: "Bismillaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi". Markaasuu Jibriil wuxuu ku yiri: “Waxaad ku hadashay eray wayn, marka cabbaar taagnow, ayadoo ay dhici karto inuu Midkaan loo jeedini kuu turee". Markaasaa Jibriil loo dhawaaqay oo la yiri: **''Dachu yakhruju'',** oo ah "Iska daa ha bexee". Markaasuu Jibriil wuxuu yiri: "llaahayow, wuxuu kuugu yeeray Al Rraxmaanu - oo ah Midka naxariista badan- ee marka u naxariiso". Markaasuu Ilaahay wuxuu yiri: **''In arxamhu la yanqusu min raxmatii shay'an, wa in yath-hab laa yucaabo calayhi shay'un. Fa khalli canhu yath-hab thumma yarjic fii mi'ati uluufin min awlaadihi cusaatin xattaa yushaahida fadhlanaa calaa awlaadihi wa yaclama sacata raxmatinaa'',** oo macneheedu yahay: "Haddaan u naxariisto, taasi naxariisteyda waxba ka dhimi mayso, hadduu tagana waxba lagu ceebeyn mayo. Marka iska daa ha tagee, kaddibna soo laabtee isagoo ay la socdaan boqol kumanyaal ah oo dhashiisa ah oo caasiyiin ah, si uu u arko deeqdeenna aan ubadkiisa siinaynno, uuna u ogaado waasicnimada raxmadeenna". Taasi waa khulaaso lasoo koobay

waxa ay wariyeen ragga qisaska wariya. Markaasuu Aadan wuxuu ku soo degay buur la yiraahdo Buuth oo dalka Hindiya ku taalla. Aadan wuxuu la soo degay carafta Jannada, caraftaasoo ku dhegtay Hindiya geedeheeda, waadiyadeeda iyo banankeedaba, kuwaasoo intii ku tiillayba ay carafi ka buuxsantay. Xaawo waxay kusoo degatay Jiddah. Waxaa kaloo la yiri waxay kusoo degatay Carafo. Waxaa kaloo la yiri waxay kusoo degatay Al Muzdalifah. Ibliis wuxuu kusoo degay beledka la yiraahdo Al Ubullah, ahna beled u dhow magaalada Al Basrah ee dalka Ciraaq. Waxaa kaloo la yiri waxaa lagu dejiyay Jiddah. Abeesadiina waxaa lagu soo dejiyay meesha la yiraahdo Baysaan, waxaana kaloo la yiri degmada Sajistaan. Waxaana kaloo la yiri degmada Isfahaan oo labadaan danbeba ay Iiraan ku yaalliin. Intaasoo idil meelo ka duwanna waa la sheegay.

Dhiigga caadada ee haweenka

Cabdu Allaahi ibnu Cabbaas waxaa laga wariyay inuu yiri: "Ilaahay Tacaalaa wuxuu yiri: **"Yaa Aadamu maa xamalaka calaa maa sanacta?"** oo ah: "Aadanow maxaa kugu xambaaray waxaad fashay?" Aadan wuxuu yiri: "Waxaa ii qurxisay Xaawo". Markaasuu Ilaahay Tacaalaa wuxuu yiri: **"Fa Innii ucqibuhaa an laa taxmala illaa karhan, wa la admiyannahaa fii al shahri marratayni",** oo, macnihiisu yahay: "Marka Anigu waxaan uga abaalmarinayaa inayan uur yeelan oo ayan xaamilo noqon cunug siddah ayadoo ku dhibtoota mooyee, ayanna dhalin ayadoo ku dhibtoota mooyee, waxaanna dhiig ka keenayaa bishiiba laba goor". Imaamka Xadiithka sharxay wuxuu yiri: "waxaa dhici karta inuu macnuha labada goor ee dhiiggu yahay inuu dhiig ka keeno, taasna ay ku dhabowdo ayadoo uu mar keli ah ka yimaado, ama ayba sidaas ahaato oo ay istaahisho inay laba goor dhiigto, yuusanba ka imaane, si la mid ah siduu Ilaahay u cafiyo macaasida ciqaabo lagu mutaysto oo kale. Waxaa kaloo la yiri: waxaa dhiigga loogu riday ciqaab looga abaalmarinayo inay geedka dhiig ka keentay. Waxaa kaloo la yiri: waa ciqaab inay abeesada lugaha ka jebisay. Waxaana dhici karta inay intaasoo idilba sabab u yihiin." Al Xaakim iyo Ibnu Al Munthir waxay isnaad saxiix ah uga wariyeen Ibnu Cabbaas inuu yiri: "Bilawga dhiigga caadada ihi wuxuu Xaawo ku dhacay kaddib markay Jannada kasoo degatay oo ay dhulka timid". Cabdu Al Razzaaq wuxuu sanad saxiix ah Ibnu Mascuud uga wariyay inuu yiri: "Ragga iyo haweenka reer Banii Israa'iil way wada tukan jireen, markaasey haweenku ragga jirkooda u muujin jireen. Markaasuu Ilaahay dhigga xaydka korkooda yeelay, uuna masaajidyada ka mamnuucay oo ka reebay." Cadu Al Razzaaq wuxuu Xadiithkaas mid la mid ah ka wariyay Caa'ishah, Allaha raalli ka noqdee. Xaadiithkaas muuqaalkiisa kore waxaad mooddaa inuu tilmaamayo inuu dhiigga caadada ihi marka ugu horreyseyba uu haweenka reer Banii Israa'iil ku dhacay, Bukhaarina wuxuu yiri: "Nabiguna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Inna haathaa amrun katabahu Allaabu calaa banaati Aadama",** oo macnihiisu yahay: "Kani -waa dhiigga caadada ee haweenkee- waa amar uu Ilaahay u dhigay gabdhaha Aadan korkooda."

Waxaa labadaas Xadiith kulmiyey Al Xaafith Ibnu Xajar oo yiri: "Dhiigga lagu riday gabdhaha reer Banii Israaiil wuxuu hayey muddo dheer, taasoo abaalmarin ama ciqaab looga dhigay, ee ma aha inay ayagu ugu horreeyeen gabdho uu dhiig ku dhaco." Al Dhabraanii iyo ghayrkiisba waxay Ibnu Cabbaas iyo ghayrkiisba ka wariyeen inuu hadalka Ilaahay Tacaalaa ee ku sugan qisada Ibraahiim oo ah: **"Wa imra'atuhu qaa'imatun fa daxikat**(71)**",** oo macneheedu yahay: "Haweentiisuna waa taagnayd markaasey qososhay(71)", ahna Aayadda kow iyo toddobaanaad ee Suuratu Huud, macneheedu waxaa weeye, ayay yiraahdeen, "waxaa ka yimid dhiigga caadada ah", oo al daxku waa magac kale oo xaydka ama dhiigga caadada haweenka. Qisaduna way ka horreysey reer Banii Israaiil, oo waaba Nabi Ibraahiim, Calayssalaamu." Caddayn kalena waxaa weeye in marka la yiraahdo gabdhaha Aadan, ayan Xaawo ka baxsanayn, ayadoo ayada laga abuuray feertiisa, oo ay markaas la mid noqotay gabdhihiisa uu dhalay oo kale, in kastoo ayan run ahaantii gabadhiisa ahayn oo uusan dhalin.

Boohinta Aadan

Wahab bin Munabbih, oo ah ibnu Kaamil al xaafith abuu Cabdu Allaahi al Sancaanii, al callaamah, al akhbaarii, runlowga kutubbada badan sannifay, kana wariyay Ibnu Cabbaas iyo Ibnu Cumar, isagana ay qoyskiisu ka wariyeen iyo Samaak bin al Fadl, dhintayna sanadka Hijriga ee boqol iyo afar iyo toban, wuxuu yiri: "Aadan marka arliga loo soo dejiyay wuxuu ahaaday mid booyaya saddex boqol oo sano, ayadoo ayan ilmadu ka joogsanayn, ayanna ka qallaleyn waxa ku dhacay daraadeed." Al Mascuudii, oo ah Cabdu Al Raxmaan bin Cabdu Allaahi bin Cutbah bin Mascuud al Kuufii, al xaafith, dhintayna sanadka boqol iyo lixdan ama shan iyo lixdan Hijriga, uuna ibnu Numayr ka yiri: "wuxuu ahaa nin thiqqah ah oo lagu kalsoon yahay, markii dambena isku qasmay, ibnu Muscar uu yiri: "Ma ogi qof isaga uga cilmi badan cilmiga Cabdullaahi ibnu Mascuud", Allaha raalli ka noqdee, wuxuuna yiri: "Haddii ilmada dadka arliga deggan oo idil la isku keeno oo la barbar dhigo ilmaduu Aadan ooyay oo uu daadiyay, waxaa badan ilmaduu Aadan ooyay markuu Ilaahay Jannada kasoo saaray", tiiraanyo uu ka calool xun yahay kasoo tegidda Jannada uu kasoo tegey, iyo inuu geedkii laga reebay ka cunay, in kastoo loo dembi dhaafay intuusanba kasoo bixin, siduu u gooyey Al Qurdhubiii iyo ghayrkiisba. Sababtu waxay tahay cabsi uu cabsaday iyo xishood uu xishooday, iyo kaamilnimada ay qalbigiisa ku sugantahay waynaanta Ilaahay. Sheekheennu wuxuu yiri: "Waxaa dhici karta inuu muraadku yahay marka la leeyahay "Haa waqtiga tawbad keenidda" inaan laga aqbalin tawbaddiisa muddo kaddib markii uu Jannada kasoo baxay mooyee".

Mujaahid bin Jabyar al Makhzuumii mawlaahum al Makkii, al thiqqah, al xaafith oo Tafsiirka Imaam ku ah iyo cilmigaba, imaamnimadiisana la isku waafaqay, in kastoo uu ibnu Xibbaan kitaabkiisa Al ducafaa'u ku yiri: "waa marduud", kuna dhintay Makkah isagoo sujuudsan sanadka Hijriga. ee boqol iyo saddex, sanad kalena waa la sheegay, axaadiithtu wariyayna ay

soo wariyeen kutubbada lixda ah, wuxuuna yiri: "Aadan wuxuu booyayey boqol sano isagoo aan madaxiisa marna Samada kor ugu qaadin" xishood uu Rabbigiis ka xishoonayo daraadeed. Boqolkaan sano waxay ka mid yihiin saddexda boqol oo uu Wahab xusay. Ilaahayna wuxuu ilmadiisa ku dhaliyay cuudka la yiraahdo al cuudu al radbo", oo ay dhici karto inuu yahay midka la shito oo la bukhuursado, waxaana la wariyay, siduu sheekheennu u yiri, inuu Aadan Jannada kasoo degay isagoo cuudkaas sita oo uu Jannada dhexdeeda kasoo qaatay. Hadday sidaas tahayna, waxaa loo qaadanayaa inuu cuudkaasi kaddib ilmadiisa dhulka uga soo dhashay oo uu sidaas kusoo baxay. Waxaa kaloo ilmadiisa kusoo baxay zanjabiisha oo dednaanta madaxa faydda araggana xoojisa oo mugdiga ka qaadda; iyo geedka la yiraabdo al sandalu oo loox qaali ah laga sameeyo, midabkiisuna guduud ama caddaan yahay, bararkana u daawo ah oo qaada, cudurrada wadnaha iyo madax xanuunka iyo qandhadaba u daawo ah. Waxaa kaloo ilmadiisa ku soo dhashay anwaacda kala duwan ee dhirta cadarka laga samecyo. Xaawana waxay ooyeysey ilaa uu Ilaahay ilmadeeda kusoo dhafiyay qurunfulka iyo dhirta cadarka laga sametyo oo la yiraahdo al aqaawii, iyo dhirta cuntada lagu darsadaba. Marka, ubadka Aadanowi Bal arka siduu aabihiin uu hal ficil ama fal oo keli ah oo uu falay isagoo halmaansan amarka Ilaahay ugu ooyayey saddex boqol oo sano. Marka maxaad faleysaan kuwiinna dambiyada waaweyn kas iyo ula kac u sameeyey? Marka, ku cibro qaata, oo ka qiyaas qaata in aabihiin Jannada looga soo saaray ciqaab lagu ciqaabayo hal dambi oo uu galay, kuwiinna, absaarta iyo aragga u saaxiibka ahow. Aadan wuxuu ahaa mid markuu arkaba Malaa'igta Samada kor usii tafeysa iyo kuwa kasoo, deganayaba uu hilowga uu waddankiisii u qabo uu kordho, waddankaasoo ahaa beelaha kala duwan ee Jannada, kuwaasoo isaga loo banneeyey intuu dhexdeeda ku jiray, ayadoo aan barna laga reebin. Aadan wuxuu indhihiisa ku arki jiray Malaa’igta, in kastoo ayan caddayn inuu suuraddooda asliga ah ku arki jiray iyo in kale. Waxaana la sheegay inay tahay arrin Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, gooni loo siiyay oo isaga khaaska u ay tahay inuu Malag Jibriil suuraddiisa asliga ah laba goor ku arkay. Wuxuu kaloo Aadan xusuustay cahdiga iyo ammaanka uu ku sugnaa ka hor intuusan arliga usoo degan iyo ballankii Ilaahay oo uu isagu halmaamay, oo ahaa inuusan geedka u dhowaanin. Wuxuu kaloo xusuustay deriskiisii Jannada oo ahaa Malaa'igta iyo wixii xoolo ahaa oo Jannada dhexdeeda kula noolaa, oo sidaas deriskiisa ku noqday. Marka, kuwiinna dambiyada waawayn gala, iska ilaaliya simbiriiriqasho uu midka wax jeceli uu midkuu jecel yahay ku yiri: " **Haathaa firaaqu baynfi wa baynika**(78)**",** oo ah Aayadda sideed iyo toddobaatanaad ee Suuratu Al Kahfi oo macneheedu yahay: "Kani waa kala tagga dhexdeenna(78)", ahna qisada Nabi Muuse, Calayhissalaamu, iyo Al Khidr, Allaha raalli ka noqdee, ayadoo uu Aadan markuu geedka, ka cunay ay ka fogaadeen kuwuu jeclaa, markuu arligaan usoo degayna ayan cidna hoy siin. Marka, wa sida ayagoo, sida uu Al Khidr Muuse ku yiri oo kale, ayaguna Aadan ku yiri: **"Haathaa firaaqu baynii wa baynika",** oo ah Aayadda sideed iyo toddobaatanaad ee Suuratu Al Kahfi oo macneheedu yahay: "Kani waa kala tagga

dhexdeenna". Marka midkaaga caqliga fiyow lahow, u fiirso siduu aabahaa Aadan ugu fariistay sariirta boqortooyada, oo sida nasoo martay ka sameysan dahab iyo yaaquut guduudan oo toddoba boqol oo lugood leh, oo Aadan karaameyn loogu fariisiyay, oo uu markaas gacanta u taagay luqmad laga reebay, oo markaas Jannada looga soo saaray. Marka, ubadkiisow, iska jira cirib xumida macaasida, maxaa yeelay qofkay haleesho hoos ayay u dhigtaa, martabada uu lahaana way ka dejisaa.

Ka cunidda geedku ma dambi wayn baa mase mid yar?

Mar ka hadduu qof yiraahdo: "Ka cunidda iyo soo dejinta ma dambi wayn baa ama mid yar? Ficilkaas Aadan Jannada looga soo dejiyay ma kabiirah baa oo waa dambi wayn, mase maya?" Hadday kabiirah tahay, dambiyada waaweyn Anbiyada kama dhacaan, intaan Nabi laga dhigin ka hor iyo kaddibba, oo way ka ilaalsan yihiin oo waa "macsuumiin". Hadday ficlad yar ahaydna, waxaa la yiri inay Anbiyada ka dhacaan, waana la dhaafaa dambiyada ka dhasha, waxaana looga. dhaafaa ka fogaanshah kuwa waaweyn laga fogaado, siduu Ilaahay, Cazza wa Jalla, ku yiri Aayadda kow iyo soddonaad ee Suuratu Al Nisaa': **"In tajtanibuu kabaa'ira maa tunhawna canhu nukaffir cankum sayyi'aatikum wa nudkhilkum mudkhalan kariiman**(31)**",** oo macneheedu yahay: "Haddaad ka fogaataan dambiyada waaweyn ee waxa la idinka reebayo, waxaan ka asturi (dhaafi) xaggiinna dambiyadiinna (yaryar), waxaanna idin gelineynnaa meel la galo oo sharaf leh (Jannada)(31)". Marka haddii muslimiintii caadiga ahaa sidaas dambiyada yaryar looga dhaafayo, maxaad marka mooddaa Nabi Aadan oo Anbiyadoo idil dhalay? Marka, hadduu qofkaasu yiraahdo: "Hadaba maxaa yeelay ee ficilkaas daraadiis Aadan iyo Xaawo labbiskay xirnaayeen looga siibay, siday Aayadda toddoba iyo labaatanaad ee Suuratu Al Acraafi noo sheegtay, oo tiri: **"Yaa banii Aadama laa yaftinannakumu al shaydhaanu kamaa akhraja abawaykum mina al Jannati yanzicu canhumaa libaasahumaa li yuriyahumaa saw'aatihimaa**(27)**",** oo macneheedu yahay: "Dhasha Aadanow, yuusan idin fitnayn shaydaan, siduu uga soo bixiyay oo kale labadii idin dhashay Jannada, isagoo ka siibay dharkoodii, si uu u tuso cawradooda(27)". Dharkana waxaa looga siibay doonidda uu doonay inuu xabbad geedkaas, mirihiisa ka mid ah uu cuno, oo uu afka gashaday, uusanse wali leqin, oo ay markaas ka duuleen taajka madaxa u saarnaa, dharkuu xirnaa iyo intaas ghayrkoodba, sida canaanta la canaantay oo kale, sida markuu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Aayadda labo iyo labaatanaad ee Suuratu Al Acraafi ku yiri oo kale: **"Wa naadaahumaa Rabbuhumaa alam anhakumaa can tilkumaa al shajarati**(22)**",** oo macneheedu yahay: "Markaasuu Ilaahay u yeeray oo uu ku yiri: "Miyaanan idinka reebin geedkaan?(22)". Su'aashaas waxaa ka jawaabay Abuu Al Qaasim Muxammad Al Zamakhsharii, al callaamah, Jaaru Allaahi, al muctazilii, inuu muctazilii yahayna sheegi jiray, siday u wariyeen ibnu Kullikaan iyo ghayrkiisba: hadduu albaab garaaco uuna ithan qaadanayo inuu gurigaas galo wuxuu oran jiray: "Waxaa albaabka taagan oo

ithan qaadanaya inuu soo galo Abuu Al Qaasim Al Muctazilii". Waxa ugu horreyey oo uu sannifayna waa kitaabkiisa tafsiirka Quraanka ah ee la yiraahdo Al Kash-shaaf. Al Zamakhsharii wuxuu dhintay habeenka Carafo ee sanadka shan boqol iyo saddex iyo soddon Hijriga. Al Zamakhsharii wuxuu yiri: "Ma ayan ahayn waxaan "saghiirah" ahayn oo ah mid yar, waa dambi yaree, oo ku duugan kuna dhex qarsoon acmaasha qalbigiisa ee khaaliska Ilaahay u ahaa iyo athkaar saalix ah oo wanwanaagsan, kuwaasoo ah u hoggaansanaanta Ilaahay iyo adeeciddiisa. kuwa ugu waaweyn iyo acmaasha ugu waaweyn -dambiyada yaryarna hadday ka bataan dhaacaadku oo ay daacaadku bataan, la isuma qabto oo waa la dhaafaa. Waxaana dambigaas yar uu ugu socday waxa ku socday waynayn dambigaas la wayneynayo iyo muujin foolxumadiisa la muujinayo oo lasoo bandhigayo, iyo cabsiin lagu cabsiinayo midka dambigaas galay, si ay taasi u turid iyo naxariis ugu noqoto isaga Aadan ah iyo dhashiisaba, si ay dambi falidda uga fogaadaan oo ay iska ilaafiyaan. Waxayna taasi sabab u noqotay inuu Aadan adduunkaan ku helay kaamilnimo u faaiideysey kana dhalatay badnida ajarka uu ku muteystay iyo waynaanta makaankiisa aakhiro. Jamhuurka culummada, oo ah intooda badan, ee raacsan Imaam Maalik iyo Imaam Abuu Xaniifah iyo Imaam Al Shaaficii waxay qabaan inay Anbiyadu macsuumiin ka yihiin xattaa dambiyada yaryar dhammaantood, oo uu Ilaahay, Cazza wa Jalla, ka ilaaliyay. Cusmadaasu waxay ahaaneysaa intaan falidda dambiyadaas yaryar dhicin horteed, oo ay ka hortegeysaa inayba ahaadaan, hadduusan amar iyo sharci Ilaahay kusoo degin iyo wax la mid ah, oo sidaas ayay mid sidaas u yari Aadan uga dhacday, taas dhiciddeedoo ay ka ratibmeen oo ay uga dhasheen manaafic iyo wax waxtar u leh Aadan iyo ubadkiisaba. Haddayan sidaas oo kale ahaynna Anbiyada sina dambiyo yarna kama dhacaan si ula kac ah iyo si sahwi iyo halmaamid ahba."

Xikamada iyo naxariista kasoo dejinta Aadan ee Jannada

Marka, bal arag naraxariista iyo xikmada faraha badan ee ku sugan in Aadan Jannada laga soo dejiyay oo arligaan loo so dejiyay, ahna faaiidooyinka soo dejintiisa ka dhashay, oo hadduusan arligaan usoo degi lahayn lama arkeen Jihaadka kuwa mujtahidiinta ah oo cilmiga baara oo barta oo bara, iyo jihaadka caabidiinta Ilaahay si dhab ah u caabuda, ayadoo ay xikmadu ahayd hubinta iyo helidda cilmiga, kaddibna camalka lagu dabbaqo, oo uu sidaas ku noqdo camal sugan oo sidii ay ahayd inuu ahaado ah. Hadduusan Adan soo degi lahayn Samada kor uma tafeen codadka iyo neefdhawga kuwa tawbadkeenaya, hoosna uma ayan qubteen dhibcaha ilmada kuwa dambiyada galay. Imaam Al Qurdhubii wuxuu tafsiirkiisa ku yiri: ""Kasoo saaridda Ilaahay ee uu Aadan Jannada kasoo saaray ma ayan ahayn ciqaab isaga lagu ciqaabayo, maxaa yeelay waxaaba Jannada laga soo saaray oo dhulka loo soo dejiyay kaddib markuu isaguna ka tawbad keenay wuxuu sameeyey, Ilaahayna uu tawbaddiisa aqbalay. Waxaase loo soo dejiyay edbin la edbinayo iyo adkayn la adkaynayo mixnada iyo dhibaatada ku habsatay. Runtuna waxay tahay inay soo dejintiisa arliga loo soo dejiyay ay

ka mid tahay xikmada Ilaahay oo azaliga ah oo waligeed jirtay ee arrinkaas ku saabsan, ahna inuu ubadkiisa arliga ku faafiyo, uuna takliif iyo waajibaad korka ka saaro, kuna imtixaano oo ay halkaas ka rattibmaan abaalmarin iyo ajar siin ama ciqaab markay Aakhiro tagaan, ayagoo ayan Jannada iyo Naartu ahayn laba daarood oo uu takliif jiro. Marka, cunidda xabbaddaas miraha geedka laga reebay uu ka cunay waxay sabab u noqotay in arliga loo soo dejiyo. Ilaahayna waa Midka wuxuu doono fala, wuxuuna hore uba yiri: **"Innii jaacilun fii al ardi khaliifatan**(30)**",** oo ah Aayadda soddonaad ee Suuratu Al Baqarah, macneheeduna yahay: "Anigu waxaa arliga dhexdiisa yeeli mid sharcigeyga ku oofiya oo ay facba fac isaga dambeeyaan(30)". Culummada tafsiirka Quraanka iyo macnihiisa ku xeel dheerna waxay ka yiraahdeen hadalka Ilaahay ee ku xusan Aayadda shan iyo soddonaad ee Suuratu Al Baqarah iyo Aayadda sagaal iyo tobnaad ee Suuratu Al Acraaf ee ah: **"Wa laa taqrabaa haathi-hi al shajarata"** oo macneheedu yahay: "Hana u dhowaanina geedkaan": "Waxaaba ku sugan dareen in dambigaas lagu dhici doono, Jannadana looga soo saari doono, oo degidda uu Aadan Jannadaas degay uusan ku waareyn, maxaa yeelay qofka Jannada ku waaraya wax dhexdeeda ku jira lagama reebo, waxna lama amro inuu la yimaado, waxna lagama reebo inuu ka haro, waxaana u daliil ah **"Innii jaacilun fii al ardi khaliifatan**(30)**",** oo ah Aayadda soddonaad ee Suuratu Al Baqarah, macneheeduna yahay: "Anigu waxaa arliga dhexdiisa yeeli mid sharcigeyga ku oofiya oo ay facba fac isaga dambeeyaan(30)". Intaasuu ku egyahay hadalka Imaam Al Qurdhubii. Al Axwathii wuxuu yiri: "Inuu Aadan kasoo baxay Jannada waxay sabab u noqotay jiritaanka ubadkiisa iyo dhashaas badan, iyo jiritaanka Anbiyada iyo Rususha iyo saalixiinta, kamana uusan soo bixin Jannada isagoo laga soo eryay, bal wuxuu usoo baxay inuu arligaan joogo inta loo xukumay inuu joogo kaddibna uu ku noqdo. "

Ilaahay, Tabaaraka wa Tacaalaa, oo Aadan qalbiga u qaboojiyay

Ilaahay, Tabaaraka wa Tacaalaa, markuu towbadda Aadan aqbalay, wuxuu u waxyooday oo uu u caddeeyey, kuna ilhaamiyay, wax ay naftiisu ku xasishay, cabsidii haysay iyo kurbadana ka qaaday, sida Isagoo Ilaahay ku yiri oo kale: **"Yaa Aadamu in kunta ahbadhta min daari al qurbi, fa Innii qariibun, mujiibun, ujiibu dacwata al ddaacii. In kaana xasala laka mina al ikhraaji kasrun, fa Anaa cinda al munkasirati quluubihim min Ajlii. Wa in kaana faataka fii Al Ssamaa'i zajalu al musabbixiina, fa qad tacawwadtu fii al ardi aniina al muthnibiina, fa aniinu al muthnibiina axabbu Ilaynaa min tasbiixihim: rubbamaa yashuubuhu al iftikhaaru, wa aniinu al muthnibiina yuzayyinuhu al inkisaaru.** " Hadalkaas oo aan Xadiith ahayn, macnihiisu waxaa weeye: "Aadanow, haddaad kasoo degatay daarta dhowaanshaha -oo Ilaahay u dhow, waana Jannadee-ha tiiraanyoon, maxaa yeelay Anigu waan dhowahay, waxa la iga baryana qofka iga barya waan siiyaa, oo sidaas dhowaanshaha aan Jannada kuugu dhowaa wuxuu la mid yahay dhowaanshahayga aan arliga kuugu

dhowahay. Waana maqlaa oon siiyaa kuwa i barya waxay iga baryaan. Hadday bixidda Jannada lagaa bixiyay uu qalbigaagu ku jabay -sida dhacdayba- Anigu waxaa ahaan agta iyo Midka u dhow oo aan kabaa kuwa ay quluubtoodu Aniga daraadey u jabeen." Oo waxaa qalbiga laga dhigay sida quraarad khafiif ah oo taag daran oo hadday jabto kala daadaneysa, oo sidaas oo kale ayuu qalbigu u taag daranyahay. Xadiithka uu Imaam Al Ghazaalii ku wariyay kitaabkiisa Al Bidaayah wuxuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka wariyay inuu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa leeyahay: " **Anaa cinda al munkasirati quluubuhum min ajlii",** oo macnihiisu yahay: "Anigu waxaan ahay agta -oo aan kabaa- kuwa quluubtoodu u jaban tahay Aniga daraadey". Haddaan hadalkii Ilaahay inuu Aadan ku yiri loo nisbeeyey tarjumiddiisa dib ugu laabanno wuxuu yiri: "Hadduu Samada kugu seegay -marka arliga laguu soo dejiyay- codadka kuwa tasbiixsanaya, oo Subxaana Allaahi oranaya, waxaan cawil celin ahaan kuu siiyay arliga dhexdiisa iniinka -oo ah boohintaan lala qaylin oo uu ku taaho qofka xanuun hayaa ay iniinaan markay xanuunsadaan oo ay Ilaahay u booyaan inuu dambigooda. dhaafo oo uu xanuunkaas ka qaado- kuwa dambaaba. Iniinka kuwa dambaaba ayaanna ka jeclahay tasbiixda kuwa tasbiixsada. Hadday sidaas tahayna, oo aan iniinka dambiilayaasha ka jecelnahay codadka kuwa tasbiixsanaya, markaas adiguna waxaad jeceshahay waxaan jecelnahay. Codka kuwa arliga dhexdiisa ku tasbiixsanaya, ayagoo aan ahayn kuwa Samada ku tasbiixsanaya oo kale, waxaaba dhici karta inuu dhex galo faan oo uu markaas fasaadiyo. Iniinka kuwa dambiga galayse waxaa qurxiya qalbi jabka, oo sidaasuu inta kale oo cod ahba uga sarreeyaa. Waaba ayada uu Muslim Abuu Hurayrah, Allaha raalli ka noqdee uga wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Wa Allathii nafsii bi yadihi law lam tathnibuu la thahaba Allaahu bikum wa la jaa'a bi qawmin yathnibuuna, thumma yastaghfiruuna",** oo macnihiisu yahay: "Waxaan ku dhaartay Midka ay nafteydu Gacantiisa ku jirto, haddaydnaan dambaabi lahayn, Ilaahay waa idin qaadi lahaa, markay ajashiinnu soo gasho, wuxuuna keeni lahaa qawm dambaaba kaddibna dambi dhaafid weydiista, oo uu markaas Ilaahay u dambi dhaafo, si ay u muujiyaan oo looga arko dambi dhaafidda, Isagoo Ilaahay Ghaffaar dhambi Dhaafe isku tilmaamay", siduu noogu sheegay Aayadda kow iyo tobnaad ee Suuratu Al Namli oo kale: **"Fa Innii Ghafuurun Raxiimun**(11)**"** oo macneheedu yahay: "Oo Anigu waxaan ahay dambi Dhaafe Raxmad miiran ah(11)". Marka si loo helo Al Ghaffaaru waa in la helaa mid loo dambi dhaafo, si loo arko Al Rraxiimuna oo ah Midka ugu naxariis badan waa in la arkaa kuwuu u naxariistay. Marka, yeeyan dambiyadiinnu idinka hor istaagin inaad tawbad keentaan, oo aad Ilaahay u noqotaan, quusasho aad naxariista Ilaahay ka quusateen. Marka, hadalka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ma aha ruqso in la dambaabo la isu ruqseynayo, ama la iskuba boorrinayo, balse ujeedadu waa baraarujin la isku baraarujinayo weynaanta deeqda Ilaahay iyo waasicnimada dambi dhaafkiisa, iyo boorrin la isku boorrinayo in dambiyada laga tawbad keeno. Subxaana, oo waxaa ceeb iyo baahi iyo

naaqusnimo oo idil ka fiyow oo ka fog oo ka hufan Midka markuu addoonkiisa uu balaayooyinka uu ku jiro uga naxariisto, balaayooyinkaas laftooda uga dhiga oo ugu beddela siin oo wax fiican siiya, ama beddelka balaayada wax fiican siiya, Ilaaha hadduu addoon dulleeyana ayan kaas dadaal badan oo uu la yimaado iyo ijtihaad badani ayan wax tarin, ijtihaadkaasna uuba ku noqdo korkiisa cirib xumo. Ilaahay wuu talqiiniyay oo uu baray Aadan wax xujjo u noqday, oo waaba isaga. yiri: "Uma aanan malayneyn inuu. axadna been ku dhaaran karo". Ragna waxayba yiraahdeen: Aadan iyo Xaawo kamaba ayan cunin geedka laga reebay, waxayse ka cuneen geed kale oo ay isku jinsi yihiin oo la mid ah, ayagoo amarka u fasirtay oo u gartay waxa laga reebay uu geedkaas farta loogu fiiqay oo loo tilmaamay yahay, loolana jeedo, aanse loola jeedin jinsiga geedkaas oo idil, sida ayadoo la yiraahdo geedkaas bardaha ah ha ka cunin, oo kii farata loogu fiiqay inta ka fogaaday geed kale oo isaguna barde ah ka cunay. Waxaana warkaan sheegay Al Qurdhubii. Ilaahayna wuxuu Aadan baray oo, uu ku riday wax hadduu yiraahdo tawbaddiisa laga aqbalayo, ahna, siday u yiraahdeen Ibnu Cabbaas iyo Al Xasan iyo Ibnu Jubayr iyo al Daxxaak iyo Mujaahid: "Rabbanaa thalamnaa anfusanaa wa in lam taghfir lanaa wa tarxamnaa la nakuunanna mina al khaasiriina", oo macneheedu yahay: "Rabbigeenow, waxaan gardarreysannay nafafkeenna, haddaadanna dambigeenna dhaafin, aadanna noo naxariisan waxaan ka mid noqoneynnaa kuwa khasaaray." Waxaa kaloo Mujaahid laga wariyay inay Aadan iyo Xaawo yiraahdeen: "Allaahumma laa ilaaha illaa Anta, thalamtu nafsii, fa ighfir lii Innaka Anta Al Ghafuuru Al Rraxiimu", oo macneheedu yahay: "llaahayow, ilaahaan Adiga ahayni ma jiro. Nafteyda ayaan dulmiyay ee marka ii dambi dhaaf, Adigoo ah Midka dambi Dhaafka badan oo naxariistah." Waxaa kaloo, la yiri: Aadan wuxuu arkay inay ku dhigan tahay lugaha Carshiga **"Muxammadun Rasuulu Allaahi",** markaasuu ku shafeeco weydiistay. Al Qurdhibii wuxuu kaloo yiri: "muraadku waa boohinta iyo xishoodka iyo ducada iyo shalleytida iyo dambi dhaaf weydiisashada."

Eryirida Ibliis

Markaasaa Ibliisna Samada laga soo eryay, kaddib markuu muddo dheer adeegayey, oo siduu Al Qurdhubii yiri wuxuu Ilaahay caabudayey sideetan kun oo sano. Kitaabka Muntahaa Al Nuquuli-na wuxuu sheegay inuu Ibliis Ilaahay sagaal kun oo sano caabudayey. Kitaabka Taariikhu Al Khamiisina wuxuu wariyay laba boqol iyo afartan kun oo sano ayadoo ayan ku harin Samaawaadka iyo toddobada arliba in taako ah oo uusan ku sujuudin, wuxuuna, waa Ibliis, yiri "llaahayo, miyay hartay bar aanan ku sujuudin?" Markaasuu Cazza wa Jalla ku yiri: " **Usjud li Aadama** " oo ah "U sujuud Aadan". Markaasuu Ibliis wuxuu yiri: "Ma anigaad iga fadli yeeleysaa -iga kor marineysaa-?" Ilaahay wuxuu yiri: **"Afcalu maa ashaa'u wa laa us'alo cammaa Afcalu"** oo macneheedu yahay: "Waxaan doono ayaan falaa, la igamana waydiiyo waxaan falo, oo maxaad u fashay la ima yiraahdo".

Markaasuu Ibliis diiday inuu sujuudo. Markaasaa la eryay oo la lacnaday. Kitaabka Al Mishkaatu wuxuu sheegay oo yiri "Al Xasan wuxuu yiri: "Ibliis wuxuu Ilaahay Samada ku caabudayey toddoba boqol iyo shan iyo toddobaatan kun oo sano, wuxuu arligana Ilaahay ku cabuday isagoo aan ka tegin in le'eg inta cag la dhigo ee waa illaa kan ku sujuuday." Marka la eryay ayuu camalkiisii oo idil wuxuu noqday sida Habaa'an Manthuuran, oo ah waxa habaaska la firdhiyey oo kale ah oo qolka dhexdiisa lagu arko markuu shabaakada qorraxda iftiinkeedu kasoo galo oo duulduula, waxaasoo aan waxba tarin. Sidaas oo kale ayuu camalkiisii noqday, oo wax waxtar ah u yeelan mayo, sababtuna ay tahay inuusan la imaan shardigii loo baahnaa oo ah inuu Ilaahay waxtar uga dhigo. Markaasuu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, wuxuu Ibliis ku yiri, waana Aayadaha afar iyo shan iyo soddon ee Suuratu Al Xijri: **"Qaala Fa akhruj minhaa fa innaka rajiimun**(34)**Wa inna calayka al llacnata ilaa Yawmi Al Ddiini**(35)**",** oo macnohoodu yahay: "Wuxuuna yiri: ka bax xaggeeda adigu waxaa tahay mid la fogeeyeye(34)Korkaagana waxaa ah lacnad tan iyo Maalinta Xisaabtankee (Qiyaame)(35)". Taas waxaa weeye: "Jaanada ka bax -oo Samada lagama soo saarin oo waxaa laga reebay Bicthada oo ah marka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, lasoo diray dabadeed-, adigoo lagaa fogeeyey oo lagaa eryay khayr iyo karaamoo idil, adigoo lagula dhacayo oo lagugu rajmayo shihaab, oo ah dab ololoya, waxaana korkaaga ah lacnad -oo ah eryid iyo fogayn naxariista Ilaahay laga fogeeyey- ilaa Maalinta Xisaabtanka, oo ah Maalinta Qiyaame." Ilaahay, hadduu addoonkiisa cadaaladdiisa dul dhigo oo uu ku xisaabiyo xasanadna u reebi mayo oo uma ay harayso, maxaa yeelay marna kama uusan marna afcaal keeneysa in lagu qabto oo dambi ah. Waaba tuu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Aayadda shan iyo afartanaad ee Suuratu Faadhir ku yiri: **"Wa law yu'aakhithu Allaahu al nnaasa bimaa kasabuu maa taraka calaa thahrihaa min daabatin**(45)**",** oo macneheedu yahay: "Hadduu Ilaahau u qaban lahaa dadka waxay kasbadeen oo xumaan ah, kagama tageen dhulka korkiisa wax socda(45)".

Taas waxaa weeye: "ugama tageen arliga korkiisa mid korkeeda xumaanta macaasida kula socda (daabad). Waxaa kaloo la yiri: daabadda waxaa laga wadaa dadka." Hadduuse Ilaahay deeqdiisa u fidiyo addoonkiisa oo uu si naxariis leh iyo dambi dhaafid kula dhaqmo, addoonkaas sayyi'aadna oo ah dambi uma haro, oo laguma qabto. Muraadka labadaas qodobna waa sidatan: xasanaadkiisii iyo sayyi'aadkiisii oo idil ayaa laga tirtirayaa xaashiyaha Malaa'igta, markaasey kii xasanaadkiisa la wada tirtiray waxaa qalbigiisa gelaya caloolxumo iyo tiiraanyo xoog leh, inuu xad gudbay ilaa heer ay xasanaadkiisii oo idil tageen. Kii sayyi'aadkiisa la tirtirayna waxaa aad loogu fogaaday daboolidda xumaantiisa iyo dambiyadiisii uu galay, siduuba Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yiri: **"Ithaa taaba al cabdu ansaa Allaahu Al Xafathata thunuubahu, wa ansaa thaalika jawaarixahu wa macaalimahu mina al ardi, xattaa yalqaa Allaaha wa laysa calayhi shaahidun min Allaahi bi thanbin",** oo macnihiisu yahay: "Hadduu ama markuu addoonku tawbad keeno, Ilaahay wuxuu Malaa'igta

afcaashiisa dhigta oo ilaalisa halmaansiiyaa dambiyadiisa. Wuxuu kaloo dambiyadiisa halmaansiiyaa xubnaha jirkiisa iyo baraha arliga ka midka ah oo uu dambiyadaas korkooda ku galay. Markaasuu addoonkaasu wuxuu Ilaahay la kulmaa isagoo uusan jirin cid Ilaahay hortiisa dambiyaduu galay ugu markhaati kacda". Waxaa Xadiithkaan wariyay Al Asbahaanii, kuna wariyay kitaabkiisa Al Targhiibu, iyo Al Xakiim iyo Al Tarmathii oo ku wariyay Al Nawaadir, iyo Ibnu Casaakir. Labadaas addoon kooda horena waa la xisaabiyay -llaahow ha na xisaabin- oo acmaashiisana la miizaamay, kan labaadna waa la cafiyay, lana asturay: Ilaahayow na cafi, nana astur.

Deeqaha Aadan la siiyay

Bal u fiirso, oo isha qalbigaaga ku arag oo ku fakar arrinkaan: markay deeqda uu Aadan, Calayssalaamu, uu khalqiga intiisa kale, sida Malaa'igta iyo ghayrkoodba, dheer yahay, ahna aqoonta iyo cilmiga, kuna tilmaaman Aayadda kow iyo soddonaad ee Suuratu Al Baqarah: **"Wa callama Aadama al asmaa'a kullahaa**(31)**"** oo macneheedu yahay: "Wuxuuna baray Aadan magacda kulligood(31)", iyo ballaarnaanta caqliga uu Ilaahay siiyay, uuna Abuu Umaamah ka yiri: "Haddii turidda iyo dulqaadka Banii Aadanka oo idil tan iyo markuu Ilaahay khalqiga abuuray ilaa Maalinta Yawmul Qiyaamaha inta la isku daro gacan miisaanka la saaro, dulqaadka iyo turidda Aadanna gacanka kale la saaro, tan Aadan ayaa culusaan lahayd," Al Qurdhubii wuxuu yiri: "Taasi waxay ixtimaaleysaa in tiradaas guud laga saaro oo uusan ka mid ahayn Al Musdhafaa, Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, maxaa yeelay isagaa dadkoo idil ugu dul qaad badnaa iyo turidba. Waxaa kaloo uu warkaasi ixtimaalayaa in loola jeedo intaan Anbiyada ahayn." Intaasi waa warkii Al Qurdhubii. Cilmiguna kaamil ma noqdo jeer lagu dhaqmo, oo lagu camal falo waxa uu xambaarsanyahay. Jannaduna ma aha daar dhexdeeda lagu shaqeeyo oo lagu dadaalo, balse waa daar lagu nicmeysto, oo lagu raaxeysto iyo mushaahadah oo ah wax fiirsasho iyo arag. Sidaas daraadeed ayaa waxaa lagu yiri: "Aadanow, u dego arliga jihaadka oo ah jihaadka nafta, iyo shahawaatka nafta. Naftu waxay dooneysana, waxaad uga adkaataa shaqo badan oo adag oo dhab ah oo aad kula jihaadid. Waana ku kanoo noloshaadii nicmada badnayd ee aad ku haysatay Jannada aad kasoo baxday, ay kuu soo noqotay ayadoo ka kaamilsan siday hore u ahayd, oo aad Jannada uga caado yeelatay, taasoo ku ahaatay kaddib markaad intaad adduunkaan ku noolaatay aad hadana Jannada dib ugu noqotay". Waxaa hadalkaas ka cad inayan adduunyadaani, intay doontaba ha dheeraatee, ayan waxba ka ahayn marka loo fiiriyo nicmooyinka Aakhiro, tanoo waareysa, ayadoo uu adduunku dhammaanayo. Wax dhammaanayana waxba ma aha marka loo fiiriyo waxa waaraya.

Sawirnimada Ibliis

Markuu Ibliis, korkiisa lacnad ha ahaatee, xaasidnimada uu Aadan u qabo muujiyay, wuxuu ku dadaalay inuu dhibaateeyo, ilaa uu sabab uga noqday kasoo saaridda Jannada ee Sayyidka Aadan. Caalinka magaciisu yahay Al Yaaficii wuxuu kitaabkiisa Nafaxaatu Al Azhaari uga wariyay Calii bin Abii Dhaalib, Calayhissalaatu Wassalaamu, inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: " **Habadha calayya Jibriilu, fa qaala:** " **Inna li kulli shay'in sayyidan, fa sayyidu al Bashari Aadamu, wa sayyidu waladi Aadama anta",** oo macnihiisu yahay: "Waxaa igu soo degay Jibriil wuxuuna yiri: "Shay walba wuxuu leeyahay sayyid, oo ah hoggaamiye ama madax, basharkana, waa dadkee, sayyidkoodu waa Aadan, dhasha Aadan, oo ah Bani Aadanka oo idilna, sayyidkoodu waa adiga." Marka, hadduu sax yahay, waxaanna taageeraya Xadiithka Fatxu Al Baari bi Sharxi Saxiixi Al Bukhaarii, oo wariyay inayan sayyidnimadu isla markaas keeneyn afdaliyo ama ka sarreyn wax la dheer yahay kuwa sayyidka loo yahay, ayadoo uu Cumar bin Al Khadh-dhaab, Allaha raalli ka noqdee, yiri: "Abuu Bakar waa sayyidkeenna, wuxuuna xoreeyey sayyidkeenna (oo ahaa Bilaal oo intuu isagoo addoonn ah gatay isagoo rabidda Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo doonayey in inta la gato la xoreeyo meel marinaya, hadana xoreeyey)". Cumar wiilkiisa Cabdu Allaahi ibnu Curnar, Allaha raalli ka noqdee, caalinka iyo caabidka ummaddaan, wuxuu isaguna isagoo ka faallonaya Mucaawiyah ibnu Abii Sufyaan, Allaha raalli ka wada noqdee, oo markaas Madaxweynaha Dawladda Islaamka noqday kaddib afarta Khulafaa'u al Raashidiina oo ah Abuu Bakar iyo Cumar iyo Cuthmaan iyo Calii iyo Al Xasan bin Faadhimah bintu Rasuuli Allaahi, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: "Ma aanan arag mid ka sayyidsan Mucaawiyah", in kastoo uu arkay sayyidnimada Al Cumarayni Abuu Bakar iyo Cumar, Allaha raalli ka wada noqdee. Sawirka Ibliis ahna ma uusan garan in Aadan haddii Jannada laga soo saaro ay deeqihiisu kaamil noqonayaan, kaddibna uu Jannada ku noqonayo isagoo siduu hore u ahaa ka kaamilsan. Imaamku wuxuu Ibliis ku magacaabay **al ablahu,** ablahna waxaa la yiraahdaa midka doqonka ah oo aan wax aqoon ah lahayn oo waxa xun iyo waxa fiican aan
kala garanayn oo aan kala soocayn. Wuxuuna ablah ku noqday ayadoo cilmiguu hore u lahaa laga siibay markuu gaaloobay. Al Qurdhubii wuxuu yiri: "La iskuma khilaafsana inuu Ibliis caalin ahaa, oo uu yiqiinnay Ilaahay, intuusan gaaloobin ka hor. Midka yiri: jaahilnimuu la gaaloobay wuxuu ka yiri: cilmiga ayaa laga siibay markuu gaaloobay. Midka yirina cinaad iyo madax adayg ayuu la gaaloobayna wuxuu ka yiri: wuxuu gaaloobay isagoo cilmigiisii leh oo wata oo lagama siibin". Ibnu Cadhiyyah wuxuu yiri: "Gaalnimo uu cilmigiina u haro waa wax la fogeysto, agteyda taasi waa suurtowdaa oo wax aan suurtoobin ma aha, ayadoo isla markaasna qofkuu doono Ilaahay dulleynayo." Al Qurdhubii wuxuu yiri: "Waxaa la isku khilaafay waa markaas ka hor Ibliis gaal miyuu ahaa? Waxaana la yiri maya, isagaana ahaa axadka ugu horreeya oo gaal noqda." Waxaa kaloo la yiri: bal

hortiis waxaa jiray qawm gaalo ah, ahna jinnigii arliga degganaa. Ibliis ma jaahilnimo ayuu la gaaloobay ama cinaadnimo? Ehelu Sunnadu laba aragti ayay ka leeyihiin. Ibliis hadduu ogaan lahaa inuu Aadan Jannada kusoo noqonayo isagoo ka fadli badan xaaladdiisii markii hore oo uu ku jiray intaan laga soo saarin, kuma uusan dadaaleen inuu kasoo saaro. Al Qurdhubii wuxuu yiri: "Ujeedada Ibliis ma ayan ahayn inuu Aadan Jannada kasoo saaro, wuxuuse doonayey inuu hoos uga soo rido martabada iyo darajada uu ku sugnaa, uuna u fogeeyo sida isaga loo fogeeyey oo kale, oo naxariista Ilaahay looga fogeeyey. Mase uusan gaarin muraadkiisii, oo ma uusan hanan, wuxuuse kororsaday naaqusnimo iyo caro uu naftiisa u caroodo iyo hungo, uu maladiisii uu u kacay ku hungoobo. Waaba ayada uu Ilaahay Tacaalaa Aayadda boqol iyo labo iyo labaatanaad ee Suuratu Dhaahaa ku yiri: " **Thumma ijtabaahu Rabbuhu**(122) " oo macneheedu yahay: "Kaddibna waxaa doortay Rabbigiis(122)". Kaddibna Ilaahay Aadan tawbadiisa ayuu aqbalay, wuuna hanuuniyay, wuxuuna noqday Khaliifka Ilaahay ee arligiisa kaddib markuu dariskiisa ku ahaa daartiisa." Intaas weeye hadalka Al Qurdhubii.

Suufiyada

Suufiyadu waxay yiraahdeen: kasoo bixinta Aadan ee Jannada waxaa ku sugan tilmaan ama ishaaro tusaysa sida Isagoo uu Ilaahay Tacaalaa oranayo: **"Law ghafartu fii al Jannati lamaa tabayyana karamii bi Annii aghfiru li nafsin waaxidatin, bal u'akhiro ilaa al dunyaa, wa aatii bi uluufin mina al cusaati xattaa aghfira lahum wa lahu li yatabbayana juudii wa karamii",** oo macneheedu yahay: "Haddaan u dambi dhaafo isagoo Jannada dhexdeeda ku jira kariimnimadeydu, oo ah deeqsinnimadeydu kuma ay muuqaneyso inaan qof keligiis u dami dhaafay, balse dib ayaan ugu dhigayaa adduunka, waxaanna keenayaa kumanyaal caasiyiin ah markaasaan u dambi dhaafayaa ayaga iyo isagaba Maalinta Qiyaame, si ay isaga iyo ghayrkiisba ugu caddaato deeqsinnimadeydu iyo kariimnimadeydu.” Ragga warkaas wariyayna ma ayan arag nas ku saabsan oo ka sugnaaday Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Kitaabka Taariiikhu Al Khamiisina, sida nasoo martay, wuxuu wariyay inuu Ilaahay Tacaalaa Malag Jibriil ku yiri: **"In raximtuhu laa yanqusu min raxmatil sha'un, wa in yath-hab laa yucaabu calayhi shay'un. Fa khalli canhu xattaa yath-haba, thumma yarjica ghadan fii mi'ati uluufin min awlaadihi cusaatin xattaa yushaahida fadlanaa calaa awlaadihi wa yaclama sacata raxmatinaa",** oo macneheedu yahay: "Haddaan u naxariistana, taasi raxmadayda waxba ka naaqusin mayso, hadduu tagana, oo uu adduunka u degana, shayna lagu ceebeyn mayo. Marka iska daa ha tagee, hana soo laabto berrito isagoo wada boqollo kun oo ubadkiisa ah oo caasiyiin ah, si uu markhaati iyo gole joog uga noqdo deeqdeenna aan siinnay, uuna u ogaado ballaarnaanta naxariisteenna."

Ilaahay siduu Aadan galladdiisa ugu kaamilay

Waxaa kaloo ayaduna jirta inuu Ilaahay Tacaalaa u cilmi lahaa inay dhabarkiisa ama duudkiisa ku jireen dhashiisa, Jannaduna ayan ahayn daar la isku dhalo oo uu ubadku ku tarmo. Arrinkaan dambena ma diidayo hadalka uu Ibnu Isxaaq ka wariyay ehelu Kitaabka qaarkood, waa hadduu warkaas uu wariyay sax yahaye, inuu Aadan Xaawo Jannada dhexdeeda kula gogol gali jiray ka hor intayan geedka xaggiisa ka cunin, oo ay markaas qaaday uurka Qaabiil iyo mataantiisa (oo uu Al Dhabarii taariikhdiisa ku sheegay inuu magaceedu ahaa Qaliimaa), ayanna uurkaas wax xanuun ah ayan iskaga arag iyo wax biyo iyo dhiig ah toona markay dhashay. Waxaa uu intaas Ilaahay doonayey inuu arligaan dhabarkiisa uga soo saaro inta dhashiisa ah oo aan Jannada nasiib iyo sad ku lahayn, kuwaasoo ah gaalada, si waafaqsan cilmiguu hore ugu lahaa Subxaanahu wa Tacaalaa, ahna fariiqun fii Al Jaannah wa fariiqun fii al Ssaciiri, oo ah qaybna waxay geleysaa Jannada, qaybna Naarata. Al Imaamu Taaju Al Diini Al Subkii wuxuu kitaabkiisa Al Tanwiiru ku yiri: "Muraadka uu Ilaahay uu Aadan ka lahaa wuxuu ahaa inuu geedka ka cuno, si uu arliga ugu soo dejiyo, oo uu halkaas khaliifo uga dhigo oo camira. Marka muuqaal ahaan waxay ahayd hoos usoo dhigid, macna ahaanse waxay ahayd kor u kicid. Sidaas daraadeed ayuuna al shaykhu abuu Al Xasan al Shaathilii wuxuu u yiri: "Wa Allaahi inuusan Ilaahay Aadan arliga ugu soo dejin inuu naaqusiyo oo uu hoos u dhigo, wuxuuse usoo dejiyay inuu kaamil ka dhigo". Kaddibna wuxuu yiri: "Uma uusan dejin arliga waxaan ahayn inuu kaamil uga dhigo inuu Ilaahay aqoodo, uuna u qumo oo uu meel mariyo hawlaha takliifka looga dhigay oo lagu waajibiyay." Sidaas ayay addoonka Aadan ah kaamil ugu noqotay addoonnimadiisa uu Rabbigiis ku aqoonsado, iyo addoonnimada u qumidda takaaliifta waajibka ku ah inuu la yimaado. Sidaas ayaa waxaa ku waynaatay munnada iyo galladda Ilaahay oo korkiisa ahaatay, iyo badnaanta u ixsaan iyo samafalkiisa." Intaas waxaa ku eg warka Imaam Al Subkii. Marka, miskiinow ogow, Ilaahay Jannada, Inshaa'a Allaahu, annaguu na siiyay oo noo gooyey, si aan ugu raaxeysanno oo aan ugu nicmeysanno. Inay sidaas tahayna, oo annaga naloo gooyey, waxaa warkeeda noo keenay Jibriil, Calayhissalaamu, oo Nabigeenna Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u keenay, waxaana u daliil ah hadalka Ilaahay Tacaalaa ee ku xusan Aayadda shan iyo labaatanaad ee Suuratu Al Baqarah: **"Wa bash-shiri allathiina aamanuu wa camiluu al ssaalixaati anna lahum Jannaatin tajrii min taxtihaa al anhaaru, kullamaa ruziquu minhaa min thamaratin rizqan qaaluu haathaa allathii ruziqnaa min qablu wa uutuu bihi mutashaabihan wa lahum fiihaa azwaajun mudhahharatun wa hum fiihaa khaaliduuna**(25)**",** oo macneheedu yahay: "Ugu bishaaree kuwa rumeeyey, camal fiicanna falay inay leeyihiin jannooyin ay socoto dhexdeeda wabiyo, mar kastoo laga arzaaqo xaggeeda miro waxay yiraahdaan: kani waa kii hore naloogu arzuqay, waxaa la siiyay isagoo isu eg. Waxayna dhexdeeda ku leeyihiin haween daahir ab, dhexdeedana way ku waarayaan(25)." Camal fiicanna falay waxaa weeyey inay inta fardiga ah iyo

sunnooyinkaba la yimaadaan. Jannaatinna waxaa weeye beero geedo badan iyo guryo leh. Waxaanse Jannooyinkaas loo goyn oo aan wax ku lahayn kuwa ka baxa daacadda Ilaahay. Allaha na waafajiyo.

Jannada uu Aadan degganaa

Al Qurdhubii wuxuu yiri: "Janno waa beer, waxaana Janno loogu bixiyay "li annahaa tajunnu man fiihaa," oo macneheedu yahay: "maxaa yeelay geedeheeda ayaa qofka dhexdeeda ku jira astura oo qariya, oo janna waxaa weeye waa qariyay." Waxaa la isku khilaafay Jannada uu Aadan degay midday ahayd, marka lagu yiri: **"Wa qulnaa yaa Aadamu askun anta wa zawjuka Al Jannata**(35)**",** oo ah Aayadda shan iyo soddonaad ee Suuratu Al Baqarah, oo macneheedu yahay: "Waxaanna niri: Aadanow deg adiga iyo haweentaaduba Jannada(35)".

Jannada lagu waaro

Waxaana la yiri: waa Jannatu Al Khuldi, oo ah Jannada dhexdeeda lagu waaro. Sidaas waxaa qaba badan ashcariyyiinta. Ibnu Badhaalna wuxuu ka wariyay mashaayiikhda qaarkood inay ehelu sunnadu aragtidaas isku waafaqeen, waxayna yiraahdeen laamku (waana laamka Jannah ka horreeya) waa lil cahdi, mana uusan jiro machuud kale; waxaana kaloo u daliil ah, ayay yiraahdeen hadalka Ilaahay Tacaalaa oo ku sugan Aayadaha boqol sideed iyo toban iyo sagaal iyo toban ee Suuratu Dhaahaa: **"Innaka laa tajuucu fiihaa wa laa tacraa**(118)**Wa annaka laa tath-ma'u fiihaa wa laa tadxaa**(119)**"** oo macnohoodu yahay: "Waxaa kuu sugnaaday inaadan dhexdeeda ku gaajoon, aadanna ku arradin(118)Waxaana kuugu sugnaaday inaadan ku oomin dhexdeeda, aadanna ku qorroxoon".
Marka sifooyinkaas Aayadahaasu tilmaamayaanna waxay ka mid yihiin tilmaamaha Jannada dhexdeeda lagu waaro. Sidoo kale, ayay yiraahdeen, hadalka Ilaahay Tacaalaa ee ku sugan Aayadda sideed iyo soddonaad ee Suuratu Al Baqarah oo ah **"Ahbidhuu minhaa**(38)**"** oo macneheedu yahay: "Ka hoobta xaggeeda oo hoos u dega(38)", ayadoo ay degashaduna ku dhabowdo in meel kore laga soo dego oo meel hooseysa loo soo dego, taasoo aan ku dhaboobeyn beer arligaan dhexdiis lagu abuuray oo ku taalla. Waxaa kaloo u daliil ah inay sidaas tahay, ayay yiraahden, inuu Muuse markuu Aadan la kulmay, Calayhimussalaamu, waana Maalinta Qiyaamee, uu ku yiri: "Adigu waad daalisay dhashaada, Jannada ayaadna kasoo saartay". Aadan taas kuma inkirine, balse wuxuuba yiri: "Ma waxaad igu eedeyneysaa arrin uu Ilaahay korkeyga ku qaddaray ka hor intaanba la i abuurin?" Al Xadiith. Haddayan Jannada waaritaanka ahaan lahaynna, Aadan wuu uga jawaabi lahaa Muuse, oo uu u caddayn lahaa.

Jaanno Adduunkaan ku tiillay

Waxaa kaloo la yiri Jannadaasi Jannada waaritaanka ma ayan ahayne, waxay ahayd Janno kale, siday u wariyeen Munthir bin Saciid oo sheegay inay daliillada taas xoojinayaa ay badan yihiin, iyo Al Imaamu Al Maawardii iyo Al Imaamu Al Rraazii iyo Ibnu Cuqayl iyo Al Imaamu Al Qurdhubii iyo Al Ruumaanii iyo ghayrkoodba. Kuwa sidaas qabana waxay isku khilaafeen meeshey Jannadaasi ku tiillay. Abuu Al Qaasim Al Balkhii iyo abuu Muslim al Asbahaanii iyo al Thaclabii oo ka wariyay Al Qadariyyah, waxayna yiraahdeen waa beer arligaan ku tiillay, oo waliba arliga Cadan (ee dalka Yaman) ku tiillay, siduu Al Qurdhubii u xusay, ama arliga Falasdhiin ku taalla ama inta u dhexeysa Faaris iyo Karmaan, siduu Al Baghawii u xusay. Al Raazii iyo ibnu Cuqaylna waxay yiraahdeen: kuwa sidaas qaba hubuudhka oo ah kasoo degidda Jannada waxay yiraahdeen waa ka guurid bar oo beel kale loo guuro, si la mid ah soo degidda ku xusan Aayadda kow iyo lixdanaad ee Suuratu Al Baqarah, kana mid qisada Nabi Musse iyo reer Banii Israaiil: " **Ahbidhuu Misran**(61) " oo macneheedu yahay: "Dega Masar", ayagoo beel kasoo guuray beel kalena dega la leeyahay.

Janno kale oo Samada toddobaad ka korreysa

Waxaa kaloo la yiri: Waxay ahayd Janno kale oo Samada toddobaad ka korreysa, siduu u yiri Abii Haashim iyo riwaayad laga wariyay Al Jabaa'ii. Ibnu Cuqaylna wuxuu yiri: "taasina waa oraahyo aan daliil lahayn, ayadoo ayan sugnaan inay Samada ku yaallaan beero aan Jaanatu Al Khuldi ahayn, midda lagu waaro".

Janno ibtilo iyo imtixaan

Waxaa kaloo la yiri waxay ahayd Janno aan ahayn Jannatu Al Khuldi, oo uu Ilaahay ka yeelay daar Aadan iyo Xaawo lagu ibtileeyo oo lagu imtixaano, maxaa yeelay Jannatu Al Khuldi, Jannada dhexdeeda lagu waaro, waxaa la galaa Maalinta Qiyaame, ayadoo Jannada ay Aadan iyo Xaawo degeen ayba Qiyaame hortiis galeen. Jannatu Al Khuldi waa daar thawaab iyo abaalmarin kuwa arliga Ilaahay Tacaalaa ugu hoggaansamay oo camal suuban la yimid looga abaal gudo, ee ma aha daar takliif iyo waajibaad la isku saaro, oo waxna la is amro in lala yimaado, waxna la is faro in laga reebtoomo. Marka, hadday Jannatu Al Khuldi ahaan lahayd, geedna lagama reebeen. Jannatu Al Khuldi waxay kaloo tahay daar nabad gelyo, oo looga nabad helo cudurro iyo dhibaato iyo cabsi noocay tahayba, iyo murug iyo calool xumaba, mana ay aha daar ibtilo iyo imtixaan, sida Aadan iyo Xaawo loogu ibtileeyey oo loogu imtixaanay. Jannatu Al Khuldi waxay kaloo tahay daar lagu nagaado, siduuba Ilaahay Tacaalaa ugu yiri Aayadda sideed iyo afartanaad ee Suuratu Al Xijri: **"Laa yamassuhum fiihaa nasabun wa maa hum minhaa bi mukhrajiina**(48)**",** oo macneheedu yahay: "Kumana taabto Jannada dhexdeeda dal iyo dhib, xaggeedana lagama bixiyo(38)", mana aha daar laga

guuro, siday Aadan iyo Xaawo uga soo guureen midday degganaayeen. Marka, intaasoo idil waxay daliil u tahay inay jannaday Aadan iyo Xaawo degganaayeen ayan Jannatu Al Khuldi ahayn. Kuwa oranaya inay jannaday ku jireen ay tahay Jannatu Al Khuldi waxay xujjo iyo daliil ka dhigteen ayagoo yiri: Jannadu waa mid magac badan leh. Qaar kalena waxay yiraahdeen: Jannooyinku waa toddoba Janno. Koox culummo ahna waxay rajaxeen inay Jannooyinku afar yihiin, sida ugu xusan Suuratu Al Rraxmaani, afartaas hoostoodana ay jannooyin badan yihiin,sida ugu soo aroortay Xadiithka saxiixa ah oo uu Nabi Muxammada, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ugu yiri: **"Innahaa jinaanun kathiiratun"** oo macneheedu yahay: "Waa jannooyin tiro badan". Gelidda la galo Jannatu Al Khuldi si loo arko waa dhici kartaa Maalinta Qiyaame ka hor, waxaana u daliil ahba inuu Nabigeennuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, galay habeenka la dheelmiyay, kaddibna uu kasoo baxay, uuna sheegay waxa dhexdeeda ah iyo inay xaq ahaan tahay Jannatu Al Khuldi. Kuwa oranayana janno aan ayada ahayn ayay ahayd. midday Aadan iyo Xaawo degganaayeen, oo yiri: inaan Jannatu Al Khuldi dhexdeeda laga dareemin wuxuu Aadan iska dareemay oo xuzni iyo calool xumo ah, iyo inuu labbiskuu xirnaa ka dhacay iyo daalka uu daalay kaddib markuu shaqeeyey oo uu soo gurtay caleemaha geedaha Jannada si uu cawradiisa u asturo, xaladahaasi ka fiyoobaantoodu wuxuu u sugnaadaa markay mu'miniintu galaan Maalinta Qiyaame, siday u muujinayaan Aayaadka kulligood, oo jiritaan la'aanta calool xumo, dharka iska siibiddiisa, shaqaynta iyo daalidduba waxayan jirayn markay mu'miniintu jannadaas galaan Maalinta Qiyaame. Ayadaas ayaana daar lagu waaro ah. Runtana Rabbi ayaa u cilmi leh. Al Qurdhubii wuxuu yiri: "Aadan iyo Xaawo waxay degganaayeen Jannatu Al Khuldi, waanna ka jawaabay oo aan xujjooyin kusoo rogay inayan janno Cadan ku tiillay ahayn." Abuu Al Qaasim Al Ruumaanii wuxuu tafsiirkiisa ku rajaxay inay Jaanatu Al Khuldi ahayd, wuxuuna yiri: "Sidaasi waa qawlka Al Xasan iyo Cumar", wuuna xiriiriyey. Ehelu Tafsiirkuna taas ayay qabaan oo ah inay Jannatu Ak Khuldi ahayd.

Tawassulka Aadan ee Nabigeenna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam

Markuu Aadan u kacay inuu Jannada kasoo baxo, kaddib markuu Ilaahay Tacaalaa uu Aadan ku yiri, siduu u wariyay Kitaabka Al Khamiis: **"Ukhruj, laa yujaawirunii man casaanii"** oo macneheedu yahay "Bax, ila darsi mayo mid i caasiyaye", ayuu Aadan indhihiisa kor Carshiga ugu qaaday, wuxuuna arkay inay ku dhigan tahay **Laa ilaaha illaa Allaahu Muxammadun Rasuulu Allaahi.** Markaasuu wuxuu yiri: "Rabbigeeyow, xaqqa Muxammad iigu dambi dhaaf". Markaasuu Ilaahay wuxuu yiri: **"Qad ghafartu laka bi xaqqihi, wa laakin laa yujaawirunii man casaaniiaa",** oo macneheedu yahay: "Xaqqiisa ayaan dambigaaga ku dhaafay, laakin daris ila noqon mayo mid i caasiyay." Aadan wuxuu arkay inay dhudhunka Carshiga ku dhigan tahay, laguna dhigay laba kun oo sano ka hor intaan Samaawaatka iyo arliga la abuurin, sida Anas bin Maalik laga wariyay, ayna

ku dhigan tahay bar kasta oo Jannada dhexdeeda ka mid ah, ha ahaato qasri iyo qol kasta iyo luqumaha xuurul ciinta iyo caleemaha geedka Dhuubaa iyo caleemaha Sidratu Al Muntahaa, iyo darafyada xijaabka iyo indhaha Malaa'igta dhexdooda, siduu ibnu Casaakir uga wariyay Kacb Al Axbaar, magaca Muxammadun oo ku lammaansan magaca Ilaahay Tacaalaa: oo ah **Laa ilaaha illaa Allaahu Muxammadun Rasuulu Allaahi.** Markaasuu Aadan wuxuu yiri: "Rabbiyow, midka magacaan Muxammad la yiraahdo waa kuma?" Markaasuu Ilaahay Tacaalaa wuxuu yiri: **"Haathaa waladuka allathii law laahu maa khalaqtuka",** oo macneheedu yahay: "Kani waa wiilkaaga, oo haddayan isaga ahaan lahayn kumaba aanan abuureen." Markaasuu Aadan wuxuu yiri: "Rabbiyow, xurmada wiilkaan daraadeed, aabahaan dhalay ugu naxariiso". Markaasaa loo dhawaaqay oo uu Ilaahay Malag amray oo u dhawaaqay: "Aadanow, Alle barigaaga waan aqbalnay, haddaad Muxammad noogu shafeeco weydiisan lahayd, oo aad u shafeeci lahayd inta ku nool Samaawaatka iyo arliga, waan kaa shafeeco aqbali lahayn."

Waxaa Cumar bin Al Khadh-dhaab, Allaha raali ka noqdee, laga wariyay inuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Lammaa iqtarafa Aadamu al khadhii'ata qaala: "Yaa Rabbi, as'aluka bi xaqqi Muxammadin illaa maa ghafarta lii". Fa qaala Allaahu Tacaalaa: "Yaa Aadamu, wa kayfa carafta Muxammadan wa lam akhluqhu?" Qaala: "Yaa Rabbi, li Annaka Lammaa khalaqtanii bi yadika, wa nafakhta fiyya min Ruuxika rafactu ra'sii fa ra'aytu calaa qawaa'imi Al Carshi maktuuban laa ilaaha illaa Allaahu Muxammadun Rasuulu Allaahi, fa calimtu Annaka lam tadaf (waa daadka korka dhibicda ku leh oo saadka ku xigah) ilaa Ismika illaa axabba al khalqi Ilayka". Fa qaala Allaahu: "Sadaqta yaa Aadamu, innahu la axabbu al khalqi Ilayya wa ithaa sa'altanii bi xaqqihi, qad ghafartu laka, wa law laa Muxammadun maa khalaqtuka".** Imaam Al Bayhaqii ayaa ku wariyay kitaabkiisa Dalaa'ilu Al Nubuwwati, kitaabkaasoo uu Al Thahabii ka yiri: "Qaado kitaabkaas oo ka baro, isagoo dhammaantiis yahay hanuun iyo nuur." Xadiithkaani waa qayb Xadiithka uu wariyay Cabdu Al Rraxmaan bin Zayd bin Al Aslam Al Madanii, oo ka wariyay aabihiis iyo Ibnu Al Munkadir. Isagana waxaa ka wariyay Asbagh wa Qutaybah iyo Hishaam oo daciif weeye yiri, wuxuuna leeyahay Kitaab Tafsiir ah, wuxuuna dhintay sanadka boqol iyo labo iyo sideetanka Hijriga ah. Waxaa kaloo Xadithka wariyay Al Xaakim oo yiri waa saxiix. Waxaa kaloo wariyay **Al Dhabraanii,** o ah Al Imaamu Abuu Al Qaasim Sulaymaan bin Axmad bin Ayyuub Al Lakhmii Al Shaamii, Al Xaafith, oo kutubbada badan dhigay, cilmigana ka qaatay in kun Shaykh ka badan, isagana ay ka qaateen Abuu Nucaym iyo ghayrkiisba. Al Thahabii wuxuu Al Dhabraanii ka yiri: "Waa thiqqah, hadalkiisa lagu kalsoon yahay oo runlow ah, xifthi ballaaran leh, aragtina u leh oo ku xeel dheer Al Cilal, oo ah sababaha iyo ragga Xadiithka wariya iyo abwaabtaba, isagayna kusoo arooreen Xadiithka iyo culuumtiisuba. Wuxuu ku dhintay Masar sanadka Hijriga ah ee saddex boqol iyo lixdan isagoo boqol sano iyo toban bilood jir ah". Al Dhabraanii wuxuu

Xadiithkaas ku kordhiyay dhammaadkiisa inuu Ilaahay Tacaalaa yiri: **"Wa huwa aakhiru Al Anbiyaa'i min thurriyatika".** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Markuu Adan dambiga falay wuxuu yiri: "Rabbiyow, waxaan kugu weydiisanayaa xaqqa Muxammade,dambigayga dhaaf". Markaasuu Ilaahay Tacaalaa wuxuu yiri: "Aadanow: sidee baad ku ogaatay Muxammad, Anigoo aan weliba abuurine?" Waxaan la abuurinna waa jirkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayadoo nuurkiisa wax jiraba oo idil hortood la abuuray. Taasi waxay kaloo ku tusineysaa deeqda Aadan la siiyay, isagoo dhaagay qiimaha sare ee qofka magacaas Muxammad leh, kaddib markuu arkay isagoo dhigan iyo meeshuu ku dhigan yahay. Aadan wuxuu yiri: "Rabbiyow, Adigu markaad gacantaada igu abuurtay si toos ah -oo aanan ka dhalan aabe iyo hooyo- oo aad igu afuuftay Ruuxaaga, oo aad sidaas nolol ii gelisay, madaxeyga ayaan kor u qaaday markaasaan waxaa lugaha Carshiga ku arkay inay ku dhigan tahay laa ilaaha illaa Allaahu Muxammadun Rasuulu Allaahi. Markaasaan waxaa ogaaday inaadan Adigu Magacaaga ku lammaanin midka aad khalqiga ugu jeceshahay mooyee", taasoo tilmaameysa ballaarnaanta caqliga Aadan iyo siduu hadalkaas meesha ku dhigan xikmaddaas uu sheegay ugala soo dhex baxay. Markaasuu Ilaahay Tacaalaa wuxuu yiri: "Run ayaad sheegta Aadanow, oo khalqigoo idil isagaan ugu jeclahay. Haddadna isaga xaqqiisa igu weydiisatay waan kuu dambi dhaafay. Haduusan Muxammad ahaan lahaynna kumaba aanan abuureen. Isagaana ah Nabiga ugu dambeeya ubadkaaga."

Al Xaafith Abii Al Qaasim Calii bin Al Xusayn bin Hibbatu Allaahi, oo reer Dimishiq ah, Shaaficina ah, allifayna kitaabka Taariikhu Dimishiq iyo kutubbo kaleba, laguna kalsoon yahay, xujjada ah, cilmiga si daqiiq ah u yaqaanna, cilmiga badan, Diinta iyo khayrka badan iyo fadligaba, dhashayna sanadka Hijriga ah ee afar boqol iyo sagaal iyo sagaashan, cilmina u doontay Baghdaad iyo meelo kaleba, kana qaatay qiyaas kun iyo saddex boqol oo Shaykh iyo sideetan culummo haween ah, dhintayna sanadka shan boqol iyo kow iyo toddobaatanka, wuxuuna Salmaan Al Faaris, oo ka mid ah kuwa ay Jannadu u hilowsan tahay, ka wariyay inuu yiri: "Jibriil ayaa Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kusoo degay, wuxuuna ku yiri: "Rabbigaa wuxuu ku leeyahay: **"In kuntu ittakhathtu lbraahiima Khaliilan, fa qad ittakhathtuka Xabiiban. Wa maa khalaqtu khalqan akrama Calayya minka, wa la qad khalaqtu al ddunyaa wa ahlahaa li acrifahum karaamaataka wa manzilataka Cindii. Wa law laaka maa khalaqtu al ddunyaa".** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Rabbigaa wuxuu ku leeyahay: "haddaan hore Ibraahiim Khaliil ka dhigtay (oo ah saaxiib dhow), sidaad u ogsoon tahay, ogow inaan adiga kaa dhigtay **Xabiib,** oo ah midkaan jeclahay, ee marka bishaareyso oo farax. Mana aanan abuurin khalqi adiga agteyda iiga karaamo badan. Waxaanna u abuuray adduunka iyo inta ku noolba inaan ogeysiiyo karaamadaada iyo makaankaaga aad agteyda ku leedahay. Haddayan adiga ahaan lahaynna, adduunkaba ma. aanan abuureen".

Maxaana ka fiican hadalka Sayyidii Calii Wafaa, uuna ku yiri qasiidadiisa Daaliyadda ah, oo bayt walba uu xarafka deelka ah ku dhammaado:

1. Sakana al fu'aado fa cish hanii'an yaa jasadu
Haathaa al naciimu huwa al muqiimu ilaa al abadi.
2. Asbaxta fii kanafi al Xabiibi wa man yakun
Jaara Al Kariimi fa yaciishuhu al cayshu al raghadi.
3. Cish fii amaani Allaahi taxta liwaa'ihi
Laa khawfa fii haathaa al najaabi wa laa nakadi.
4. Laa takhtashaa faqran wa cindaka baytun min
Kulli al munaa laka man ayaadiihi madadi.
5. Rabbu al jamaali wa Mursili al jadwaa wa man
Huwa fii al maxaasini kullihaa fardun axadaa.
6. Qudhba al nuhaa ghawthu al caalami kullihaa
Aclaa calaa saari Axmadin min Muxammadaa.
7. Ruuxu al wujuudi xayaatu man huwa waajidu
Law laahu maa tamma al wujuudu liman wujidaa.
8. Ciisaa wa Aadama wa al suduuri jamiicahum
Hum acyuunin huwa nuurahaa lama wuridaa.
9. Law absara al shaydhaanu dhalcata nuurihi
Fii wajhi Aadama kaana awwala man sajadaa.
10. Aw law ra'aa al Namruudu nuura jamaalihi
Cabada Al Jaliila maca Al Khaliilaa wa laa canadaa.
11. Laakiin Jamaalu Allaahi Jalla fa laa yaraa
Illaa bi takhsiisin min Allaahi Al Samadaa.
12. Fa abshir bi man sakana al jawaanixa minka yaa
Anaa qad mala'ta "n al munaa caynan wa yadaa.
13. Caynu al wafaa macnaa sirra al nadaa
Nuura al hudaa ruuxa al nuhaa jasada al rushdaa.
14. Huwa li al Salaati mina al Salaami al murtadaa
Al jaamicu al makhsuusu maa daama al abadaa.

Qasiidada macneheedu waxaa weeye:

1. Qalbigu wuu degay ee farxad ku noolow jirow
Nicmathaan waa mid ebedkeed wareysa.
2. Waxaad ku waabariisatay ilaalada Xabiibka, qofkiina
Ahaaday dariska Al Kariimu noloshiisu waa nolol fiican oo waasic ah.
3. Ku noolow ammaanka Ilaahay iyo calankiisa hoostiisa
Dhankaan ma jiraan cabsi iyo nolol ciriiri ah oo adagee.
4. Ka baqi maysid saboolnimo adigoo agtaada uu yahay guri ay ku jiraan
Kulli waxaad doontid Ilaahayna uu kordhinayo.
5. Rabbiga quruxda, ahna Midka siinta soo dira iyo Midka
Inta fiicanba kulligood ku ah keligiis aan lala wadaagin.
6. Hoggaamiyaha cuquusha iyo badbaadiyaha caalanka kulligiis
Inta xamdidana wuxuu u kor mariyay Axmad.
7. Nabi Muxammad,Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa ruux jiritaanka waxa
jira oo dhan oo isagaa jiritaankoodaba sabab u ah

Oo haddayan isaga ahaan lahayn ma jireen inta jirtaa.
8. Ciise -oo ah Rasuulka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku xigay oo ka horreeyey- iyo Aadan -oo ah Rasuulka ugu horreeyey dhammaantood- iyo ragga waaweyn oo dhan/Waa indho uu isagu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, nuurkooda yahay markuu yimid.
9. Hadduu shaydaan arki lahaa iftiinka nuurkisa ka iftiimayey/Oo ka nuurayey wajiga Aadan wuxuu ahaan lahaa kan ugu horrecya oo sujuuda.
10. Ama hadduu Namruud -oo ahaa Boqorkii Baabil oo Ibraahiim dabka ku tuuray arki lahaa quruxda nuurkiisa -oo ka iftiimayey wajiga Ibraahiim
Wuxuu la caabudi lahaa Ilaahay Al Jaliilu Ibraahiim Al Khaliilu, mana uusan khilaafeen xaqqa, isagoo xaqnimadiisa og oo caniid ma ahaadeen.
11. Laakiin Quruxda Ilaahay way weyn tahay oo ay kor ahaatay markaasaan indhaha lagu arkayn/Qofkuu Ilaahay Al Samadu siiyey mooyee.
12. Marka ku bishaareyso midka xaqqa baalasha ka degay yaa
Anigoo siin iyo galladeysi ka buuxsaday isha iyo gacantaba.
13. Isha fulinta, macnaha saafinnimada, sirta cod dheerida iyo deeqsinnimada/Nuurka hanuunka iyo ruuxa caqliga, jirka toosan oo hanuunsan.
14. Isagu Salliga Ilaahay waa kan istaahila oo ehel u ah
Kan kulmiyay laguna gooni yeelay ilaa ebedkeed.

Ilamaha Aadan iyo Xaawo

Markuu Ilaahay Tacaalaa Xaawo abuuray inay Aadan ku degto, Aadanna uu ayada ku xasilo, boqol sano ama boqol iyo labaatan sano, siduu labadaas taariikhoodba uu u wariyay Taariikhu Al Khamiisi, kaddib markii arligaan loo soo dejiyay, barakooyinkii Aadan ayaa ku hooray Xaawo, waxayna sanooyinkaas fiican -oo isagu wuxuu noolaa kun sano: marka ka goo intuu jannada dhexdeeda ku jiray iyo boqolkaan ama boqol iyo labaatankaan sano oo soo degiddisa ka dambeysey, markaasaa waxaa kuu soo baxaya sanooyinkaan fiican oo uu adduunkaan ku sugnaa-, waxayna u dhashay afartan cunug oo ay labaatan caloolood ku qaaday, ayagoo mataano ahaa. Al Bayhaqii wuxuu yiri: "Waxaa ugu horreeyey caruurtiisa Qaabiil iyo mataantiisa oo magaceedu ahaa Iqliimiyyan. Ibnu lsxaaqna wuxuu ehelu kitaabka kasoo guuriyay inay Qaabiil iyo Iqliimiyyan ay Jannada dhexdeeda ku dhasheen iyo inay dhashooda ugu dambeeyeen Cabdu Al Mughiithu iyo inataantiisa Aamatu Al Ghaythu." Intaas waxaa ku eg warka Al Bayhaqii. Kitaabka Al Nafsii wuxuu yiri: "Waxaa ugu horreeyey dhashooda Al Xaarithu, wiilkooda Shayth-na wuxuu dhashay keligiis mataan la'aan", oo uu Al Mughlaadhay yiri waa Shaath oo macneheedu yabay Hibada ama Siinta Ilaahay. Al Suhaylii-na wuxuu yiri: "afka saryaaniga waa Shaath, afka cibrigana Shayth." Ibnu Kathiir iyo ghayrkiisba waxay yiraahdeen waa Hibbatu Allaahi, oo ah Hibada Ilaahay, ayagoo Aadan iyo Xaawo wiilkaas lagu rizqiyay oo la siiyay shan sano kaddib Haabiil, waxayna dhashay isagoo u eg oo leh ekaanshaha Haabiil oo uusan meelna uga duwaneyn. Waxaa kaloo la yiri: wuxuu dhashay afartan sano Haabiil dhimashadiisa kaddib.

Intaasoo idil wax ka duwanna waa la sheegay. Waxaa kaloo la yiri: keligiis ma dhalane balse wuxuu lahaa gabar mataantiisa ah, siduu Al Khamiis u wariyay. Kitaabka Al Baxru Al Nasfii wuxuu dhigay inuu caruurtooda ugu horreeyey Al Xaarithu oo aan gabar mataan ah lahayn, waxaana ku xigay Qaabiil iyo mataantiisa, kaddibna Haabiil iyo mataantiisa, kaddibna Asawwatu iyo walaashiis, kaddibna Shiith keligiis, dabadiisna gabar keligeed calool ka dhalatay oo aan wiil mataan ah lahayn, taasoo uu Aadan Shiith u guuriyay. Sidaas ayayna u dhalanayeen ilaa ay labaatan uur afartan cunug ku dhashay, siduu Ibnu Isxaaq u wariyay. Wahab bin Munabbih wuxuu yiri: waxay ahaayeen boqol iyo labaatan caloolood. Waxaa kaloo la yiri shan boqol oo caloolood oo ay kun cunug kaamil ku noqdeen. Intaasuu ku egyahay warka kitaabka Al Baxru al Nasfii. Shiith wuxuu keligiis u dhashay karaamayn uu Ilaahay ku karaameynayo midku Nabinnimada u doortay, oo ah Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo Shiith ku abtirsada. Wajiga Shiith waxaa ka iftiiinayey nutirka Nabigeenna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markaasey Malaa'igtu Aadan u timid oo ay ugu bishaareysey.

Dhimashada Aadan

Markuu Aadan dhintay, Calayhissalaamu, isagoo kun sano jirsaday, sida kusoo aroortay Xadiithka Abuu Hurayrah iyo Ibnu Cabbaas, oo ay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka wariyeen. Waxaa kaloo la yiri kun sano oo toddobaatan dhimman. Waxaa kaloo la yiri kun sano oo lixdan dhimman. Waxa kaloo la yiri oo afartan dhimman. Wuxuuna ku dhintay, ayaa la yiri, Makkah Al Mukarramah maalin Jimce ah, waxaana ku tukaday Malag Jibriil oo Imaam u ah Malaa'igta kale iyo dhasha Aadanba. Waxaa kaloo la yiri waxaa ku tukaday wiilkiisa Shiith, taasoo uu Jibriil ku amray, waxaana lagu duugay qabri ku yaalla god ku yaalla buurta Jabalu Qubays, oo ah buurta uu hadda ka dul dhisan yahay guriga Boqorka Sucuuudiga oo Kacbada agteeda ka dhisan. Sidaas waxaa sheegay Al Thaclabii iyo ghayrkiisaba. Ibnu Cabbaasna waxaa laga wariyay inuu yiri: "Markuu Aadan Xajka dhammaystay oo uu ka firaaqoobay oo uu kasoo jeestay, wuxuu u laabtay Hindiya, halkasoo uu ku dhintay." Thaabit Al Banaanii waxaa laga wariyay inuu yiri: "Markuu Aadan dhintay waxay u qaadeen god ku dhex yaalla sarandiib -oo ah god- ku yaalla barta lagu soo dejiyay (waana buurta dalka Hindiya ku taalla oo la yiraahdo Jabalu Buuthaa, magac kalena waa lagu sheegay)". Warkaasna waxaa saxiix weeye yiri Al Xaafith Ibnu Kathiir. Waxaa kaloo la yiri; waxaa lagu duugay meel u dhexeysa Baytu Al Maqdis iyo Masjidka Ibraahiim (oo ku yaalla magaala Al Khaliil ee daanta galbeed ee Wabiga Urdun ee arliga Falasdhiin), isagoo madixiisu xigo xagga dhagaxa Masjidu Al aqsaa ku dhex yaalla, oo uu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka safray habeenka Samaawaadtka kore loo dheelmiyay, uuna Ilaahay, Cazza wa Jalla, intuu hor istaagay uu indhiliiisa madixiisa ku yaalla kusoo arkay (sidaan Axaadiithta warisay ugu arki doonno Inshaa'Allaahu markaan meesheeda gaarno),

Ilaahayna uu turjubaan la'aan si toos ah ula hadlay, uuna shanta Salaadood oo waajibka ah isaga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, korkiisa iyo korka ummaddiisaba ku fardi yeelay. Aadan lugihiisuna waxay xigaan xagga Masjidu Ibraahiim. Waxaa kaloo la yiri: waxaa lagu duugay Masjidu Al Khayfi oo Mina ku yaalla. Ibnu Isxaaq iyo ghayrkiisba waxay yiraahdeen: waxaa duugtay Malaa'igta iyo Shiith iyo walaaliliiis, waxayna ku duugeen Mashaariqu Al Firdawsi tuulada ahayd magaalada ugu horreysey oo adduunkaan lagu dhisay. Maalintaas waxaa madoobaaday qorraxda iyo dayaxaba oo labadooduba madoobaa. Xaawo waxay Aadan dabadiis nooleyd hal sano. Waxaa kaloo la yiri waxay ka dambeysey saddex maalmood, waxaana lagu duugay dhiniciisa.

S h i i t h

Aadan wuxuu dhashiisa kala dardaarmay Shiith, Calayhisssalaamu, ayaguna way adeeceen oo ay walaalkood u hoggansameen. Waxaa Ibnu Cabbaas laga wariyay inuu yiri: "Aadan ma uusan dhiman jeer ay caruurtiisa iyo kuwa awoowaha uu u yahay afartan kun gaareen, afartankaas kunna ay ka mid yihiin afartan uu isagu dhalay." Kitaabka Musnadu Al Firdawsa wuxuu Anas ka wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Inna Aadama Calayhi Assalaatu wa al Ssalaamu qaama khadhiiban fii arbaciina alfan min waladihi wa walada waladihi, wa qaala: "Inna Rabbii cahida ilayya fa qaala: "Yaa Aadamu aqlil kalaamaka tarjicu ilaa jawaarii". Wa kaana Shiithu ajmala awlaadihi wa ashbahahum bihi, wa axabbahum ilayhi, wa afdalahum, wa callamahu Allaahu Al Ssaacaata wa Al Cibaadata fii kulli saacatin minhaa, wa anzala calayhi khamsiina saxiifatin, wa zawwajahu Allaahu ukhtahu allatii waladat bacdahu wa kaanat jamiilatan ka ummahaa Xawaa'a. Wa khadhaba Jibriilu wa shahidat Al Malaa'ikatu, wa kaana Aadamu waliyyahaa wa razaqahu Allaahu awlaadan fii xayaata abiihi, wa cammara tisca mi'atin wa ithnay casharata sanatin.** " Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Aadan, Calayhi Assalaatu wa al Ssalaamu, ayaa wuxuu hor istaagay afartan kun oo ah caruurtiisa uu isagu dhalay iyo caruurtay caruurtiisu dhaleen, wuuna u khudhbeeyey, wuxuuna yiri: "Ilaahay waa ila dardaarmay wuxuuna yiri: "Aadanow hadalkaaga yaree markaasaad darisnimadeyda usoo noqoneysaaye". Shiith-na wuxuu ahaa kan dhashiisa ugu qurxoon, isagana ugu ekaansho badan, uuna ugu jecel yahay, uguna deeq badan. Ilaahay wuxuu Shiith baray saacadaha maalinta iyo habeenka iyo cibaadeysiga mid walba oo saacadahaas ka midka ah, wuxuuna kusoo dejiyay konton saxiifo, waa waraaqee. Ilaahay ayaa wuxuu u guuriyay walaashiisa isaga dabadiisa dhalatay, ahaydna gabar qurxoon, sida ay hooyadeed Xaawo u qurxooneyd oo kale. Waxaa gabadha u doonay Jibriil oo khudbadna jeediyay, markhaatina waxaa ka ahayd Malaa'igta, waligeeduna wuxuu ahaa aabeheed Aadan. Ilaahay wuxuu Shiith gabadhaas ka siiyay ubad intuu isaga aabihiis wali nolol ku sugnaa. Shiith wuxuu noolaa oo uu cumrigiisu gaaray sagaal boqol iyo laba iyo toban sano".

Waxaa kaloo la yiri Sagaal boqol iyo labaatan sano, wuxuuna dhintay markay soo degidda Aadan kasoo wareegatay kun iyo labo iyo afartan sano. Shiith Waxaa lagu duugay hogga ku yaalla buurta Abuu Qubays (Oo Kacbada agteeda ku taalla, haddase qaar la jebiyay oo guriga boqorka laga dhisay.

Y a a n i s h/A n u u s h

Kaddib markuu Ilaahay u waxyooday inuu wiilkiisa Anuush doorto oo uu u dardaarmo, wuxuu Shiith ogaaday in geeridiisa loo sheegay oo uu dhimanayo. Sidaas ayuu Shiith u dardaarmay wuxuuna khaliif ka dhigtay umuuraha maareeya isaga dabadiis, wiilkiisa Anuush. Waxaa kaloo la yiri wiilka magaciisu waa Yaanish. Waxaa kaloo la yiri waa Anash. Al Suhaylii wuxuu yiri: "Anuush waxaa weeye Al Saadiqu oo macnihiisu yahay kan runlowga ah, afka Carabigana waxaa lagu yiraahdaa Anash." Mughlaadhay wuxuu yiri: "Waa Yaanish oo macneheedu yahay Al Saadiqu, kan runlowga ah, siduu u xusay kitaabka Al Nuuru". Yaanish ayay madaxtinnimada khalqigu usoo wareegtay aabihiis dabadiis, hawshaasoo uu sidii aabihiis oo kale ugu qumay. Yaanish wuxuu lahaa dhererka iyo caddaanta iyo quruxda aabihiis, wuxuuna noolaa sagaal boqol iyo konton sano. Waxaa kaloo la yiri sagaal boqol iyo labaatan sano. Waxaa ayadana la yiri sagaal boqol iyo shan iyo lixdan sano. Shiith wuxuu wiilkiisa Yaanish kala dardaarmay inuusan nuurkaan, oo wajiga Aadan sida qorraxda uga nuurayey, ku wareejin waxaan ahayn haween daahirad ah mooyee. Sidaas ayuu dardaarankaasi u taagnaa, oo uu facba faca ku xiga ugala dardaarmayey. Sidaas ayuu markaasi rag suuban iyo haween daahiraad ah isugu gudbiyeen ilaa uu uga soo gudbo Cabdi Al Mudh-dhalib iyo wiilkiisa Cabdu Allaahi. Markaasuu Ilaahay ugu nicmeeyey inuu nuurkaasu u wareego oo ay ku liibaanto Aaminah bintu Wahab, Allaha raalli ka noqdee, hooyada dhashay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.

(Saddex) Nabi Idriis

Nabi Idriis, Calayhissalaamu, oo ah Nabiga ugu horreeyey Aadan dabadiis. Waxaa la sheegay inuu Idriis ku dhashay magaalada Memfi ee dalka Masara oo ayagaas loo diray. Si kalena waa la yiri. Rasuul ma ahayn oo cidna looma dirin ayadoo ay zamankiisa dadkoo idil muslimiin ahaayeen oo ayan gaalo iyo gaalnimo jirin. Gaalnimo waxay bilaabatay zamanka Nabi Nuux oo ahaa Rasuulka ugu horreeyey Nabi Adan dabadiis. Idriis wuxuu ahaa qofka uguhorreeya oo qalin wax ku dhiga, waxaana Idriis loogu bixiyay ayaa la yiri badnida wax barashadiisa, oo eraygu wuxuu ka yimid darasa oo ah waxbuu bartay. Ibnu Kathiir wuxuu yiri: "Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "wuxuu ka gaaray oo noolaa saddex boqol iyo sideed sano oo nolosha Aadan ka mid ah." Al Qurdhubii wuxuu tafsiirkiisa ku yiri: "Idriis ayaa ugu horreeyey qof qalin wax ku dhiga iyo qof cirbad wax ku tola oo dhar lolan labbista (hortiis hargaa la xiran jiray), isagaana ugu horreeyey qof cilmiga xiddigaha barta iyo xisaabta,

waxaan Idriis loogu bixiyay siduu kitaabka Ilaahay Tacaalaa barashadiisa ugu dadaali jiray. Ilaahay Tacaalaa wuxuu korkiisa kusoo dejiyay soddon saxiifadood, sida ku xusan Xadiithka Abuu Tharr. Isagaana ugu horreeyey Nabi, Aadan dabadiis. Magaciisuna waa Akhnuukh ibnu Yarid bin Muhlaa'iil bin Qaynaan bin Yaanish bin Shaytrh bin Aadam Calahissalaamu." Waa intaas warka Al Qurdhubii ee tafsiirkiisa Aayadda lix iyo konton ee Suuratu Maryama.

Boqollaalo sano kaddib Idriis, masaaridu waxay Nabi Idriis Calayhissalaamu u caabudeen ilaah ahaan waxayna u bixiyeen Osiris, waxayna ku dareen Isis oo ay yiraahdeen waa hooyada ilaahay iyo Horus oo ay yiraahdeen waa wiilka ilaahay. Talada in saddex ilaah la caabudo Masar ayay krishtaanku ka qaateen, oo ay ilaa maanta caabudaan. Siday qisada krishtaanku ku timidna waxay ahayd sidatan. Ninka yuhuudiga ah oo la oran jiray Shawl kuna noolaa magaalada Tarsus wuxuu noolaa kaddib marka Ciise ina Maryama Samada kor loogu qaaday, mana uusan arag, xaasid ayuuna ku ahaa oo Nabinnimada ayuu u quuri waayay. Shawl wuxuu necbaa diinta islaamka oo uu markaaas asxaabta Ciise ku dacweyn jiray dawladda roomaanka si loo xabbiso ama loo dilo. Kaddib marka Ciise Samada kor loogu qaaday wuxuu sheegtay nabinnimo, wuxuuna goostay inuu dadka sidaas caabudidda Ciise ku lumiyo. Markaasuu wuxuu yimid Al Iskandariyyah ee dalka Masar oo uu fikradda saddexda ilaah ka qaatay, uuna la tegey Roma ee dalka talyaaniga, halkaasoo lagu dilay oo maydkiisana la waray, isagoo boqorka Roma oo ilaahnimo sheegan jiray u geeyey ilaah kale oo lala caabudo. Ninkaas wuxuu la baxay Paul ama Paolo, isagaana diinta krishtaanka asaasay.

Cabdu Al Xamiid Jawdah Al Ssaxxaar wuxuu kitaabkiisa Muxammadun Rasuulu Allaahi, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo musalsalka kitaabkiisa laga sameeyey oo ay Jaamacadda Al Azhar ee Al Qaahira hubisay inuu sax iyo run yahay ku wariyay inay Idriis dabadiis dadku diintiisa islaamka beddelaeen oo isu bixiyeen Al Saabi'iina, oo caabudi jiray xiddigaha ayagoo aaminsanaa inay xiddiguhu yihiin hadalka Ilaahay oo ay markaas Ilaahay la caabudeen, ayna malaa'ig iyo asnaam la caabudeen. Waxayna aaminsanaayeen Ilaahay iyo maalinta aakhiraba.

Waxaa kaloo la sheegay inuu ku dhashay Ciraaq dadkeedana loo diray. Runtana Rabbi ayaa og.

Al Qasdhalaanii wuxuu yiri: "Wuxuu ibnu Caadil ku xusay tafsiirkiisa inuu Jibriil, Calayhissalaamu, Idriisna kusoo degay afar goor

(Afar) Nabi Nuux

Nabi Nuux, Calayhissalaamu, oo dhashay boqol iyo lix iyo labaatan sano kaddib dhimashada Nabi Aadan. Waxaana loo diray dadkiisa Ciraaq degganaaa oo la oran jiray Banuu Raasib, magaalo madaxdooduna ay ahayd Shuurbaak oo dalka Ciraaq ku taalla. Magaaladiisa Shuurbaak bad kuma taallo iyo wabi toona, taas ayaana u sabab ah inay gaalada tolkiis ku qoslaan inuu halkaas doon ku dhiso.

Al Sayuudhii wuxuu kitaabkiisa Rafcu Sha'ni Al Xubshaani, oo Jaamacadda

Al Azhar ay daabacday, uuna hubiyey Dr. Muxammad Cabdu Al Wahhaab Fadl oo macallin ka ah Jaamacadda Al Azhar ee Al Qaahirah, bogga kow iyo lixdanaad wuxuu Samurah bin Jundub ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Saam abuu Al Carabi wa Yaafith abuu Al Ruumi wa Xaam abuu Al Xabash."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Saam (waa ina Nabi Nuux) waa aabaha dhalay Carabta, Yaafith (ina Nabi Nuux) waa aabaha dhalay roomaanka, Xaamna (ina Nabi Nuux) waa aabaha dhalay xabshada (oo ah dadka madow oo dhan, ayagoo dhammantood isaga ku abtirsada)." Waxaa wariyay Al Tarmathii, yirina waa Xadiith Xasan Waxaa kaloo wariyay Ibnu Sacad, ibnu Kathiir oo Al Bidaayah iyo Nihaayah ku wariyay, iyo Imaam Axmad iyo Al Dhabarii iyo kuwo kaleba. Al Sayuudhii wuxuu kaloo bogga afar iyo lixnadaad ee isla kitaabkiisaas Abuu Hurayrah uga wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Walada Nuuxun Saam wa Xaam wa Yaafith. Fa walada Saam Al Carab wa Faaris wa Al Ruum wa al khayru fiihim. Wa walada Yaafith Ya'juuj wa Ma'juuj wa al turka wa al Saqaalibata wa laa khayra fiihim. Wa walada li Xaamin Al Qibdhu wa al Barbaru wa Al Suudaanu."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Nuux wuxuu dhalay Saam iyo Xaam iyo Yaafith. Markaasuu Saam wuxuu dhalay Carabta iyo Faaris (oo ah iiraaniyiinta) iyo Roomaanka, khayrkuna ayaguu ku jiraa. Yaafithna wuxuu dhalay Ya'juuj iyo Ma'juuj iyo Turkiga iyo Al Saqaalibah, khayrma ma laha, Xaamna waxaa loo dhalay Al Qibdhu (oo Masar degah) iyo Barbarta iyo dadka madow." Xadiithka waxaa kaloo uu Ibnu Xajar Al Casqalaanii ku wariyay Fatxu Al Baarii, kaddibna ku daray oo yiri: "silsiladdiisana taag darro ayaa ku sugan." Waxaa kaloo wariyay ibnu Kathiir (Al Bidaayah wa al Nihaayah).

Al Mascuudii wuxuu Muruuju Al Th-thahabi ku sheegay inayan dadka wax baara isku khilaafsanyan inuu Yaafith ina Nuux yahay kan ugu yar ee wiilasha Nuux, iyo inay dhashiisa ka mid yihiin Al Afranjah (oo ah dadka Yurub degah qaarkood) iyo al Saqaalibah iyo Al Nuukubard iyo Al Ashbaan iyo Ya'juuj iyo Ma'juuj iyo Turkiga iyo Al Khazar (oo ah dadka degah dhulka Bari iyo Waqooyi ka xigah dalka Turgiga oo buuraaleyda Al Qawqaaz kasii dambeeya iyo Badda Caspian, ayna magaalo madax u ahaan jirtay Itiil, lehna indhaha yar sida shiinaha, siduu Lisaanu Al Carab u yiri). Al Saqaalibah waa dhasha Maar bin Yaafith bin Nuux isagayna ka farcameen dhammaan jinsiga Saqaalibada, waxayna degaan Al Judaa ilaa ay kala xiriiraan Al Maghrib, waana jinsiyo kala duwan oo ay dagaallo dhex yaallaan, qaarkoodna ay Nasraaniyada ka diin yeeshaan, qaaraana ayan Kitaab lahayn." (Muruuju Al Thahab 2/32-34)

Ibnu Kathiir wuxuu Al Bidaayah wa Al Nihaayah (2/110) ku yiri: "Yaafith ayaa dhalay Turkiga. Ya'juuj iyo Ma'juuj waa qayb turkiga ka mid ah waana dadka la yiraahdo Maghuul (oo hadda la yiraahdo Mongol oo shiinaha la dariska ah, ama kaba tirsan). Turkigana waxaa magacoodaan ah turki loogu bixiyay ayadoo markuu Thuu Al Qarnayn biyo xireenka dhisay, uuna Ya'juuj iyo M'ajuuj uu gadaashiisa ku takooray waxaa ka hartay koox aan fasaadkooda oo kale gaarin, markaasay ka tageen, markaasaa turki lagu magacaabay, oo ah kuwa laga tegey."

Quudh bin Xaam wuxuu guursaday gabadha la yiraahdo Bukht uuna dhalay Bitaawiil, markaasey waxay u dhashay wiil uu u bixiyay Qibdh, oo ay Masaaridu ka farcamdeen. Wiilka kale ee Xaam, magaciisuna yahay Kancaan wuxuu guursaday Bukht ina Bitaawiil walaasheed magaceedu yahay Artiil, markaasey waxay u dhashay wiilasha ay dadka madow oo idil ku abtirsadaan, ayna ka mid yihiin Nuubah (oo ah aabaha dadka Suudaan degah oo Nuubiyiinta la yiraahdo) iyo Fazaan.

Waxaa la yiri inuu Nuux magaciisu ahaa Cabdu Al Ghaffaar, Nuux-na loogu bixiyay badnida oohintiisa kaddib markuu dambiga galay oo uu dambigaas ka ooyayo. Nuux iyo Aadan waxaa u dhexeysay kun sano, wuxuuna noolaa afar kun iyo shan boqol iyo toddobaatan sano ka hor dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Nuux wuxuu ku dhashay magaalada la yiraahdoo Shuurbaak oo dalka Ciraaq ku taalla. Doontuu dhisayna waxay ka kobnayd saddex dabaq, oo dabaqa ugu hooseeya waxaa saarnaa xoolaha nafleyda ah, oo noociiba ay laba ka saarnaayeen mid labood ah iyo mid dhaddig ah. Dabaqa labaad waxaa saarnaa dadkii rumeeyey oo ahaa sideetan nin iyo caruurtooda, oo uu midkood Jurham ahaa. Ubadkii dadkaas oo idil ma ayan tarmin oo waa cirib go'een, banii Aadanka adduunka maanta ku noolna wuxuu ka kooban yahay ubadka saddexdiisii wiil oo kala ahaa Saam iyo Xaam iyo Yaafith (waa tha saddex dhibcood kor ku leh). Dadka uu ka dhashay oo loo dirayna waxaa la oran jiray **Banuu Raasib**, sida annaga Soomaali naloo yiraahdo oo kale. Dhuufaantu waxay socotay, oo uu cirkana roob ka soo degayey, dhulkana ay biyo kasoo burqanayeen toddoba habeen iyo toddoba maalmood. Waxaa sidaas ku halaagmay oo ku dhintay wixii nafley ahaa oo adduunkaan oo idil iyo qaaradihiisa ku noolaa, intaan ahayn intii doontaas saarneyd, siduu ayadana noo sheegay sharaxa Fatxu Al Baarii bi Sharxi Saxiix Al Bukhaarii, Xadiithka saddex boqol iyo shan iyo soddon sharaxiisa. Waxay ku qaadatay lix bilood iyo toban maalmood inuu dhulku biyahaas ka leqo, oo uu qallalo. Meeshay doontu ke degatay waxaa loo bixiyay magaalada **Thamaaniina**, oo ah sideetan, ahna tirada dadkii doonta saarnaa, oo ayaduna dalka Ciraaq ku taalla. Ummadda Nabi Nuux ayaa ugu horreysey cid gaalowda, oo intii ka horreysey Muslin ayay wada ahaayeen. Dadka Nabi Nuux waxay caabudeen shan sanam, oo siduu Ilaahay, Cazza wa Jalla, Suuratu Nuux noogu sheegay kala ahaa **Waddan** iyo **Suwaacan** iyo **Yaghuutha** (waa tha saddex dhibcood kor ku leh) iyo **Yacuuqa** iyo **Nasran** . Makkata Al Mukarramata dadka deggani waxay ahaayeen weligood Muslin waxayna gaalnimadu soo gashay markuu ninka la oran jiray **Camr bin Luxayyin bin Qamacata bin Ilyaas Al Kuzaaciyyi** oo ahaa madaxa qabiilka Khuzaacah, waqtigay Khuzaacah haysay Maamulka Baytka, kaasoo asnaam inta keenay dadka ku amray inay caabudaan, taasoo ku beegnayd saddex boqol oo sano dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Asnaamtasna waxaa burburiyay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, maalintuu Ilaahay Makkah u furay ee sanadka sideedaad ee Hijrada. Sidaas ay gaalnimadu waxay Makkah ka jirtay saddex boqol oo sano oo Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam ka horreysey. Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, habeenkii la

dheelmiyay, wuxuu Camr bin Luxayyin kusoo arkay Naarta, isagoo foorara oo madixiisuna hooseeyo lugihiisuna korreeyaan oo sankiisa naarta loogu jiidayo, siduuna Bukhaarii ugu wariyay Xadiithkiisa mujalladka afaraad bogga laba boqol afar iyo labaatan, Muslimna kow iyo konton.
Qabriga Nuux wuxuu ku yaalla magaalada Al Karak oo koofurta ka xigta Cammaan caasimadda dalka Urdun, aniguna waan dul istaagay.Al Qasdhalaanii wuxuu yiri: "Wuxuu ibnu Caadil ku xusay tafsiirkiisa inuu Jibriil, Calayhissalaamu, Nuuxna kusoo degay konton goor."

(Shan) Nabi Huud

Nabi Huud, Calayhissalaamu, oo uu Nuux u yahay awoowaha labaad. Huud waxaa loo diray dadka Carabta ah ee reer Caad oo degi jiray Al Axqaaf, kuna beegan gobolka Xadramuut ee dalka Yaman iyo dalka Cummaan**.** Gaalnimadooda daraadeed ayaa qawmkaas loo wada halaagay inta islaamtay mooyee, kuwaasoo ay ka farcameen Thamuud. Caasimaddoodana waxaa la oran jiray Iram, oo uu dayax gacmeed maraykanu leeyahay ka helay hadda xuduudda Yaman iyo Cummaan. Waxay ahaayeen dad jirar waawayn oo xoog badan boqollaalo sano noolaada, guryohoodana buuraha ka qota ayagoo guryahay dhisteen gaboobayeen ayagoo weli nool.
Al Dhabarii wuxuu yiri waxaa ka mid ah: "qabiilka Caad waxay ku abtirsadaan Caad bin Caws bin Iram bin Saam bin Nuux, waana Caad Al uulaa, waana Caad Midda koowaad. Caadda labaad waa Thamuud oo ku abtirsata Thamuud bin Jaathir bin Iram bin Saam bin Nuux, waana kuwa la yiraahdo Al Carabu Al Caaribah.
Qabiilka Caad wuxu Ilaahay Tacaalaa u diray Huud bin Cabdu Allaahi bin Rabaax bin Al Khuluud bin Caad bin Caws bin Iram bin Saam bin Nuux. Caad waxay ahaayeen gaalo caabudi jirtay saddex sanam oo kala ah (Kow) Suddaa'u, (Laba) Samuud, (Saddex) Al Habaa'u. Markaasay Rasuulkooda beeniyeen, ayna yiraahdeen; "yaa annaga naga xoog badan?" Markaasuu Ilaahay roobka ka ceshaday oo ay abaaraysteen. Markaasay wafdi Makkah Al Mukarramah u dirsadeen inuu usoo Alle baryo. Markaasay waxay direen ragga la yirahdo Qayl bin Catr iyo Luqaym bin Hazzaal bin Huzayl bin Cutayl bin Sadd bin Caad Al Akbar, iyo Marthad bin Sacd bin Cufayr ahaana muslin muslinnimadiisa qarinayay, iyo Julhumah bin Al Khubayriyyi abtiga Mucaawiyah bin Bakr oo hooyadiis la dhashay. Kaddibna waxay direen Luqmaan bin Caad bin Fulaan bin Sadd bin Caad Al Akbar. Markaasuu nin walboo raggaas ka mid ahi dhaqaaqay isagoo wata rag tolkiis ka mid ah, oo sidaasay tirada wafdigu waxay ku noqotay toddobaatan nin. Markay Makkah tageen waxay ku degeen oo u martiyeen Mucaawiyah bin Bakr oo degganaa meel Xaramka ka baxsan. Markaasuu dejiyay oo karaameeyey, waxayna ahaayeen abtiyaalkiis iyo xididkiisaba. Markaasay agtiisa ku sugnaayeen bil ay intaasna khamro cabbayaan, ayna laba gabdhood oo la yiraahdo Al Jaraadataani oo uu lahaa Mucaawiyah bin Bakr oo heesa u heesayaan. Waxay Makkah u socdeen bil, ayadana ay degganaayeen bil kale. Markaasuu Mucaawiyah ku dhibtooday joogiddooda, uuna labadaas gabdhood u eed

sheegtay. Markaasay waxay ku yiraahdeen: "waxaad tiraahdaa gabay aan ku heesno oo ayan ogayn cidda tirisay, oo waxaa dhici karta inay taasu dareen geliso oo tagaane." Markaasuu gabay u tiriyey uu ku sheegayo abaarta haleeshay Caad oo harraadka loogu le'day, haweenkooduna ku indho beeleen, dugaaguna uu maalintoo cad magaalada ugu imaanayo ayadoo aan fallaaraha Caad ka cabsanayn, adinkuna halkaan ayaad joogtaan adinkoo ku haysta waxaad doontaanba habeen iyo maalinba. Marka waxaad tihiin wafdiga ugu xun oo qawm soo dirsado, oo aan istaahilin in la salaamo oo lasoo dhoweeyo." Markaasay labadaas gabdhood gabaygaas ku heeseen. Markaasay markay maqleen wafdigu isku yiraahdeen: "ragow wuxuu dadkiinnu idiin soo dirsaday inaad u roob doontaan, waadna ka gaabiseen oo ka raagteen. Marka Xaramkaan gala oo dadkiinna u roob doona." Markaasuu Marthad bin Sacd bin Cufayr wuxuu ku yiri: "wa Allaahi inaan ducadiinna roob la idinku siinayn, laakiin haddaad Nabigiinna adeecdaan oo aad u noqotaan xaggiisa waa la idin waraabinayaa!" Halkaasuu islaannimadiisa ku muujiyay. Markaasuu Julhumah bin Al Khaybariyyu, Mucaawiyah bin Bakr abtigiis, markuu hadalkiisa maqlay, uuna ogaaday inuu diinta Huud raacay uuna aaminay gabay tiriyay uu ku sheegayo siduu diinta aabayaalkiis uga leexday, kaddibna wuxuu Mucaawiyah bin Bakr iyo aabihiis Bakr ku yiri: "naga xabbisa oo naga reeba midkaan Marthad bin Sacd, oo yuusan Makkah nala gelin, isagoo diinta Huud raacay, diinteennana ka tegay." Markaasay Makkah galeen oo ay Caad u roob dooneen, waxaana u Alle baryay ninka la yiraahdo Qayl bin Catr oo wafdiga Caad madax ka ahaa, wuxuuna yiri: "Ilaaheenow, hadduu Huud run sheegay na waraabi, oo waan le'annay." Markaasuu Ilaahay saddex daruurood halkaas ka dhaliyay: mid cad iyo mid guduudan iyo mid madow. Markaasaa waxaa Qayl u dhawaaqay mid daruuraha ku dhex jira oo yiri: "Qaylow, u door naftaada iyo qawmkaaga mid saddexdaan daruurood ka mid ah." Markaasuu wuxuu yiri: "waxaan doortay daruurta madow, ayadoo daruuraha ugu biyo badan." Markaasaa waxaa lagu yiri: "waxaad dooratay dab intuu gubo dambas wax ka dhiga. Caadna axadna ka reebi mayso oo axadna ka hari mayo. Kana tegi mayo waalid iyo cunug toona ee way dileysaa, intaan ka ahayn caruurta Al Lluthiyyah Al Muhdaa, ahna Banuu Lqaym bin Hazzaal bin Huzayyil bin Huzaylah gabadha Bakr, waxayna la degganaayeen Makkah abtiyaalkood oo Caad arligooda lama degganayn, waana kuwaan Caad Al Aakhirah oo Thamuud la yiraahdo, ayaga iyo intay dhaleen oo ka haray Caad. Markaasu Ilaahay daruurtaas madow geeyey arliga Caad oo markay arkeen ay ku bishaaraysteen, ayna yiraahdeen: "middaan ayaa na waraabinaysa." Qofka ugu horreeyey oo arka inay daruurtaas madow dhexdeeda ku jirto dabayl waxay ahayd haweeney Caad u dhalatay oo la yiraahdo Mahdad. Markaasay qaylisay kaddibna ay suuxday. Markay soo miyarsatay ayay waxay ku yiraahdeen: "Mahdaday maxaad aragtay?" Waxay tiri: "waxaan arkay dabayl ay ku jirto holoc dab ah, ayna horsocdaan rag hoggaaminaya." Markaasay dabayshaasu waxay reer Caad ku socotay oo ku afuufaysay toddoba habeen iyo sideed maalmood si joogto ah. Markaasa Caad oo idil dishay oo uusan axadna ka reebin.

Sidaasay maahmaah u noqotay "Ilaahay nagama dhigo sida wafdiga Caad", oo tolkood daruurtaas gubtay u keenay.
Huud iyo muslimiinta la jirtayna waxay galeen beer ayadoo uusan dabayshaas ka gaarayn waxaan ahayn wax haraggooda taabta oo ayba ku macaansadaan oo naftuba jeceshahay. Halkaasaa wafdiga Caad warka inta dadkooda la halaagay ugu yimid ayagoo la jooga Mucaawiyah bin Bakr."

(Lix) Nabi Saalix

Nabi Saalix waxaa loo diray dadka Carabta ah oo ka farcamay muslimiintii reer Caad oo la yiraahdo Thamuud, degi jirayna Al Xijru, oo Al Madiinah Al Munawwarah waqooyigeeda ku taallaa, una jirta saddex boqol iyo laba iyo labaatan kiiloomitir.
Reer Thamuud Ilaahay ayay ku gaaloobeen, arliga dhexdiisana fasaad ka sameeyeen. Markaasuu Ilaahay wuxuu u diray Saalix bin Cubayd bin Asaf bin Maasikh bin Cubayd bin Khaadir bin Thamuud bin Jaathir bin Iram bin Saam bin Nuux. Reer Thamuud waxay lahaayeen oo uu Ilaahay siiyay cumri dheer oo ay sidaas buuraha guryo uga qorteen ayagoo guryahay dhistaan ayagoo weli nool intay bololaan dumaan. Waxayna caabudi jireen asnaam. Ibnu Kathiir wuxuu yiri: "waxay mufassiriintu isku raaceen inay reer Thamuud ay maalin ku shireen naadigooda oo uu halkaas ugu yimid Rasuulka Ilaahay Saalix, Calayhissalaamu, oo uu markaas ugu yeeray inay Ilaahay keli ah caabudaan, wuuna waaniyay, una digay, uuna amray. Markaasay waxay ku yiraahdeen: "haddaad buurtaan dhagaxa ah, oo waxay u tilmaameen buur dhgaxa ah oo meeshaas ku tiillay fartana ay ugu fiiqeen, nooga soo saartid tulud geela oo sifooyinkeedu sidaas iyo sidaas yihiin, ayna rimman tahay toban bilood oo dheer, cunuggeeduna sifooyinkaas leeyahay, waan ku rumaynaynnaa." Markaasuu Nabi Saalix wuxuu ku yiri: "bal ka warrama haddaan idinka yeelo waxaad doonaysaan oo aan idin siiyo ma aaminaysaan waxaan idiinla imid, mana rumaynaysaan waxaa la iigu kiin soo diray?" Waxay yiraahdeen: 'haa." Markaasuu sidaas ballan uga qaaday oo uu heshiis kula galay. Kaddib wuxu tegay musallihiisa oo ku tukan jiray oo uu Ilaahay Cazza wa Jalla u tukaday intuu u qadaray, kaddibna uu Rabbigiis Cazza wa Jalla ka baryay inuu ka yeelo oo siiyo waxay weydiisteen. Markaasuu Ilaahay Cazza wa Jalla wuxuu buurta dhagaxa amray inay soo saarto oo ay dhexdeeda kasoo baxdo hal rimman oo toban bilood xaamilo ah oo leh sifooyinkay weydiisteen. Markaasay hashaasu buurta ayago u jeeda kasoo baxday. Markay taas arkeen wuxuu la noqday amar wayn iyo xujjo caddaan ah. Markaasay in badanb oo ayaga ka mid ihi islaameen, intooda badanna ay gaalnimadooda iyo baadinnimadooda kusii joogeen. Markaasuu Saalix wuxuu ku yiri: "tani waa hasha Ilaahay ee daaya ha daaqdo arliga Ilaahay, xumaanna ha u geysannina oo ay markaasi cathaab idin haleesho." Ceelkoodana maalin ayagaa ka waraabi jiray maalinna hasha oo maalinteeda biyaha ceelka oo dhan cabi jirtay. Markaasay maalintooda dhaansan jireen biyahay laba maalmood u baahan yihiin. Markaasay markay xaaladda hashaasu la dheeratay ayay madaxdoodu shireen oo goosteen inay hasha dilaan, waxaana dilay ninka la

yiraahdo Qadaar bin Saalif bin Jundac, ahaana nin guduudan indhihiisuna bulug yihiin timihiisuna midabka dahabka ahaayeen. Waxaana la yiri wuxuu ahaa wacal, waxaana dhalay nin la yiraahdo Saybaan oo hooyadiis ka dhalay ayadoo ninkeeda Saalif u dhaxda. Waxaana dilidda hasha u kacay isaga iyo sideed nin oo kale oo sagaalkoodaas ayaa Quraanka ku xusan, waxaana dilidda hasha ku dhiirri gelisay habar cajuuzo ah oo gaal ah oo la yiraahdo Cunayzah bintu Ghunaym bin Majliz, koofaarteeduna tahay Ummu Ghanmah oo lahayd afar gabdhood oo ay dhashay ninkeeda Thu'aab bin Camr oo madaxdooda ka mid ahaa. Markaasay waxay Qadaar bin Saalif bin Jundac afarteeda gabdhood usoo bandhigtay inuu ka doorto tuu doono hadduu hasha dilo. Waxaa ayaduna jirta haweeney labaad oo la yiraahdo Saduuq ibnatu Al Maxyaa bin Zuhayr bin Al Mukhtaaru oo laan dheer ahayd maalna lahayd, una dhaxday nin islaamay, markaasay ka tagtay. Markaasay waxay u yeertay wiil ina adeerkeed ah oo la yiraajdho Masrac bin Mahraj bin Al Maxyaa, ayna u sheegtay inay isi siinayso hadduu hasha dilo. Markaasaa waxaa Masrac iyo Qadaar kusoo biiray toddoba nin oo kale oo sidaasay sagaalka Quraanku sheegay ku noqdeen.

Markaasay hasha dileen. Waxaana ugu horreeyey Qadaar bin Saalif oo hasha faylo gooyay. Markaasay dhulka ku dhacday. Markaasay seefohooda ku boobeen oo ay googooyeen.

Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu Calii bin Abii Dhaalib, Allaha raalli ka noqdee, intuu ku jiray duullaanka Al Cushayrah ku yiri: **"Alaa uxaddithukumaa bi ashqaa al nnaasi rajulayni?"** oo macnihiisu yahay: "Ma idiinka warramaa labada nin oo dadka ugu ayaan daran?" Waxaan niri: "Haa Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Uxaymiri Thamuuda allathii caqara al nnaaqata, wa allathii yadribuka yaa Caliyyu calaa haathihi** -wa wadaca yadahu calaa qarnihi- **xattaa yabulla minhaa haathihi** -wa akhatha bi lixyatihi." Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Waa Uxaymir ee reer Thamuud, ahna midka hasha faylo gooyey, iyo midka seef kaaga dhufan doona halkaan Caliyow -wuxuuna gacantiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam saaray madaxiisa- oo uu markaas dhiigga kasoo daata uu middaan qooyo", oo uu markaas Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, garkiisa qabtay." Calina sidaas uu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, sheegay ayaa loo dilay.

Markaasay nirigteedu carartay oo ay buur dusheeda fuusha oo ay saddex jeer qaylisay. Taas ayaa u sabab ahayd inuu Saalix dadka ku yiri: "isaga raaxaysta daarihiina saddex maalmood." Markaasuu Ilaahay sagaalkaas cathaab kusoo dejiyay oo uu dhagax cirka uga soo daadiyay laysay ka horba intaan dadkooda la cathaabin. Maalinta koowaad ee saddexda maalmood oo uu Saalix u qabtay waxay ahayd maalin khamiis ah waxay waabariisteen ayadoo wajiyadoodu hurdi yihiin. Markaasay galabtii isu sheegeen: "war hoy maalin ayaa ka gudubtay saddexda maalmood oo ajasha loo qabtay." Markaasay subaxa labaad waabariisteen, ahna maalin jimce, oo ah maalinta lkabaad, ayadoo ay wajiyadoodu guduudan yihiin. Markaasay markay galabtii tahay ayay waxay yiraahdeen: "war hoy ajashii waxaa ka gudbay laba maalmood." Markaasay

waxay maalinta saddexaad waabariisteen, ahna maalin sabti, ayadoo ay wajiyadoodu madow yihiin. Markaasay marka galabtii noqotay waxay yiraahdeen: "war hoy ajashii waa dhammaatay." Markaasay markay ahayd subaxa axadaad ayay cathaab isu diyaariyeen ayagoo aan ogayn meeshay uga imaanayso iyo waxay tahayba.
Markaasay markay qorraxdu soo baxday ayay qaylo uga timid samada, hoostooduna dhulka la gariiray. Markaasaa wadnuhu wada go'ay oo naftu ka wada baxday, oo ay daarohoodu ku waabariisteen ayagoo wada mayd ah oo jilbo jabsan oo aan ruux lahayn. Kamana uusan harin waxaan ahayn gabar fadhiid ah oo la oran jiray Kalbah bintu Al Salaq, lana yiraahdo Al Thariicah, oo gaalnimada ku fogaatay iyo colaadinta Saalix, Calayhissalaamu. Markaasay markay cathaabta aragtay ay lugeheedu u furmeen oo intay istaagtay si xoog leh u carartay. Markaasay waxay u timid qabiil Carabta ka mid oo ay u sheegtay waxa tolkeed ku dhacay, ayna weydiisatay inay biyo waraabiyaan. Markay biyaha cabtayna way dhimatay.

Rasuulka Ilaahay, Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam oo Al Xijru wadanka Thamuud maray

Al Balaadii wuxuu yiri: "Al Xijru waa waadi ay kusoo biyo shubaan buuraha Madaa'inu Saalix, oo ah arliga Thamuud, kaddibna ku biyo shuba Waadii Al Quraa, oo uu daadkiisu maro magaalada Al Culaa, magaalada macruufka oo la yaqaanno. Al Xijru waa madaxa Waadi Al Quraa, maantana waxaa dega qabiilka Canzah, waxaana ku yaalla beero fiican. Waxa ugu muhimsan oo halkaas ku yaallana waa waxa Thamuud ka haray oo raadkooda ah. Inta xaaraanta ah ee Al Xijri waxay qiyaas laba iyo labaatan kiiloomitir u jirtaa oo waqooyi ka xigtaa magaalada Al Culaa. Al Culaana waxay Al Madiinah waqooyiga ka xigtaa saddex boqol laba iyo labaatan kiiloomitir. Markaasuu magaca Waadii Al Quraa wuxuu noqday Waadii Al Culaa."
Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu Al Xijru maray wuu ku degay, dadkuna uu ceelkeeda biyo kasoo dhaansadeen. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam,ku yiri: **"Laa tashrabuu min maa'ihaa, walaa tatawadda'uu minhu lilssalaati. Wa maa kaana min cajiinin cajintumuuhu fa aclifuu al ibila, wa laa ta'kuluu minhu shay'an. Wa laa yakhrujanna axadun minkum al llaylata illa wa macahu saaxibun lahu."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Biyeheeda waxba ha ka cabina, salaadna ha uga weyso qaadannina. Cajiintaad biyeheeda ku raqdeenna geela calaf ahaan u siiya, adinkuna waxba ha ka cunina. Caawana axadna yuusan idinka soo bixin isago uu nin kale la socdo mooyee." Markaasuu dadku yeelay wuxuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku amray, intaan ka ahayn laba nin oo Banii Saacidah u dhashay, oo uu midkood xaajo u baxay, kan kalena uu ratigiisa doonay. Midka xaajadiisa u baxay markuu tegeyba waa la ceejiyay. Kan ratigiisa donayayna dabaysha ayaa qaaday oo labada buurood oo Dhayyi' dhigtay. Markaasuu warkaas Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, loo sheegay oo u yiri: **"Alam anhakum an yakhruja axadukum**

illaa wa macahu saaxibun?" oo macnihiisu yahay: "Soo idinkama reebin inuu axadkiin baxo inuu nin kale la socdo mooyee?" Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu u duceeyey midka la ceejiyay oo uu bogsooday, kan kalena oo labada buurood oo Dhayyi' lagu tuurayna, qabiilka Dhayyi' ayaa hadiyo ahaan u siisay Rsulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu Al Madiinah kusoo laabtay."
Ibnu Hishaam wuxu yiri: "Markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa allaahu Calayhi Wasallam, Al Xijri maray maradiisuu wajigiisa saaray oo uu ku daboolay, hashiisana u dhaqaajiyay, kaddibna uu yiri: **"Laa tad-khuluu buyuuta allathiina thalamuu illaa wa antum baakuuna, khawfan an yusiibakum mithlu maa asaabahum."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Ha gelina guryaha kuwa dulmiga falay adinkoo ooyaya mooyee, cabsi aad ka qabtaan inay idinku dhacaan wax la mid ah waxa ayaga ku dhacay oo kale."
Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Markaasay waxay waabariisteen ayagoo aan biyo haysan oo ay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u ashtakoodeen. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u duceeyey oo uu Ilaahay Subxaanahu soo diray daruur oo ay roob soo di'isay, oo ay biyo ka dhergeen, biyahay u baahnaayeenna ay weelashooda ku qaateen."

(Toddoba) Nabi Ibraahiimu Al Khaliilu

Nabi Ibraahiim, Calayhissalaamu, wuxuu noolaa saddex kun iyo afar boqol iyo toddobaatan sano ka hor dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Ibraahiim waxaa loo diray ummado badan ayna ugu horreyso dadka Ciraaq degganaa oo ay caasimaddoodu Baabil ahayd, uuna boqor u ahaa Namruud ibnu Kancaan bin Xaam bin Nuux. Boqorka Masar oo uu Nabi Ibraahiim u tegeyna, kaddib marka haweentiisa Saarrah inta laga xaday boqorkaas gurigiisa la geeyey, magaciisu wuxuu ahaa, siduu Al Dhabarii u yiri Sinaanu bin Culwaana bin Cubayd bin Cuwayj bin Cimlaaqu (oo ninkaanay ku abtirsadaan qabiilka la yiraahdo Al Camaaliiqu oo uu Nabi Ibraahiim laftiisu u dhashay. Al Camaaliiqu iyo Jurham waxay ka mid yihiin qabaa'ilka Carbeed oo dhammaaday oo aan ummadda Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ninna kasoo gaarin oo waa horeba le'day) bin Laawath bin Saam bin Nuux, uuna Ibraahiim islaamka ugu yeeray, kanna ka diiday. Ibnu Hishaamna wuxuu ku yiri Al Tiijaani inuu boqorkaas magaciisu ahaa Camr bin Imri'u Al Qaysi bin Baabilyuun bin Saba'a. Labadaasba waxaa wariyay Al Suhaylii. Risaalada Ibraahiim waxay kaloo koobtay Siiriya, Lubnaan, Falasdhiin, Urdun iyo Makkah Al Mukarramah, oo waaba isaga oo uu kaalmeynayo wiilkiisa Ismaaciil ay Kacbada dhiseen.
Nabi Ibraahiim, Calayhissalaatu Wassalaamu, wuxuu magaciisu ahaa Ibraahiim ina Aazar, ina Naaxuur, ina Saaruugh, ina Raaghuu, ina Raacuu, ina Faalikh, ina Caybar, ina Shaalakh ina Arfakh-shath, ina Saam, ina Nabi Nuux Calyhissalaamu. Hooyadiis magaceeduna wuxuu ahaa Amatu Allaahi, oo macnihiisu yahay addoonta Ilaahay. Ibraahiim wuxuu u dhashay qabiilka Carbeed oo la oran jiray Camaaliiq oo Yaman degganaa, waxayna reerkiisu ka

guureen Yaman afar fac aabihiis hortiis oo ay dalka Ciraaq degeen, halkaasoo lagu oran jiray "Al Curbaanu", oo ah "Carabta". Dadka Ciraaq dega waxaa la oran jiray Kildaaniyiin oo loogu bixiyay ayagoo loo nisbeeyey gobolka Kildaa kaddib markay soo weerareen oo ay seef iyo xoog uga adkaadeen oo ay arligoodana kala wareegeen, dadka arligaas asalka u degi jiray oo la oran jiray Al Suumaariyyiina, halkaasna ay degeen. Sidoo kale waxay Camaaliqdu ku duuleen arliga Masar oo faraaciintii xukuntay ka adkaadeen, ayna xukunka kala wareegeen, lana baxeen Haksuus. Sidoo kale waxay qabsadeen Shaam.
Boqorka Baabil, oo Baabil macneheedu waxaa weeye: "Baab" oo ah "albaab" iyo "Iil" oo ah "Ilaahay" oo sidaasay Baabil waxay ku tahay "Albaabka Ilaahay", oo ahaa Namruud ayaa loo sheegay inuu boqortooyadiisa dumin doono oo ay kala wareegi doono wiil Carabtaas soo haajirtay u dhashay. Markaasuu wuxuu amray in wiil kasta oo u dhasha la dilo. Sidaasuu Ibraahiim awoowihiisa aabihiis Aazar dhalay wuxuu markay hooyadiis soo dhowaatay markay Ibraahiim dhali lahayd wuxuu ku qariyay, ayayadoo uu ninkeedu Baabil ku maqnaa, hog uu lahaa oo ku yiillay xagga dambe ee beertiisa. Hoggaas ayuu Ibraahiim ku dhashay, ayna hooyadiis ku haysay ilaa uu saddex sano gaaro, siday Jaamacadda Al Azhar ugu xaqiijisay musalsalka laga sameeyey kitaabka Cabdu Al Xamiid Jawdah Al Ssaxxaar oo magaciisu yahay Muxammadun Rasuulu Allaahi, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.
Erayga Ibraahiim wuxuu ka kooban yahay laba eray oo kala ah "Ab" oo ah "aabe" iyo "Raam" oo ah riximka ama ilmo galeenka, taasoo macnaha magaciisa ka dhigaysa aabaha dad isku aaba ah ayse kala dhaleen arxaam kala duwan, waana "aabaha shucuubta iyo qabaa'ilka" iyo "aaabaha umadaha". Hooyadiis waxaa lagu yiri inta godka ku jirtay u bixi "Ibraahiim, ama Abraahiim". Nabi Ibraahiim waxaa la dhashay laba nin oo kala ah Haaraan oo dhalay Nabi Luudh iyo Naaxuur.
Nabi Ibraahiim intuu faas qaatay ayuu wuxuu tegay macbadka ay asnaamta ku caabudi jireen, markaasuu wada burburiyay intaan ka ahayn kooda ugu waynaa oo magaciisu ahaa Marduukh. Namruud iyo kuhaantiisu markay macbadka soo galeen oo ay arkeen siday ilaahyadooda loo burburiyay, ayuu Ibraahiim wuxuu ku xukumay dil ah in dab lagu dhex rido oo sidaas loo gubo. Marka lagu dhex tuuray ayuu Ilaahay Tacaalaa wuxuu dabka ku yiri: **"Kuunii bardan wa salaaman calaa Ibraahiima"** oo macneheedu yahay: "Dabow, Ibraahiim u ahaw qabow iyo nabadgelyo, (oo qabowga badani wax buu dilaa)." Markaasuu maalintaas dabka adduunkoo idil wada qaboobay isagoo dab walba u maleeyey inuu Ilaahay isaga taas amrayo! Namruud markuu arkay Ibraahiim oo dabka dhexdiisa ku jira, oo ayan tinna ka guban, oo laba sheekeysanayaa axad uusan isagu u jeedin, oo ahaa Jibriil, ayuu u yimid oo intuu u sijuuday ku yiri: "Ibraahimow adigaa ka xoog badan aniga ilaahay, anigoo u jeeda siduusan dabku wax ku yeelin! Marka adigaan ilaah ahaan kuu caabudayaa, waxaan kuu gawracayaa qurbaan ahaan afar kun oo lo' ah." Markaasuu Ibraahiim wuxuu ku yiri: "Ilaahay wax kasta waa cafiyaa hadduu doono, mase cafiyo in ilaahnimada shariik loo yeelo!"

Markaasuu Ilaahay Tacaalaa wuxuu Ibraahiim ku amray inuu arliga Ciraaq ka haajiro oo uu diinta islaamka arliyada kale geeyo. Markaasuu Inbraahiim u hoggaansamay amarka Ilaahay.

Markuu Nabi Ibraahiim isagoo fulinaya amarka Ilaahay Ciraaq kasoo guuray oo uu arliga Shaam usoo guuray wuxuu kasoo tillaabay wabiga Fuurat. Dadka Shaam waxaa wabigaas u joogay ilaalo usoo sheegta dadka xagga Ciraaq uga imaanaya, oo dagaal badnaa, xarbina wabiga uga soo tillaabi jiray. Markaasay markay ilaaladu aragtay Nabi Ibraahiim iyo muslimiinta la socota oo wabiga kasoo tillaabaya ayay waxay la qayliyeen oo yiraahdeen: "haa cibriim, haa cibriim" oo macneheedu yahay: "war hoy wabiga Furaat ayay kasoo tillaabeen". Halkaasuu ka yimid erayga "Cibraaniyyiin" ama Ebreo ama Hebrew, oo waa kaas macnihiisu, mana aha qabiil iyo qolo toona ee waxaa la oran jiray cidda wabiga Furaat kasoo tillaabta, oo cibriim waa jamaca cabbara oo ah waa kasoo tillaabay. Markay soo tillaabeen ayay reer Shaam ka cabsadeen oo ka argagexeen. Markaasuu Ibraahiim wuxuu muslimiinta ku yiri: "waxaad tiraahdaan Salaam si ay cabsidu uga baxdo." Markaasay wada yiraahdeen, dadka meeshaas degganaana ay cabsidu uga baxda, uuna usoo dhoweeyey oo uu lo'diisa caano uga maalay oo siiyay. Bartaas uu Ibraahiim lo'da ugu maalay waa magaalada hadda la yiraahdo Xalab oo Suuriya ku taalla, oo xalaba waxaa weeye caanu lisay. Markaasuu ku marti qaaday, uuna ku yiri: "markay cabbaysaanna waxaad ku bilowdaan adinkoo leh Bismi Allaahi, markaad dhammaysataanna waxaad tiraahdaan al xamdu li Allaahi."

Nabi Ibraahiim wuxuu marka hore guursaday Saarrah, oo macneheedu yahay amiiradda, ahaydna ina adeertiis laxmi ah oo uu dhalay adeerkiis Haaraan, wuxuuna ku guursaday magaalada Uur ee arliga Ciraaq, waxayna u dhashay wiilkiisa Nabi Isxaaq. Saarrah walaasheed waxaa guursaday Ibraahiim walaalkiis Naaxuur. Kaddibna wuxuu guursaday Haajar, oo ayaduna ahayd amiirad run ah oo Masar u dhalatay oo boqorkay u doonnayd dagaal looga dilay, waxayna u dhashay wiilkiisa Nabi Ismaaciil.

Kaddib Nabi Ibraahiim wuxuu tegay dalka Masar si uu usoo ceshado haweentiisa Saarrah oo laga xaday ayadoo joogta Bayt Iil oo ah Al Quddus.

Sida Saarrah lo xadayna waxay ahayd sidatan: haweeney saabi'iinta ka mid ah ayaa waxay u timid Saarrah, ayna usoo jeedisay inay diintooda gasho. Saarrahna way ka diiday, ayna u sheegtay inay saab'iintu gaalo mushrikiin ah yihiin. Markaasay waxay haweentaasuu Saarrah weydiisatay inay u keento xoogaa timaha iyo cad marada Nabi Ibraahiim, hadday doonayso inay wiil u dhasho, ayagoo aan tan iyo markaas Ilaahay caruur siin. Saarrahna taasna way ka diiday, kuna tiri inay saaxirad tahay, ayaduna ayan caasinta Ilaahay caruur ku doonayn, sixirkuna uu gaalnimo yahay. Markaasay saabi'addu carootay, una dhaaratay inay ka aargoosan doonto. Boqorka Masar wuxuu hore u maqlay mucjizooyinka Nabi Ibraahiim gaar ahaan inuu isago nool kasoo baxay markuu maalin dhan ku dhex jiray dabkuu Namruud ku tuuray. Markaasuu wuxuu aad u doonayay inuu Ibraahiim arko si uu mucjizadaas afkiisa uga maqlo. Markaasay haweentaas saabi'da ahi waxay ciidankuu boqorku usoo diray inuu Ibraahiim uga soo qabto Bayt Iil (oo macnihiisu yahay "Bayt" oo ah "guri" iyo "Iil" oo ah "Ilaahay", oo sidaas ku ah Guriga

Ilaahay, waana magaalada maanta Baytu Al Maqdis ama Quddus la yiraahdo caasimadda arliga Falasdhiin iyo Xaramka saddexaad ee Msulimiinta) ku tiri inay ayadu gacanta usoo gelinayso dagaal la'aan. Markaasay waxay u tagtay haweeney ku foolanaysay khaymad ka mid ah khaymada muslimiinta oo ay ku tiri inay u yeerato Saarrah taasoo ah haweeney barakaysan oo markay u timaaddoo uu cunuggu caloosheeda kasoo bixi doono. Markaasay u ciddirsatay Saarrana ay u timid. Halkaas ayaa waxaa ugu gabbanaa askarta boqorka masar oo Saarrah dafay oo qafaashay oo geeyey guriga boqorka dalka Masar oo ku yiillay caasimadda dalkaas oo waagaas ahayd magaalo la yiraahdo Awaariis oo waqooyiga Masar ku tiillay. Markaasaa Saarrah waxaa lala dejiyay haweenka kale ee boqorkaas asalkiisu Carabta yahay una dhashay qabiilka Al Camaaliiqu. Markaasay Nabi Ibraahiim iyo qaar ka mid asxaabtiisu waxay soo aadeen oo yimaadeen Awaariis caasimadda Masar, oo uu darbi ku wareegdsanaa, lahaaydna albaab laga galo, oo cidda loo oggolaado keli ah ay ka gasho, ganacsatadana halkaas canshuur looga qaado. Sayyidinaa Ibraahiim wuu kurbooday marka haweentiisa la dafay, asxaabtiisuna way la kurboodeen, markaasuu wuxuu yiri: "Ilaaha jirkayga dabka ka dhawray ayaa cirdigaygana, waa sharafteydee iyo haweenteyda, ceebta ka dhawraya. Ilaahayna wuxuu amrayaa darbiga gurigay ku jirto inuu sida quraaradda oo kale noqdo oo aan markaas waxa gudihiisa ku jira aan arko, adinkuna waad arki doontaan in shaa'a Allaahu. Waxaanna u jeedaa Saarrah oo khayr ku sugan iyo xifthiga iyo ilaalinta Ilaahay oo xumaan oo dhan ka celiyay. Marka xagga guriga fiiriya, oo markaasuu Ilaahay wuxuu idin tusinayaa waxay quluubtiinno ku sugnaadaane. Aniga ha ii cabsannina, hana quusannina oo Saarrah Ilaahay ayaa la jira oo ilaalinaya." Markaasay Ibraahiim iyo asxaabtiisuba Saarrah oo qolkeeda guriga boqorka ku dhex jirtay oo nabad qabto khayrna ku sugan ay ayagoo meel magaalada dibaddeeda ah jooga arkeen, oo ay salaantay oo ay wada maqleen, isaguna uu salaamay. Wuxuu kaloo Ibraahiim Saarrah ku yiri: "hadduu ku waydiiyo waxaan isku nahay waxaad ku tiraahdaa inaan walaalkaa ahay, oo waxaan ahay walaalkaa xagga diinta, oo haddaad ku tiraahdo inaad haweenteyda tahay wuu iga kaa qaadanayaa."

Isla markaasba waxaa dagaal ka dhex oogmay boqorkaas iyo amiirka magaalada Memphi oo koofurta ku taalla, una dhashay dadka dalkaas Masar asalkiisa degganaa oo aan Carabta ahayn, boqorradoodana Fircoon loogu yeeri jiray, ilaahnimana sheegan jiray. Isla waqtigaas ayaa waxaa amiirkaas aabihiis, ku nikaaxiyay gabar uu walaalkiis dhalay oo ahaa amiirka dhanka kore ee Al Ssaciidu gobolka la yiraahdo ee dalkaas Masar, ayada magaceeduna Haajar yahay. Amiirka Memfi wuxuu yiri: "amiiraddaasu waa bikro waxayna jirtaa shan iyo toban sano aniguna waxaan ka waynahay saddex sano, weligayna mar ayaan arkay, waana markay toddoba sano jirsatay, aniguna aan toban jirsaday. Markaasuu boqorkaan Carabta oo reer miyiga ah ahi oo dalkeenna naga fara maroorsaday intuu fircoonnada ka adkaaday wuxuu doonayaa inuu i dilo anigoo aan amiiraddayda marna dhunkan oo ayan Memfi soo gaarin ayadoo markab soo saaran oo dariiqa iigu soo jirta." Markaasuu wuxuu damcay markii dagaalku kululaaday oo gacnaha

la isla galay inuu cararo, markaasuu nin wasiirkiisa ahi ku yiri: "ma intaad askarta dagaal gelisay ayaad ka cararaysaa? Qofka sidaas yeela abaal marintiisu waa in la dilaa!" Markaasuu dilay. Markaas kaddib ayay Haajar timid oo ay ka mid noqotay qafaalka boqorka Sinaanu bin Culwaanu oo dagaalka ku adkaaday. Markaasaa la qaaday oo ayadana guriga boqorka ee caasimadda Awaariis la geeyey oo haweenka halkaas degganaa oo ay Saarrah mid tahay lala dejiyay. Waxay halkaas ku xabbisnayd, Nabi Ibraahiimna uu Masar joogay shan sano oo kale isagoo diinta islaamka fidinaya. Sanooyin kalena waa sii joogay, ayaa la yiri ilaa wadartoodu ka noqotay toban sano. Markaas kaddib ayay Saarrah ninkeeda Ibraahiim arliga Falasdhiin ugu dhistay Haajar oo labaatan jir ah, oo marka lasoo qafaalay afar iyo toban jir ahayd ama aan gaarinba, koofaarteeduna ahayd "thaatu al taajayni", oo ah 'midda laba taaj u saaxiibka ah".

Boqorku markuu dagaalka kasoo laabtay ayay haweenta xariimka u madaxda ahi waxay ku tiri: "caawa ma dooneysaa inaad amiiradda Memfi laga soo qafaalay ee Haajar ku raaxaysatid?" Wuxuu yiri: "maya, oo taasu way yar tahay, waxaanna doonayaa inay caruur ii dhasho, ee caawo waxaan doonayaa haweenta ka timid Baabil", oo ah Saarrah. Markaasuu qolka ugu soo galay, ayaduna ay Ilaahay ka magan gashay. Markuu xaggeeda soo aaday ayaa boqorka la ceejiyay oo la xanuujiyay, uuna qayliyay oo kuhaan iyo askarba gurmad ahi qolka soo galeen, hadalkuna kasoo bixi waayey oo uu jilibka dhulka dhigtay. Markaasay Saarrah waxay tiri: "wuxuu ii tilmaamayaa inaan waxa ku dheggan ka fujiyo!" Markaasay ka qaaday ballan in hadduu Ilaahay waxaas ku dheggan ka fujiyo uusan xaggeeda mar dambe soo aadayn, isaguna uu ballankaas qaaday. Markaasay Ilaahay u bariday inuu ka fujiyo waxa haya. Markaasuu Ilaahay ka fujiyay. Markaasuu wuxuu yiri: "yuu ahaa ilaaha aad baryaysay, magaciisuna muxuu yahay?" Waxay tiri: "magaciisu waa Allaahu, waana Ilaaha abuuray Samaawaadka iyo arliga iyo inta jirtaba." Markaasuu ka tegey. Markasaa waxaa lagu yiri boqorka inay haweentaan Baabil ka timid ay saaxirad tahay, oo markaas waxaa loogu yeeray dadka sixirka yaqaanna, oo u sameeyey sixir, luquntana ugu xiray aleel iyo waxa sixirka buriya. Isaguna wuxuu yiri: "saaxirad ma aha oo tuftufidda iyo nuunaaska iyo guryanka iyo guntidda saaxiriinta midna ma laha." Markaasay waxa ka qanciyeen inuu isaguna sixirkaas loo sameeyey tijaabiyo oo uu mar labaad u tago. Markaasuu hadana qolkeeda ugu galay, isagoo ballankii uu galay jebiyay. Markuu xaggeeda u dhaqaaqay oo uusan uba dhowayn ayaa hadana la ceejiyay, laba dhudhunna ee labadiisa gacnoodna la isku dhejiyay. Markaasuu qayliyay oo booyay oo baryootamay, oo ay markaas Saarrah u Alle bariday oo gacnihiina loo kala fujiyay ceegadana laga fujiyay. Markaasuu wuxuu amar ku bixiyay oo yiri: "haweentaan dejiyay qasrigayga ayadoo martidayda ah, ayadoo la karaameeyey oo ilaalsan, xumaanna ka wada ilaalsan intuu ninkeedu ka imaanayo", ayadoo ay u sheegtay inuu ninkeedu Nabi Rasuul ah yahay. Ibraahiim iyo asxaabtiisu markay boqorka u yimaadeen ayuu nin asxaabtiisa ahi wuxuu ku yiri: "boqorow waxaan u nimid inaan madaxa Saarrah furanno ee no sheeg waxaad dooneysid inaan ku siinno si aan noogu soo celisid." Markaasuu boqorku wuxuu ugu jawaabay: "maal ka qaadan mayo haweeney

uu Ilaaheed ilaaliyay, ee Ibraahiimow boqortooyadayda meeshaad doontaan ka dega oo ka taga, waxaad doontaanna i waydiista oo ah maal iyo beero iyo alaabo iyo dhar, oo kulligood waan idin siinayaaye." Markaasay Saarrah waxay tiri: "boqorow waxaa ii hibeysaa gabadha bikrada ah oo usoo baxday isuna diyaarinaysay inay amiirkeeda la qal gasho, oo markaas amiirkeeda laga dilay, oo hadda gurigaaga haweenkaga la deggan." Markaasuu boqorku wuxuu yiri: "waan ku siiyay ayada iyo afartan gabdhood oo kale oo kuu adeega, iyo addoommo kale oo badan iyo kun neef oo lo' iyo geel ah iyo dameerro iyo dhar iyo dahab iyo maal badanba qurbaan ahaan aan Ilaahiinna ugu dhowaanayo, Kaasoo aan marna idinkaba maqnayn." Markay arligooda Falasdhiin ku noqdeen ayay Saarrah waxay gabadhaas shan iyo toban jirka ah oo bikrada ah ninkeeda Ibraahiim u dhistay, waxayna u dhashay Nabi Ismaaciil, aabaha dhalay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhim Wasallam.

Sidaasuuna Ibraahiim boqorka Masar ugu yimid si uu haweentiisa u wato. Boqorkuna wuu soo dhoweeyey, una oggolaaday inuu arligiisa ku noolaado, taasoo uu Ibraahiim ka diiday. Boqorkuna markuu Ibraahiin usoo jeediyay inuu islaamo wuxuu ku yiri: "haddaan islaamo boqornimadayda ayaa iga lumaysa."

Doktoor Musdhafaa Muraad, oo xubin ka ah hay'adda waxbarashada ee jaamacadda Al Axhar ee Al Qaahira ee dalka Masar wuxuu kitaabkiisa Zawjaatu Al Anbiyaa'i, laguna daabacay Daaru Al Fajri lil turaathi ee Al qaahira sanadka kun afar boqol iyo kow iyo labaatan Hijriga una dhiganta laba kun iyo kow ee miilaadiga, wuxuu kutubbada hore ka wariyay inuu markay Saarrah dhimatay uu Ibraahiim guursaday haweentiisa saddexaad, oo magaceedu yahay Qandhuuraa bintu Yaqdhan Al Kancaaniyyah, ayna u dhashay lix wiil oo kala ah: (Kow) Madyan, ahna ninka degay oo aasaasay magaalada Madyan oo maanta ka tirsan dalka Sucuudiga oo Al Madiinah waqooyiga ka xigta. (Laba) Zamraan. (Saddex) Sarju. (Afar) Yuqshaan (waxaana kaloo la yiri Luqshaan iyo Niqshaan, wuxuuna dhalay wiil la yiraahdo Barbar oo ay ka farcameen dadka la yiraahdo barbarta, oo ay culummada qaarkeed soomaalidana ku daraan, oo halkaasuu ka yimid magaca magaalada Barabara. Hooyadiisna waxaa la oran jiray Righwah). (Shan) Nashqu. (Lix) Ninka lixaad magaciisa lama yaqaanno. Markay haweentiisaas Qandhuuraa' ka dhimatay Ibraahiim wuxuu guursaday haweeney afaraad, magaceeduna yahay Xajuun bintu Amiin, waxayna u dhashay shan wiil oo kala ah (Kow) Kaysaan. (Laba) Suuraj. (Saddex) Amiim. (Afar) Ludhaan. (Shan) Naafis. Waxaa kaloo wariyay ibnu Kathiir oo qisasu al Ambiyaa'i ku wariyay. Waxaana isaguna wariyay Al Suhaylii oo Al Rawdu Al Unuf ku wariyay.

Degidda Makkah al Mukarramah

Saddex kun iyo shan boqol oo sano qiyaas dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calyhi Wasallam, ka hor ayuu Nabi Ibraahiim, Calyhissalaamu, isagoo fulinaya amarka Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa,

willkiisa dhaladka ah, oo markaas dhashay Ismaaciil iyo wiilkaas hooyadiisii dhashay oo magaceedu yahay Haajar, wuxuu ka keenay arliga Falasdhiin oo uu degganaa, wuxuuna keenay Makkah al Mukarramah, oo markaas-se ah waadi saxra ah oo cidla ciirsila ah oo aan la degganayn, beer iyo dhir iyo geed iyo har midna aan lahayn. Halkaas ayuu wuxuu uga dhisay cariish qoryaha geedka araak la yiraahdo, oo ah geedka cadayga, ka sameysan, buurta Abuu Qubays agteeda, oo ah buurta uu hadda ka dul dhisanyahay qasriga Boqorka Sucuudiga, wuxuuna siiyay jiraab timir ah oo aan buuxin iyo sibraar biyo ku jiraan, aanse buuxin. Markuu intaas yeelay, ayuu ka gaddoomay oo ka tegey, isagoo arliga Falasdhiin dib ugu laabanaya. Markaasey Haajar dabagashay oo ay tiri: "Ibraahiimow, xaggee baad u socotaa, adigoo na dhigay waadigaan (waadi waa ban buuro u dhexeeya) uusan dadna joogin, wehelna aan lahayn, waxna ayan ku oollin?" Ibraahiim uma uusan soo jeesan xaggeeda, umana jawaabin horese ayuu socodkiisa u sii watay. Markaasey Haajar, oo sii daba socota ay mar labaad waxay ku tiri: "Ibraahiimow, xaggee baad u socotaa, adigoo waadigaan na dhigay uusan dadna joogin, wehelna aan lahayn, waxna ayan ku oollin?" Markaasuusan Ibraahiim xaggeedaba soo dhuganin, uusanna u jawaabin. Haajar, ayaadoo sii daba socota, Ibraahiinna uu socodkiisa sii wato, ayay mar saddexaad waxay tiri: "Ibraahiimow, xaggee baad u socotaa, adigoo na dhigay waadigaan uusan dadna joogin, wehelna aan lahayn, waxna ayan ku oollin?" Markaasuusan markaan saddexaadna usoo jeesan xaggeeda, una jawaabin. Markaasey waxay ku tiri: "Ma Ilaahay ayaa sidaan ku amray?" Wuxuu yiri: "haa". Markaasey waxay ku tiri: "Hadaba (Ilaahay) na lumin mayo", ayadoo uu qalbigeeduna degay, hubsatayna in haduu Ilaahay ninkeeda, Nabi Ibraahiim, Calahissalaamu, ku amray inuu ayada iyo wiilkeeda arliga Falasdhiin kasoo raro oo uu bartaas soo dejiyo, inuu Ilaahy doonayo inuu willkeeda iyo ayadaba u nicmeeyo, oo nicmaduu hore u siiyay uu u dhammeystiro.

Markay Haajar xagga cariishka dib ugu laabatay, oo ayan u jeedin, isaguna uu jiirta buuraha dhexdooda ah marayo, ayuu Ibraahiim, Calayhissalaamu, intuu xagga Kacbada, oo aan markaas dhisnayn, uso jeestay, ayuu Alle baryay, siduu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa Aayadda toddoba iyo soddon ee Suuratu Ibraahiim noogu sheegay:

"Rabbanaa innii askantu min thurriyatii bi waadin ghayri thii zarcin cinda Baytika Al Muxarrami Rabbanaa li yuqiimuu al ssalaata fa ijcal af'idatan mina al nnaasi tahwii ilayhim wa arzuqhum mina al th-thamaraati lacallahum yashkuruuna". Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Rabbiyow, waxaan caruurteyda qaarkeed dejiyay tog aan beer lahayn oo ah Gurigaaga Xurmada leh agtiisa ah, Rabbiyow inay salaadda u oogaan, ee ka yeel quluubta dadka tii ayaga xaggooda u iilata, kana arzuq miro, inay shukriyaan ayay mudanyihiine". Isagoo uu Nabi Ibraahiim, Calayhissalaamu, uu bartaas ku magacaabay Guriga Ilaahay oo Xurmada leh, intayan isaga iyo willkiisuba dhisin, ayay waxay culumada qaarkeed yiraahdaan taasi waxay daliil u tahay inay Kacbadu hore u jiri jirtay, ayse duntay, laakiin ay qawaaciddi, ama aasaaskii Gurigu oo dhulka hoostiisa ku duugnaa ay hareen, oo ay Ibraahiim iyo Ismaaciil, Nabigeenna iyo ayagaba Calayhimussalaatu wa

Al Ssalaamu, aasaaskaas kor usoo qaadeen oo ay sidaas Kacbada ku dhiseen. Culumadaasu waxay daliil ka dhiganayaan Aayadda boqol toddoba iyo labaatan ee Suuratul Baqarah, oo uu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa ku yiri: **"Wa ith yarfacu Ibraahimu al qawaacida mina Al Bayti wa Ismaaciilu."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Xusuuso markuu kor u qaaday Ibraahiim aasaaska guriga iyo Ismaaciil." Culumadaasi waxay leyihiin aasaas hore u jirey ayaa dhulka kor looga qaadi karaa. Runtana Rabbi ayaa og.
Sidaas ayuu Nabi Ibraahiim, Calayhissalaamu, Falasdhiin dib ugu laabtay.

Xijru Ismaaciil ama Al Xadhiimu

Nabi Ibraahiim, Calayhissalaamu, barta uu cariishkaas ka dhisay waa barta maanta la yiraahdo **Xijru Ismaaciil**, oo ah barta goobaabin nuskeed ah oo darbiga yari ku wareegsanyahay oo Kacbada Sharafta leh xagga waqooyi uga taalla. Xijr wuxuu ka yimid erayga xujrah oo ah qol. Halkaas ayay Nabi Ismaaciil, Calayhissalaamu iyo hooyadiis Haajar, Allaha raalli ka noqdee, degganaayeen oo uu qolkoodu ahaa, ayna ku duuganyihiin. Haajar waxay dhimatay isagoo Ismaaciil labaatan sano jiro. Xijru Ismaaciil waxaa kaloo la yiraahdaa oo magaciisu yahay **Al Xadhiimu**, looguna bixiyay in qaarkiis (waana saddexda mitir oo darbiga Kacbada xigtah) laga jebiyay Kacbada oo uu uu dhexdeeda ka mid yahay, oo qofkii saddexdaas mitir ku tukada wuxuu ku tukaday Kacbada dhexdeeda, oo xadhiim wuxuu ka yimid erayga xadhama oo macnihiisu yahay waa la dumiyay. Darbigaas Xijru Ismaaciil wuxuu dhulka ka qaadanyahay hal mitir iyo soddon iyo labo sentiimitir, ballaarkiisuna waa hal mitir iyo shan iyo konton sentiimitir, labada irdood oo Xijrigana waxaa u dhexeysa siddedd mitir iyo toddoba iyo toddobaatan sentiimitir. Qaybta Kacbada ka mid oo Xijriga ku jirtana waa saddex mitir. Irridda Xijriga oo xagga al Multazam iyo Albaabka Kacbada u furan waa laba mitir iyo sagaal iyo labaatan sentiimitir. Irridda labaad oo ayada kasoo horjeedana waa laba mitir iyo saddex iyo labaatan sentiimitir. Darbigaas gaaban dhererkiisuna, marka dibadda laga cabbiro, waa kow iyo labaatan mitir iyo toddoba iyo konton sentiimitir. Cabbirradaas iyo kuwa kale oo kitaabkaan ku xusan ee Kacbada iyo Xaramka Maakkah waxaan kasoo qaadannay kitaabka magaciisu yahay Taariikhu Makkata Al Mukarramata Qadiiman wa Xadiithan, uuna dhigay Dr. Muxammad Ilyaas Cabdu Al Ghanii, iyo Kitaabka Story of the Great Expansion, oo ku saabsan ballaarinta labada Xaram, ayna dhigtay Shirkadda Saudi Bin Ladin Group.

Socodka Al Saffaa iyo Al Marwata dhexdooda

Markay biyiihii sibraarka ugu jiray ka dhammaadeen, oo wiilkii harraaday, ayay Haajar kurbootay, oo ay hareereheeda dhugatay, inay aragto dad socda oo ay biyo ka qaadato. Cidnase way arki wayday. Markaasey orodday oo ay buurta **Al Saffaa**, oo kacbada boqol iyo soddon mitir u jirta dusheeda fuushay, si ay ilaa il qabadkeeda u qooraansato, oo sidaas dad socda oo biyo sita ay ku aragto haaday aaggaas marayaan. Al Saffaa macneheeduna waxaa weeye buur

dhagax sulub ah. Mase ayan arkin cid dhaqaaqeysa. Markaasey kasoo degatay buurta oo intay socod iyo orodbaba isku dartay waxay dul fuushay buurta kale oo la yiraahdo **Al Marwata**, Rukniga Shaamiga ah ee Kacbadana u jirta saddex boqol oo mitir. Al Marwata macneheeduna waxaa weeye buurta dhagaxa ah oo jilicsan oo cad. Labdaas buurood waxay isku jiraan saddex boqol iyo afar iyo sagaashan mitir iyo konton sentiimitir. Markay buurtaasna dul fuushay oo il qabadka qooraansatay oo ay cidna arki wayday, ayay kasoo degatay oo intay socod iyo orodba isku dartay buurta Al Saffaa kusoo laabatay oo ay dul fuushay, mar labaad, ayay cidna arki wayday. Sidaas ayay toddoba goor labadaas buurood isaga dhex socotay, ayadoo saddex goorna Al Saffaa dul fuushay, afar goorna Al Marwata. Intaasoo idil wiilkeedu harraad ayuu la booyayaa. Taas ayaa u sabab ah in qofka cumreysanaya ama xajinaya uu labadaas buurood toddoba goor u kala socdo, camalkaasoo **Al Sacyi** la yiraahdo, intuu labadaas buurood isaga kala soconayo, ordayana ay tahay 394,5x7goor= 2761,5 mitir, oo ku dhaw saddex kiiloomitir. Ayadoo wali buurta Al Marwata dul saaran, toddobadaas goor ka dib, ayay cod maqashay. Markaasey waxay u malaysay inay ayadu isla hadashay, markaasey waxay tiri: "Sihin" (oo saad ka bilaabatah) oo macneheedu yahay aamus. Markaasey hadana dhegeysatay, oo ay hadana cod maqashay.

Ceelka Zamzam

Markaasey usoo dhaqaaqday bartay wiilkeeda uga soo tagtay, oo ay tiri: "Waa lagu maqlay haddaad wax lagu badbaado haysid". Markay timid barta wiilkeedu joogayna waxay ugu timid Malaku Jibriil oo ku sugan barta ceelka Zamzam, oo intuu ciribtiisa dhulka ku dhuftay ay **ceelka Zamzam** biyihiisu halkaas kasoo burqadeen. Al Suhaylii wuxuu leeyahay inuu Malaku Jibriil dhulka ciribtiisa ku dhuftay, oo uusan gacantiisa ama uusan wax kale ku dhufan waxay ishaaro u tahay oo ay tilmaameysaa inuu ceelkaasi u wareegi doono ubadkiisa ka dambeeya oo dhaxli doona: Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaana ah ubadka Nabi Ismaaciil, kaasoo uu ceelka Zamzam isaga, Sallaa Allaahu Caleyhi Wasallam iyo ummaddiisaba uso wareegay oo yeeshay, oo ubadku waa ciribta ka harta ninka. Markaasey Haajar biyahaas ceshatay oo ay barkad sameysatay, ayna sibraarkeeda gacanteeda biyo uga buuxsatay. Markaasey biyaha ka cabtay, wiilkedana ay nuujisay. Malaggu wuxuu Haajar ku yiri: "Ha ka baqin inaad luntid, maxaa yeelay kani waa Guriga Ilaahay oo Xurmada leh, ayna dhisi doonaan wiilkaan iyo aabihiisa. Ilaahayna ehelkiisa ma luminayo."

Ceelka Zamzam wuxuu Kacbada u jiraa shan iyo toban mitir. Ceelka afkiisu wuxuu **Madhaafka**, oo ah meesha lagu socdo markay la dhawaafayo, ka hooseeyaa hal mitir iyo konton iyo lix sentiimitir. Ceelka afkiisa iyo salkiisu waxay isku jiraan, oo uu dhererkiisu yahay soddon mitir. Biyuhu waxay ceelka afkiisa ka hooseeyaan afar mitir. Ceelka waxaa biyaha siiya oo kusoo shuba ilo, kuwaasoo ceelka afkiisa u jira toddoba iyo toban mitir. Ballaarka afka ceelku waa afar mitir. Laba ilood ayaa ceelka biyo kusoo shuba: ili waxay u jeeddaa xagga Xajarul Aswadka iyo Kacbada. Daloolkaas biyuhu

kasoo baxaan dhererkiisu waa shan iyo toddobaatan sentiimitir, taaggiisuna waa soddon sentiimitir. Biyaha ugu badani isagay ka yimaadaan. Il labaad ayaa ayaduna ceelka kusoo shubta, daloolkeeduna wuxuu u jeedaa xagga Ajyaad. Daloolkaan labaad dhererkiisu waa toddobaatan sentiimitir, taaggiisuna soddon sentiimitir. Ilo yaryar oo kalena waxay u jeedaan xagga Al Saffaa iyo Al Marwata. Ceelku wuxuu soo shubaa halkii il biriqsiba kow iyo toban ilaa sideed iyo toban iyo nus liitar oo biyo ah, biyaahaasoo haan wayn oo Masjidka dibaddiisa ah matoor ku tuuro oo lagu shubo. Halkaas ayaa dhuumo kasoo qaadaan oo ay Masjidka kusoo celiyaan. Biyaha Zamzam waxay kusoo dhacaan marka ceelka laga soo tuuro haamo, kaddibna inta haamahaas dhuumo kasoo qaadaan ayaa Masjidka Xaramka dib loogu celiyaa. Haamahaas waxaa ka dhaansada baabuurta haamah sida oo biyahaas meelo kale uu qaada, Mashruucaas waxaa la dhammaystiray sanadka Hijriga ee kun afar boqol shan iyo toban (waa toddoba sano ka hor markaan kitaabkaan dhigayo), wuxuuna ku yaalla meesha la yiraahdo Kudaa Makkah. Tirada biyaha halkii saac ceelka Zamzam keeno waa sidatan:

Sideed iyo toban iyo nus. Hal ilbiriqsi ee ku dhufo marka lixdan il bieiqsi, taasoo ah kun boqol iyo toban liitar halkii daqiiqo. Intaas ku dhufo lixdan waxaana kuu soo baxaya lix iyo lixdan kun iyo lix boqol oo liitar, waana inta halkii saacba soo baxda. Intaas ku dhufo afar iyo labaatan saac, waxaana kuu soo baxaya hal malyan shan boqol sideed iyo sagaashan kun iyo afar boqol oo liitar maalintii. Bal xisaab inta biyo kasoo burqatay tan iyo waqtiga Nabi Muxammaad, Sallaa Allaahu Caleyhi Wasallam! Ilaa iyo sanadka kun saddex boqol toddoba iyo soddon Hijriga, una dhiganta kun sagaal boqol saddex iyo konton miilaadiga biyaha waxaa ceelka looga soo saari jiray wadaan xarig ku xiran.

Biyaha Zamzam waxaa la geeyaa Masjidka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ee Al Madiinah Al Munawwarah, degmooyin kale oo Boqortooyada Sucuudiga ka mid ah, dadka Xajka iyo Cumradana gutana dalalkooda ay ka yimaadeen ayay u qaataan oo ay dib ula noqdaan. Marka, maadaama uusan jirin dal adduunkaan ka mid ah oo aan laga soo xajjin, ma uusan jiro dal addunkaan ka mid ah oo aan biyaha Zamzam la gayn oo aan laga cabin.

Biyaha Zamzam waa il ka mid ah ilaha biyaha ee Jannada, waana mirihii ugu horreeyey oo uu Ilaahay Nabi Ibraahiim, Calyhissalaamu, siiyay markuu baryay. Biyahaas ayaana u sabab ah degidda iyo nolosha Makkah Al Mukarramah. Biyahaasi waxay ka mid yihiin nicmooyinka ugu waaweyn iyo Aayaatka cadcad oo muuqda ee Xaramka Makkah. Biyahaasi waa biyaha ugu khayr badan oo adduunkaan dushiisa ku sugan, uuna soo saariddooda Malak Jibriil u sabab ahaa, Caleyhissalaamu, waxayna kasoo burqadeen barta ugu muqaddisan arliga oo idil. Biyahaas waxaa lagu dhaqay qalbiga Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Caleyhi Wasallam, in mar ka badan. Rasuulka Ilaahay, Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Caleyhi Wasallam, wuu barakeeyey biyaha ceelkaas isagoo calyadiisa sharafta leh ku dhex tufay. Biyaha Zamzam, sidaan u arki doonno, haddi Ilaahay idmo, waa cunno uu ka dhergo qofka gaajeysan, waa biyo uu ku harraadboxo midka oomani, waa daawo cudur

kasta u daawo ah; biyahaasi waxayna qaadaan oo daaweeyaan madax xanuunka. Ceelka Zamzam fiirintiisuna wuxuu xoojiyaa aragga indhaha. Waxaa biyahaas lagu hela wixii khayr ah oo loo cabbo oo uu Ilaahay qofkaas wixii uu niyaystay oo uu u cabbay siiyaa. In biyahaas laga dhergo oo ilaa feeraha laga buuxsado waa calaamad iimaanka qofkaas, waxaana looga bogsoodaa nifaaqa. Biyahaas waxaa caba kuwa baariyiinta ah, waana waxa ugu fiican oo la isku martisooro. Waxay jirka siiyaan xoog, badnida inta laga cabay daraadeedna biyaaha ceelkaasi uma guraan. Hadda wuxuu jiraa in ka badan shan kun oo sano, oo sidaasuu ku yahay ceelka adduunkaan ugu fac wayn. Maalin walbana waxaa ka cabta malayiiin qof, oo ka weyseysata, oo ka qubaysta, oo danahooda oo idil ku qunsada.

Qofka biyahaas cabbaya waxaa habboon inuu weelka biyuhu ki jiraan uu midigta ku qabsado, uuna xagga Qiblada u jeesto, uu Bisinka qabsado intuusan cabbin, uu niyaysto waxa uu doonayo inuu Ilaahay cabbidda biyaahaas ku siiyo, sida dambi dhaaf, ama cudur uu qabo inuu ka bogsoodo, ama inuu Ilaahay cilmi siiyo, iyo wixii la mid ah. Markaas kaddib uu cabbo, isagoo taagaan ama fadhiyaba. Saddex goor ayuu weelkaas afka ka qaadayaa oo uu neefsanayaa, biyahana caloosha ayuu ka buuxinayaa ilaa ay feeraha ka gaaraan. Markuu cabbidda dhammeysto Ilaahay ayuu ku xamdinayaa, oo wuxuu leeyahay al xamdu li Allaahi. Kaddib wuxuu ku ducaysanayaa wixii khayr ah ee adduunkaan iyo khayr aakhiraba, maxaa yeelay marka biyaha Zamzam la cabbo kaddib waa waqti ka mid ah waqtiyada ducada la aqbalo. Wuxuu Muslim ka wariyay Abuu Tharr al Ghifaariyyi inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, biyaha Zamzam ka yiri: **"Innahaa mubaarakatun, innahaa dhacaamu dhucmin wa shifaa'u suqmin."** (xadiithka Muslim laba kun afar boqol saddex iyo toddobaatan) Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Biyaha Zamzam qofkii cabbah waxay u dherjinayaan siduu u dhergayo hadduu cunno cuno." Qaybta dambe ee xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Biyaha Zamzam bukaankana waxay u yihiin daawo uu ku bogsoodo." (Waxaana wariyay al Dhabraanii, al Bazaar iyo Aboo Daauud). Wuxuu al Bayhaqii Jaabir ka wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, biyaha Zamzam ka yiri: **"Maa'u Zamzama limaa shuriba lahu."** (Xadiithka 5/148 iyo 5/202 ee al Bayhaqii, Axmad 3/357, Ibnu Maajah: 3062) Wuxuu kaloo al Bayhaqii Ibnu Cabbaas, Allaha labadoodaba raalli ka noqdee, ka wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Caleyhi Wasallam, biyaha Zamzam ka yiri: **"Aayatu maa baynanaa wa bayna al munaafiqiina annahum laa yatadallacuuna min Zamzam."** (Xadiithka 5/147 ee al Bayhaqii) Xadiithka macnihiisawaxaa weeye: "Calaamadda annaga iyo munaafiqiinta noo dhexeysaa waxaa weeye inayan ayagu biyaha Zamzam ilaa feeraha ka buuxsan."

Amarka in Ismaaciil la gawraco

Markuu Nabi Ismaaciil saddex iyo toban sano jirsaday, da' kalena waa la sheegay, ayaa Nabi Ibraahiim, Calayhissalaamu, Makkah Al Mukarramah

kusoo laabtay, oo uu wiilkiisa Ismaaciil, Calayhissalaamu, iyo hooyadiis Haajar u yimid. Markaasuu isagoo habeen hurda wuxuu ku riyooday isago la amrayo inuu willkiisa Ismaciil, oo uu carrurba keligiis ka leeyahay uu gawraco. Riyada Anbiyaduna waa xaq run ah, oo shaydhaan awood kuma laha. Markuu waabariistay ayuu wuxuu wiilkiisa Ismaaciil ku yiri: "Mandhow, xarig iyo mindi soo qaad oo na keen aan bankaas buurta dhineceeda ku yaalla aan ciiddaada uga soo qoryo gurnee". Markuu soo qaatay ayay Ibraahiim iyo Ismaciil is raaceen oo ay xagga buurta aadeen. Waxaa ka horyimid nin oo ku yiri: "xageebaad uso socotaa oday yahaw?" Markaasuu Ibraahiim intuu buurta la yiraahdo **Jabalu Thabiir** (oo ka bilodah tha saddex dhibcood kor ku leh) dhugtay ayuu wuxuu yiri: "Waxaan u socdaa bankaas buurta ku yaalla, oo aan xaajo ka leeyahay". Markaasuu wuxuu ninkii Ibraahiim ku yiri: "w Allaahi waxaan u arkaa inuu shaydhaan adigoo hurda kuu yimid, oo uu markaas ku amray inaad wiilkaagaan gawracdid, haddana waxaad u socotaa adigoo doonayo inaad gawracdid." Markaasuu Ibraahiim aqoonsaday inuu Ibliis laftiisii yahay, wuxuuna ku yiri: "Iga tag cadawga Ilaahayow, oo wa Allaahi waan fulinayaa amarka Rabbigay". Markaasuu ku tuuray, oo uu la dhacay toddoba dhagax. Markuu Ibliis Ibraahiim ka quustay, ayuu wuxuu u tegey Ismaaciil, oo ka dambeeyey Ibraahiim, sidana xarig iyo mindi. Markaasuu wuxuu ku yiri: "Ma ogsoontahay meeshuu aabahaa kuu wado?" Wuxuu Ismaaciil yiri: "Bankaas ayuu ehelkeenna uga soo qoryo gurayaa." Wuxuu Ibliis ku yiri: "wa Allaahi inuusan doonayn waxaan ahayn inuu ku gawraco". Wuxuu Ismaaciil yiri: "Sababtuna maxay tahay?" Wuxuu Ibliis yiri: "Wuxuu ku andacoonayaa inuu Ilaahay sidaas ku amray." Markaasuu Ismaaciil, isagoo iimaan qalbigiisa ka buuxo wuxuu ku yiri: "Ha meelmariyo wuxuu Rabbigiis amray." Markaasu ku tuuray, oo uu la dhacay toddoba dhagax.

Markaasuu Ibliis wuxuu u tegey Haajar, wuxuuna ku yiri: "Ismaaciil hooyadiisow, ma ogsoontahay meeshuu Ibraahiim Ismaaciil la aaday?" Waxay tiri: "Wuxuu u watay inuu nooga soo qoryo guro bankaas buurta ku yaalla." Wuxuu Ibliis yiri: "Wax kale uma uusan wadan inuu gawraco mooyee." Waxay tiri: "Intaas wuu uga naxariis badanyahay, jeceylka uu u qabana wuu ka xoog badanyahay inuu gawraco." Ibliis wuxuu yiri: "Wuxuu ku andacoonayaa inuu Rabbigiis amray inuu gawraco." Waxay tiri: "Haddu Rabbigiis sidaas amray waxaan u hoggaansameynnaa amarka Ilaahay." Markaasay ku tuurtay, oo ay la dhacday toddoba dhagax.

Buurtaas Jablu Thabiir waxay ku taalla Muzdalifah, waxayna ka qabaneysaa bidixda qafka Carafaat ka yimaada oo Mina iyo Makkah Al Mukarramah u socda, waxayna midigta ka qabaneysaa qofka Mina ka taga oo Carafaat u socda.

Saddexdaas meelood waa saddexda Jamraat, oo Xajka Ibliis dhagaxda lagula dhaco.

Ibraahiim markuu wiilkiisa Ismaaciil buurta la tegey ayuu wuxuu ku yiri: Wiilkeygow, waxaan ku arkay hurdada anigoo ku gawracaya, ee bal eeg waxaad fali." Ismaaciil wuxuu ku yiri: "Aabow samee waxa lagu amray, waxaadna arki doontaa, haddii Ilaahay idmo, inaan ka mid ahay kuwa sabree."

Wuxuu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa sidaas noogu sheegay Aayadaha boqol iyo laba ilaa boqol kow iyo toban ee Suuratu Al Saafaat, oo uu Cazza wa Jalla ku yiri: **"Falammaa balagha macu al ssacya qaala yaa bunayya innii araa fii al manaami annii athbaxuka fa anthur maa thaa taraa, qaala yaa abati ifcal maa tu'maru satajidunii in shaa'a Allaahu mina al ssaabiriina**(102)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Markuu ku gaaray agtiisa socodka, wuxuu yiri: wiilkeygow, waxaan ku arkay hurdada anigoo ku gawracaya, ee eeg waxaad fali. Wuxuuna yiri: aabow samee waxa lagu faray, waxaadna heli doontaa hadduu Ilaahay idmo, inaan ka mid noqdo kuwa sabree (adkeystee)(102)".

Markaasuu Ismaaciil wuxuu aabihiis ku yiri: "Aabow, haddaad dooneysid inaad i gawracdid si fiican xarigga iigu xir, si ayan wax iiga kaa soo gaarin, oo uusan sidaas ajarkeygu ku naaqusin, maxaa yeelay geeridu waa adagtay, aniguna isma hubo inaanan isku dardarsami doonin markay geeridu i taabato. Mindidaadana si fiican u afee, si aad dhakhso aan dhibka uga raaxeysto (oo aan dhakhso u dhinto). Markaad dhulka i dhigeysidna, dhinac ha ii dhigin, ee wajigayga dhulka dhig, maxaa yeelay waxaan ka baqayaa inaad inta wajigayga fiirisid uu qalbijilayc ku galo, kala dhexgalana aniga iyo fulinta amarka Ilaahay (oo aad markaas amarkii fulin waydid, oo aad i gawrici waydid) Haddaad u aragtid inaad qamiiskeygaan hooyadey u geysidna, hadaba iga siib hadaba (si intuu dhiiggeygu gaaro, ay markaas aragto oo ay ku calool xumaato)".

Ibraahiim wuxuu yiri: "Caawinaad khayr badan ayaad iigu tahay fulinta amarka Ilaahay."

Madax furashada Ismaaciil

Markuu inta xarigga ku xiray, qamiiskana ka siibay, wajigana u dhigay, mindidiina intuu kacanta ku qabsaday uu tunka Ismaaciil saaray uuna ku dhaqaaqay inuu mariyo, ayaa Rabbigiis la hadlay, oo uu ku yiri: "Ibraahiimow, riyadii waad rumaysay, sidaas ayaanna kuwa suuban u abaal marinnaa, arrinkaasna wuxuu ahaa imtixaan cad." Ilaahayna wuxuu Ismaaciil ku furtay wan wayn, oo uu beddelkiisa bireeyo. Markaasuu Ibraahiim farax la ilmeeyey ilaa uu garkiisu ka qoyay, wiilkiisana uu ku yiri: "Wiilkaygow, maanta ayaa la ii kaa hibeeyey." Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, oo dhacdadaas nooga warramayana wuxuu Quraanka ku yiri, oo uu Aayadaha boqol iyo saddex ilaa boqol kow iyo toban ee Suuratu Al Saafaat ku yiri: **"Falammaa aslamaa wa tallahu liljabiini**(103)**Wa naadaynaahu an yaa ibraahiimu(**104)**Qad saddaqta al Rru'yaa innaa kathaalika najzii al muxsiniina**(105)**Inna haathaa lahuwa al balaa'u al mubiinu**(106)**Wa fadaynaahu bi thibxin cathiimin**(107)**Wa taraknaa calayhi fii al aakhiriina**(108)**Salaamun calaa Ibraahiima**(109)**Kathaalika najzii al muxsiniina**(110) **Innahu min cibaadinaa al mu'miniina**(111)**."** Aayadaha macnohoodu waxaa weeye:

"Markay hoggaansameen oo uu wajiga u legday(103)Ayaan u dhawaaqnay: Ibraahiimow!(104)Dhab ahaan ayaad ugu rumaysay riyadii, sidaas ayaanna ku

abaal marinnaa sama falayaasha(105)Taasina waa imtixaan cad oo muuqda (oo wayn)(106)Waxaanna ku furannay loog wayn (wan)(107) Waxaanna ugaga tagnay (ugu reebnay) kuwa dambe (oo ay Ibraahiim ammaanayaan ilaa yawmul qiyaamaha, taasoo abaalmarinta Ilaahay uu Ibraahiim siiyay ka mid ah inay cid walba jeceshahay oo ay ammaanto)(108)Nabadgelyo (Salaan) Ibraahiim korkiisa ha ahaato(109)Saas ayaanna ku abaal marinnaa sama falayaasha(110)Wuxuu ka mid ahaa addoomadeenna mu'miniinta ah (111)."
Nabi Ibraahiim wuxuu ku dhintay oo ku duugan yahay magaalada la yiraahdo Al Khaliilu ee daanta galbeed ee wabiga Urdun, meeshuu ku yaallo xaramkiisu ee arliga Falasdhiin. Al Cumarii wuxuu kitaabkiisa ku wariyay inuu qabriga Nabi Ibraahiim booqday, ayna halkaas kula duugan yihiin haweentiisa Saarrah oo isaga hortiis dhimatay oo u isagu inta hog halkaas ku yiillay gatay, kuna gatay konton Dirham, ku duugay. Markaasaa markuu isaguna dhintay ayada dhineceeda lagu duugay oo qabrigiisa qabrigeeda lagu dhejiyay. Kaddib waxaa dhimatay haweenta Nabi Isxaaq Rabqatu oo ayadana halkaas lagu duugay. Kaddib waxaa dhintay Isxaaq oo isagana halkaas lagu duugay oo qabrigiisa qabrigeeda lagu dhejiyay. Kaddib waxaa dhintay wiilkiisa Nabi Yacquub, oo isagana halkaas lagu duugay. Kaddibna waxaa dhimatay haweenta Yacquub oo ayadana halkaas lagula duugay. Waxaa kaloo la yiri inay qubuurta Aadan iyo Nuux iyo Saam ayaguna godkaas dhexdiisa ku yaallaan. Xaramka dibaddiisana waxaa ku yaalla qabri la yiraahdo waa qabriga Nabi Yuusuf. Maydka Yuusufna waxaa Masar kasoo qaaday ayaa la yiri Nabi Muuse. Waxaan booqday qabriga Ibraahiimu Al Khaliilu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, bisha Thuu Al Xijjah ee sanadka toddoba boqol shan iyo afartan Hijriga." Waa intaas warka Al Cumarii oo kooban.
Al Qasdhalaanii wuxuu yiri: "Wuxuu ibnu Caadil ku xusay tafsiirkiisa inuu Jibriil, Calayhissalaamu, Ibraahiimna kusoo degay laba iyo afartan goor."

(Sideed) Nabi Luudh

Nabi Luudh, Calayhissalaamu, oo uu Ibraahiim adeer u ahaa isagoo uu dhalay walaalkiis Haaraan bin Aaazar, isku zaman ayayna noolaayeen.
Luudh wuxuu ka mid noqday qoyska adeerkiis Ibraahiim oo isagaa soo koriyay, ayadoo ayan Ibraahiim iyo haweentiisa Saarrah caruur lahayn. Markaasuu marka lasoo diray aaminay oo rumeeyey Nabi Ibraahiim uuna soo raacay markuu Ibraahiim kasoo haajiray arliga Ciraaq, uuna lasoo maray inta dal oo uu Ibraahiim soo maray. Markaasuu markuu Ibraahiim Falasdhiin degay ayuu Ilaahay Tacaalaa wuxuu Luudh ka dhigay Nabi iyo Rasuul wuxuuna u diray dawlad shan boqortooyo ka koobnayd oo la isku oran jiray Saduum oo ahayd magaalo madaxdooda, boqorkeeduna ahaa Baaric. Shantaas magaalo waxay kala ahaayeen Sabcah (waa saad) iyo Sucrah (saad) iyo Camuurah (Ghamuuraa'a ayaana la yiri) iyo Duumaa iyo Saduum. Wuxuuna yiri: "magaalo kasta waxaa degganaa boqol kun oo qof." Wuxuu kaloo Qataadah ka wariyay: "waxaa degganaa afar kun oo kun" oo la mid ah afar malyan oo qof. Dadka Saduum dega gaalnimada waxay ku darsadeed laba caado oo ay lahaayeen oo kala ah (kow) ayagaa ugu horreeyey oo hindisay khaniismada inuu rag rag kale u tago. (Laba) Dadka dariiqa maraya ayay

dariiqa ka goyn jireen oo ay dhici jireen, waxaas xunna ku samayn jireen. Markaasuu Ilaahay wuxuu usoo diray malag Jibriil iyo laba malag oo kale oo la socota inay soo halaagaan dadkaas qawmu Luudh. Markaasay malaa'igtu waxay soo martay adeerkiis Nabi Ibraahiim, uguna bishaareeyeen isaga iyo haweentiisa Saarrah inay dhali doonaan wiil suuban, oo ah Nabi Isxaaq. Waxay kaloo u sheegeen in loo diray inay haligaan oo burburiyaan dadka Luudh loo diray. Markaasuu Ibraahiim la dooday malaa'igta, kuna yiri: "waxaa ku jira dad muslin ah, ee miyaad halaageysaan?" Nabi Ibraahiim wuxuu yiri: "bal ka warrama hadday ku jiraan konton qof oo muslimiin ah?" Waxay yiraahdeen: "hadday ku jiraan konton qof oo muslim ah ma cathaabaynno." Wuxuu yiri: "afartanna?" Waxay yiraahdeen: "hadday afartan ku jiraanna cathaabi maynno." Wuxuu yiri: "soddoonna?" Waxay yiraahdeen: "soddon hadday ku jiraanna cathaabi maynno." Sidaasuu ku waday ilaa uu toban ka gaarsiiyo. Markaasay waxay yiraahdeen? "Hadday toban ku jiraanna?" Wuxuu Ibraahiim yiri: "qawm laga waayo toban qof khayr ma lah." Dadka Luudh rumayana waxay ahaayeen labadiisa (saddexna waa la yiri) gabdhood, oo magacoodu ahaa Raythaa oo ahayd midda wayn iyo Rucziyaa oo ahayd midda yar, iyo saddex qof oo kale, oo isaga laftiisa toddoba ku noqonaya! Oo toban ka yar! Jibriil waxaa la socday labada malag oo kala ah Miikaa'iil iyo Israafiil. Markaasay saddexda malag waxay yimaadeen magaalada Luudh, waxaana lo sheegay inuu Luudh ku maqan yahay oo ka shaqaynayo beer uu leeyahay. Markaasay waxay wabiga agtiisa ka heleen gabar uu Luudh dhalay oo biyo kasoo dhaaminaysa. Markaasay waxay ku yiraahdeen: "gabaray, ma na marti gelinaysaan?" Waxay tiri: "haa." Markaasay waxay ku tiri: "meeshiinna ha ka dhaqaaqina jeer aan idiinka imaado", ayadoo dadkeeda uga baqday. Markaasay waxay u timid aabeheed oo ay ku tiri: "waxaa ku doonaya laba nin oo magaalada albaabkeed ajooga, oo anan arag dad ka wajiyo qurxoon, ee yeeyan dadkaagu qabsannin oo ayan martidaada kugu fadeexeynin." Dadkiisuna hore ayuu uga reebay inuu rag marti geliyo. Markuu Luudh raggaas gurigiisa keenay ayay haweentiisa, oo magaceedu yahay Waalihah, oo gaalo ahayd, intay oradday ragooda usoo sheegtay inay gurigeeda joogaan rag ayan kuwa ka qurxoon hore u arag. Markaasay guriga Luudh yimaadeen oo markuu albaabka ka furi waayey ay darbiga kasoo boodeen ayagoo raggaas doonaya. Markaasuu Jibrill baalkiisa wajiga ka mariyay oo ay sidaas ku indho beeleen. Markaasay u sheegeen inay yihiin malaa'ig loo soo diray inay qawmkiisa halaagaan. Markaasuu Luudh wuxuu ku yiri: "haddeer halaaga." Markaasay malaa'igtu waxay ku tiri: "ballankoodu waa berri subax, oo soo subuxu ma dhowa! Luudhow adiguna habeennimadaba magaalada ka bax oo reerkaaga wado, oo yuusan midkiinna magaalada dib usoo dhugan intaan ahayn haweentaada, oo ayadana waxaa haleelaya cathaabta ayagana haleesha!" Markaasuu markay subuxii ahayd uu Jibriil intuu baalkiisa ilaa dhulka toddobaad hoos u geliyay ayuu intay qawmu Luudh degganaayeen soo fujiyay iyo xoolohooda iyo dushiisa ku noolaydba oo intuu baalkiisa kor ugu soo qaaday ilaa ay malaa'igta Samada deggani ka maqleen ciga diiqooda iyo eeyohooda ayuu dhulka kusoo celiyay oo dhankii hooseeyey kor mariyay. Isla markaasna waxaa Samada looga soo daadiyay dhagax dhoobo laga sameeyey oo dabka Naarta Jahannama lagu soo dubay oo qofkuu ku dhacayo uu magaciisu ku dhigan yahay oo markuu ku dhaco hore ka dhimanayo. Markaas kaddib ayuu

dhulkay Saduuma iyo magaalooyinkeedu ku fadhiyeen waxaa lagu kor sameeyey badda Maydka ah oo ayan wax noole ahiba, xoolo iyo dhirba, ku noolaan karin, oo ilaa maanta waa sidaas. Markuu Luudh habeenkaas waqtiga suxuurta reerkiisa iyo muslimiintaba magaalada kala baxay ayay waxay maqleen qaylada qawmu Luudh marka la cathaabayay, markaasay haweenta Luudh dib usoo dhugatay oo ay tiri: "tolkeeyow!" waxayna ahayd gaal asnaamta la caabudda, una sheegtay markay rag usoo martiyaan. Markaasaa waxaa ayadana ku dhacay dhagax dhagaxda Samada laga soo daadiyay ka mid ah oo dilay. Badda Maydka ah xeebteeda, meesha la yiraahdo mandhiqato al potaas, oo biyaha badda ayaa waxaa laga dhaliyay maadadaas kimikada ah, oo arliga Urdun ka mid waxaan tegay god ku yaalla buurahaas mid ka mid ah oo la yiraahdo Kahfu Luudh, oo ah hogga Luudh, oo qolal kala duwan ku yaalliin, iyo jiko iyo qubuur iyo meel jaranjarooyin is dul saaran ah oo sida meelaha la fariisto oo ku yaalla meelaha waagii hore riwaayadaha lagu fiirsan jiray oo la yiri halkaasuu Luudh muslimiinta la fariisan jiray oo kula hadli jiray. Buurtaas dusheedana waxaa ku yaalla dhagax sanam oo kale ah oo qof dheer taaggiisa leh oo la igu yiri inay tahay haweenta Luudh oo dhagax cusbo ah laga dhigay oo lagu cathaabay. Waxaan meeshaas booqday kun sagaal boqol afar iyo sagaashan, intaan taxi ka ijaartay Cammaan caasimadda Urdun. Waxaanna halkaas ku galay, ayadoo ah gobol askareed oo aan la geli karin, oo badda xeebteeda kale ay ka tirsan tahay arliga yuhuuddu xoogtay oo Israa'iil la yiraahdo, indhahaaga ayaadna ku arkaysa ciidammada yuhuudda iyo Minaarad ka mid ah minaaradaha masjid ku yaalla Quddus, anigoo askarta ilaalada ah tusay warqaddayda aqoonsiga inaan ahay Danjire Jaamacadda Dawladaha Carabta oo aan kitaab ka dhigayo bartaas. Ayaguna way iga yeeleen wa al xamdu li Allaahi Rabbi al caalamiina.

Al Cumarii wuxuu wariyay inuu qabriga Luudh ku yaallo tuulada Kafr Tariik oo qorrax kasoo bax ka xiga degmada Al Khaliilu ee arliga Falasdhiin

(Sagaal) Nabi Ismaaciil

Nabi Ismaaciil ina Ibraahiim oo Nabi ahaa laba kun iyo saddex boqol iyo sideetan sano ka hor dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Ismaaciil waxaa loo diray dadka degah Tihaamah oo ah Xijaaz iyo Yaman iyo gobollada halkaas ku yaalla. Hooyadiisna waa Haajar, oo amiirad masriyad ah ahayd. Isaguuna Ilaahay ceelka biyaha Zamzam usoo burqiyey, waana ceelka adduunka ugu biyo fiican, ugu biyo badan, uguna fac weyn. Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo isagana Makkah dhexdeeda Nabi uma dhexeyn, oo reer Makkah waxay wada ahaayeen muslimiin haysta shareecada iyo Diinta Ismaaciil, ilaa saddex boqol oo sano ka hor dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markaasoo uu Camr bin Luxayy Al Khuzaacii, una dhashay qabiilka Khuzaacah oo Makkah madax ka ahaa sanamkii ugu horreeyey oo magaciisu Apollo ahaa arliga roomaanka kasoo qaatay oo Makkah keenay, afka Carabigana loogu bixiyey Hubal oo uu Kacbada dhexdeeda dhigay, dadkana ku amray inay caabudaan. Sidaasey Makkah waxay gaalnimo ka jirtay qiyaas saddex boqol oo sano.

Nabi Ismaaciil wuxuu guursaday hawweney qabiilka Al Camaaliiq u dhalatay oo magaceeda la yiraahdo Cumaarah bintu Sacd bin Usaamah bin Ukayl Al Camaaliiqii, waana tuu aabihiis ku amray inuu furo, caruurna uma dhalin. Kaddib wuxuu guursaday haweeney u dhalatay qabiilka Carbeed ee Jurham oo magaceedu yahay Al Ssayyidatu bintu Mudaad (waa daadka saadka ku xigah) bin Camr Al Jurhamii, waxayna u dhashay laba iyo toban wiil oo ay ka farcameen dadka maanta Carabta la yiraahdo oo adduunka ku nool, uuna ugu sarreeyo, uguna khayr badan yahay, uguna wayn yahay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Caayhi Wasallam. Laba iyo tobankaas wiil waxay kala yihiin: (Kow) **Naabit,** oo curadkiisa ah. (Laba) **Qaydar** (Qaydaar-na waa la yiri). (Saddex) **Athbul** (waa thaal dhibic kor ku leh oo deelka ku xigah) (Adbiilna waa la yiri). (Afar) **Manshaa.** (Shan) **Mismac.** (Lix) **Maasaa.** (Toddoba) **Dimmaa.** (Sideed) **Athar** (waa thaalka dhibic kor ku leh oo deelka ku xigah). (Sagaal) **Dhiimaa.** (Toban) **Yadhuuraa.** (Kow iyo toban) **Nabish.** (Laba iyo toban) **Qaythumaa** (waa thaalka dhibic kor ku leh oo deelka ku xigah).

Haweentaas waxay Ismaaciil u dhashay oo kale gabar la yiraahdo Nasmatu bintu Ismaaciil, uuna guursaday ina adeerkeed Caysuu (waa saadka shiinka ku xigah) bin Isxaaq bin Ibraahiim, waxayna u dhashay wiil la yiraahdo Al Ruumu, oo roomaanka aabohood ah waana in badan oo dadka yurub dega, iyo wiil Faaris la yiraahdo oo iiraaniyiinta dhalay. Laba iyo tobankaas wiil oo uu Ismaaciil dhalay ayaa Carabta maanta jirta ka wada farcantay, haddii Qaxdhaan laga dhigo siday culummada qaarkood yiraabdeen ina Cadnaan bin Udd, oo ah awoowaha labaatanaad ee Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.
Nabi Ismaaciil waxaa loo diray reer abtigiis Jurham iyo Al Camaaliiqu oo wada degganaa arliga Xijaaz. Markaasay qaarkoodna aaminaeen, qaar kalena ku gaaloobeen. Sidaasay Al Suhaylii iyo ghayrkiisba u wariyeen.

(Toban) Nabi Isxaaq

Nabi Isxaaq ina Ibraahiim, Calayhimussalaamu, waana Ismaaciil walaalkiis ay isku aabe yihiin, kalase hooyo, oo Isxaaq waxaa dhashay ina adeerta Ibraahiim Saarrah. Isxaaq waxaa loo diray dadka Falasdhiin iyo gobolkaas degi jiray, waxayna isku zaman yihiin walaalkiis Ismaaciil.
Nabi Isaxaaq ina Ibraahiim wuxuu dhalay laba wiil oo mataano ah oo la kala yiraahdo **Cays** oo soo horreeyey, iyo walaalkiis oo ciribtiisa ku joogay oo magaciisuna ahaa **Yacquub**, oo ah Nabi Israa'iil. Yacquub macneheedu waxaa weeye kii midka ka horreeya ciribtiisa ku joogay oo caqab waxaa la yiraahdaa ciribta.

(Kow iyo toban) Nabi Yacquub/Israa'iil

Nabi Yacquub, Calayhissalaamu, waana ina Isxaaq bin Ibraahiim Khaliilu Al Rraxmaani. Yacquub waa isla Nabi Israa'iil, waxaana Yacquub loogu bixiyay isagoo ahaa mataanka walaalkiis Cays oo midkaan ciribtiisa ku joogay oo

caqab waa ciribta. Yacquub wuxuu noolaa isla waqtiga aabihiis Isxaaq. Yacquub waa aabaha dhalay laba iyo tobanka wiil oo ay ka farcameen laba iyo tobanka qabiil ee reer Banuu Israa'iil.

Yacquub waxaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, ka dhigay Nabi iyo Rasuul. Isagoo hurda ayaa ruuxiisa la dheelmiyay, oo sidaas ayuu magac labaad ku yeeshay oo ah Israa'iil, oo macneheedu yahay "kii la dheelmiyay". Ruuxiisa ayaa la dheelmiyay ee jirkiisa lama dheelmin, sida loo dheelmiyay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Nabi Yacquub wuxuu dhalay laba iyo toban wiil, oo ay ubadkooda yihiin yuhuudda maanta adduunkaan ku nool.

Sidaas ayaa inta Nabi iyo Rasuul ka dambaysay Nabi lbraahim, Calayhissalaamu, waxaa ahaayeen ubadkiisa, oo isagay ka wada farcameen. Sidaas ayaa Nabi Ibraahiim, Calayhissalaamu, waxaa loogu naaneysaa **"Aabaha Anbiyada".**

Waxaad halkaas ka arkeysaa inay Carabta iyo Yuhuudda kala dhaleen wiil iyo adeerkiis, oo uu wada dhalay Nabi Ibraahiim, Calayhimussalaamu.

Nabi Yacquub, oo ah Nabi Israa'iil, wuxuu dhalay labo iyo toban wiil, oo ah ragga ay ku abtirsadaan labo iyo tobanka qabiil ee reer Banii Israa'iil, oo Banii Israa'iil macneheeduba waxaa weeye "wiilasha Israa'iil". Wiilashaas magacoodu waxay kala ahaayeen: (kow) **Rawbiil.** (Labo) **Shamcuun.** (Saddex) **Laawii.** (afar) **Yahuuthaa.** (Shan) **lisaakhir.** (Lix) **Zaablunn.** Lixdaas hooyadoodna waxaa la oran jiray Layyaa. (Toddoba) **Nabi Yuusuf**. (Sideed) **Benyaamiin**. (Sagaal) **Daan**. (Toban) **Naftaalii**. (kow iyo toban) **Jaad**. (Laba iyo toban) **Ashiir**. Yuusuf iyo Benyaamiin, hooyadoodna waxaa magaceedu ahaa Raaxiil. Daan iyo Naftaalii oo ay dhashay addoomad ay lahayd Raaxiil ayna u guurisay ninkeedaYacquub intayan ayadu ubad u dhalin, magaceeduna ahaa Balhaa; Jaad iyo Ashiir oo, ay u dhashay addoomad ay lahayd Layyaa, oo ay ninkeeda Yacquub u guurisay, magaceeduna ahaa Zulfaa. Layyaa iyo Raxiil waxay ahaayeen labo gabdhood oo walaalo ah, oo isku aabbe iyo isku hooyo ahaa, uuna dhalay Yacquub abtigiis oo la oran jiray Laabaan. Yacquub abtigiis Laabaan ayuu isagoo dhallin yar u yimid. Abtigiisna wuxuu lahaa laba gabdhood, oo midda weynna la oran jiray Layyaa, midda yarna Raaxiil. Labadooda waxaa qurux badnayd midda yar ee Raaxiil ah. Yacquub wuxuu weydiistay abtigiis inuu u guuriyo Raaxiil, abtigiisna wuu ka yeelay, wuxuuse ku xiray shardiga ah inuu toddoba sano ariga u raaco. Yacquub waa yeelay, oo markii ay toddoba sano kasoo wareegatay, ayaa habeenkii dambe gabar loo aqal geeyey. Markuu subixii soo kacay, ayuu Yacquub arkay in gabadha xalay uu la aqal galay ay ahayd Layyaa, oo ahayd tii weyneyd, lagan qurxoonaa. Markaas ayuu Yacquub wuxuu abtigiis ku yiri: "Miyaad i dhagartay? anigu gabadhaan ku weydiistay waxay ahayd Raaxiil." Abtigiis wuxuu ku yiri: "Annaga sunnadeenna ma aha inaan gabadha yar uga hor aqal dhisno midda yar. Haddaad midda laguu dhisay walaasheed jeceshay, toddoba sano oo kale ariga ii raac, markaas ayaan kuu guurinayaaye," Sidaas ayuu Yacquub yeelay, oo markaas kaddib ayaa Raaxiil loo guuriyay, una dhali doonta Nabi Yuusuf iyo walaalkiis Benyaamiin. Waxaa halkaas ka cad in shareecadii Nabi Isxaaq, oo ahaa Nabi

Yacquub aabihiis ay bannaanayd oo ay xalaal ahayd in laba gabdhood oo walaalo ah uu nin isku waqti qabi karo, siday ugu bannaanayd shareecadii u ku taagnaa Nabi Aadan inay wiil iyo gabar wada dhashay is guursadaan. Shareecada la siiyay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo ummaddiisana waa xaaraan oo ma bannaana in ay laba gabdhood oo walaalo ah ay isku mar hal nin u dhaxaan, ama in wiil iyo gabar wada dhashay ay is guursadaan. Diinta ay Anbiyaadaas oo idil haysteen waxay ahayd Diinta Islaamka, waxaase is beddelayay hadba siduu u garto Ilaahay, Cazza wa Jalla, shareecada lagu dhaqmo, oo ah waxa xalaasha ah iyo waxa xaaraanta ah iyo waxa iska bannaan oo mubaax la yiraahdo. Laba iyo tobankaas wiil oo Nabi Israa'iil dhalay waxaa Nabi ka noqday Nabi Yuusuf, Allaha u wada naxariistee, kaasoo dalka Masar muddo Xaakim u ahaa, oo boqor u noqday. Inta Yuusuf ka dambeysey, Nabiyada reer Banii Israa'iil, Allaha u wada naxariistee, ilaa laga soo gaaro Nabi Daa'uud iyo wiilkiisii Nabi Sulaymaan, waxaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, ka soo dhex saari jiray ubadka ninka la yiraahdo Laawi; boqorradoodana wuxuu ka soo saari jiray ubadka ninka la oran jiray Yahuuthaa: oo waxaa halkaas laga arkayaa inay Nabiga iyo Boqorku ay laba qof kala ahaayeen. Markay reer Bani Israa'iil dhulka Falasdhiin , oo Quddus caasimadda. u tahay, galeen, ayaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, wuxuu Nabinnimada iyo Boqornimada isugu daray Nabi Daa'uud, Calayhissalaamu, kaasoo ku abtirsada ninka la yiraahdo Benyaamiin, oo ay Nabui Yuusuf isku bahda ahaayeen, oo aan hore laga soo dhex saari jirin Nabiyada iyo Boqorrada midna. Markaas ayay labadii qabiil oo ahaa reer Laawi, oo Nabiyada laga soo dhex saari jiray, iyo Yahuuthaa, oo Boqorrada laga soo dhex saari jiray, oo ay sidaas sharaftii uga wareegtay, nabinnimadiisa diideen iyo boqornimadiisaba, oo intay ku keceen, ka sameeyeen sheekoyin af miinshaarnimo ah oo aan ka suurtoobin nin ah Nabi iyo Rasuul Ilaahay uu soo diray oo macsuum ilaalsan ah. Quraanka kariimka ah ayaa sidaas nooga sheekeynaya, oo ilaa maanta aan joogno, dadka yuhuud isku sheega ma aqoonsana inay Daa'uud iyo Sulaymaan Nabiyyo ahaayeen. Ninka la yiraahdo Cimraan, oo intuu noolaa Salaadda imaam ugu ahaan jiray dadkiisa, wuxuu ku abtirsadaa, oo uu ka farcamay Nabi Daa'uud, waana ninka iyo qoyskiisa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, ugu magac daray Suuradda Wayn ee Kariimka ah ee la yiraahdo Aali Cimraana, oo macneheedu yahay "Qoyska Cimraan".

Cimraan wuxuu ahaa ina Maathaan, waxaana awoowe u ah, oo uu ku abtirsadaa Nabi Sulaymaan, Calayhissalaam. Cimraankaan waa aabaha dhalay Maryama bintu Cimraana, hooyada dhashay Nabi Ciise Calayhissalaamu. Waxaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, noogu sheegay Aayadaha saddex iyo soddon iyo afar iyo soddon ee Suuratu Aali Cimraana: **"Inna Allaaha isdhafaa Aadama wa Nuuxan wa Aala lbraahiima wa Aala Cimraana calaa al caalamiina**(33)**Thurriyata bacduhaa min bacdin wa Allaahu Samiicun Caliimun**(34) Aayadaha macneheedu waxaa weeye: "Ilaahay wuxuu ka doortay Aadan, Nuux, ehelka Ibraahiim iyo ehelka Cimraan caalamka(33)Waana farac qaarkood qaar ka. yimid, Ilaahayna waa Maqle wax walba Ogsoon(34)". Waxay Aayadahaani noo sheegayaan inuu Ilaahay,

Subxaanahu wa Tacaalaa, uu jinniga iyo insiga dhexdooda ka doortay Nabi Aadan, iyo Nabi Nuux, iyo ehelka Nabi Ibraahiim oo uu Nabi Muxammada, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka mid yahay, isagoo uu Ibraahiim awoowihiisa yahay, iyo ehelka Cimraan, oo kuwaasu yihiin kuwii jinniga iyo insigaba ugu fiicnaa. Cimraan wuxuu qabay haweeney magaceedu ahaa **Xinnah** ina Faaquud ina Qabiil oo Ilaaheed aad u caabudi jirtay; walaasheedna waxaa la oran jiray **Al Ashbaac** ama Ashyaac ina Faaquud, waxaana qabay Nabi Zakariyyaa, oo ay u dhashay wiil ahaa Nabi Yaxye, kulligood Allaha Kariimika ah ha u naxariistee.
Al Qasdhalaanii wuxuu yiri: "Wuxuu ibnu Caadil ku xusay tafsiirkiisa inuu Jibriil, Calayhissalaamu, Yacquubna kusoo degay afar goor."

(labo iyo toban) Nabi Yuusuf

Nabi Yuusuf, Calayhissalaamu, waana ina Nabi Yacquub bin Isxaaq bin Ibraahiim. Hooyadiisna waa Raaxiil. Yuusuf wuxuu noolaa laba kun iyo sideed boqol iyo toddobaatan sano ka hor dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Yuusuf waxaa loo diray Fircoonka Masar oo uu Al Suhaylii yiri magaciisu wuxuu ahaa Al Rrayyaanu bin Al Waliidu. Fircoonka Muusena waxaa la oran jiray Al Waliidu bin Muscab, kan Ibraahiinna Sinaanu bin Culwaana, kaddibna, siduu Ilaahay Quraanka noogu sheegay wuxuuba noqday boqorka Masar, kaddib markuu Fircoonkiisu islaamay.
Nabi Yuusuf wuxuu maray tijaabooyin yaab leh oo walaalihiis ayaa ceel ku riday oo inta agtiisa fariistay dhawray inuu safar soo maro. Markaasaa waxaa soo maray safar Masar u socda, markaasay ka gateen oo lacag yar ka siisteen oo kaddibna suuqa Masar ku gateen, waxaana gatay Wasiirka Boqorka Masar, oo magaciisu ahaa Qidhfiir, ibnu Isxaaqna uu yiri wuxuu ahaa Idhfiir bin Ruwayxib, una gaday haweentiisa Raaciil, siduu Al Maawardii magaceeda ku sheegay. Waxaa kaloo la yiri inuu magaceedu ahaa Zaliiqaa'a. Sidaaasuu addoon la leeyahay ku noqday. Kaddibna haweenta lahayd ayaa u yeeratay ayadoo isku rabta isaguna uu diiday. Markaasaa la xabbisay. Wuxuu xabbisnaa ilaa saddex iyo toban sano, ilaa afar iyo tobanna waa la yiri. Kaddibna Yuusuf isagaaba Masar boqor ka noqday. Markaasuu u yeeray oo ay u yimaadeen aabihiis iyo walaalihiis iyo reerkooda oo idil, tiradooduna waxay wada ahaayeen laba iyo toddobaatan qof oo rag iyo haweenba isugu jira. Kaddib waxaa Banuu Israa'iil ka waday Masar Nabi Muuse, Calayhissalaamu, waana isaga Badda Cas loo kala dhanbalay oo intuu Masar ka baxay isagoo reerr Banii Israa'iil hoggaaminaya, tiradooduna ay tahay lix boqol oo kun oo nin oo wada gar madow dagaal yahan ah oo uusan ku jirin nin labaatan jir ah ama ka yar oo yaraan lagu tiriyay ama lixdan iyo ka badan jirah oo odaynnimo lagu tiriyey, ayna la socdaan haweenkooda iyo caruurtooda iyo waayeelkooduba, siduu Al Baghawii tafsiirkiisa ugu wariyay, uuna ku daray inuu Yacquub iyo ubadkiisu markay arliga Masar soo galeen oo uu wiilkiisa Yuusuf oo Boqor ka ahaa u yimid ay tiradoodu ahayd, uu dhanka Siinaay ugu tillaabay, maalinta Caashuuraa' oo ah maalinta tobanaad ee bisha

Muxarram oo uu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam in la soomo ayadaas iyo maalinta sagaalaadba noo sunneeyey." Runtana Rabbi ayaa og.
Intuu Yuusuf xabbiska ku jiray ayuu Wasiirku dhintay. Markuu boqor noqday Yuusu ayuu helay Zaliiqaa'a oo miskiinad indha beeshay ah oo islaantay, waxayna u sheegtay inuusan ninkeedu haweenka u tegi jirin. Markaasuu u Alle baryay oo uu Ilaahay dhallinyarannimadeeda u soo celiyay iyo indheheedaba. Markaasuu guursaday, wuxuuna arkay inay bikro aan la taaban tahay, waxayna u dhashay laba wiil oo la kala yiraahdo Ifraathiim bin Yuusuf iyo Manshaa bin Yuusuf. Nabi Muuse ayaa markuu Masar ka baxayay maydkiisa hore usii qaaday oo aabihiis agtiisa ku duugay arliga Falasdhiin.
Al Cumarii wuxuu yiri: "tan saxiixa ah waa inuu ceelka Yuusuf lagu riday uu ku yaallo dariiqa Al Quds, tuulada la yiraahdo Sinjiil. Waxaana kaloo la yiri waa Sayluun, oo ah tuuladuu degganaan jiray Yacquub Calayhissalaamu Ceelkuna wuxuu u dhexeeya Sinjiil iyo Naabulus dhanka midigta ah ee dariiqa. Qabriga hooyadiis Raaxiil wuxuu ku yaalla dhanka midig ee dariiqa isku xira Al Quds iyo Al Khaliil."

(Saddex iyo toban) Nabi Ayyuub

Nabi Ayyuub, Calayhissalaamu, wuxuu noolaa qiyaas laba kun iyo sideed boqol iyo toddobaatan sano ka hor dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Nabi Ayyuub waa Ayyuub bin Muus bin Zaraax bin Racwaayil bin Al Cays bin Isxaaq bin Ibraahiim Calayhissalaamu, sidayba noo sheegtay Aayadda afar iyo sideetan ee Suuratu Al Ancaami: **"Wa min thurriyyatihi** (Ibraahiim) **Daa'uuda wa Sulaymaana wa Ayyuuba wa Yuusufa wa Muusaa wa Haaruuna**(84)**"**, oo macneheedu yahay: "Dhashiisana (waana Nabi Ibraahiim) waxaa ka mid ah Daa'uud iyo Sulaymaan iyo Ayyuub iyo Yuusuf iyo Muusaa iyo Haaruun(84)." Aabihiis iyo hooyadiis waxay aamineen oo rumeeyeen Nabi Ibraahiim, Calayhissalaamu maalintuu Namruud dabka ku riday. Haweentiisa Quraanka ku xusanna magaceedu waa, siduu u yiri Doktoor Musdhafaa Muraad oo xubin ka ah Hay'ad wax barashada ee jaamacadda Al Azhar ee Al Qaahira, dalka Masar, kuna yiri kitaabkiisa Zawjaatu Al Anbiyaa'i oo lagu daabacay Daaru Al Fajri Lil-turaathi, Manshaa bintu Yuusuf bin Yacquub, sida caanka ah, waxaana kaloo la yiri waa Layyaa bintu Yacquub bin Isxaaq, isagaana u guuriyay. Waxaa kaloo la yiri waa Raxmah bintu Ifraa'iim bin Yuusuf bin Yacquub, oo lahayd beesha la yiraahdo Al Bathaniyyah oo arliga Shaam ku taalla dhammaanteed. Ayyuub wuxuu iska lahaa lahaa Al Bathaniyyah kulligeed qorrax kasoo bexeeda ilaa qorrax u dheceeda, wuxuuna halkaas ku lahaa kun riyood iyo ari jirkooda, iyo shan boqol oo faddaan, waa hektare, oo ay uga shaqeeyaan shan boqol oo addoon, addoon walbana uu leeyahay haweeney iyo caruur iyo maal, qalabka hektar walba looga shaqeeyana lagu qaado dammerad, dameerad walbana ay caruur leedahay u dhexeeya laba ama saddex ama afar ama shan ama ka badanba. Ayyuub hooyadiisna waxaa dhalay Nabi Luudh bin Haaraan. Si kalena waa la yiri. Intaas waxaa wariyay

Al Dhabarii iyo Al Mascuudii. Al Nawawii wuxuu Tahthiibu Al Asmaa'i ku sheegay inay degmadiisu ahayd magaalada Xawraan, halkaasna uu qabrigiisu ku yaallo tuulada Nawaa agteeda, hlakaasoo uu masjid ugu yaallo. Xawraan amaa Xaaraan waxay ku taallaa arliga Ciraaq waxayna u dhexeysaa oo waqoyiga ka xigtaa labada magaaloo oo kala ah Niinawaa (Ciraaq) iyo Xalab (Suuriyaa). Qabrigiisuna wuxuu ku yaalla Xawraan.
Al Qasdhalaanii wuxuu yiri: "Wuxuu ibnu Caadil ku xusay tafsiirkiisa inuu Jibriil, Calayhissalaamu, Ayyuubna wuxuu kusoo degay saddex goor."

(Afar iyo Toban) Nabi Muuse

Nabi Muuse, Calayhissalaamu, oo noolaa qiyaas kun iyo toddoba boqol iyo toddobaatan sano ka hor dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Muuse waxaa loo diray Fircoonka Masar oo magaciisu ahaa Al Waliidu bin Muscab. Ibnu Kathiir wuxuu yiri: "Muuse magaciisu waa Muusaa bin Cimraan bin Qaahith (waa tha saddex dhibcood kor ku leh) bin Caazir bin Laawii bin Yacquub bin Isxaaq bin Ibraahiim Calayhimussalaamu. Al Suhaylii wuxuu yiri: "magaca Muuse hooyadiis waa "Ayaarikhaa", waxaa kaloo la yiri waa: "Ayaathakhtu". Waa intaas warka ibnu Kathiir. Al Dhabarii wuxuu wariyay oo yiri: "inay hooyadiis ahayd "Yuukhaabid". Walaashiisa ka waynna oo Quraanka Suuratu Al Qasas ku xusanna magaceedu wuxuu ahaa Maryama, siduu Al Qurdhubii iyo ghayrkiisba u xuseen. Walaalkiisa ka waynna waa Nabi Haaruun bin Cimraan. Aabohood wuxuu ka shaqayn jiray buuraha dhagaxda laga qodo markay Banii Israa'iil Fircoonka Masar addoommo u ahaayeen, wuxuuna dhintay isagoo Muuse caloosha hooyadiis ku jiro, oo isma ayan arag.
Muuse wuxuu guursaday gabadha Nabi Shucayb oo loo diray Madyan, magaceeduna wuxuu ahaa Safuuriyaa, ama Saafuuraa walaasheedna waxay ahayd Layyaa. Waxayna u dhashay wiilasha kala ah Jurshuun iyo Ilyaacaazir.
Fircoonka loo dirayna haweentiisu waxay ahayd muslimad siduu Ilaahay Quraanka noogu sheegay, magaceeduna wuxuu ahaa Aasiyah bintu Muzaaxim bin Cubayd bin Al Rriyaan bin Al Waliid, siduu Al Dhabarii u wariyay.
Nabi Muuse qabrigiisu wuxuu ku yaalla, ayu Al Cumarii yiri, magaalada Ariixaa'a agteeda , tuulo loo yaqaanno Shayxaan ee arliga Falasdhiin. Qiso cajiib ahna wuu ka sheekeynayaa iyo inuu Ilaahay ka baryay inuu tuso calaamad inuu qabrigaasu yahay qabriga Muuse. Markaasuu Muuse ku riyooday isagoo qabrigiisaas kasoo baxaya. Qabriga haweentiisa Safuuraa'a ina Nabi Shucayb wuxuu ku yaalla tuulada la yiraahdo Kafr Mandah, oo la yiri inuu ceelkuu gabdhaha ariga uga waraabiyay oo dhagaxa afka ceelka saarnaa ka qaaday uu isaguna tuuladaan ku yaallo. Qabriga hooyadiisna, siduu Al Cumari u yiri, wuxuu ku yaalla tuulo la yiraahdo Irbil oo ka mid ah tuulooyinka Dhabariyyah ee arliga Falasdhiin, dhanka midig ee dariiqa, halkaasoo ay ku duugan yihiin afar ka mid ah wiilasha Yacquub oo kala ah Daan iyo Absaakhuur iyo Zabluun iyo Kaath.
Al Qasdhalaanii wuxuu yiri: "Wuxuu ibnu Caadil ku xusay tafsiirkiisa inuu Jibriil, Calayhissalaamu, Muusana kusoo degay afar boqol oo goor."

(Shan iyo toban) Nabi Haaruun

Nabi Haaruun, Calayhissalaamu, oo ahaa Muuse walaalkiis ay isku hooyo iyo isku aabe yihiin, waxayna wada noolaayeen isku zaman.
Al Cumarii wuxuu yiri: "qabriga Haaruun wuxuu ku yaalla Al Siiq oo ka tirsan degmada Al Sh-shawbak ee arliga Falasdhiin."

(Lix iyo toban) Nabi Shucayb

Nabi Shucayb, Calayhissalaamu, oo noolaa zamnka Muuse, loona diray dadka degi jiray magaalada Madyan, oo ku taallaa waqooyiga boqortooyada Sucuudiga, xagga Al Madiinah Al Munawwarah waqooyigeeda, una dhexeysa Tabuuk iyo xeebta Badda Cas, Tabuukna u jirta boqol iyo laba iyo soddon kiiloomitir, baddana toddobaatan kiiloomitir. Maantana waxaa la yirahda Al Bidc. Tabuukna waxay Al Madiinah Al Munawwarah waqooyiga ka xigtaa toddoba boqol iyo sideed iyo toddobaatan kiiloomitir. Muuse ayaaba guursaday, siduu Ilaahay Quraanka noogu sheegay, gabadha Shucayb, kaddib markuu toban sano ariga u raacay, taasoo meherkeeda ahayd.
Magaciisuna, siduu Al Dhabaraii u wariyay waa Shucayb bin Sayfuun bin Cayfaa bin Naabit bin Madyan bin Ibraahiim, koofaartiisuna waxay ahayd "Khadhiibu Al Anbiyaa'i" oo ah "khadhiibka Anbiyada" isagoo cod kar ahaa.
Ibnu Isxaaqna wuxuu yiri: "waa Shucayb bin Miikaa'iil oo ah dhasha Madyan.
Madyan wuxuu ahaa ina Nabi Ibraahiim oo ahaa kan ugu horreeyey oo bartaas dega. Dadka Madyan dega waxay khayaani jireen miisanka iyo beega badeecadaha, waxayna ahaayeen burcad dadka dariiqa ka gooya, waxayna caabudi jireen asnaam, oo gaalay ahaayeen.
Al Cumarii wuxuu wariyay inuu qabriga Shucayb ku yaallo tuulada Xidh-dhiin, qabriga haweentiisuna uu burta korkeeda ku yaallo sida la yiri.

(Toddoba iyo toban) Nabi Daauud

Nabi Daauud, Calayhissalaamu, oo noolaa kun iyo shan boqol iyo toddobaatan sano ka hor dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Magaciisu waa Daauud bin Iishaa Cuwayd bin Caabir bin Salmuun bin Taxshuun bin Cuwaynaadib bin Iram bin Xasruun bin Faarid bin Yahuuthaa bin Yacquub bin Isxaaq bin Ibraahiim Al Khaliilu. Daauud wuxuu ahaa siduu ibnu Isxaaq u wariyay nin gaaban, indhihiisu bulug yihiin, timo yar oo midabkooduna dahabka midabkiisa yahay. Ibnu Jariir Al Dhabarii wuxuu yiri: "Daauud aabihiis Iishaa wuxuu lahaa saddex iyo toban wiil oo u Daauud ugu yaryahay. Iishaa iyo laba iyo tobanka wiil oo kale waxay ka mid ahaayeen ragga Dhaaluut wabiga Urdun kala tillaabay si ay Jaaluut iyo ciidankiisa ula dagaallamaan. Nabigooduna wuxuu ahaa Shamwiil. Daauud maalin ayuu aabihiis u yimid oo ku yiri: "warafkayga waxaan ku tuuro la gafi mayo waana dilayaa." Markaasuu aabihiis wuxuu ku yiri: "bishaareyso wiilkaygow, oo Ilaahay wuxuu rizqigaaga geliyay warafkaaga oo aad ku kasbanaysaa." Markaasuu maalin kale u yimid oo ku yiri: "aabow, waxaan galay buuraha

dhexdooda, waxaanna halkaas ka helay libaax fadhiya, markaasaan dhabarka fuulay oo aan labadiisa dhegood ku dhegay, imana dhibin." Aabihiis wuxuu ku yiri: "bishaareyso wiilkaygow, kanu waa khayr uu Ilaahay ku siinayo." Markaasuu maalin kale u yimid uuna ku yiri: "aabow markaan buuraha dhexdooda socdo oo aan tasbiixsado buur walba way ila tasbiixsanaysaa." Aabihiis wuxuu ku yiri: "bishaareyso wiilkaygow oo kaasu waa khayr uu Ilaahy ku siiyay." Daauud wuxuu ahaa ari jir, wuxuuna aabihiis iyo walaalihiis u keeni jiray cunnadooda intay Dhaaluut la socdeen.

Markaasuu Jaaluut wuxuu usoo faray Dhaaluut farriintaan: "maxay dadkaaga iyo dadkaygu isu laynayaan? Adigu ii soo bax ama ii soo bixi ninkaad doontid, oo haddaan ku dilo anigaa boqortooyada iska leh, haddaad adigu I dishana adigaa boqortooyada iska leh." Markaasuu Dhaaluut, oo ahaa boqorka Banii Israa'iil wuxuu askartiisa ku yiri: "Yaa u baxaya Jaaluut oo hadduu dilo aan ku darayaa gabadhayda, boqortooyadana ila wadaagaya, aniga dabaydayna boqor noqonaya?" Markaasaa waxaa usoo baxay Daauud oo warafkiisa wata iyo hal dhagax. Jaaluut wuxuu ahaa nin jir wayn oo xoog miiran ah oo birta dagaalka wada labbisan oo hubaysan, markaasuu markuu Daauud arkay Ilaahay qalbigiisa cabsi iyo argagax ku riday. Markaasuu wuxuu ku yiri: "wiilow noqo oo waan kuu naxariisanayaa mana doonayo inaan ku dilo." Markaasuu Daauud wuxuu ku yiri: "bal anigaa ku dilaya." Markaasuu intuu warafkiisa warfiyay dhagaxa ka ganay. Markaasuu dhagaxu wuxuu Jaaluut uga dhacay labada indhood dhexdooda oo uu intuu madaxiisa dhex maray oo dalooliyay qadaadkiisa ka baxay oo uu dilay.

Markaasuu Dhaaluut wuxuu gabdhiisa uguuriyay Daauud, isaga dabadiisna boqorka Bani Israa'iil ayuu noqday, iyo Nabigooda iyo Rasuulkooda, Calayhissalaamu. Dhaaluut magaciisuna wuxuu ahaa Shawl bin Qays bin Abyaal bin Diraar bin Baxrat bin Ufayx bin Aysh bin Benyaamiin bin Yacquub bin Isxaaq bin Ibraahiim, siduu Al Dhabarii u wariyay.

Al Cumarii wuxuu wariyay inuu Daauud Baytu Laxm ku duugan yahay oo dhawr kiiloomitir u jirta Quddus, arliga Falasdhiin. Nabi Daauud Ilaahay wuxuu siiyay cod aad u qurxoon oo markuu kitaabka Ilaahay akhrinayo uuna thikrinayo uu khalqigoo idil istaago oo dhegeysto. Waxaana la tasbiixsan jiray buuraha iyo shinbiraha. Daauud ayaa isagoo dhawr iyo toban jir ah dilay Jaaluut boqorka gaalka ee ee Kancaaniyiinta, siduu Ilaahay noogu sheegay Suuratu Al Baqarah. Daauud wuxuu ahaa farsamo yaqaan oo Ilaahay wuxuu u jilciyay birta oo uu ka samayn jiray gaashaammo iyo hub iyo wax kaleba oo uu markaas gadan jiray. Ilaahay Tacaalaa wuxuu Daauud isugu daray Nabinnimo, Rasuulnimo iyo Boqornimo.

(Sideed iyo toban) Nabi Sulaymaan

Nabi Sulaymaan, Calayhissalaamu, waa ina Nabi Daauud. Sulaymaan waxaa loo diray Banii Israa'iil. Al Cumarii wuxuu wariyay inuu qabriga Sulaymaan ina Daauud ku yaallo Baytu Laxm ee arliga Falasdhiin, dhinaca qabriga aabihiis Daauud. Sulaymaan wuxuu ahaa farsamo yaqaan oo Ilaahay wuxuu u jilciyay nuxaasta oo wuu ka shaqeyn jiray. Ilaahay wuxuu u sakhiray jinniga

oo u shaqayn jiray iyo dabaysha oo gelinka horena u socon jirtay inta caadiyan bil loo socdo, soo noqoshada galabtiina soo soconeysay inta bil loo socdo. Wuxuu kaloo u sakhiray Cazza wa Jalla shinbiraha. Sulaymaan ayaa dhisay Masjidka Quddus ee hore, wuxuuna ku dhisay jinniga u shaqeynayay. Ibnu Jariir wuxuu yiri: "Sulaymaan wuxuu ahaa nin cad oo jir wayn oo quruxsan, timo badan leh, wuxuuna xiran jiray dhar cadcad. Aabihiisna wuu la tashan jiray markuu da'da ragga gaaray, waaba ayada uu Quraanku noo sheegay arrinka xukunka ariga beerta nin kale lahaa iyo sisuu Sulaymaan u riday xukun ka duwan midka aabihiis."
Sulaymaan hooyadiis, siduu Al Dhabarii uga wariyay Qataadah waxay ahayd haweeney dagaal jihaad ah lagu soo qafaalay uuna Dauud u hibeeyey ninka soo qafaalay oo askartiisa ka mid ahaa oo la oran jiray Uuriyyaa, kanoo isagoo aan la aqal gelin jihaad kale aaday. Shareecada Tawraadda ku dhignaydna waxa dhigaysay in marka gabar bikro ah la guursado laba sano uu ninkeedu la jooga oo uu raalli geliyo, markaas kaddib hadduu doono jihaad waa aadi karaa. Hadday gabadhu garoob tahayna waa hal sano inuu la jooga oo raalli geliyaa. Markaasuu Uuriyyaa jihaad aaday isagoo aan laba aqal gelin. Markaasuu Daauud u yeeray oo maxkamad la saaray, oo la doorsiiyay inuu shareecada Tawraadda ku dhaqmo oo uu la joogo haweentiisa iyo inuu furo. Markaasuu maxkamadda horteeda ka sheegay inuusan taaban gabadhaas, uuna furayo, ayadana ka doortay inuu jihaadka dib ugu laabto. Markaasuu jihaadka ku shahiiday. Markaasuu Nabi Daauud guursaday oo ay Sulaymaan ina Daauud u dhashay.

Inkiridda yuhuudda Nabinnimada Sulaymaan

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Yuhuuddu way inkireen inuu Sulaymaan bin Daauud Nabi ahaa, waxayna taasu ku timid, sida isoo gaartay, in markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam, Sulaymaan ina Daauud ku tiriyey Mursalinta ayuu nin axbaarta ka mid ihi wuxuu yiri: "Soo Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, lama yaabtaan, oo wuxuu leeyahay inuu Sulaymaan bin Daauud Nabi ahaa. WaAllaahi mana uusan ahayn waxaan saaxir ahayn." Markaasuu Ilaahay Tacaalaa kasoo dejiyay Aayadda boqol iyo labaad ee Al Baqarah: **"Wa ittabacuu maa tatluu al sh-shayaadhiinu calaa mulki Sulaymaana wa maa kafara Sulaymaanu wa laakinna al sh-shayaadhiina kafaruu yucallimuuna al nnasa al sixra**(102)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Waxayna raaceen, waa yuhuuddee, waxay shayaadiintu ka akhrineysey boqortooyada Sulaymaan. Sulaymaanna ma gaaloobin oo sixir ma samayn jirin, waxaase gaaloobay shayaadiinta oo dadka sixirka baraysay(102)." Sulaymaan hortiisa ayay ku islaanta boqorrada Yaman ee Bilqiis ahayd, sida Quraanka ku xusan.

(Sagaal iyo toban) Nabi Zakariyyaa

Nabi Zakariyyaa, Calayhissalaamu, magaciisuna waa Zakariyyaa bin Barkhiyaa, waxaa kaloo la yiri waa Zakariyya bin Daan, waxaa kaloo la yiri

waa Zakariyyaa bin Ladan bin Muslim bin Saduuq bin Xushbaan (ama Xanshabaan) bin Daauud bin Sulaymaan, ahna dhasha Nabi Daauud Calayhimussalaamu. Zakariyyaa wuxuu ahaa najjaar alwaaxda iyo qoryaha qora oo sidaasuu kasabka gacantiisa ka cuni jiray, siduu Muslim u wariyay.
Zakariyyaa waxaa u dhaxday Maryama habaryarteed oo magaceedu ahaa Ashyaac ama Ashbaac, oo u dashay wiilkiisa Yaxyaa bin Zakariyyaa. Qaar qisadiisa ka mid ahna waxaan ku arki doonnaa inshaa'a Allaahu qisada Nabi Ciise.
Zakariyyaa waxaa loo diray Banuu Israa'iil wuxuuna noolaa shan boqol iyo toddobaatan sano ka hor dhalshada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaana dishay yuhuudda kaddib markuu dhashay Ciise ina Maryama ayna yiraahdeen isagaa ka dhalay Maryama guur la'aan, taasoo been ah, Nabina uuba macsuum yahay. Markay damceen inay dilaan ayuu ka cararay. Markaasaa waxaa dariiqa u istaagay isagoo nin ari jir ah isu ekeysiiyay Ibliis oo ku yiri: "ma ku eryoonayaan?" Wuxuu yiri: "haa." Wuxuu yiri: "hadaba Ilaahaa ka bari inuu geedkaan kuu kala dhanbalo oo dhexdiisa gal oo uga dhuumo." Markaasuu Zakariyyaa Ilaahay baryay oo uu geedka u kala dhanbalay oo uu dhex galay. Markaasaa waxaa dibadda ku haray cad maradiisa ka mid ah markuu geedku isku soo noqday. Markaasaa waxaa yimid raggii eryoonayay. Markaasuu Ibliis wuxuu ku yiri: "ma nin ayaad eryoonayseen?" Waxay yiraahdeen: "haa". Wuxuu yiri: "geedkaan ayuu sixray oo dhex galay, maradiisiina waa tanaa." Markaasay miinshaar soo qaateen oo ay sidaas geedka ku gooyeen, ayna Nabi Zakariyyaa u dileen Calayhissalaamu.
Qabriga Zakariyyaa iyo wiilkiisa Yaxyaa ayuu Al Cumarii yiri waxay ku yaallaan tuulada la yiraahdo Sabasdhiyah. Waxaana la yiri inuu madaxa Yaxyaa Al Masjidu Al Amawii ee Dimishaq ku duugan yahay. Runtana Rabbi ayaa og.

(Labaatan) Nabi Yaxyaa

Nabi Yaxyaa ina Nabi Zakariyyaa, wuxuu dhashay shan boqol iyo toddobaatan sano qiyaas ka hor dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Yaxyaa waxay isku mar dhasheen oo isku mar Nabi iyo Rasuul wada ahaayeen Nabi Ciise ina Maryama Calayhimussalaamu. Qaraabana way ahaayeen. Aabihiis Zakariyyaana isku mar ayay Nabi iyo Rasuul wada ahaayeen. Qabriga Zakariyyaa iyo wiilkiisa Yaxyaa ayuu Al Cumarii yiri waxay ku yaallaan tuulada la yiraahdo Sabasdhiyah. Waxaana la yiri inuu madaxa Yaxyaa Al Masjidu Al Amawii ee Dimishaq ku duugan yahay. Runtana Rabbi ayaa og. Sababta dilidda Yaxyaa waxay ahayd sidatan. Boqorka yuhuuddu oo fadhiyay Dimishaq arliga Suuriya, wuu karaamayn jiray Nabi Yaxyaa, umuurtiisana wuu kala tashan jiray, o isago aan la tashan go'aan ma gaari jirin. Markaasuu boqorku wuxuu damcay inuu guursado haweentiisa gabadheeda ay dhashay oo xaaraan ka ah. Markaasuu Yaxyaa talo weydiiyay, Nabiguna uu ka reebay guurkeeda, uuna ku yiri: "raalli kaagama ihi." Markaasaa warkiisaasu wuxuu gaaray gabadha hooyadeed, oo Yaxyaa ku

nacday inuu boqorka u diiday inuu gabadheeda guursado colaadna way u qaadday. Markaasuu habeen markuu boqorku cabidda khamraduu cabi jiray u fariistay ayay haweentu gabadheeda u yeertay oo ay u labbistay dhar khafiif ah oo jirka laga arko oo guduudan, cadarna way u marisay, waxayna u labbistay dahab, intaasoo idilna waxay uga kor labbistay maro madow. Markaasay waxay ku amartay inay boqorka khamrada u shubto oo waraabiso, ayna isku muujiso. Hadduu markaas isu doono ay diido jeer uu siiyo waxay dooneyso. Hadduu ka yeelo inuu siiyo waxay dooneysana inay weydiisato madaxa Yaxyaa bin Zakariyyaa oo inta la soo gooyey saxan ama baaquli loo soo saaray. Markaasay gabadhu sidaas yeeshay oo ay boqorka khamrada cabsiisay, ayadoona is tusaysay. Markaasuu markuu sakhraamay ayuu doonay inuu la gogol galo. Markaasay waxay tiri: "yeeli mayo jeer aad i siisid waxaan ku weydiisto." Wuxuu yiri: "maxaadna i weydiisanaysaa?" Waxay tiri: "waxaan doonayaa inaad cid u dirtid Yaxyaa bin Zakariyyaa oo madixiisa la iigu soo rido baaquligaan." Wuxuu yiri: "war hoy maxaad leedahay! Waxaan taas ahayn i weydiiso." Waxay tiri: "ma doonayo inaan ku weydiisto waxaan taas ahayn." Markaasay markay ka diiday uu cid u diray oo madaxa Yaxyaa bin Zakariyyaa oo baaquli saaran loo keenay. Gabdhaas magaceeduna wuxuu ahaa Salomee. Qisadana waxaan kasoo qaadannay Taariikh Al Dhabarii, mujalladka koowaad bogga saddex boqol saddex iyo afartan.

(Kow iyo labaatan) Nabi Ciise ina Maryama
Warbixin kooban ee Nabi Ciise ina Maryama Calayhissalaamu

Ehelka Ibraahiim, Calayhissalaamu

Nabi Ibraahiim, Calayhissalaatu wa Al Ssalaamu, wuxuu magaciisu ahaa Ibraahiim ina Aazar, ina Naaxuur, ina Saaruugh, ina Raaghuu, ina Raacuu, ina Faalikh, ina Caybar, ina Shaalakh ina Arfakh-shath, ina Saam, ina Nabi Nuux Calayhissalaamu.

Nabi Ibraahiim wuxuu dhalay caruur ay ka mid yihiin Nabi Ismaaciil iyo Nabi Isaxaaq. Nabi Ismaaciil, oo hooyadiis ahayd Haajar, wuxuu dhalay laba iyo toban wiil oo ah dadka carabta ah oo maanta adduunka jirah, uuna ugu waynaa, uguna sharaf badanyahay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.

Laba iyo tobankaas wiil hooyadood waxaa magaceedu ahaa Assayyidah bintu Mudaad bin Camruu Al-Jurhamiyyi, oo qabiilka Jurham ah oo ka mid ah carabta Yaman degtah u dhalatay. Wiilashaas magacdoodu waxay kala ahaayeen: **(1) Naabit,** oo curadkiisa ah, **(2) Qaydar**, (Qaydaar-na waa la yiri), **(3) Athbul** (waa thaal dhibic kor ku leh oo deelka ku xigah), (Adbiilna waa la yiri), **(4) Manshaa**, **(5) Mismac**, **(6) Maasaa**, **(7) Dimmaa, (8) Athar** (waa thaalka dhibic kor ku leh oo deelka ku xigah), **(9) Dhiimaa**, **(10) Yadhuuraa, (11) Nabish**, **(12) Qaythumaa** (waa thaalka dhibic kor ku leh oo deelka ku xigah). Wiilashaas hooyadood magaceedu wuxuu ahaa Al Sayyidatu bintu Mudaad bin Camr Al Jurhamiyyi, waana midda uu Ibraahiim ku oran doono, markuu Makkah yimid ayadoo uu Ismaaciil qabo, markaasna uu Ismaaciil

Makkah ka maqan yahay: "Waxaad ninkaaga ku tiraahdaa markuu yimaado: "Raalli ayaan xakabadda gurigaaga kaaga ahay". Ibnu Hishaam wuxuu yiri: Jurham waa ina Qaxdhaan, Qaxdhaanna waa aabaha Yaman wada dhalay, oo isaguu nasabkoodu isugu yimaadaa, Qaxdhaanna waa Ibnu Caabir bin Shaalakh bin Arfakhshad bin Saam bin Nuux." Haweentaas waxay Ismaaciil u dhashay oo kale gabar la yiraahdo Nasmatu bintu Ismaaciil, uuna guursaday ina adeerkeed Caysuu (waa saadka shiinka ku xigah) bin Isxaaq bin Ibraahiim, waxayna u dhashay wiil la yiraahdo Al Ruum, oo Roomaanka aabohood ah, iyo wiil Faaris la yiraahdo oo Iiraaniyiinta dhalay. Laba iyo tobankaas wiil oo uu Ismaaciil dhalay ayaa Carabta maanta jirta ka wada farcantay, haddii Qaxdhaan laga dhigo siday culummada qaarkood yiraahdeen ina Cadnaan bin Udd, oo ah awoowaha labaatanaad ee Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Isaxaaq wuxuu dhalay laba wiil oo mataano ah oo la kala oran jiray **Cays** oo soo horreeyey, iyo walaalkiis oo ciribtiisa ku joogay oo magaciisuna ahaa **Yacquub**: Yacquub macneheedu waxaa weeye kii midka ka horreeya ciribtiisa ku joogay.

Yacquub waxaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, ka dhigay Nabi iyo Rasuul. Asagoo hurda ayaa ruuxiisa la dheelmiyay, oo sidaas ayuu magac labaad ku yeeshay oo ah Israa'iil, oo macneheedu yahay "kii la dheelmiyay": ruuxiisa ayaa la dheelmiyay, ee jirkiisa lama dheelmin, sidii loo dheelmiyay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Nabi Yacquub wuxuu dhalay laba iyo toban wiil, oo ay ubadkooda yihiin Yuhuudda maanta.

Sidaas ayaa intii Nabi iyo Rasuul ka dambaysay Nabi Ibraahim, Calayhissalaam, waxaa ahaayeen ubadkiisa, oo isagay ka wada farcameen. Sidaas ayaa Nabi Ibraahiim, Calayhissalaamu, waxaa loogu naaneysaa "Aabaha Anbiyada".

Waxaad halkaas ka arkeysaa inay Carabta iyo Yuhuudda kala dhaleen wiil iyo adeerkiis, oo uu wada dhalay Nabi Ibraahiim, Calayhimussalaamu.

Ehelka Cimraan

Nabi Yacquub, oo ah Nabi Israa'iil, wuxuu dhalay laba iyotoban wiil, oo ah ragga ay ku abtirsadaan laba iyotobanka qabiil ee reer Banii Israaiil, oo Banii Israa'iil macneheeduba waxaa weeye "wiilashii Israa'iil". Wiilashaas magacoodu waxay kala ahaayeen: Rawbiil, Shamcuun, Laawii, Yahuuthaa, Iisaakhir, Zaabluun: shantaas hooyadoodna waxaa la oran jiray Layyaa; Yuusuf iyo Benyaamiin, hooyadoodna waxaa magaceedu ahaa Raaxiil. Daan iyo Naftaalii oo ay dhashay addoomad ay lahayd Raaxiil ayna u guurisay ninkeedaYacquub intayan ayadu ubad u dhalin, magaceeduna ahaa Balhaa; Jaad iyo Ashiir oo ay u dhashay addoomad ay lahayd Layyaa, oo ay ninkeeda Yacquub u guurisay, magaceeduna ahaa Zulfaa. Layyaa iyo Raxiil waxay ahaayeen labo gabdhood oo walaalo ah, oo isku aabbe iyo isku hooyo ahaa, uuna dhalay Yacquub abtigiis oo la oran jiray Laabaan.

Yacquub abtigiis Laabaan ayuu isagoo dhallin yar u yimid. Abtigiisna wuxuu lahaa laba gabdhood, oo midda weynna la oran jiray Layyaa, midda yarna Raaxiil. Labadooda waxaa qurux badnayd midda yar ee Raaxiil ah. Yacquub

wuxuu weydiistay abtigiis inuu u guuriyo Raaxiil, abtigiisna wuu ka yeelay, wuxuuse ku xiray shardiga ah inuu toddoba sano ariga u raaco. Yacquub waa yeelay, oo markii ay toddoba sano kasoo wareegatay, ayaa habeenkii dambe gabar loo aqal geeyey. Markuu subixii soo kacay, ayuu Yacquub arkay in gabadha xalay uu la aqal galay ay ahayd Layyaa, oo ahayd tii weyneyd, lagana qurxoonaa. Markaas ayuu Yacquub wuxuu abtigiis ku yiri: "Miyaad i dhagartay? anigu gabadhaan ku weydiistay waxay ahayd Raaxiil." Abtigiis wuxuu ku yiri: "Annaga sunnadeenna ma aha inaan gabadha yar uga hor aqal dhisno midda wayn. Haddaad midda laguu dhisay walaasheed jeceshay, toddoba sano oo kale ariga ii raac, markaas ayaan kuu guurinayaaye," Sidaas ayaa Yacquub yeelay, oo markaas kaddib ayaa Raaxiil loo guuriyay, una dhali doonta Nabi Yuusuf iyo walaalkiis Benyaamiin. Waxaa halkaas ka cad inay shareecada Nabi Isxaaq, oo ahaa Nabi Yacquub aabihiis ay bannaanayd oo ay xalaal ahayd in laba gabdhood oo walaalo ah uu nin isku waqti qabi karo, siday ugu bannaanayd shareecadii u ku taagnaa Nabi Aadan inay wiil iyo gabar wada dhashay is guursadaan. Shareecada la siiyay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo ummaddiisana waa xaaraan oo ma bannaana in ay laba gabdhood oo walaalo ah ay isku mar hal nin u dhaxaan, ama in wiil iyo gabar wada dhashay ay is guursadaan. Diinta ay Anbiyaadaas oo idil haysteen waxay ahayd Diinta Islaamka, waxaase is beddelayay, hadba siduu u garto Ilaahay, Cazza wa Jalla, shareecada lagu dhaqmo, oo ah waxa xalaasha ah iyo waxa xaaraanta ah iyo waxa iska bannaan oo mubaax la yiraahdo.

Laba iyo tobankaas wiil oo Nabi Israa'iil dhalay waxaa Nabi ka noqday Nabi Yuusuf, Allaha u wada naxariistee, kaasoo dalka Masar muddo Xaakim u ahaa, oo xukumayey oo boqor u noqday. Inta Yuusuf ka dambeysey, Nabiyada reer Banii Israa'iil, Allaha u wada naxariistee, ilaa laga soo gaaro Nabi Daa'uud iyo wiilkiisii Nabi Sulaymaan, waxaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, ka soo dhex saari jiray ubadka ninka la yiraahdo Laawi; boqorradoodana wuxuu ka soo saari jiray ubadka ninka la oran jiray Yahuuthaa: oo waxaa halkaas laga arkayaa inay Nabiga iyo Boqorku ay laba qof kala ahaayeen. Markay reer Bani Israa'iil dhulka Falasdhiin , oo Quddus caasimadda u tahay, galeen, ayaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, wuxuu Nabinnimadii iyo Boqornimadii isugu daray Nabi Daa'uud, Calayhissalaam, kaasoo ku abtirsan jiray ninka la yiraahdo Benyaamiin, oo ay Nabi Yuusuf isku bahda ahaayeen, oo aan hore laga soo dhex saari jirin Nabiyada iyo Boqorrada midna. Markaas ayay labadii qabiil oo ahaa reer Laawi, oo Nabiyada laga soo dhex saari jiray, iyo Yahuuthaa, oo Boqorrada laga soo dhex saari jiray, oo ay sidaas sharaftii uga wareegtay, nabinnimadiisa diideen iyo boqornimadiisaba, oo inta ku keceen, ka sameeyeen sheekoyin afmiinshaarnimo ah oo aan ka suurtoobin nin ah Nabi iyo Rasuul Ilaahay uu soo diray oo macsuum ilaalsan ah. Quraanka kariimka ah ayaa sidaas nooga sheekeynaya, oo ilaa maanta aan joogno, dadka Yuhuud isku sheega ma aqoonsana inay Daa'uud iyo Sulaymaan Nabiyyo ahaayeen.

Ninka la yiraahdo Cimraan, oo intuu noolaa Salaadda Imaam ugu ahaan jiray dadkiisa, wuxuu ku abtirsadaa, oo uu ka farcamay Nabi Daa'uud, waana ninka

iyo qoyskiisa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, ugu magac daray Suuradda Wayn ee Kariimka ah ee la yiraahdo Aali Cimraana, oo macneheedu yahay "Qoyska Cimraan".

Cimraan wuxuu ahaa ina Maathaan, waxaana awoowe u ah, oo uu ku abtirsadaa Nabi Sulaymaan, Calayhissalaam. Waxaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, noogu sheegay Aayadaha saddex iyo soddon iyo afar iyo soddon ee Suuratu Aali Cimraan: **"Inna Allaaha isdhafaa Aadama wa Nuuxan wa Aala Ibraahiima wa Aala Cimraana calaa al caalamiina**(33)**Thurriyata bacduhaa min bacdin wa Allaahu Samiicun Caliimun**(34)." Aayadaha macneheedu waxaa weeye: "Ilaahay wuxuu ka doortay Aadan, Nuux, Ehelkii Ibraahiim iyo ehelkii Cimraan caalamka(33)Waana Farac qaarkood qaar ka yimid, Ilaahayna waa Midka wax walba maqla, wax walbana og(34)".

Waxay Aayadahaani noo sheegayaan inuu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, uu Jinniga iyi Insiga dhexdooda ka doortay Nabi Aadan, iyo Nabi Nuux, iyo ehelka Nabi Ibraahiim oo uu Nabi Muxammada, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka mid yahay, isagoo uu Ibraahiim awoowihiisa yahay, iyo ehelka Cimraan, oo kuwaasu yihiin kuwii jinniga iyo insigaba ugu fiicnaa. Cimraan wuxuu qabay haweeney magaceedu ahaa Xinnah ina Faaquud ina Qabiil oo Ilaaheed aad u caabudi jirtay; walaasheedna waxaa la oran jiray Al Ashbaac ama Ashyaac ina Faaquud, waxaana qabay Nabi Zakariyyaa, oo ay u dhashay wiil ahaa Nabi Yaxye, kulligood Allaha Kariimka ah ha u naxariistee. Xinnah caado kuma dhici jirin, oo ma ay dhali jirin. Maalin ayay waxay aragtay shimbir cunuggiisa quudinaya, markaas ayay waxay jecleysatay inay ayaduna cunug dhasho. Markaas ayay waxay Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, u gashay nathar, ama ballan ah in haddii uu siiyo cunug ay cunuggaas ka xoreyn doonto hawl kasta oo kale, ayna u goyn doonto inuu adeege u noqdo Masjidka Quddus. Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, oo natharkeedaas nooga warramaya, wuxuu Aayadda shan iyo soddon ee Suuratu Aali Cimraana noogu sheegay: **"Ith qaalat imra'atu Cimraana Rabbi innii Nathartu laKa maa fii badhnii muxarraran fa taqabbal minnii Innaka Anta Al Ssamiicu Al Caliimu**(35)**".** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Xusuuso markay tiri haweeneydii Cimraan: Rabbiyow, waxaan kuugu nadray waxaa uurkayga ku jira inuu xor u ahaado (Cibaadadaada) ee iga aqbal Adiga umbaa wax Maqle Oge ehe(35)." Waxaa dhici karta in erayga soomalidu **xer** tiraahdo uu Aayaddaas ka yimid, oo ah qof u xoroobay cibaadada iyo cilmigii lagu meelmarin lahaa. Markay gabadhaasu natharkaas gashay, ayay markiiba xayd isku aragtay oo ay caadadii heshay, kaddibna uur ayay yeelatay oo xaamilo ayay noqotay.

Xinnah

Markay ay Xinnah, ina Faaquud, oo u dhaxday Cimraan ina Maathaan, ay nathartay in haddii Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, cunug siiyo ay u xoreyn doonto inuu adeege u noqdo Masjidka Quddus, uur ayay yeelatay. Marka cuugga dhashay, Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, ayaa nooga warramaya wuxuuna ku yiri Aayadda lix iyo sddon ee Suuratu Aali Cimraan:

"Falammaa wadacathaa qaalat Rabbi innii wadactuhaa unthaa wa Allaahu Aclamu bimaa wadacat wa laysa al th-thakaru ka al unthaa wa innii sammaytuhaa Maryama wa innii uciithuhaa Bika wa thurriyatahaa min al sh-shaydhaani al rajiimi(36)**."**

Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Markay dhashay gabar, waxay tiri: Rabbiyoe, waxaan dhalay dhaddig, Rabbina waa ogyahay waxay dhashay, labna la mid ma aha dhaddig, waxaanna ku magacaabay Maryama, waxaanna kaa magan galinayaa ayada iyo fareceeda shaydhaanka la dhagaxyeeyey (la dheereeyey)(36)."

Aayadda qaybteeda ah "labna la mid ma aha dhaddig", waxay ku saabsan tahay u adeegidda Masjidka wiil iyo gabar isku mid ma aha, oo waa kala xoog badan yihiin. Tan kale wiilku waa ku nagaadi karaa Masjidka dhexdiisa, gabartuse waxay leedahay bil walba maalmo ayan dhaahir ahayn, oo ayan Masjidka dhexdiisa ku nagaadi karin, waana inta ay caadada qabto, oo markaas ayan Masjidka u adeegi karin. U adeegiddas Masjidka waxaa ka mid nadiifintiisa, dhaqiddiisa, dayactirkiisa, keenidda biyaha iyo hawlihii Masjidka la xiriira oo idil. Marka wiilku waa uga xoog badan yahay, hawlahaas, gabar. Xinnah sidaas ayay Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, waxay weydiisaneysaa cudur daar, inuu ka raalli noqdo inay gabar dhashay, aan hawlihii ay ballan qaaday siday ku habboonaayeen aan u qaban karin.

Waxay caado u lahaayeen, zamankaas iyo dadkaasu inay cunug caruurtooda ka mid ah Masjidka u nathraan. Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, baryadaas waa ka aqbalay, oo Maryama iyo wiilkay dhashayba, oo ah Nabi Ciise, Calayhissalaam, shaydhaan waa ka magan geliyay. Waxaa Imaam Axmad uu Abuu Hurayrah ka wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Maa min banii Aadama min mawluudin illaa yamasuuhu al sh-shaydhaanu xiina yuuladu, fa yastahillu al sabiyyu saarikhan mina al sh-shaydhaani, ghayra Maryama wa ibnahaa."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: **"Ma jiro cunug dhashah, oo markuu dhashaba uusan shaydhaan taaban, oo uusan taabashadaas daraadeed la ooyin, intaan ahayn Maryama iyo wiilkeeda mooyee"**, markaas ayuu Abuu Hureyrah wuxuu oran jirey: haddaad doontaan sababta ay sidaas ku noqotayna akhriya Aayadda **"Wa innii uciithuhaa Bika wa thurriyatahaa min al sh-shaydhaani al rajiimi."** Intii ay Xinnah uurka Maryama lahayd ayaa ninkeedii Cimraan dhintay, oo marka ay gabadhu dhalanayso aabeheed waa mootan yahay, ayaduna waa agoon.

Maryama

Waa Maryama ina Cimraan ina Maathaan, aabeheedna waa Cimraan, hooyadeedna waa Xinnah. Maryama waxaa la sheegay inay dhalatay markay shan iyo lixdan sano kasoo wareegatay markii uu Boqorkii la oran jiray Al Iskandar uu ka adkaaday Dawladdii Baabil (oo Ciraaq iyo Iiraan ka dhisnayd), waxayna dhimatay, ayadoo saddex iyo konton sano jirtah, shan sano kaddib markii Ciise Samada loo qaaday. Runtana Rabbi ayaa og. Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, qaybtii kale ee baryadii Xinnah wuu aqbalay, siduu

noogu sheegay Aayadda toddoba iyo soddonaad ee Suuratu Aali Cimraana: **"Fataqabbalahaa Rabbuhaa bi qabuulin xasanin wa anbatahaa nabaatan xasanan**(37)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Wuxuuna ka aqbalay Rabbigeed aqbal fiican, wuuna koriyay korin fiican (xannaano)(37)." Xinnah, ayadoo oofinaysa ballankii ay Ilaaheed la gashay, ayay markay dhashay, oo ay nuujisay, intay maro ku duubtay, ayay Maryama waxay geysey Masaajidka, waxayna u dhiibtay culumadii Masaajidka maamulaysay. Sidaan hore u soo sheegnayna, Maryama aabeheed, Cimraan, intii uu noolaa, wuxuu ahaan jiray Imaamka Masaajidka, qurbaankoodana asagaa gawrici jiray.

Mid walba oo culumadii Masaajidka joogtay oo maamulaysayba wuxuu jeclaaday, oo waydiistay inuu gabadhaas asagu kafaalo qaado, oo uu koriyo. Culumadaas waxaa u Madax ah Nabi Zakariyyaa, oo ah ina Adaa, ina Muslim, ina Saduuq kana mid ah ubadkii Nabi Sulaymaan, ina Nabi Daa'uud, Calayhimussalaamu. Nabi Zakariyyaa wuxuu qabaa, oo u dhaxdah Xinnah walaasheed, magaceeduna ahaa Al Ashbaac ina Faaquud, ahna Maryama habaryarteed. Markaas ayuu Nabi Zakariyyaa, oo Imaamkoodiina ah, wuxuu culummadii ku yiri: "Anigaa kafaalo qaadkeeda xaq u leh, oo habaryarteed qabah". Culummadii waxay Nabiga ugu jawaabeen: "Sidaas ha yeelin, maxaa yeelay haddii qofka ugu xaq leh loo daynayo, waxaa loo deyn lahaa hooyadeeda dhashay. Sidaas daraadeed aan qofkii kafaalo qaadi lahaa u qori tuuranno, oo qofkii magaciisu soo baxo xilkeeda ha qaado". Qori tuurka sida loo sameeyo waxaa weeye in inta magacda dadka tartamaya qof walba magaciisa hal warqad ama hal qori oo yar lagu dhigo, ayaa weel lagu wada ridaa. Markaas ayaa qof kale inta loo yeero waxaa la yiraahdaa hal warqad ama hal qori soo bixi. Qofkii warqaddaas ama qorigaas magaciisu ku dhignaa ayaa adkaanaya, oo wixii loo tartamayay helaya.

Sidaas ayay Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, qori tuurkaas noogu sheegayaa Aayadda afar iyo afartan ee Suuratu Aali Cimraana, Asagoona la hadlaya Nabigiisa Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuuna yiri: **"Wa maa kunta ladayhim ith yalquuna aqlaamahum ayyuhum yakfulu Maryama wa maa kunta ladayhim ith yakhtasimuuna**(44)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Mana aadan la joogin markay tuuranayeen qalimmadooda, koodii kafaala qaadi lahaa Maryama, mana aadan la joogin markay murmayeen(44)". Sida qori tuurkaan u dhacay wuxuu ahaa ayadoo intii kafaalo qaadkaas ku tartameysey, ahaana sagaal iyo labaatan nin nin, ay inta is raaceen ay wabiga Urdun oo aan ka fogayn tageen, uu mid walba oo ayaga ka mid ahaa qalinkiisii qoriga ahaa oo uu wax ku dhigan jiray wabiga ku tuuray, waxayna ku heshiiyeen in qofka ayan qalinkiisa biyaha wabigu liqin ee kor sabbeeyah, uu ahaan doono midka tartankaas ku adkaaday, oo Maryama kafaala qaadi doona. Markay qalimmadoodii wabiga ku tuureen, way wada mooseen oo biyihii ayaa leqay oo ay ka hoos mareen, daadkii ayaana qaaday, intaan ahayn qalinkii Nabi Zakariyyaa oo biyaha ka kor maray, daadkuna uusan qaadin. Sidaas ayaa Zakariyyaa xaq u yeeshay inuu Maryama kafaalo qaado oo koriyo. Kafaalo qaadku waxaa weeye inuu qofkaasu ballan qaado qofkaas la korinayo xannaaneyntiisa, cunnadiisa, arratirkiisa, hoy'giisa, waxbarashadiisa, daaweyntiisa, nabadgelyadiisa, iyo

intii qofkaas noloshiisa la xiriirtah oo awooddiisa ah. Inuu Nabi Zakariyyaa ku guuleystay kafaalo qaadkii Maryama Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, ayaa noogu sheegay Aayadda toddoba iyo soddon ee Suuratu Aali Cimraan, wuxuuna Cazza wa Jalla yiri: **"Wa kafalahaa Zakariyyaa**(37)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Waxaana kafaala qaaday (dhaqaaleeyey) Zakariyyaa(37)". Markuu Nabi Zakariyyaa, Caleyhissalaam, ku adkaaday kafaala qaadka Maryama, wuxuu u geeyey habaryarteeda uu isagu qabay, oo ahayd hooyada dhashay Nabi Yaxye ina Nabi Zakariyyaa, ayadaana korisay. Markay Maryama kortay oo ay da'dii haweenka gaartay, wuxuu qol uga dhisay dabaq kore oo ku beegan masjidka bartamihiisa, laguna koro jaranjaro, la mid ah jaranjarada lagu gaaro Albaabka Kacbada, oo qof aan isaga ahayn uusan kori jirin. Wuxuu halkaas maalin walba ugu geyn jiray waxay cunto, waxay cabtoh iyo waxay ku dhaashato oo ah dufan ay korkeeda iyo timeheeda marsato. Mar kasta oo uu Zakariyyaa ugu tago Maryama qolkaas, wuxuu dhexdiisa ku arki jiray cunno uusan isago u keenin oo taalla, gaar ahaan markuu xilligu jiilaal ama kulaylo yahayna waxaa u tiillay miraha xilliga gu'ga ama qaboobaha baxa, marka xilligu qaboobe yahayna wuxuu ku arki jiray agteeda miraha waqtiga kulaylaha baxa, oo aan markaas dalkaas laga helin. Arrintaas aad ayuu ula yaabay, markaas ayuu ayadii weydiiyay, sida Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Aayadda toddoba iyo soddon ee Suuratu Aali Cimraana noogu sheegay: **"Kullamaa dakhala calayhaa Zakariyyaa al mixraaba wajada cindahaa rizqan qaala yaa Maryamu annaa laki haathaa qaalat huwa min cindi Allaahi innaa Allaaha yarzuqu man yashaa'u bi ghayri xisaabin**(37)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Mar kastoo uu ugu galana qolka, wuxuu ka helaa agteeda rizqi, wuxuuna dhahaa: xaggee kaaga yimid Maryamow kan? Waxayna dhahdaa: wuxuu ka yimid Ilaahay agtiisa, Ilaahayna wuu u arzuqaa cidduu doono xisaab la'aan(37)." Erayga Maryama macnihiisu waxaa weeye addoontii Ilaahay oo cibaadada badnayd: waa dheddigga Cabdu Allaahi. Maryama way cibaadeysi badnayd, xagga tukashada salaadda, soomidda iyo cibaadeysiga kaleba. Sidaasna waxaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, noogu sheegay Aayado ay ka mid yihiin Aayadaha laba iyo afartan iyo saddex iyo afartan ee Suuratu Aali Cimraan: **"Wa ith qaalat al Malaa'ikatu yaa Maryamu inna Allaaha isdhafaaki wa dhahharaki wa isdhafaaki calaa nisaa'i al caalamiina**(42)**Yaa Maryamu uqnutii li Rabbiki wa asjudii wa irkacii maca al rraakiciina**(43)" Aayada macnohoodu waxaa weeye: "Xusuuso markay tiri Malaa'igtu: Maryamoy, Ilaahay waa ku doortay, waana kaa dhaahir yeelay, wuxuuna kaa doortay haweenka Caalamiinta (jinniga iyo insiga waqtigaas noolaa)(42)Maryamay adeec Rabbigaa, sujuudna, la rukuucna kuwa rukuucaya oo salaadda tukanaya(43)."

Waxay labadaas Aayadood noo sheegayaan in Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, uu Malag Jibriil u diray Maryama, uguna faray inay salaadda tukato, ayadoo la imaaneysa rukuucii iyo sujuudkii, iyo inay Ilaahay u hoggaansanaato. Markii Amarkaas loo keenay kaddib tukashada salaadda way badin jirtay, taagnaanteeduna intay tukaneyso way dheereyd tan iyo intay luguhu ka bararaan. Waxaa kale oo Aayadda hore noo sheegeysaa inuu

Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, haweenkii zamankaas noolaa oo jinniga iyo insigaba lahaa uu kasoo dhex doortay Maryama. Waxaa Tarmathi Aanas bin Maalik ka wariyay inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: : **"Khayru nisaa'a al caalamiina arbacun: Maryama bintu Cimraana wa Aasiyah binti Muzaaxim imra'atu Fircawna, wa Khadiijatu binti Khuwaylid waa Faadhimatu binti Muxammadin."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Haweenka caalamiinta, oo ah jinniga iyo insigaba afar haween ayaa ugu khayr badan: Maryama bintu Cimraana, Aasiyah haweentii Fircoon (magaceeduna wuxuu ahaa Asiyah bintu Muzaaxim), Khadiija bintu Khuwaylid (oo ah Ummu Al Mu1miniin haweenta Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, una dhashay caruurtiisa oo idil intaan lbraahiim ahayn, kanoo hooyadiis tahay Mariya), iyo Faadhimatu bintu Muxammad Rasuulka Ilaahay". Waa Xadiith saxiix ah uuna Al Tarmathii ku wariyay kitaabka Manaaqibta, baabka labo iyo lixdanaad ee fadliga Khadiijah, Allaha ka raalli noqdee, waana Xadiithka saddex kun sideed boqol iyo sideed iyo toddobaatanka.

Wuxuu Al Xaakim kitaabkiisa Al Mustadrik ka wariyay Cabdu Allaahi bin Cabbaas, Allaha ha ka wada raalli noqdee, inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Afdalu nisaa' a ahla al Jannati Khadiijatu bintu Khuwaylid, wa Faadhimatu bintu Muxammad, wa Maryama bintu Cimraana, wa Aasiyatu bintu Muzaaxim imra'atu Fircawna."** Xadiithkaan oo uu lbnu Xajar Al Casqalaanina ku xusay Fatxu Al Baarii mujalladka lixaad bogga afar boqol iyo kow iyo toddobaatan, wuxuu sugay inuu isnaadkiisu saxiix yahay, macnihiisu waxaa weeye: "Haweenka Jannada waxaa ugu deeq badan oo ugu fiican Khadiijatu bintu Khuwaylid iyo Faadhimatu bintu Muxammad iyo Maryama bintu Cimraan iyo Aasiya bintu Muzaaxim, haweenta Fircoon." Waxaa halkaas ka cad qiimaha wayn ee ay Maryama Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, agtiisa ku lahayd, iyo sida suuban oo Ilaahay ugu barbaariyay sidii ay hooyadeed Xinnah uga bariday. Waxaa kaloo wariyay Al Nasaa'ii.

Waxaa Maryama ina Cimraan karaameyn iyo ammaan xagga Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, uga timid ku filan inuu Suurad Weyn ee Quraanka ka mid ah, oo ah Suuratu Maryama, mageceeda siiyay, oo la akhrinayo intuu adduunkaan jiro, oo aan la rogin.

Markay arrintu halkaas marayso, sida uu Imaam Baghawi, bogga laba boqol lix iyo sagaashan ee mujalladka koowaad ee Tafsiirkiisa loo yaqaan Macaalimil Tanziil, iyo Imaam Dhabari uu bogga saddex boqol shan iyo afartan ee mujalladka kowaad ee kitaabkiisa Taariikhda noo wariyeen, ayaa dalkaas iyo dadkii waxaa ku dhacay abaar iyo dhibaato dhaqaale, markaas ayaa Zakariyyaa waxaa ku adkaaday dhaqaalihii uu ku sii wadi lahaa korrimada Maryama. Markaas ayuu Banii Israa'iil arrintii u bandhigay, wuxuuna yiri: "Ilmihii Israaiilow, wa Allaahi waxaad ogtihiin in da'deydu weynaatay, tabartii dhaqaale oo aan Maryama ina Cimraan ku korin lahaana way yaraatay: kiinneebaa dabadey kafaalo qaadaya?". Waxay yiraahdeen: "w Aallaahi waan dhibtoonnay, abaarta aad u jeedo ayaana na haleeshay", markaas arrintii isku dhiib dhiibeen, markaas ayay iska waayeen qof kafaala

qaadah. Markaas ayay u qori tuurteen, ama u qalimo tuurteen, waxaana soo baxay qalinkii nin Banii Israa'iil ka mid ahaa oo najjaar ahaa, oo farsamada alwaaxda ku shaqeysan jiray, magaciisuna ahaa Yuusuf ina Yacquub ina Maathaan, oo ay Maryama ilma adeer laxmi ah ahaayeen, oo laba nin oo walaalo ah ay kala dhaleen. Yuusuf ayaa marka ay dhabarka u saarantay inuu bixiyo dhaqaalaha korinta Maryama. Yuusuf dhaqaalahaasu wuxuu ku ahaa culays, Maryamana wajigiisa ayay ka garatay culayskaas, markaas ayay waxay ku tiri: "Yuusufow, Ilaahay wax san ka filo, Asagaa rizqi na siinayee". Markaas ayaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, xilkaas Maryama uu qaaday daradiis, Yuusuf ku rizqi siin jiray, markaas ayuu maalin walba wuxuu u keeni jiray intii maalintaas uu kasbaday inta ayada ku filan. Intaas uu Yuusuf ugu keeno Masjidka dhexdiisa maalin walba, ayaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa u tarmiyaa oo u badiyaa. Markaas ayaa markii uu Nabi Zakariyyaa Maryama qolkeeda ugu soo galo, ayuu wuxuu ku arkaa cunno hartay, oo kaba badan intii uu Yuusuf u keenay. Halkaas ayaa Zakariyyaa wuxuu qolka Maryama ku arki jiray miro aan xilligoodii la joogin, oo waqtigaas aan dalkaasba laga helin, iyo cunno hartay, ama hambo Maryama markay cuntay ka hartay, oo kaba badan intii uu Yuusuf u keenay. Maryama iyo ina adeerkeed Yuusuf waxay u xilsaarnaayeen u adeegidda Masjidka, xagga xaaqidda, nadiifinta, dayactirka dhaaminta iyo hawl kasta oo laga qabanayo: hawshaasu waxay Banii Israa'iil agtooda ku lahayd fadli iyo deeq wayn. Lama arag laba qof oo u adeegidda Masjidkaas uga dadaal badan. Markay biyuhu ka dhammaadaan, intuu mid walba haantiisa qaato ayay waxay aadi jireen hog ay dhexdiisa ku tiil god biyuhu fariistaan, markaas ayay halkaas ka soo dhaamin jireen, ayagoo haamohooda soo buuxsanaya.

Kulanka Jibriil iyo Maryama

Maalin maalmaha ka mid ah, oo ahayd maalinta sanadka ugu dherer uguna kulayl badan, ayaa Maryama waxaa ka dhammaaday biyihii haanta ugu jiray, markaas ayay waxay Yuusuf ku tiri: "Ina keen aan soo dhaansannee". Wuxuu ugu jawaabay: "Waxaa ii haray in biyo ah oo tan iyo berri igu filan". Ayadii ayaa waxay markaas tiri: "wa Allahi aniga biyo iima harin", markaas ayay intay haanteedii qaadatay ayay keligeed hoggii u biyo doonatay. Sidoo kale markii ay xaydh isku aragto, oo caadadii u timaaddo, Masjidka wax ka bixi jirtay, iyo markay xaajjo kale oo lagama maarmaan ah jirtana Masjidka way ka bixi jirtay. Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Asagoo bixiddaas ay Maryama Masjidkii ka baxday nooga warramaya, wuxuu ku yiri Aayadaha lix iyo toban iyo toddoba iyo toban ee Suuratu Maryama: **"Wa athkur fii Al Kitaabi Maryama ithi intabathat min ahlihaa makaanan sharqiyyan**(16)**Fa ittakhathat min duunihim xijaaban fa arsalnaa ilayhaa Ruuxanaa fa tamath-thala lahaa basharan sawiyyan**(17)**."** Aayadaha macnohoodu waxaa weeye: "Ku xusuuso Kitaabka Maryama, markay uga fogaatay ehelkeeda meel bari ah (bariga Magaalada Quddus)(16)Oyna ka yeelatay xaggeeda astur, oon u dirray xaggeeda Ruuxannaga (Jibriil), oo isugu shabahay dad eg(17)." Markay hoggii dhex gashay, ayaa waxaa u yimid

Malak Jibriil oo nin iska soo dhigay, oo muqaal nimeed leh. Markay aragtay, way ka cabsatay oo waxay u moodday inuu yahay nin banii Adan ah, markaas ayay waxay ku tiri: **"Qaalat innii acuuthu bi Al Rraxmaani minka in kunta Taqiyyan**(18)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Waxay tiri anigu waxaa kaa magan galay (Eebaha) Raxmaan ah, haddaad tahay mid dhawrsanaya(18)", waana Aayadda sideed iyo tobnaad ee Suuratu Maryama. Ujeedadeedu waxaa weeye, oo ay ku leedahay: haddii aad tahay nin mu'min ah oo Ilaahay ka baqah, rumeyntaada Ilaahay ayaa xumaantaada iga celinaya, asagoo uu iimaanku xumaanta reebo, isla markaasna Ilaahay hadduu xumaan la socdo ka magan geleysa. Jibriil, Calyhissalaam, wuxuu ugu jawaabay inuu yahay Rasuul Ilaahay u soo diray, ugana soo diray inuu u hibeeyo wiil dhaahir ah oo ay dhasho. Markaas ayay waxay ku tiri: sideebaan wiil u dhalayaa, anigoo uusan nin i qabin, aanna ahayn mid camalka xun ee zinada ah suubineysa? Jibriil wuxuu arkay inay la yaaban tahay inay wiil dhasho ayadoo aan ninna qabin ayaduna ayan gabar xun ahayn, markaasuu wuu ugu jawaabay isagoo u sheegay inay Ilaahay la sahlantahay oo wax fudud la tahay inuu wiil siiyo, maxaa yeelay wuxuu doono wuu samayn karaa. Wuxuuna Rabbigaa doonayaa inuu wiilkaas aabe la'aanta dhalanaya uu dadka uga dhigo calaamad, tusinaysa kaamilnimada awoodda abuuridda Ilaahay, Asagoo Aadan abuuray aabbe iyo hooyo la'aan, Xaawa abuuray hooyo la'aan, dadka intiisa kale aabbe iyo hooyo ka dhex abuuray, wiilkaasna hooyo ka abuuraya aabbe la'aan. Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, oo hadalladaas ay Jibriil iyo Maryama is dhaafsadeen nooga warramay, wuxuu noogu sheegay Aayadaha sagaal iyo toban iyo labaatan ee Suuratu Maryama: **"Qaala innamaa anaa Rasuulu Rabbiki li ahaba laki ghulaaman zakiyyan**(19)**Qaalat annaa yakuunu lii ghulaamun wa lam yamsasnii basharun wa lam aku baghiyyan**(20)**Qaala kathaaliki qaala Rabbuki Huwa calayya hayyinun wa li najcalahu aayatan li al naasi wa Raxmatan Minnaa wa kaana amran maqdiyyan**(21)".

Aayadaha macnohoodu waxaa weeye: "Wuxuuna ku yiri anigu waxaan uun ahay Rasuulka Rabbigaa inaan ku siiyo wiil daahir ah(19)Waxayna tiri sidee iigu ahaan wiil, anigoo uusan i taaban dad, ahaynna mid xun (la tuhmo)(20).Wuxuuna yiri: waa sidaas, wuxuuna yiri Rabbigaa wuu u fudud yahay korkeyga iyo inaan uga yeello calaamad dadka iyo naxariis xagayga ah, waana arrin la xukumay (dhammeeyey)(21)". Waxay Aayadda 21 caddeyneysaa inay ujeedooyinka uu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, wiilkaas hooyo uga abuurayo asagoo aan aabbe lahayn, ay ka mid tahay inuu Nabi iyo Rasuul ka dhigo, uuna u soo diro dadkiisa oo uu kuwaas inay Ilaahay keli ah caabudaan ugu yeero, oo sidaas intii yeesha u yeeriddaas ay Naarta Jahannimo ka badbaadaan: taas weeye naxariista Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, uu Nabi Ciise Caleyhissalaam, u soo diray. Isagoo naxariistaas noo tilmaamaya, ayaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, wuxuu Aayadda kow iyo labaatan ee Suuratu Aali Cimraana ku yiri: **"Wa Raxmatan Minnaa**(21)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Iyo naxariis xagayga(21)".

Maryama uurka Ciise ayay yeelaneysaa

Kaddib markii ay Jibriil iyo Maryama hadalkaas is dhaafsadeen, ayaa Ilaahay, Subxaanahu wa tacaalaa, wuxuu Jibriil amray inuu qoorta cambuurkeeda Ruuxii ku afuufo. Markaas ayaa Malak Jibriil, Calayhissalaam, intuu Maryama ka qabtay dhammadka gacnaha cambuurkeedii, ayuu wuxuu afuufay meesha luqunta cambuurka ku beegan, halkaasoo afka carabiga jeebka cambuurka la yiraahdo. Neeftii waxay u degatay, oo ay ku sugnaatay ilmo galeenka Maryama halkaas oo uu Nabi Ciise ku calool galay. siduu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Aayadda sagaashan iyo koowaad ee Suuratu Al Anbiyaa'i noogu sheegay: **"Wa allatii axsanat farjahaa fa nafakhnaa fiihaa min Ruuxinaa wa jacalnaahaa wa ibnahaa aayatan li al caalamiina**(91)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Tiina (xusuuso) dhawrtay farjigeeda (waa Maryama) oon ku afuufnay dhexdeeda Ruuxdanadii, kana yeellay iyada iyo wiilkeeda calaamad caalamiinta(91)." Imaam Baghawi wuxuu ku fasiray in erayga **Ruuxeenna** oo erayga afuufidda la raaciyay, ay tahay sharaf Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, uu Nabi Ciise, Calayhissalaam, ku sharfayo. Imaam Aluusi, wuxuu intaas ku daray in afuufidda Ruuxu, siduu ku fasiray, bogga sideed iyo sideetan ee mujalladka sagaalaad ee Tafsiirkiisa Ruuxul Macaanii, ay tahay in Jibriil uu ku afuufay Maryama Ruuxii nolol gelin lahaa Nabi Ciise, markay afuufiddaasu uurka Maryama gaarto. Waxaa inay sidaas tahay u daliil ah, in markii uu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalla, Nabi Aadan, Caleyhissalaam, abuuray, uu ku afuufay Ruuxiisa, oo uu sidaas ku noolaaday, sida ay noo sheegtay Aayadda sagaala iyo labaatan ee Suuratu Al Xijri: **"Fa ithaa sawwatuhu wa nafakhtu fiihi min Ruuxii fa qacuu lahu saajidiina**(29)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Ee markaan ekeeyo kuna afuufo dhexdiisa Ruuxayga, ugu dhaca sujuud(29)." Ruuxaas Nabi aadan iyo Nabi Ciise, Naxariiste Eebbe korkooda ha ahaatee, lagu afuufay waa ruuxa qofka nooleeya, markuu dhimanayana laga siiboh, uuna ka siiboh Malagga Mawtka ama Geerida. Waxay Al Bukhaarii iyo Muslim Cabdu Allaahi bin Mascuud ka wariyeen, kulligood Allaha Raalli ka noqdee, inuu ka wariyay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **'in axadakum yujmacu khalquhu fii badhni ummihi arbaciina yawman nudhfatan, thumma yakuunu calaqatan mithla thaalika, thumma yakuunu mudghatan mithla thaalika, thumma yursalu ilayhi al malaku fa yanfukhu fiihi al rruuxa."** Waana Xadiithka Al Bukhaarii laba kun lix iyo soddon iyo Muslim laba kun lix boqol sadde iyo afartan, oo macnihiisu yahay: "Mid walba oo adinka idin ka mid ah, waxaa lagu ahaysiiyaa uurka hooyadiis afartan maalmood asagoo le'eg dhibic, markaas kaddibna afartan maalmood oo kale ayuu wuxuu ahaanayaa xinjir, markaas kaddibna afartan maalmood oo kale ayuu wuxuu ahaanayaa cad. Markaas kaddib ayaa waxaa loo soo dirayaa malag, kaasoo ruuxa ku afuufaya". Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, haddii uu doono inuu wax ahaysiiyo, wuxuu yiraahdaa "ahaw", markaas ayuu ahaadaa, siduu noo sheegay Aayadda sagaal iyo konton ee Suuradda Aali Cimraan: **"Inna mathala Ciisaa cinda Allaahi ka mathali Aadama khalaqahu min**

turaabin thumma qaala lahu kun fa yakuunu(59)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Tusaalaha Ciise Ilaahay agtiisa waa sida Aadan: Ilaahay ka abuuray carro, markaasuu ku yiri ahow, wuuna ahaaday(59)". Waxaa kale oo Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Aayadda lixaad ee Suuratu Aali Cimraan noogu sheegaya, inuu Asagu awood u leeyahay inuu Ilma galeenka hooyada ku abuuro qofkuu doono, una ekeysiiyo siduu doono, wuxuuna yiri: **"Huwa Allathii yusawwirakum fii Al arxaami kayfa yashaa'u laa ilaaha illaa Huwa Al Caziizu Al Xakiimu**(6)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Waana Ilaaha idinku sawira (abuurah) Riximyada (ilmo galeenka) siduu doono. Ilaah mooyee, Ilaah kale ma jiro, waana Adkaade Fal san." Markii uu Malag Jibriil Maryama Ruuxii ku afuufay, afuufiddii waxay gaartay ilmo galeenkeeda, halkaasoo uu Ciise ku abuurmay, oo markiiba uur ayay yeelatay, sida ay noo sheegtay Aayadda laba iyo labaatan ee Suuratu Maryama: **"Fa xamalathu fa intabathat bihi makaanan qasiyyan**(22)**."**Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Way Xambaartay (uurowday), waxayna u fogaatay meel dheer (durugsan)(22)." Markaas ay Maryama uurka Ciise yeelaneyso waxay jirtaa saddex iyo toban sano; waxaa kale oo la yiri waxay jirtay toban sano. Waxayna sidday, oo Ciise, Caleyhissalaam, uurkiisa ay lahayd inta haweenku caadiyan caruurta sidaan oo ah sagaal bilood. Sideedaba, Maryama waxay caado heshay laba goor oo keli ah, intayan Ciise uurkiisa yeelan. Runtana Rabbi ayaa og.

Markay Maryama ka soo noqotay meeshii ay kula kulantay Jibriil, waxay ku soo noqotay Masjidkay ka shaqeynesay, oo halkaas ayay hawsheedii ka sii wadatay. Markii muddo la joogay, ninkii ay Masjidka ka wada shaqaynayeen, oo isla markaasna ina adeerkeed ahaa, magaciisuna ahaa Yuusuf, ayaa wuxuu ahaa qofkii ugu horreeyey oo dareemah inay Maryama uur leedahay. Yuusuf wuxuu kaloo arkay inuu jirkeedii is beddelay, iskuna beddelay sida haweenka uurka leh oo kale, ayadoo tabarteedii yaraatay, caatowday, midabkeedii caddaa uu hurdi noqday, wajigeedii dhibcoh midab leh yeeshay, caloosheedii soo baxday oo muuqato iyo dadaalka iyo adeygga fiirinteeda. Markuu intaas ku arkay, ayuu wuxuu bilaabay inuu isagu qabto hawshay ayadu qaban jirtay. Yuusuf arrintii Maryama way la weynaatay, wuuna ka naxay, wuxuu sameeyo ayuuna garan waayay. Markuu xumaan ku tuhmo, wuxuu xusuustaa suubanaanteeda iyo dambi la'aanteeda, ayadoo, isla markaasna aan marna hal saac ka maqnaan, oo ay mar walba Masjidka wada joogeen. Markii uu damco inuu ka dhigo mid aan dambi lahayn, oo aan xumaan samayninna, wuxuu arkaa inay uur leedahay. Markii ay arrintii Yuusuf culays ku noqotayna, oo ay ku adkaatay, wuu la hadlay. Hadalkii ugu horreeyey oo uu Maryama ku yiri wuxuu ahaa: "Waxaa nafteyda galay arrin adiga kugu saabsan, aanna ku dadaalay inaan baabi'iyo, aanna nafteyda dhexdeeda ku qariyo, wayse ii suurtoobi wayday, oo arrintii way iga adkaatay. Markaas ayaan waxaan gartay inay qalbigayga daawo u tahay inaan arrintaas kaala hadlo". Waxay Maryama tiri: "Hadaba hadal wanaagsan dheh". Wuxuu yiri: "Iimaba habboona inaan wax wanaagsan mooyee ku hadlo. Marka ii sheeg: beer ma dhalataa abuur la'aan (abuur dhulka lagu rido)?" Waxay ugu jawaabtay: "Haa". Wuxuu yiri: "Geed ma dhashaa, oo baxaa, isaga oo aan roob ku di'in"? Waxay ugu

jawaabtay: "Haa". Wuxuu yiri: "Wiil ma dhashaa aabbe la'aan?" Waxay ugu jawaabtay: "Haa. Soo ma ogid in Ilaahay, maalintuu abuuray beerta, ayada ahaysiiyay abuur la'aan(abuur dhulka lagu rido, oo markaas ay beertu kasoo dhalato)? Soo ma ogid in Ilaahay isla awooddaas uu leeyahay oo beerta abuur la'aan ku ahaysiiyay, inuu roobkana uga dhigay geedka nolol, kaddib markii uu mid walba oo labadooda ahba (geedka iyo roobka) goonidiisa u abuuray? Mase waxaad leedahay Ilaahay awood uma laha inuu geed dhaliyoh inuu biyo la kaashado mooyee, oo hadduusan biyo la kaashan inuusan geed dhalin karin?" Yuusuf wuxuu ku yiri: "Sidaas oran mayo, laakin waxaan ogahay in Ilaahay Asagoo wixii uu doonaba awood u leh, hadana uu ku ahaysiiyo Asagoo yiraahda KUN (ahaw), markaasuu wixii ahaadaa". Maryama waxay ku tiri: "Soo ma ogid in Ilaahay uu Aadan iyo Haweentiisa abuuray lab iyo dheddig la'aan (aabbe iyo hooyo)? Wuxuu yiri: "Haa". Markay sidaas ku tiri ayaa naftiisa wax galeen, wuxuuna ogaaday in xaaladda Maryama ay ku sugantahay ay tahay arrin ka timid xagga Ilaahay, Cazza wa Jalla, isagana ayan u habboonayn inuu wax ka weydiiyo, kaddib markuu arkay inay xaaladdeeda ka qarisay, oo ayan siday wax u dheceen ugu sheegin. Markaas ayuu Yuusuf wuxuu la wareegay shaqadii Masjidka, si uu Maryama dhibka uga furtoh, uguna fududeeyo. Markii ay soo dhowaatay goortay dhali lahayd, ayaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Maryama u waxyooday inay magaaladaas ay ku noolaayeen (oo ahayd Quddus) ka baxdo, maxaa yeelay haddii ay halkaas ku dhasho dadkeedu ayadana waa caayi lahaayeen, wiilkana waa laga dili lahaa. Markaas ayaa Maryama magaalada Quddus ka guurtay, oo ay magaalada Baytu-Laxm oo dhawr kiloomitir u jirta Quddus u guurtay, sida Cabdu Allaahi bin Cabbaas laga wariyay, ayna wariyeen Al Nasaa'i iyo Al Bayhaqii. Qaxaas ay Maryama Qaxday, waxaa Ilaahay Subxaanahu wa Tacaalaa, noogu sheegay Aayadda laba iyo labaatan ee Suuratu Maryama, wuxuuna yiri: **"Fa intabathat bihi makaanan qasiyyan**(22)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Waxayna u fogaatay meel dheer(22)".

Maryama waxay u tagtay habaryarteed (walaasheed ayay ahaydna waa la yiri), oo markaas ayaduna uur leh, sidana Nabi Yaxye, oo dhalashadiisa hore loogu bishaareeyey. Markaas ayay waxay ku tiri: "Ma dareentay inaan uur leeyahay?" Markaas ayay Maryama ugu jawaabtay: "Adiguna ma dareentay inaan aniguna uur leeyahay?" Markaas ayay labadii gabdhood, intay isku soo boodeen, ayay luqunta luqunta isku sureen oo dhabannada iska dhunkadeen. Markaas ayaa Yaxye hooyadiis waxay Maryama ku tiri: "Waxaan dareemayaa in cunugga caloosheyda ku jirah uu cunugga calooshaada ku jirah u sujuudayo (sujuud madaxa hoos loo jeediyo, loogana dan leeyahay salaan weyneyn ah, taasoo shareecadooda ka mid ahayd, ama sida Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, u amray Malaa'igta inay Aadan u sujuudaan)". Sujuudaas macneheedu waxaa weeye inuu Nabi Yaxye aqoonsaday Nabinnimada Ciise, uuna ka mid yahay shanta u Madax ah Rususha oo idil, oo kala ah Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Nabi Nuux, Nabi Ibraahiim, Nabi Muuse iyo Nabi Ciise, Calayhimussalaamu, shantaas oo Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, ku magacaabay "kuwa sugnaanta iyo niyada u saaxiibka ah", siduu noogu sheegay Aayadda shan iyo soddon ee Suuratul

Axqaaf: **"Fa asbir kamaa sabara uuli al cazmi mina Al Rrusuli**(35)**."** Aayaddu macneheedu waxaa weeye:"U sabir siday u sabreen kuwii sugnaanta iyo niyadda u saaxiibka ahaa ee Rasuullada ahaa(35)." Aqoonsiga uu Nabi Yaxye, isagoo uurka hooyadiis ku jira uu aqoonsanayo Nabinnimada Ciise, Nabigeenna Muxammad iyo labadoodaba Sallaa Allaahu Calayhim wa Sallama, waxaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, noogu sheegay Aayadda sagaal iyo sddon ee Suuratu Aali Cimraan, wuxuuna yiri, Asagoo Nabi Zakariyya oo ah aabaha Yaxye la hadlaya: **"Anna Allaaha yubash-shiruka bi Yaxyaa musaddiqan bi Kalimatin mina Allaahi**(39)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Ilaahay wuxuu kuugu bishaarayn Yaxye, isagoo rumaynaya Kalimada Ilaahay (Ciise)(39)". Kaalimadaas waa tii Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, ku yiri Ciise **KUN**, oo macneheedu yahay ahaw oo jir, sidaasna uu Ciise ku ahaaday.

Foolashada Maryama ina Cimraan

Markay Maryama Baytu Laxam tagtay, ayaa maalin ayadoo meel cidla ah joogtah ayaa fooshii kadisay oo qabatay. Xanuunkii dhalmada markuu sidaas ku kadiyay, oo uu ku batay, ayay waxay aragtay meel dhulka intiisa kale kor uga taagan, sida buur yar oo kale, korkeedana uu ku yaal geed timireed oo aan laamo, caleen iyo miro midna lahayn, ayadoo xilligu qaboobe yahay. Halkaas ayay taftay oo fuushay, sida Cabdu Allaahi bin Cabbaas, Ilaahayga Deeqsiga ah isaga iyo aabihiisba raalli ha ka noqdee, uu Imaam Aluusi Tafsiirkiisa uga wariyay (mujalladka sideedaad, juzka lix iyo toban, boggakow iyo sideetan1), si ay geedkaas u qabsatoh. Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, siday arrintaasu u dhacday nooga warbixinaya, wuxuu Aayadda saddex iyo labaatan ee Suuratu Maryama ku yiri: **"Fa ajaa'ahaa al makhaadu ilaa jithci al nnakhlati qaalat yaa laytanii mittu qabla haathaa wa kuntu nasyan mmansiyyan**(23)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Waxayna u dhibaataysay fooshii jirrid timir waxayna tiri: shalleytee, maan dhinto ka hor arrintaan, oo aan noqdo mid la halmaamo oo laga tago(23)." Markay geedkii qabsatay, ayay waxay ka cabsatay cayda iyo aflagaadada reer Banii Israa'iil uga imaan doonta, haddii ay ku noqotoh ayadoo wadata cunug ay dhashay oo aan aabe lahayn, kuwaasoo aan hadalkeedi rumaysan doonin, in kastoo ay suubanaanteeda iyo cibaado badnaanteeda ay ogaayeen, khaadimadna kaba ahayd Masjidka Quddus. Markaas ayay waxay qoomameysay inay tahayba qof jira oo nool oo la yaqaan, waxayna jecleysatay inay ahaato mid aan jirin oo aan la abuurinba, oo jiritaankeedaba la illoobo.

Dhalashada Nabi Ciise, Calayhissalaamu

Markii ay Maryama xanuunkii fooshu qabatay, oo intay meeshii taagga ahayd fuushay, ayna geedkii timirta qabsatay, malaa'ig ayaa dhinac walba ka hareereysay, ayagoo saf saf u taagan. Markaas ayay Nabi Ciise, Calayhissalaamu, dhashay. Markay dhashay, Maryama way tiiraanyootay,

ayadoo ka xun waxa ay filaneyso inay dadkeeda kala kulmi doonto. Markaas, ayaa Malag Jibriil, oo joogay taaggaas hoostiisa, wuxuu ku yiri: "ha tiiraanyoon, Ilaahayna wuxuu hoostaada kaaga yeelay oo dillaaciyay wabi yar. Rux, oo gilgil jirridda geedka timirta, waxaa sidaas kuugu soo daadaneysa timir bisaylkeedu cusub yahay oo qoyane". Waxaa inay sidaas wax u dheceen nooga warbixinaya, Ilaahii ayagaas, annaga iyo inte kaleba abuuray: waaba ayadii uu, Subxaanahu wa Tacaalaa, Nabigiisii Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku yiri Aayadda saddexaad ee Suuratu Yuusuf: **"Naxnu naqussu calayka axsana al qasasi bi maa awxaynaa ilayka haathaa Al Qur'aana wa in kunta min qablihi la mina al ghaafiliina**(3)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Annagaa kaaga qisoonaya qisooyinka kuwa ugu fiican, waxyigaan Quraankan kuu waxyoonnay dartiis, waxaadna ka mid ahayd kuwaan wax ogayn(3)". Oo sidaas ayaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, wuxuu Quraanka noogu sheegay sheekooyinka wixii naga horreeyey, ha ahaadaan kuwaasu ummado jiri jiray, sida Nabi Aadan, Nabi Idriis, Nabi Nuux iyo dadkiisii, Nabi Ibraahim iyo dadkiisii, Nabi Muuse iyo dadkiisii, Nabi Ciise iyo dadkiisii, iyo Anbiyada iyo Rususha kale oo idil wararkoodii iyo xaaladaha dadkoodi; ama ha ahaadaan sidii loo abuuray dhulka iyo cirka, jinniga iyo insiga, iyo inta uu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, uu inta abuuray, hadana nooga sheekeeyey. Waxaa kale oo Quraanku nooga warbixinaya sida mustaqbalku ahaan doono, xaaladda marka la dhinto qabriga la galo lala kulmi doono; bacthiga marka la isi soo saaro maalinta qiyaame, xashriga iyo sida inta la is kulmiyo xukunka loo qaadayo maalintaas, Miisaanka iyo Siraadka, sifooyinka Jannada iyo Naarta iyo dadka ku jiraa siday u egyihiin iyo xaaladdoodaba. Haddaan warbixintii dhalashada Nabi Ciise, Calayhissalaamu, dib ugu noqonno, markay ay Maryama dhashay, oo ay tiiraanyootay, ayaa Malag Jibriil, oo meel ka hooseysey bartay ku dhashay ku sugnaa, ayaa la hadlay, siday noo sheegeyso Aayadaha afar iyo labaatan iyo shan iyo labaatan iyo lix iyo labaatan ee Suuratu Maryama, oo wuxuu yiri: **"Fa naadaahaa min taxtihaa allaa taxzanii qad jacala Rabbuki taxtaki sariyyan**(24)**Wa huzzii ilayki bi jithci al nnakhlati tusaaqidh calayka rudhaban janiyyan**(25)**Fa kulii wa ishrabii wa qarrii caynan fa immaa tarayinna mina al bashari axadan fa quulii innii nathartu li Al Raxmaani sawman falan ukallima al yawma insiyyan**(26). Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Wuxuuna uga dhawaaqay hoosteeda: ha murugoonin, wuxuu yeelay Rabbigaa hoostaada wabi yar(24)Una gilgil xaggaaga jirridda timirta, ha kuu soo riddo korkaaga timir curdana oo fiicane(25)Ee cun oo cab, qabawsana il (waa faraxee), haddaad ka aragto dadkana ruux waxaad tiraahdaa: anigu waxaan ugu nadray Eebaha Raxmaana soon inaanan la hadlin maanta cidna(26)." Waxay , hadana, Aayadahaas noo sheegayaan, oo kale, sida Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, uu Maryama u karaameeyey oo uu ugu roonaaday, Asagoo wabi ay ka cabto u dillaaciyay, ayadoo la joogo xilligii qaboobaha, oo uusan geedka timirtu miro bixin, uu geed qallalan timir curdan ah oo qoyan uga soo saaray, Malaa'ig ku hareereeyey, ayada iyo wiilkeeda ilaalisa, oo shaydhaan iyo intii xunba ka dhawrta, iyo Asagoo inta tiiraanyadii qalbigeeda ka saaray ugu beddelay, oo

qalbigeeda ku sugay farax. Laba darsi oo kale oo halkaas laga baran karo waxaa weeye, in Ilaaha qolkeeda xirnaa oo masjidka dhexdiisa ku yiil cunto iyo miro ku siinayay, ay markay dhashay oo tabar darantahay uu ku amray, sida uu Jibriil u sheegay, in si ay timirtaas ku hesho ay shaqeyso oo ay jirridda geedka gilgisho oo ruxdo. Xikmada ku jirta waxaa weeye in haweenta umusha ah, markay dasho ay u habboon tahay inay dhaqdhaqaado oo jirkeeda ku shaqeyso, si xubnihii caloosha ku jiray, oo dhalmada daraadeed u kala baxay, ay sidoodii ugu soo noqdaan. Sidoo kale in ay lagama maarmaan tahay in si rizqi loo helo inay tahay in la kasbado, oo la shaqeeyo. Darsiga labaad, oo arrintaan laga baran karo waxaa weeye, in cunnada ugu nafaqo badan oo haweeney dhasha ay cunto, ay tahay timir curdan ah, taasoo Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, uu u dooray Maryama. Waagaas laga bilaabana, haweenku markay dhalaan waxaa la quudiyaa timir. Markii uu Subxaanahu wa Tacaalaa uu wabi biyo ah u dillaaciyo, ayadoo aan qofna biyo la'aan noolaan karin, timirna u diyaariyay, ayuu wuxuu ku yiri: "Cun oo cab, faraxna, oo ishaadu ha qabawsato". Dhalashada Nabi Ciise waxay ka horreysey shan boqol iyo toddobaatan sano dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhim Wasallam, waxayna ku beegneyd, ayaa la yiri, sanadkii laba iyo afartanaad aad ee boqornimadii Augustus ee Roma.

Markii Nabi Ciise dhashay, Caleyhissalaam, wixii sanam Ilaahay sokadiisa adduunka oo idil lagu caabudi jiray ayaa madax madax u soo wada dhacay, oo soo wada qallibmay. Markaas ayaa shayaadhiintii oo idil wada cabsadeen oo naxeen, wayna garan waayeen sababta ay asnaamtu usoo daadatay. Markaas ayay waxay si degdegsiimo leh ugu tageen aabohood Ibliis, waxayna u tageen isagoo ku fadhiya carshigiisa oo ku sugan meel mool ah oo badweynta hoosteeda ah oo hooseysa oo cagaaran, una ekeysiinaya oo ku dayana Carshiga Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, markii uu ahaa biyo korkooda, isna xijaabay oo is qariyay, isagoo ku dayana Xijaabka Nuurka ah oo Ilaahayga Raxmaana ka sokeeyah. Waxay u yimaadeen ayadoo ay maalintii ka baxday lix saacadood, markaasuu Ibliis markuu wadajirkooda arkay ayuu baqay, asagoo aan arag ayagoo wada socda tan iyo goortii uu saacaddaas ka hor kala diray. Wuxuuse u arkay mid mid ama koox koox. Wuxuu wareystay sababta isutaggooda iyo imaatinkooda keentay, markaas ayay u sheegeen oo waxay yiraahdeen: "arlada dhexdeeda waxaa ka dhacay wax sababay inay asnaamtii oo idil madax madax usoo wada dhacdoh." Asnaamtuna waxay ahayd waxa ugu weyn oo ay gargaarsadaan ama ula kaashadaan baadiyeynta iyo halaagga Banii Aadan. Waxay yiraahdeen: "intaan asnaamta uurkooda galno, ayaan dadka la hadli jirney, oo aan umuurtooda dabiri jirnay, markaas ayay waxay u maleynayeen inay asnaamtu la hadleyso." Marka, markii uu amarkaani dhacay, oo asnaamtii madax madax usoo hoobteen, ayay dadkii la yaraadeen oo yaseen oo ay liideen, "markaas ayaan waxaan ka baqnay inayan waligood mar dambe asnaamtaas caabudin. Waxaadna ogaataa inaanan kuu imaanin, jeer aan dhulkoo idil soo kormeerno oo aan soo baarno, badihiina kor iyo hoos ayaan u baarnay, annagoo kaashannay wixii wax na tari kareyba. Baariddeennaas jaahilnimo iyo aqoondarro waxaan ahayn nooma kordhin". Markay intaas u sheegeen, ayaa Ibliis wuxuu yiri: "Arrintaani waa arrin wayn,

waxaanna ogaaday in la iga qariyay, ee meeshiinnaas jooga oo ha ka dhaqaaqina." Markaas ayuu Ibliis duulay, wuxuuna ka maqnaa saddex saacadood, asagoo maray meeshii uu Nabi Ciise, Calayhissalaamu, ku dhashay. Markuu arkay meeshaas Malaa'igtu ku harereysantahay, waxaa u sugnaatay in sababta asnaamtu la hoobatay ay meeshaas ka dhacday. Ibliis wuxuu doonay inuu meeshaas kor iyo xagga samada uga yimaado, mase madaxdii iyo garbihii Malaa'igta ayaa ilaa samada gaaray oo meeshii ka korreysa. Markaas ayuu wuxuu damcay inuu dhulka hoostiisa uga yimaado, mase lugihii Malaa'igta ayaa meeshuu kasoo geli lahaa ka hooseeya oo ku raseysan. Markaas ayuu damcay inuu Malaa'igta dhexdooda ka galo, markaas ayay dhinac u riixeen oo tuureen oo fogeeyeen. Markaas ayuu Ibliis u noqday asxaabtiisii oo uu ku yiri: "Idiinma aanan imaan jeer aan soo ilaaleeyey dhulka oo idil, barigeeda iyo galbeedkeeda, barrigeeda iyo baddeeda, dhulka hoostiisa iyo hawada korreysa, intaasoo idilna waxaan ku soo maray 3 saacadood", wuxuuna u sheegay dhalashada Ciise, wuxuuna ku yiri: "Arrinta Ciise waa la iga qariyay, hortiisna cunug kasta oo ilmo galeen galah waan ogaa, marka uu dhalanayana goob joog ayaan ahaa. Waxaan rajeynayaa inaan Ciise ku baadiyeeyo in ka badan inta ku hanuuneysah, mana jiro Nabi isaga hortiis aniga iyo adinkaba nooga daran".

Wafdiga Boqorka Iiraan

Boqortooyada Iiraan ayaa dadka xiddigaha fiiriyaa waxay arkeen inuu soo baxay xiddig markii la arko u ah calaamad qof dhalan doona, sida ugu qornayd Kitaabka Daniel. Markaas ayaa Boqorkii Iiraan, habeenkaas, oo uu maalinteeda Nabi Ciise dhalan doono, wuxuu soo diray wafdi inay u tagaan cunuggaas dhalan doona, wuxuuna ugu soo dhiibay hadiyooyin ka kooban dahab, luubaan iyo dhirta malmalka. Intay Baytu Laxam usoo socdeen, waxay soo mareen boqorkii Quddus xukumay, magaciisuna ahaa Herods Kii Weynaa. Waagaas dhulka Falasdhiin, oo ay Quddus caasimadda u tahay, waxay ka tirsanaan jirtay Boqortooyada Roma. Markii wafdigii Boqorka Iiraan ay u yimaadeen Boqorkii Quddus ee ahaa Herodos, waxay u sheegeen in boqorkoodu u soo diray inay Ciise u geeyaan hadiyooyinkaas si ay qalbigiisa usoo jiitaan, oo markuu weynaado ay xiriir fiican oo saaxiibtinnimo la yeeshaan. Wuxxu Boqorkaasu weydiiyay: "Maxaad ugu soo doorteen dahab, luubaan iyo malmal?" Waxay yiraahdeen: "Saddexdaasba sifooyinkiisa ayay leeyihiin. Dahabku waa madaxa badeecad kasta, sida Nabigaan oo ah madaxa dadka zamankiisa oo idil. Malmalkana waxaa lagu daaweeyaa dhaawaca, jabkana waa lagu kabaa. Nabigaanna Ilaahay wuxuu ka dhigay sabab uu ku daaweeyo qof kasta oo cudur kasta qabah. Luubaantana fooxeedu wuxuu gaara samada, qiiq kale oo samada gaaraana ma jiro, sida Nabigaan oo Ilaahay samada u qaadi doono, ayadoo aan zamankiisa qof kale samada loo qaadi doonin." Markay intaas u sheegeen, Boqorkii Quddus wuxuu go'aansaday inuu Ciise, oo uu u arkay inuu Boqornimadiisa khatar ku yahay, dilo, wafdigiina wuxuu u oggolaaday inay u tagaan. Markii wafdigu tagay meeshii uu Ciise ku dhashay, hadiyadihii waxay ugu dhiibeen Maryama,

markaas ayay waxay dooneen inay ku noqdaan Boqorkii Quddus, si ay ugu sheegaan meesha uu Ciise joogo. Wafdigii waxaa u yimid Malag oo ku yiri: "Ha ku noqonnina, hana u sheegina meesha uu Ciise joogo, maxaa yeelay inuu dilo ayuu doonayaa." Markaas ayay dalkoodii ku laabteen, ayagoo dariiq kale sii maray, oo ka duwan midkay ku yimaadeen. Magaalada Quddus, sideedaba waxaa dhagixii ugu horreeyey dhigay, oo dhismeheeda aasaasay Nabi Yacquub, Calayhissalaamu, oo habeen uu asagoo socdaal ah bartaas seexday, ayuu wuxuu riyo ku arkay cirkii oo furan iyo hawlaha halkaas ka socda, Malaa'igtii oo Samada fuuleyssa, kana soo deganeysaa: markuu dhagixii ugu horreeyey dhigay, wuxuu bartaas u bixiyay "Bayt Iil", oo macneheedu yahay Gurigii Ilaahay.

Kulanka Maryama, Ciise iyo dadkeeda

Markay Maryama Ciise, Calayhissalaamu, dhashay, waxaa dadkeedii reer Banii Israa'iil warkooda u keenay shaydhaan, oo wixii dhacay soo gaarsiiyay. Markaas ayay arrintaas aad uga caroodeen, wayna u yeereen. Markaas ayaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, wuxuu Maryama ku yiri: "Markaad u tagtid, waxaad ku tiraahdaa: anigu maanta waan soomanahay, oo qofna la hadli mayo, ee haddaad war dooneysaan, wiilka isaga la hadla." Shareecada ay haysteen ayaa waxay dhigeysey in qofka sooman, uu maalintaas uu sooman yahay, uusan hadlin oo hadalkana ka soomo, taasoo khilaafsan shareecadenna, oo aan oggolayn in hadalka habeen iyo maalin xiriirsan laga soomo. Reer Bani Israa'iil hadalkeedaas way ka caroodeen, inay ku tiraahdo anigu waan soomanahaye, la hadla cunug markaas dhashay, oo waxayba u qaateen inay ku jeesjeeseyso, taasoo kalaba waynaatay inay soo zinaysatay, siday ku tuhmayeen, ayagoo is yiri: sideebuu cunug dhashay u hadli karaa? Qisadaas waxaa nooga warramaya Aayadaha lix iyo labaatan ilaa sagaal iyo labaatan ee Suuratu Maryama, oo uu Ilaahay, Subxaanahu Wa Tacaalaa, ku yiri: **"Fa kulii wa ishrabii wa qarrii caynan fa immaa tarayinna mina al bashari axadan fa quulii innii nathartu li Al Rraxmaani sawman falan ukallima al yawma insiyyan**(26)**Fa atat bihi qawmahaa taxmiluhu qaaluu yaa Maryamu la qad ji'ti shay'an fariyyan**(27)**Yaa ukhta Haaruuna maa kaana abuuki imra'a saw'in wa maa kaanat ummiki baghiyyan**(28)**Fa ashaarat ilayhi qaaluu kayfa nukallimu man kaana fii al mahdi sabiyyan**(29)." Aayadaha macnohoodu waxaa weeye: "Ee cun oo cab, qabawsana il (farax), haddaad ka aragto dadkana ruux, waxaad dhahdaa anigu waxaan uga nadray (Eebaha) Raxmaan oon u soomi, oonan la hadlin maanta cidna(26)Waxayna ula timid Ciise qoomkeeda, iyadoo xambaarsan, waxayna dheheen: Maryamoy waxaad la timid wax wayn(27)Haaruun walaashiisey (uga eg wanaagga) ma ahayn aabahaa ruux xun, mana ahayn hooyadaa mid xun (la tuhmo)(28)Waxayna u ishaartay xaggiisa, waxayna dhaheen: sidee ula hadlaynaa ruux ku sugan oo xool ku jira ahna sariirta caruurta isagoo yar(29)." Markaas ayaa Ciise, ina Maryama, hadlay oo wuxuu yiri, sida ay noo sheegayaan Aayadaha soddon ilaa saadex iyo soddon ee Suuratu Maryama: **"Qaala innii Cabdu Allaahi aataaniyal Kitaaba wa jacalanii Nabiyyan**(30)**Wa jacalanii mubaarakan**

ayna maa kuntu wa awsaanii bi al Ssalaati wa al Zzakaati maa dumtu xayyan(31)**Wa barran bi waalidatii wa lam yajcalnii jabbaaran shaqiyyan**(32)**Wa Al Ssalaamu calayya yawma wulidtu wa yawma amuutu wa yawma ubcathu xayyan**(33)". Aayadaha macnohoodu waxaa weeye: "Wuxuu yiri Ciise: anigu waxaan ahay addoon Ilaahay, wuxuuna i siiyay Kitaabka (Injiil), wuxuuna iga yeelay Nabi(30)Wuxuuna iga yeelay mid la barakeeyey meel kastoon ahay, wuxuuna ii dardaarmay Salaadda iyo Zakada intaan noolahay(31)Wuxuuna iga yeelay baarriga hooyaday, igamana yeelin mid madax adag oo xun(32)Nabadgelyana ha ahaato korkayga maalintii lay dhalay iyo maalintaan dhiman iyo maalinta laysoo bixin anoo nool(33)." Waxay Aayadahaani noo sheegayaan in hadalkii ugu horreeyey oo uu Nabi Ciise, ina Maryama, ku dhawaaqay uu ahaa: "Anigu waxaan ahay addoon Ilaahaay", wuxuuna ku xijiyay isagoo qiriya barinimada iyo eed la'aanta hooyadiis inayan falin waxa xun oo intooda jaahiliinta ah ay ku tuhmeen, oo wuxuu yiri: "Wuxuu i siiyay Kitaabka Injiil, wuxuuna iga yeelay Nabi", maxaa yeelay Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Kitaab ma siiyo oo Nabina kama dhigo qof zino ka dhishay. Inay Maryama zino ku tuhmeen intoodii xumayd waxaa Ilaahay noogu sheegay Aayadda boqol lix iyo konton ee Suuratu Nisaa'i, wuxuuna yiri: **"Wa bi kufrihim wa qawlihim calaa Maryama buhtaanan cathiiman**(156)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Iyo gaalnimadooda darteed iyo hadalkooda Maryama oo ay ku been abuurteen si wayn(156)." Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, wuxuu Aayaddaan noogu sheegayaa inay Maryama bintu Cimraan, Nabi Ciise hooyadiis, ay been wayn ka sheegeen, ayadoo mid suuban oo dhawrsan ah. Maryama beentaas laga abuuray ka sokow, waxaaba Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Aayadda sagaal iyo tobnaad ee Suuratu Al Nuur noogu sheegayaa in kuwa jecel inay xumaani ka faafto haweenka mu'minaadka ah, ay u sugnaan doonto cathaab intay adduunka joogaan iyo aakhiraba, wuxuuna yiri: **"Inna allathiina yuxibbuuna an tashiica al faaxishatu fii allathiina aamanuu lahum cathaabun aliimun fii al ddunyaa wa al aakhirati wa Allaahu yaclamu wa antum laa taclamuuna**(19)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Kuwa jecel inay ku faafto xumaantu kuwa rumeeyay xaqqa, waxaa u sugnaaday cathaab daran adduun iyo aakhiraba, Eebana waa ogyahay adinkuna ma ogidin(19)." Hadalka ku xigay oo uu Nabi Ciise, ina Maryama, ku hadlay wuxuu ahaa asagoo addoonimadiisa uu Ilaahay addoon u yahay iyo takliifka ay keeneyso oo asaga laga doonayo inuu la yimaado, sida addoommada kale oo idil, caddeeyey, wuxuuna yiri: "wuxuu igula dardaarmay, oo igu amray, inaan salaadda tukado, oo aan sidaas Ilaahay u weyneeyo, aanna Zakada bixiyo oo maalkii uu i siiyo aan xaqqiisa ka bixiyo oo aan siiyo kuwa xaqqa ku leh(19)."

Hadalka saddexaad oo Ciise, ina Maryama, uu ku hadlay, wuxuu ahaa asaggoo caddeeyey inuu hooyadii dhashay baarri u yahay, uusanna ahayn mid ku hadlah ama fala hadal iyo ficil xun. Waxaa la sheegay inuu hooyadiis aad u jeclaa, aadna uu baarri ugu ahaa. Hadalkiisa ku xigay wuxuu ahaa asagoo yiri: "Nabadgelyo ha ahaato korkeyga maalintii la i dhalay iyo maalintaan dhimanayo iyo maalinta lay soo bixin anoo nool." Wuxuu xusay saddex goor

oo qofka xaaladdiisu is beddeleyso, uuna ka guurayo xaalad uu muddo ku sugnaa oo uu yiqiin, una guurayo mid uusan hore u arag oo uusan aqoon u lahayn, waxa uu la kulmi doonana uusan ogayn. Qofku asagoo uurka hooyadiis ku jiray, oo halkaas nabadgelyo, caafimaad iyo cunno ka haystay, ayuu dibadda u soo baxayaa. Waxa ugu horreeya oo uu la kulmana markuu soo baxo waa asagoo shaydhaan taabto, markaas ayuu cunuggii dhashay ooyayaa oo qaylinayaa. Marxalada labaaad, asagoo qofku adduunkaan muddo ku noolaa, guri degganaa, dhar labbisan jiray, cunno cuni jiray, qoys iyo caruur lahaa, ayuu markuu dhinto intii oo idil wuu ka tegayaa, oo kafan ayaa inta lagu duubo, oo god la geliyo ayuu nolosha qabriga gelayaa, uusan ogayn waxa uu la kulmi doono. Sidaas ayuu marxaladdii saddexaad ugu gudbay, oo uu adduunkii uga guuray, oo uu u guuray nolosha qabriga iyo barzakha, halkaas oo uu ku sugayo Xukunka Maalinta Qiyaame iyo Daartii uu u hoyan lahaa, oo ahaaneysa ama Janno ama Naar, ayadoo uusan guri saddexaad jirin. Marka, saddexdaas marxaladoodba, Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, wuxuu ka yeelay Nabadgelyo dusha Nabigiisa Ciise ina Maryama. Markii uu Ciise intaas ku hadlay, ayaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, wuxuu noo sheegayaa in sida uu Ciise ina Maryama ku ahaaday, iyo siday wax u dheceen ay tahay sidaas uu Ilaahay noo sheegay, wuxuuna Aayadda afar iyo soddon ee Suuratu Maryama ku yiri: **"Thaalika Ciisaa ibnu Maryama qawla Al Xaqqi allathii fiihi yamtaruuna**(34)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Kaasi waa Ciise ina Maryama, waana hadalka xaqqa ah ee ay shakinayaan(34)." Waxaa Al Bukhaarii Abuu Hureyra ka wariyay, waana Xadiithkiisa saddex kun iyo afar boqol iyo lix iyo soddon, inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Caleyhi Wasallam, yiri: **"Lam yatakallam fii al mahdi illaa thalaathatun: Ciisaa ibnu Maryama, wa saaxiba Jurayj, wa saaxiba al jabbaari, wa baynaa sabiyyun yurdacu min ummihi."** Xadiithka macnihiisu yahay: "Saddex mooyee, horay ugama ayan hadlin markay dhasheen: (Kow) Ciise ina Maryama (Labo) Jurayj saaxiibkiis: waxaa jiri jiray nin reer banii Israa'iil ah magaciisuna ahaa Jurayj. Isagoo salaad tukanaya ayaa hooyadiis u timid oo ay u yeertay. Markaas ayuu wuxuu is yiri: ma hooyaan u jawaabaa, mase salaadeyda ayaan dhammaystaa? Wuxuu goostay inuusan hooyo u jawaabin, ee uu salaadda dhammaysto. Markaas ayaa hooyadiis waxay tiri: "Ilaahayow (hadduu ila hadli waayey) ha dilin oo yuusan dhiman jeer aad tustid, oo uu arko wajiyada haweenka zinaysta". Jurayj wuxuu ahaa nin suufi ah oo keligiis deggan guri Masjidna u ah oo ku yaalla buur korkeed. Gurigiisii ayaa waxaa ugu timid haweeney oo isku ban dhigtay oo la hadashay. Markaas ayuu diiday. Haweeneydii waxay kaddib u timid nin xoolo la jirah, kaasoo ay isi siisay. Markaas ayay haweentii intay uur qaaday wiil dhashay. Markii la weydiiyey aabaha wiilkaas waxay sheegtay inuu Jurayj dhalay. Dadkii meeshaas degganaa ayuu intuu Jurayj u yimid gurigiisii iyo masjidkiisii dumiyay oo burburiyay, isagiina meesha uu saarnaa oo korreysey kasoo dejiyay, oo caayay. Markaasuu Jurayj intuu weyseystey ayuu salaad tukaday. Markaas ayuu wiilkii dhashay intuu u yimid ayuu wuxuu ku yiri: "Wiilyahow, yaa ku dhalay?" Wiilkii wuxuu yiri: "Ninka xoolaha la jira." Dadkii oo intaasba rnaqlayey, waxay Jurayj ku yiraahdeen:

"Gurigaagii iyo Masjidkaagii ma kaaga dhisnaa dahab?" Wuxuu yiri: "Maya, waxaan dhoobo ahayn laga dhisi mayo." Wuxuu ibnu Athiir kitaabkiisa Usudu Al Ghaabah tarjamada Xuushab bin Yaziid, iyo Ibnu Kathiir, iyo Al Sayuudhii iyo kuwa kaleba Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka wariyeen inuu yiri: "Law kaana Jurayju al raahibu faqiihan caaliman, la calima anna ijaabatahu ummahu khayrun lahu min cibaadatihi Raabahu Cazza wa Jalla." Xadiithka , uu kaloo wariyay Al Khadhiibu al Baghdaadiina uu ku wariyay Taariikhu Baghdaad, macnihiisu waxaa weeye: "Hadduu Jurayj Al Raahib (mid cibaadeysiga u go'doomay) uu Faqiih caalin ah ahaan lahaa wuxuu cilmi u lahaan lahaa inay inuu hooyadiis u jawaabo oo uu maqlo uga khayr badnaan lahayd cibaadadiisa Rabbigiis Cazza wa Jalla". (Saddex) Saaxibu al jabbaari, oo qisadiisu sidaan tahay: haweeney ayaa waxay nuujineysey cunug ay dhashay oo reer banii Israa'iil ah. Markaas ayaa waxaa meeshaas soo maray nin daabad fuushan oo dadku kibirkiisa, quruxdiisa iyo dharka uu qabo quruxdiisa daraadood ay wada dhugteen. Markaas ayay waxay tiri: "Ilaahayow, wiilkeyga ninkaas oo kale iiga dhig". Markaas ayaa cunuggu inta uu naaskii uu nuugayey sii daayey wuxuu yiri: "Ilaahayow, isagoo kale ha iga dhigin". Markaas ayuu naaskeedii ku noqday oo nuugay. Abuu Hurayrah wuxuu yiri: "Waxaabad mooddaa inaan hadda u jeedo siduu Nabigu, Sallaa Allaahi Calayhi Wasallam, fartiisa u nuugay markuu noo sheegayey sheekadaan." Markaas kaddib ayaa waxaa meeshii soo martay haweeney, markaasey hooyada wiilka dhashay waxay tiri: "Ilaahayow, wiilkeyga rniddaan oo kale ha ka dhigin." Markaas ayaa cunuggu intuu naaskeeda sii daayey ayuu wuxuu yiri: "Ilaahayow, ayadoo kale iga dhig." Markaas ayaa hooyadiis waxay tiri: "Maxaad sidaas u tiri?" Markaas ayuu wuxuu yiri: "Ninka daabbada saarnaa wuxuu ahaa gaal gaalada ka mid ah, haweentaanna waxay dadku yiraahdeen: Wax bay xadday, way zinaysatay, midna ma ayan samayn. (Afar) Cunug ay hooyadiis nuujinayso, kuna jirta Suuratu Al Ukhduudi: Boqorkii Yaman ee Thii Nuwaas ayaa intuu galay diinta yuhuudda ayuu muslimiintii shareecada Nabi Ciise raacsanayd, wuxuu ku amray inay ayaguna diintooda kasoo baxaan oo ay yuhuudoobaan. Markaasey diideen. Markaasuu wuxuu magaalada ka dhex qoday god, markaasuu inta qoryo ka buuxiyay dab ku shiday. Markaasaa qof kasta oo muslim ah inta qarka godkaas la keeno ayaa la yiraahdo diinta Islaamka ka bax ama dabka ayaa lagugu tuurayaa. Markaasaa waxaa la keenay haweeney muslimad ah oo wiil ay nuujineyso wadata. Markaasey dib uga joogsatay oo ay meesheeda ay taagan tahay ka dhaqaaqi diiday, ayadoo kahaneysa inay dab dhex gasho. Markaasuu wiilkeedu wuxuu ku yiri: "hooyoy sabir, maxaa yeelay adigu xaqqa ayaad ku taagantahaye." Waxaa jirta Axaadiith kale oo ilmaha sidaas yaraanta ugu hadlay saddex ka badineysa. Runtana Rabbaa og.

.

Mawqifka reer Banii Israa'iil

Markaii ay reer Banuu Israa'iil Ciise arkeen oo ay wada hadleen, ayay waxay yiraahdeen: "wiilkaan zino ayuu ku dhashay, Maryamana waxaa ka dhalay

Nabi Zakariyyaa, oo ahaa midka qolkeeda Masjidka dhexdiisa ku yaalla geli jiray. Markaas ayay waxay raadiyeen Nabi Zakariyyaa, si ay u dilaan. Zakariyyaa wuu ka cararay, oo lugihiisa ayuu ku orday. Intii uu ordayay ayaa shaydhaan wuxuu isaga soo dhigay nin raaci ah oo xoolo la jirah, markaas ayuu ku yiri: "Zakariyyow, way ku soo gaareen, ee Ilaahay bari, inuu jirridda geedkaan uu kuugu kala dhanbalo, si aad u gashid, oo aad uga dhuumatid." Halkaas ayaa Zakariyyaa Ilaahay baryay, markaas ayaa geedkii u furmay, markaas ayuu dhex galay. Markuu galay, ayaa go'ii ama maradii uu qaarka sare u saarneyd ayaa dacasheedii geedka dibaddiisa ku hartay, Zakariyyana waxaa ku xirmay geedkii, siduu Ilaahay uga baryay. Markaas kaddib ayaa dadkii eryoonayay Zakariyyaa ayay meeshaas soo gaareen, markaas ayay shaydhaankii xoolo jirka iska soo dhigay waxay ku yiraahdeen: "Ma aragtay nin dhinacaan ka yimid?" Wuxuu yiri: "Haa. Wuxuu sixray geedkaan, markaas ayuu u furmay, wuuna dhex galay, intaan ka ahayn dacasha maradiisii." Markaas ayay intay miinshaaro soo qaateen geedkii gooyeen ayadoo uu Nabi Zakkariyyaa ku dhex jiro. Sidaas ayay yuhuudi Nabi Zakariyyaa ku dileen. Sida Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, laga wariyayna ma jiro dambi ka weyn Nabi xaqdarro lagu dilo, saa Nabi wax xaq loogu dilo ma keensanayee. Munaafiqiintii zamankaas qaarkoodna waxay ku tuhmeen inay Maryama la zinaysatay ina adeerkeed Yuusuf, oo ay Masjidka ka wada shaqeynayeen, oo uu isagu yahay Ciise aabihiis.

Shirqoolka Herodos-kii weynaa

Boqorkii Quddus, magaciisuna ahaa Herodos, wakiilna dhulkaas uga ahaa Boqorka Roma, markii uu ka ogaaday wafdigii uga yimid xagga Boqorka Iiraan inuu Dalkiisa ku dhalan doono Nabi dadka zamankiisa madax u noqon doonah, wuxuu gartay inuu wiilkaas dilo. Wuxuu dhulka u kala diray ciidammo raadiya wiilkaas oo dilah. Markaas ayaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Malag usoo diray Maryama, oo ku amray inay ayada iyo wiilkeedu dalka Masar u cararaan. Waxaa kaloo la yiri Malaggu wuxuu warka u keenay ina adeerkeed Yuusuf oo Masjidka Quddus joogay, kaasoo markaas intuu Baytu Laxam tegey, warkiina u geeyey, Maryama iyo wiilkeeda ula cararay dalka Masar. Qaxaas ay Maryama iyo wiilkeedii Ciise ay Masar ku tageen, waxaa nooga warrameysa Aayadda konton ee Suuratu Al Mu'minuuna: **"Wa jacalnaa ibna Maryama wa ummahu aayatan wa aawaynaahumaa ilaa rabwatin thaati qaraarin wa maciinin**(50)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Waxaan ka yeellay ina Maryama iyo hooyadiis Aayad, waxaanna u dumnay meel sare oo sugnaansho iyo biyo socda leh(50)." Maryama iyo wiilkeedii Ciise waxay markaas u qaxeen dalka Masar, halkaas oo ay joogeen laba iyo toban sano, ilaa uu Ciise ina Maryama saddex iyo toban jir noqday.

Joogidda dalka Masar

Markii Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, uu Maryama ku amray inay wiilkeeda la cararto, si ayan reer Banii Israa'iil u dilin, waxay gaadiid ahaan u raaceen dameer aan kooro lahayn, oo aan reeryada saaran waxba ka xigin. Waxay dalkaas Masar ku noolaayeen laba iyo toban sano, ilaa uu Ciise ka gaarayo oo uu dhammeystay da'da laba iyo toban sano jir. Markay Masar tageen waxay ku degeen guri uu leeyahay nin ka mid ah madaxda dalkaas, oo ay degi jireen dadka saboolka ama masaakiinta ah oo aan maal lahayn. Madaxda Masar waxaa loogu yeeri jirey erayga "Dihqaan". Calaamadaha ugu horreeyey ee Ciise laga arkay waxay dhaceen markii khasnaddii maalku ugu keydsanaa ninkii guriga lahaa la jabsaday, oo wixii maal ku jiray lala baxay. Maryama dhibaatada ninkaas gaartay way ka xumaatay. Ciise markuu arkay siday hooyadiis uga murugsantahay dhibaatada ku dhacday ninkay martida u ahaayeen, wuxuu hooyadiis ku yiri: "Hooyooy, ma jeceshahay inaan u tilmaamo meeshuu maalkiisu yaal?" Waxay tiri: "Haa, wiilkeygow." Wuxuu yiri: "Waxaad ku tiraahdaa inuu isugu key keeno masaakiinta gurigiisa deggan", taasoo ay Maryama dihqaankii u sheegtay, kaasoo masaakiinti isugu yeeray oo kulmiyay. Markii masaakiintii la isugu keenay, Ciise wuxuu u qasday laba nin oo ka mid ah, uu midkoodna indho la'yahay, kan kalena uu curyaan fadhiid ah yahay. Markaas ayuu Ciise koodii curyaanka ahaa, oo indhaha lahaa wuxuu saaray tunka ama qoorta midkii xoogga lahaa, aanse wax arki karin oo indhoolaha ahaa. Markaas ayuu indhoolihii wuxuu ku yiri: "La kac." Markaas ayaa indhoolihii wuxuu ugu jawaabay: "Anigu waan ka tabar yarahay inaan la kaco". Markaas ayaa Ciise, Calayhissalaamu, wuxuu ugu jawaabay: "Sideebaad, hadaba, xalay tabar aad ula kacdo u heshay?" Markay hadalkiisaas maqleen, dadkiibaa guulguulay, markaas ayuu koodii indhoolaha ahaa la kacay curyaankii tunka u saarnaa. Markii uu la kacay, ayaa curyaankii la siday gaaray oo furay khasnaddii Dihqaanka. Markaas ayaa Ciise yiri: "Xeeladdaas ayay xalay ku dhaqmeen, asagoo indhooluhu la kaashaday xooggiisii indhaha curyaanka.." Markaas ayay indhoolihii iyo curyaankii yiraahdeen: "Run ayuu sheegay", oo markaas ayay Dihqaanka maalkiisii ay ka xadeen u soo celiyeen, kaasoo khasnaddii ku celiyay. Dihqaankii wuxuu Maryama ku yiri: "Maalka nuskiis qaado." Waxay ugu jawaabtay: "Inaan qaato abuurtayda ma aha." Markaas ayuu Dihqaankii wuxuu ku yiri: "Hadaba wiilkaaga sii." Waxay ku tiri: "Xaaladdiisaaba tayda ka wayn, oo ma uu qaadanayo." Waqti gaaban kaddib, wiil uu Dihqaanku dhalay ayaa guursaday, markaas ayuu waliimo sameeyey, halkaasoo ay dad aad u fara badan oo reer Masar ah isugu yimaadeen. Markii ay dadkii wada cuneen oo cabbeen, ayay wada tageen. Markaas kaddib ayaa waxaa yimid dad aan la marti qaadin oo aan lagu tashan oo ka yimid dalka Shaam (waa dalalka maanta la kala yiraahdo Falasdhiin, Urdun, Siiriya iyo Lubnaan). Markaas ayaa Dihqaankii wuxuu arkay inay guriga ka dhammaadeen wixii la cabbi lahaa. Ciise markuu xaaladdaas arkay, iyo sida uu Dihqaanku uga xun yahay inay wixii martidaas cabbid ahaan loo siin lahaa ay dhammaadeen, wuxuu galay guri ka mid ah guryaha Dihqaanka, ayna yiilleen laba saf oo haamo ah.

Markaas ayuu Ciise, asagoo socda, gacantiisa mariyay afka haan walba: haantuu gacanta mariyaba cabbid ayaa kasoo buuxsama, ilaa ay haamihii oo idil wada buuxsameen. Dadkii waxay la yaabeen waxyaalaha wiilkaasi awoodda u yeeshay, iyo waynaanta waxa Ilaahay siiyay. Waqtigaasi Ciise wuxuu jiraa laba iyo toban sano. Laba iyo tobankaas sano Maryama wiilkeeda Ciise qof kale uma ayan dhiibi jirin, oo kuma aamini jirin, uma ayan oggolayn in qof kale cunno siiyo. Intay wiilkeeda garabka saarato, ayay waxay la aadi jirtay meeshay ku maqasho in beer laga goynayo, garabka kalena waxay suran jirtay dambiil ay ku gurato sabuulka ay beertaas ka hesho.

Ku noqoshada arliga Shaam

Markii uu Ciise ina Maryama laba iyo toban jirsaday, ayaa waxaa dhintay Boqorkii Quddus oo rabay inuu dilo, waxaana boqortinnimadii ka dhaxlay wiilkiisii la oran jiray Arklaws. Markaas ayaa waxaa Yuusuf u yimid Malag loo soo diray, una sheegay inuu Boqorkii Herodos uu dhintay, Ciisana haddii uu ku noqdo dalkiisii uusan khatar ku jirin, wuxuuna ku amray inuu Maryama iyo wiilkeeda Ciise ku celiyo magaalada Naasirah ee ku taal dalka Falasdhiin. Markii ay Maryama iyo wiilkeeda Ciise ku noqdeen Falsdhiin, ayagoo markaanna dameer sii raacay, Ciise waxaa lagu arkay mucjizooyin kale, oo ay ka mid ahaayeen inuu caruurta ay wada cayaaraan u sheegi jiray cunnooyinka iyo waxyaalaha ay hooyooyinkood guriga ugu qarin jireen, oo wuxuu midkood ku oran jiray: "Ma rabtaa inaan kuu sheego waxyaalaha ay hooyadaa kuu qirisay?" Markuu wiilkaas yiraahdo haa, wuxuu Ciise oran jiray: "waxay kuu qarisay waxaas iyo waxaas." Markaas ayuu inta wiilkaas gurigiisa ku noqdo ayuu hooyadiis wuxuu oran jiray: "I sii waxaad ii qarisay", markaasay ku oran jirtay: "Maxaan kuu qariyay?" Markaasuu wuxuu ku oran jiray: "Waxaas iyo waxaas." Markaas ayay waxay oran jirtay: "Yaa kuu sheegay?" Markaas ayuu oran jiray: "Ciise ina Maryama." Waxaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, arrintaas noogu sheegaya Aayadda sagaal iyo afartanaad ee Suuratu Aali Cimraana, wuxuuna yiri: **"Wa unabbi'ikum bi maa ta'kuluuna wa maa taddakhiruuna fii biyuutikum**(49)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Waxaanna idiinka warrami waxaad cuneysaan iyo waxaad ku kaydsateen guryihiinna(49)."

Nabinnimada Ciise, Calayhissalaamu

Markii uu Ciise ina Maryama afartan sano cimrigiisu gaaray, ayaa Nabinnimada Waxyigeedu u yimid: waxaa loo magacaabay Nabinnimo. Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Rasuulkuu dadka u soo dirayo wuxuu soo siiyay mucjizooyin, ka baxsan awoodda dadka loo soo diray, si ay u arkaan wax ay rumaysan karaan inuusan ka imaan axad aan Ilaahay ahayn, oo ayan ayagu awood u lahayn inay suubiyaan. Rasuul walba waxaa la soo siin jiray mucjizooyin ku saabsan waxa dadka loo diray ay aad uga xeel dheeryihiin. Tusaale ahaan Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa laga soo dhex saaray Quraysh oo ahayd dad carab ah, kuna xeel dheeraa

aftahammada, gabayyada iyo aqoonta afka. Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, wuxuu mucjizooyinkii badnaa oo uu soo siiyay midda ugu weyn ka dhigay Quraanka Kariimka ah, oo ah hadalka Ilaahay, wuxuuna Carabtii ku xujeeyey inay hal Suurad oo keli ah oo Quraan ah keenaan hadday run sheegeyaaan, oo ay awood u leeyihiin, haddii kalena inay Ilaahay iyo Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, rumeeyaan.
Dadkii Nabi Muuse, Calayhissalaam, loo diray waxay ku xeel dheeraayeen sixirka, markaas ayaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Nabigiisa soo siiyay mucjizooyin ay dadkaasi rumaysan karaan, sida ushiisii markii uu turo abeesada noqoneysay, ama gacantiisii markuu soo bixiyo iftiimeysay oo kaahu ka baxayay. Nabi Ciise, Calayhissalaamu, dadkii loo diray waxay ku xeel dheeraayeen cilmiga daaweynta dadka, markaas ayaa waxaa Ilaahay Nabigiisa soo siiyay mucjizooyin ay rumeysan karaan inuusa qof banii aadan ah sameyn karin, loona aqoonsado inay Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, ka yimaadeen.

Mucjizooyinkii Nabi Ciise, Calayhissalaamu

Mucjizooyinka Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Nabi Ciise, Calayhissalaam, uu soo siiyay, waxaa nooga warramaya Quraanka Kariimka ah, oo Aayadda sagaal iyo afartan ee Suuratu Aali Cimraana waxay leedahay: **"Wa Rasuulan ilaa Banii Israa'iila annii qad ji'tukum bi aayatin min Rabbikum anni akhluqu lakum min al dh-dhiini ka hay'ati al dh-dhayri fa anfukhu fiihi fa yakuunu dhayran bi ithni Allaahi wa ubri'u al akmaha wa al abrasa wa uxyi al mawtaa bi ithni Allaahi wa unabbi'ukum bimaa ta'kuluuna wa maa taddakharuuna fii buyuutikum inna fii thaalika la aayaatan lakum in kuntum mu'miniina**(49)**.**" Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Waa Rasuulkii Banii Israa'iil, (isagoo) uu dhihi: waxaan idiinla imid Aayad xagga Rabbigiin ka ahaatay, waxaanna idiinka abuurayaa dhoobada shimbiro oo kale, oo aan ku afuufi ooy noqon shimbir, idimka Ilaahay, waxaanna bogsiiyaa kuwa indha la'aan ku dhashay, midka baraska qaba, waxaanna soo nooleeyaa maydka idimka Ilaahay, waxaanna idiinka warrami waxaad cunaysaan iyo waxaad ku kaydsaneysaan guryihiinna, taasina waxay idiin tahay calaamad, haddaad xaqa rumeysaan(49)." Waxay Aayaddu noo sheegeysaa inuu Nabi Ciise, Calayhissalaamu, inta soo qaato dhoobo, oo uu dhoobadaas shimbir ka sameeyo, ayuu afuufi jiray, markaasaa shimbirkaas inta nolol yeesesho, idimka Ilaahay, ayuu duuli jirey. Waxaa la yiri shimbirka uu sameyn jiray wuxuu ahaa kabilliga ama fiidmeerta, taasoo inta duusha ugu abuuris kaamilsan, ayadoo uu naaso ama horaad iyo ilko leeyahay, xaydh ama caadana ku dhacdo. Markuu shimbirkaas duulo oo uu ka libro oo ka qarsoomo dadkii fiirsanayey, intuu dhinto ayuu soo dhici jiray. Sidoo kale wuxuu daaweyn jiray oo Ilaahay idimkiisa ku bogsiin jiray dadka ama indha la'aanta ku dhasha, ama sidooda u indha beelah, ama indha habeenada qaba oo maalintiina wax u jeedah, markii habeenku dumana oo ay mugdi noqotana aan wax arag. Sidoo kale wuxuu daaween jirey, oo Ilaahay idimkiisa ku bogsoon jiray, dadka baraska qabah. Labadaas cudurba, oo kala indha la'aanta iyo

baraskaba, waa laba cudur oo indhaha lagu arko oo loo jeedo, takhaatiirtuse, ayan awood u lahayn inay daaweeyaan. Indha li'ida loo dasho iyo baraskuba ilaa maanta midkoodna daawo ma laha.
Waxaa kale oo Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Ciise mucjizo ahaan u siiyay idimkiisa qof dhintay uu soo nooleeyo. Waxaa la sheegay inuu soo nooleeyey afar qof oo kala ahaa:
Kow. Nin la oran jiray Caazir, oo ay asaga saaxiib ahaan jireen. Markuu dhimanayay ayaa walaashiis u cid dirtay Ciise ayadoo u fartay inuu walalkiis Caazir dhimanayo. Caazir iyo walaashiis waxay degganaayeen meel guriga Ciise u jirta saddex maalmood oo socod ah. Ciise iyo asxaabtiisii ayaa soo aaday, waxayse yimaadeen ayadoo uu Caazir dhintay.
Markaas ayaa Ciise wuxuu ninka walaashiis ku yiri: "Ina wadoo waxaad na geysaa qabrigiisa", halkaasoo ay geysey. Markuu qabriga tegey, Ciise, Calayhissalaamu, Ilaahay ayuu baryay, markaasuu Caazir inta istaagay qabrigii kasoo baxay. Ninkaasi muddo ayuu noolaa oo soo nooleyntaas kaddib caruur baaba loo dhalay.
Laba. Nabi Ciise, Caleyhissalaam, ayaa waxaa la soo hormariyay janaazada mayd la sido, markaas ayaa Ciise Ilaahay baryay, markaas ayaa ninkii maydka ahaa, oo ay habar cajuuzo ah oo da' weyn dhashay, sariirti lagu siday, waa nacashkiiye, kusoo fariistay, raggii siday tumankooda kusoo degay, dharkiisiiba labbistay, markaas ayuu sariirtii ama nacashkii lagu siday inta tunka saartay la aaday gurigiisa. Markaas kaddib ayuu muddo noolaa oo caruur baaba loo dhalay.
Saddex. Wuxuu Nabi Ciise, Caleyhissalaam, idimka Ilaahay ku soo nooleeyey gabadhii uu dhalay Caashirka, ninkii cushurka qaadi jiray, waana qofka zakada maalka ama canshuurta soo aruuriya, oo khaznadda Dawladda ku soo shubah. Ayadoo shalay oo kale dhimatay, ayaa Ciise u Alle baryay, markaas ayay soo noolaatay, oo nooleyd oo ay ilmo dhashay.
Afar. Nabi Ciise, Caleyhissalaam, intuu tegey qabriga wiilkii Nabi Nuux oo magaciisu ahaa **Saam**, ayuu wuxuu Ilaahay ku baryay Magaciisa Cathiimka oo haddi lagu baryo uu yeelo. Markaas ayaa Saam, oo timaha madaxiisu bar cirroobay, ayadoo aan dadku zamankaas cirroobi jirin, qabrigii kasoo baxay oo yiri: "Ma qiyaamihii baa dhacay?" Ciise wuxuu ku yiri: "Maya, laakiin Ilaahay ayaan waxaan ku baryay Magaciisii Weynaa." Markaas ayaa Ciise wuxuu Saam ku yiri: "Dhimo." Saam wuxuu yiri: "Laakiin shardhi in Ilaahay iga magan geliyo sakaraatka mawtka." Ciise waa u Alle baryey, Ilaahna waa ka aqbalay, oo sidaas ayaa Saam ku dhintay.

Ibliis

Waxaa Imaam Dhabari, uu Kitaabkiisa Taariikhtha mujalladka koowaad, bogga saddex boqol afar iyo konton nooga warramayaa sida uu Ibliis ku hindisay inuu Nabi Ciise, Calayhissalaamu, dadka uga dhaadhiciyo, inuu yahay Ilaah, ama wiilka Ilaah ama Ilaah labaad oo kale, siduu hore asxaabtiisa uga ballan qaaday inuu rajeynayo inuu dad badan ku baadiyeeyo. Nabi Ciise waxaa isugu imaan jiray kumanyaal qof oo buka oo daawo doonaya, markaas

ayuu u Alle bari jiray, inuu Ilaahay bogsiiyo. Ibliis ayaa wuxuu arkay Nabi Ciise, oo meel jiir ah oo laba buurood u dhexeysah kumanyaal qof oo buktah la joogah, markaas ayuu una adkeysan wayay, waxna ka qaadi waayay. Markaas ayaa inta Ibliis uu iska soo dhigay nin da' wayn (oo Ilaahay Subxaanahu wa Tacaalaa, wuxuu Malaa'igta iyo shayaadhiintaba siiya awood inay dad isku soo ekeysiiyaan, oo waliba qofkay doonaan, oo aan Nabi ahayn, isku soo ekeysiiyaan) oo qurux iyo haybad wayn leh, wuxuuna soo watay labo shaydhaan oo muruxsan oo madax adag, oo ayaguna dad isku soo ekeysiiyay, sidiisa oo kale. Markaas ayay dadkii soo dhex galeen. Dadkii waxay la yaabeen oo soo jiidatay haybaddi iyo quruxda Ibliis, markaas ayay xaggiisa u soo jeesteen, markaasuu waxay la yaabaan uga sheekeeyey. Waxyaalaha uu Ibliis dadkaas uga sheekeeyey waxaa ka mid ahaa asagoo yiri: "Xaaladda ninkaan Ciise ah waa mid lala yaabo: markuu dhashay wuu hadlay, dad mayd ah oo dhintay ayuu soo nooleeyey, waxaan loo jeedin oo ayan ishu gaarin ayuu ka warramay, bukaankii ayuu bogsiiyay. Marka kan waa Ilaahay." Mid ka mid ah labadii shaydhaan oo la socotay ayaa asaguna wuxuu yiri: "Odayahaw, waxaan aqoon ku dhisnayn ayaad ku hadashay, waxaad sheegtayna waxay ahaayeen wax xun: uma habboona Ilaahay inuu dadka isku muujiyo, oo la arkoh, iyo inuu haweeney ilma galeenkeeda dego, haween uurkeeduna ma qaado oo ma deeqoh, laakiin midkaan waa wiilka Ilaahay." Shaydhaankii saddexaad, oo Ibliis la socday, ayaa isaguna wuxuu yiri: "Labadiinnuba waxaan fiicnayn ayaad sheegteen, oo labadiinnuba runtii waad seegteen ood gafteen, oo aqoon darraad ku hadasheen: Ilaahay uma habboona inuu wiil yeesho, ee kan waa Ilaah kale oo Ilaahay Ilaahnimada la wadaaga". Markay saddexdoodii intaas yiraahdeen, way libreen, oo kaddib lama arag." Waxaa halkaas ku cad in caqiidada krishtaanka oo oraneysaa inuu Ciise, Calayhissalaamu, uu yahay Ilaah, ina Ilaah, ama Ilaah kale, ay ka timid Ibliis laftiisa, oo ay tahay caqiido uu keenay shaydhaan, taasoo gaalnimadooda u sabab ah, ahna aasaaska caqiidad ay muslimiinta uga duwan yihiin.

Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, ayaan caqiidadaas ka magan galnay. Muslimiintu waxay aaminsanyihiin in Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, uu yahay Ilaah keli ah, aan la dhalin, aan aabbe iyo hooyo lahayn, aan haween guursan, aan caruurna dhalin, aan cidna u baahnayn ee loo baahanyahay, ka fiyow baahi iyo naaqusnimo. Waxaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Aayadda boqol kow iyo toddobaatan ee Suuratu Nisaa'i noogu sheegay: **"Yaa ahla Al Kitaabi laa taghluu fii diinikum wa laa taquuluu calaa Allaahi illaa Al Xaqqa innamaa Al Masiixu Ciisaa ibnu Maryama Rasuulu Allaahi wa Kalimatuhu alqaahaa ilaa Maryama wa Ruuxun Minhu fa aaminuu bi Allaahi wa Rasuulihi wa laa taquuluu thalaathatun intahuu khayran lakum innamaa Allaahu Ilaahun Waaxidun Subxaanahu an yakuuna Lahu waladun Lahu maa fii Al Ssamaawaati wa maa fii Al Ardi wa kafaa bi Allaahi Wakiilan**(171)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Ehelu Kitaabkow, ha ku xadgudbina Diintiinna, hana ku dhihina Ilaah waxaan Xaq ahayn: Al Masiixu Ciise ina Maryama waa uun Rasuulka Ilaahay iyo Kalimadiisa uu ku tuuray Maryama, iyo Ruux Xaggiisa ah, ee rumeeya Ilaahay iyo Rasuulladiisa, hana dhihina Saddex (Ilaah): reebtooma, saasaa

idiin khayr roon. Ilaah waa uun Ilaah Kali ah, waana ka nasahanyahay in ay ilmo u sugnaadaan. Waxaa u sugnaaday oo uu leeyahay waxa Samawaadka iyo dhulka ku sugan, Ilaahayna ku filan Wakiil(171)."

Gargaarayaalka Nabi Ciise, Calayhissalaamu

Waxay Rasuulnimada Nabi Ciise socota, oo uu Risaaladii Ilaahay u soo dhiibay dadkii loogu soo dhiibay u gudbinayay muddo saddex sano ah. Rasuul kasta, si uu Risaaladii loo soo dhibay dadkii loogu soo dhiibay u gaarsiiyo, wuxuu u baahnaa oo lahaa gargaarayaal xoojiyah oo uu ku tiirsado xag xoog, oo ka celiya kuwa raba inay u diidaan fidinta Risaaladiisa ayagoo ama dilaya ama dhibaato kale u geysanaya, xag qalbi iyo nafba, Risaaladana la faafiya oo dadka gaarsiiyah. Waxaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Aayadaha laba iyo konton iyo saddex iyo konton ee Suuratu Aali Cimraana, noogu sheegay in markii uu Nabi Ciise dadkii loo diray, oo ahaa yuhuudda ay diideen inay rumeeyaan , ayna diideen wax aan gaalnimo ahayn, ayna colaadiyeen, ayuu Nabi Ciise Caleyhissalaam, la hadlayaa dadkii, isagoo weydiinaya inta doonayesa inay u gargaarto. Waxay Aayaddu leedahay: **"Falammaa axassa Ciisaa minhum al kufra qaala man ansaarii ilaa Allaahi qaala al Xawwariyyuuna naxnu Ansaaru Allaahi aamannaa bi Allaahi wa ash-had bi annaa Muslimuuna**(52)**Rabbanaa aamannaa bi maa anzalta wa ittabacnaa Al Rrasuula fa aktubnaa maca al sh-shaahidiina**(53)**."** Aayadaha macnohoodu waxaa weeye: "Markuu ka kasay Ciise xaggooda gaalnimo, yuu yiri: yaa iigu gargaari Ilaahay? Waxayna yiraahdeen Xawaariyiintii (gargaarayaashii): annagaa ah gargaaraha Ilaahay (Diintiisa), waxaan rumeynnay Ilaahay, ee marag ka noqo inaan muslimiin nahay(52)Rabbigeenow, waan rumeynnay waxaad soo dejisay, waxaanna raacnay Rasuulka, ee nagu qor (oo naga dhig) la jirka markhaatiyada (oo ah Ummadda Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam)." Waxaa kale oo Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, uu Aayadda afar iyo tobnaad ee Suuratu Al Saffi noogu sheegayaa gargaarayaalkaas, wuxuuna yiri: **"Yaa ayuuhaa allathiina aamanuu kuunuu Ansaara Allaahi kamaa qaala Ciisaa ibnu Maryama li Al Xawwariyyiina man Ansaarii ilaa Allaahi qaala Al Xawwariyyuuna naxnu Ansaaru Allaahi fa aamanat dhaa'ifatun min banii Israa'iila wa kafarat dhaa'ifatun fa ayyadnaa allathiina aamanuu calaa caduwwihim fa asbaxuu thaahiriina**(14)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Dadka xaqa rumeeyow, noqda gargaarayaasha Ilaahay, sida kuwii Nabi Ciise ibnu Maryama Saaxiibbadiis ahaa (Xawaariyiinta) ee uu ku yiri: yaa Ilaahay iila gargaara? Markaas ayay dheheen: annagaa ah gargaarayaashii Ilaahay. Kadib ay xaqa rumeysay koox Banii Israa'iil ka mid ah, kooxna ay ka gaalowday. Ilaahay ayaana ayyiday (xoojiyay) kuwii xaqa rumeeyey (kana adkaadeen cadawgoodii), oo iyagu ka muuqdeen (ka taliyeen) dhulkii(14)."

Gargaarayaalka Nabi Ciise, Caleyhissalaam, waxaa la oran jiray Xawaariyyiin, tiradooduna waxay ahayd laba iyo toban nin. Magacdoodu waxay ahayd: Butrus, Yacquub bin Zabadaa iyo walaalkiis Yuxannis bin

Zabadaa, Andreus, Philipps, Abrathlamaa, Mattaa, Toomaas, Yacquub bin Xalqiyaa, Tadaawus, Fataatyaa iyo Yuudus. Waxaa la yiri kan guriga uu joogay Nabi Ciise, Calayhissalaamu, yuhuudda iyo romaanka doonayey inay dilaan tusay wuxuu ahaa Yuudus. Waxaa kaloo la yiri waxaa tusay nin aan Xawaariyiinta ka mid ahayn, magaciisana la oran jiray Serjis, oo markuu keenay gurigii, inta Ciise loo ekeysiiyay isaga la dilay, Ciisana Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, guriga saqafkiisa kore ka saaray.

Miis cunno saarantahay

Xawaariyiinta ayaa waxay maalin Nabi Ciise ku yiraahdeen: "Rabbigaa samada ma nooga soo dejin karaa miis cunno saarantahay?", markaas ayaa Nabigu wuxuu ku yiri: "Ilaahiin ka cabsada oo dhawrsada haddaad mu'miniin tihiin." Waxay yiraahdeen: "Waxaan dooneynaa inaan ka cunno, qalbigeenuna ku xasilo, oo aan ogaanno inaad runta noo sheegtay." Imaam Ibn Kathiir, Allaha u naxariistee, oo nooga sheekeynaya arrinta miiskaas ku saabsan, isagoo ka wariyay Cabdu Allaahi ibnu Cabbaas iyo Salmaan Al Faarisi, kulligood Allaha Raalli ka noqdee, wuxuu kitaabkiisa Qisas Al Anbiyaa', bogga shan boqol iyo labaatan ku yiri: "Waxaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Aayadaha boqol kow iyo toban ilaa boqol shan iyo toban ee Suuratu Al Maa'idah, oo ahba miiska Suuraddaan loogu magac daray ayadoo maa'idah afka carabiga lagu yiraahdo miiska ay cunnadu saarantahay, ku yiri: **"Ith qaala Al Xawwaariyyuuna yaa Ciisaa ibna Maryama hal yastadhiicu Rabbuka an yunazzala calaynaa maa'idatan mina Al Ssamaa'i qaala ittaquu Allaaha in kuntum mu'miniina**(112)**Qaaluu nuriidu an na'kula minhaa wa tadhma'inna quluubunaa wa naclama an qad sadaqtanaa ma nakuuna calayhaa mina al sh-shaahidiina**(113)**Qaala Ciisaa ibnu Maryama Allaahumma Rabbanaa anzil calaynaa maa'idatan mina Al Ssamaa'i takuunu lanaa ciidan li awwalinaa waa aakhirinaa wa aayatan Minka wa arzuqnaa wa Anta Khayru Al Rraaziqiina**(114)**Qaala Allaahu Innii munazziluhaa calaykum fa man kafara bacdu minkum fa Innii ucath-thibuhu cathaaban laa ucath-thibuhu axadan min al caalamiina**(115)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Xusuuso markay dheheen Xawaariyiintii: Ciise Ibnu Maryamow, ma karaa Rabbigaa inuu nooga soo dejiyo Miis Cunno ah Samada? Wuxuu ku yiri: ka dhawrsada Ilaahay, haddaad Mu'miniin tihiin(112)Ooyna dheheen: waxaan dooneynaa inaan wax ka cunno oo ay xasisho quluubteennu, oon ogaanno inaad run noo sheegi, oo aan noqonno kuwa ka marag kaca(113)Uuna yiri Ciise ina Maryama: Ilaahayow, Rabbigeenow, nooga soo deji miis cunno saarantahay Samada, ee u noqda ciid kaannaga hore iyo kaannaga dambe, iyo Aayad Xaggaaga ka ahaatay, nana arzaaq, adaa arzaaqe u khayr roone(114)Wuxuuna yiri Ilaah: waan ku soo dejin korkiinna ee ciddii gaalawda kaddib, oo idinka mid ah waxaan cathaabi cathaab aanan cathaabayn ruux caalamiinta (Jinniga iyo Insiga) ka mid ah(115)." Ciise ayaa wuxuu mar amray Xawaariyiinta inay saddex maalmood soomaan. Markay saddexdii soomeen, waxay Ciise weydiisteen inuu Ilaahay samada uga soo dejiyo miis cunno saaran tahay, si

ay uga cunaan, quluubtooduna ku xasisho oo ku degto in Ilaahay soonkoodii aqbalay, su'aashoodiina u yeelay, ayagana u noqota ciid ay ku afuraan, kuna filnaata dhammaantood, kooda hodanka ah iyo kooda saboolka ahba. Ciise wuxuu kula taliyay inay arrintaas ka haraan, isagoo uga baqay in haddii loo yeelo ay shukrigeedii gudi waayaan, shuruudeheediina ka soo bixi waayaan. Ayaguna waxay ku adkeysteen inuu Ilaahay weydiintooda u gudbiyo. Markaas ayaa Nabi Ciise, Calayhissalaamu, intuu salaad u istaagay, oo madaxa laadlaadiyay, oo booyay, ayuu tukaday, Ilaahayna ka baryay inuu su'aashooda ka aqbalo. Markaas ayaa ayagoo u jeeda, miis ay laba qoolleey, ama laba daruurood dandaaminayaan, samada kasoo degatay, oo si tartiib tartiib ah u soo degatay, ilaa ay Ciise hortiisa ku xasishay. Markay soo deganeysey, Ciise wuu Alle baryayey, oo wuxuu lahaa: "Ilaahow, Naxariis iyo barako iyo nabadgelyo nooga dhig, oo cathaab ha nooga dhigin." Miiska waxaa ku daboolnaa maro, markaas ayaa inta Ciise istaagay maradii ka feyday, isagoo oranaya: "Bismi Allaahi kan wax rizqiya ugu khayr badan". Markuu marada ka fayday, waxay arkeen inay miiska saarnaayeen toddoba mallay ama kalluun ah, toddoba rooti ama muufo, iyo waxaa la yiri khal, iyo miro. Miiska iyo waxa saaranna aad ayay u carfoonaayeen. Waxaana Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, miiskaas ku abuuray Asagoo yiri: "Ahaw" oo uu sidaas ku ahaaday. Markaas ayaa Ciise ku amray inay cunnadaas cunaan. Way diideen inay cunaan jeer uu isagu cuno, markaas ayuu ku yiri: "Adinka waydiistaye, bilaaba cuniddiisa". Markay diideen inay bilaabaan cuniddiisana, wuxuu ugu yeeray dadka saboolka ah, kuwa gaajoon iyo kuwa jirran oo ilaa kun iyo saddex boqol gaarayey inay cunaan. Intii cuntay oo bugtayba way bogsoodeen, intii aan cunin way ka shallayday inayan cunin. Riwaayado kale waxay leeyihiin waxaa miiskaas saarna hilib iyo rooti, ama hal mallay ah oo weynan badan; ama Malaa'ig ayaa sidday. Riwaayadahaas oo dhanna isma diidayaan. Shardiga ku xirnaa miiskaas cunnadu saarantahay wuxuu ahaa, sida ay Aayaddu noo sheegtay, in qofkii soo dejintaas kaddib gaaloobah, in la cathaabi doono cathaab aan axad kale oo jinni ama insi ah la cathaabi doonin. Intii shardhigaas kasoo bixi wayday, waxaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, ka dhigay doofaarro iyo daanyeerro, oo markay sidaas saddex maalmood ahayeen way dhinteen. Runtana Rabbi ayaa og,

Dadka Nabi Ciise, calayhissalaamu, loo diray

Waxaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Aayadda sagaal iyo afartan ee Suuratu Aali Cimraana noogu sheegay dadka Nabi Ciise, Calayhissalaamu, loo diray, wuxuuna yiri: **"Wa Rasuulan ilaa Banii Israa'iila**(49)**."**Aayadda macneheedu waxaa weeye:"Wa Rasuulka Banii Israa'iil(49)." Waxaa kale oo Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Aayadda lixaad ee Suuratu Al Saffi noogu sheegay: **"Wa ith qaala Ciisaa ibnu Maryama yaa Banii Israa'iila innii Rasuulu Allaahi ilaykum**(6)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Xusuusta marka Nabi Ciise ibnu Maryama ku yiri Banii Israa'iil: waxaan ahay Rasuul Ilaahay idiin soo diray(6)." Marka Nabi Ciise waxaa loo soo diray ubadkii Nabi Israa'iil oo ah dadka yuhuud isku bixiyay, oo dadka

krishtaanka la yiraahdo, ayaga loomaba soo dirin. Hadaba, sideebey dadka krishtaanka ah Nabi Ciise, Calayhissalaamu, ku raacen, oo ay millaaddaasu Roma ku gaartay, in kastoo ay ka been sheegeen oo yiraahdeen waa Ilaah? Su'aashaas waxaa nooga jawaabay Imaam Dhabari, Allaha Raalli ka noqdee, oo Kitaabkiisa Taariikhda, mujalladka kowaad bogga saddex boqol shan iyo konton1, wuxuuna yiri: "Boqorka Roma, oo dalka Falasdhiin ay boqortooyadiisa ka tirsanayd, isaguna ahaa kuwa asnaamta caabuda, magaciisuna ahaa Tiberius ina Augustus, ayaa wuxuu maqlay in dalkaas Xawaariyiintii la cathaabay, waxaana lagu yiri: "Nin ka mid ah dadkaas aad xukuntid oo dalkaas deggan, una dhashay reer Banii Israa'iil, ayaa inta la colaadiyay, la dilay, oo la sulbay (macnaha salbidda waxaa weeye ayadoo laba qori inta si istillaab ah la isugu xiro, ayaa qofkii la dilayay geeska kore waxaa loogu xirayaa madaxiisa, gees dhinac ahna gacan, geeska dhinaca kalena gacantii labaad, geeska hooseeyana labadii lugood ayaa lagu xirayaa: waa la warayaa, waana muuqaalka kirishtada). Ninkaasu wuxuu u sheegi jiray inuu yahay Rasuul Ilaahay u soo diray, wuxuuna tusay waxyaalo ay la yaabaan, dadkii dhintay ayuu soo nooleeyey, bukaankoodii ayuu bogsiiyay, dhoobada ayuu shimbiro ka sameeyay oo inta uu afuufay ay noolaatay oo duushay idimka Ilaahay, wuxuuna u sheegi jiray waxyaalaha ka qarsoon." Boqorkii intuu carooday, ayuu wuxuu yiri: "Maxaad arrinka ninkaas iyo dadkiisa iigu sheegi weydeen? Wa Allaahi haddaan ogaan lahaa, uma aanan oggolaadeen inay dilaan." Markaas ayuu wuxuu u cid diray Xawaariyiintii, oo markii loo keenay, intuu raggi waday kala wareegay uu ka wareystay Diinta Ciise iyo xaalkiisa. Markaas ayay uga warrameen. Markaas ayuu Diintooda galay. Markaas ayuu ninkii magaciisu ahaa Serjis, oo Ciise Ilaahay u ekeysiiyay, ayaguna ay u malaynayaan inuu yahay Ciise, oo ay sidaas Ciise ku dileen, ayuu qorigii uu ku dhintay, oo uu wali ku xirnaa, inta ka soo furay oo maydkiisii duugay, oo qorigii uu ku xirnaa soo qaatay oo karaameeyey, oo dheehay. Boqorkii, arrintaas daraadeed, uu u maleynayo inay Ciise dileen, ayuu Banii Israa'iil ku colaadiyay, oo dad badan ka dilay." Colaadaas ilaa maanta way socotaa, oo dadka krishtaanka ah way neceb yihiin yuhuudda, ayagoo u haysta inay Ilaahoodii ka dileen. Sidaas ayaa krishtaannimadu ku gashay Roma, halkaasoo ay adduunka intiisii kale uga faaftay. Waaba ayada la yiraahdo: dadku diinta boqorradooda ayay qaataan. Dawladdii Roma ee Quddus xukuntay, waxaa halkaas ka cad, inayan laba socon jiritaanka Ciise, iyo axwaashiisaba, oo ay warmoog ka ahaayeen, oo aan Ciise ayagaba loo dirin, oo markay ogaadeenna ay ku baadiyoobeen. Waxaa xukunka Quddus Boqorka Roma wakiil uga ahaa, oo Boqorkii Quddus ahaa Herodos kii Yaraa, oo ah wiilka Herodos kii Weynaa, oo doonayay inuu dilo markii uu Ciise dhashay. Kaddib, habeenkay taariikhdu ahayd sideed iyo tobanka bisha Luulyo ee sanadka afar iyo lixdan ee Miilaadiga ayaa sabab siyaasadeed magaalada Rooma loo gubay, oo dalool magaaladaas ahi gubatay. Boqorkii markaas Rooma ka talinayey, magaciisuna ahaa Nerone, ayaa wuxuu gubiddaas dusha ka saaray oo uu ku eedeeyey krishtaanka. Markaasaa krishtaankii la laayey, lana xabbisay.

Diinta Nabi Ciise, Calayhissalaamu

Waxaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Aayadda sagaal iyo tobnaad ee Suuratu Aali Cimraana noogu sheegay inay Ilaahay agtiisa ayan jirin diin kale oo aan Islaam ahayn, sida diin la yiraahdo yuhuudiyya, ama diin la yiraahdo krishtaan, ama hindus, ama kuwa kaleba, wuxuuna yiri: **"Inna Al Diina cinda Allaahi Al Islaamu**(19)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Diintuna (xaqa ah) Ilaahay agtiisa waa Islaamka(19)." Wuxuu kale oo Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Aayadda shan iyo sideetan ee Suuratu Aali Cimraana ku yiri: **"Wa man yabtaghi ghayra al Islaami Diinan fa lan yuqbala minhu wa huwa fii al Aakhirati mina al kh-khaasiriina**(85)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Ruuxii doona Diin aan Islaamka ahayn, laga aqbali maayo, Aakhirana wuxu noqon kuwa khasaaray(85)." Waxaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Aayadda shan iyo labaatanaad ee Suuratul Anbiyaa'i ku yiri: **"Wa maa arsalnaa min Rrasuulin illaa nuuxiya ilayhi annahu laa ilaaha illaa Anaa fa acbuduuni**(25)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Rasuulkaan hortaa dirayba waxaan u waxyoonnay Ilaah aan Aniga ahayn ma jiro ee i caabuda(25)." Waxaa uu Muslim Abaa Hurayrah ka wariyay inuu ka wariyay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Anaa awlaa al nnaasi bi Ciisaa, Calayhi Al ssalaamu, wa al Anbiyaa'u ukhwatun awlaadu callaatin, wa laysa baynii wa bayna Ciisaa Nabiyyun."** Xadiith macnihiisu macnihiisu waxaa weeye: "Anigaa dadka ugu xiga Ciise ina Maryama adduun iyo Aakhiraba". Waxaa la yiri: "Maxaa u sabab ah Rasuulka Ilaahayow?" Wuxuu , Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri**:** "Nabiyadu waa walaalo, hooyooyin kala duwan un baa dhalay mooyee, Diintooduna waa mid, aniga iyo isagana Nabi nooma dhexeyn." Waana Xadiithka saddex kun iyo afar boqol iyo afar iyo afartan ee Saxiixu Al Bukhaarii. Marka Diinta keli ah oo uu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, samada ka soo dejiyay waa Islaam. Soo ma aadana arag in uu Nabi Israa'iil iyo wiilashiisuba, Allaha dhammantood u naxariistee, ay leeyihiin waxaa nahaay muslimiin, sida noo sheegeyso Aayadaha boqol laba iyo soddon iyo boqol saddex iyo soddon ee Suuratu Al Baqarah: **"Wa man yarghabu can millati Ibraahiima illaa man safiha nafsahu wa la qad isdhafaynaahu fii al ddunyaa wa innahu fii al Aakhirati la mina al ssaalixiina**(130)**Ith qaala lahu Rabbuhu aslam qaala aslamtu li Rabbi al caalamiina**(131)**Wa wasaa bihaa Ibraahiimu baniihi wa Yacquubu yaa baniyya inna Allaaha isdhafaa lakum al Ddiina fa laa tamuutunna illaa wa antum Muslimuuna**(132)**Am kuntum shuhadaa'a ith xadara Yacquuba al mawtu ith qaala li baniihi maa tacbuduuna min bacdii qaaluu nacbudu Ilaahaka wa Ilaaha aabbaa'ika Ibraahiima wa Ismaaciila wa Isxaaqa Ilaahan Waaxidan wa naxnu Lahu Muslimuuna** (133)**".** Aayadaha macneheedu waxaa weeye: "Yaa naca Diinta Nabi Ibraahim ruux xumeeya naftiisa mooyee, waana doorannay Nabi Ibraahim adduunyada, Aakhirana wuxuu ka mid noqon kuwa suusuuban(130)Xusuuso markuu Ilaahay ku yiri: hoggaansan (islaan) oo uu yiri: waxaan u hoggaansamay (u islaamay) Ilaaha Caalamiinta(131)Wuxuu Ibraahiim kala dardaarmay arrinkaas caruurtiisa.

Nabi Yacquubna wuxuu u dardaarmay isaguna caruurtiisa, wuxuuna yiri: "caruurtayday Ilaahay wuxuu idiin doortay diinta islaamka ee ha dhimanina adinkoo aan muslin ahayn(132)Miyaad joogteen (Yuhuuday) marka geeridu u timid (Nabi) Yacquub, markuu ku yiri caruurtiisa: maxaad caabudaysaan gadaashay? ayna dheheen waxaan caabudaynaa Ilaahaaga iyo Ilaaha aabayawgaa Ibraahiim, Ismaaciil iyo Isxaaq, Ilaah kaliya, isaaganna u hoggaansameynaa(133." Marka Nabi Ibrahiim iyo ubadkiisii, oo uu Nabi Ciise ka mid yahay, waxay ahaayeen muslimiin. Dadka krishtaan loo yaqaaan muslin ma aha ee waa gaalo, in kastoo ay leeyihiin waxaan rumeysannahay Ciise, in kastoo ay leeyihiin isku Ilaah ayaan caabudnaa. Sababta gaalnimadoodaas waxay tahay ayagoo Ilaahayo kale Ilaaha Xaqqa ah la caabuday, oo yiri Ciise waa Ilaah, Maryamana waa Ilaahad Ruuxul Quddusna waa Ilaah, Ilaahna waa Ilaahi aabaha ahaa. Waxaa u daliil ah Aayado badan oo Quraanka Kariimka ah. Aayadahaas aan qaar ka xusno. Waxaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Aayadaha laba iyo toddobaatan iyo saddex iyo toddobaatan ee Suuratu Al Maa'idah ku yiri: **"La qad kafara allathiina qaaluu inna Allaah huwa Al Masiixu ibnu Maryama wa qaala Al Masiixu yaa Banii Israa'iila ucbuduu Allaaha Rabbii wa Rabbakum Innahu man yushrik bi Allaahi fa qad xarrama Allaahu calayhi Al Jannata wa ma'waahu Al Nnaaru wa maa li al th-thaalimiina min ansaar**(72)**La qad kafara allathiina qaaluu inna Allaaha thaalithu thalaathatin wa maa min ilaahin illaa Ilaahun Waaxidun wa in lam yantahuu cammaa yaquuluuna la yamasanna allathiina kafaruu minhum cathaabun aliimun**(73)." Aayadaha macnohoodu waxaa weeye: "Waxaa gaaloobay kuwa yiri Ilaah waa Masiix ibnu Maryama, wuxuuna yiri Masiix (Ciise) Banii Israa'iilow: caabuda Ilaah ee ah Ilaahay iyo Ilaahiin. Qofkii u shariik yeelah Ilaah (la wadaajiya), wuxuu Ilaah ka xarrimay Jannada, wuxuuna ku hoyan Naarta, Thaalimna ma helo gargaare(72)Waxaa gaaloobay kuwii yiri: Ilaahay waa saddex Midkood. Ilaah kaliyana mooyee, Ilaah kale ma jiro. Haddayanna ka joogin waxay oranayaan, waxaa taaban kuwa gaaloobay oo ka mid ah cathaab daran(73)." Waxaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Aaayadda boqol lix iyo toban ee Suuratu Al Maa'idah ku yiri: **"Wa ith qaala Allaahu yaa Ciisaa ibna Maryama a'anta qulta li al nnaasi ittakhithuunii wa ummiya ilaahayni min duuni Allaahi qaala Subxaanaka maa yakuunu li an aquula maa laysa lii bi xaqqin in kuntu qultuhu fa qad calimtahu taclamu maa fii nafsii wa laa aclamu maa fii Nafsika Innaka Anta Caalimu al ghaybi**(116)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Xusuuso markuu Ilaahay yiri: Ciise ina Maryamow, ma adaa ku yiri dadka ka yeesha ani iyo hooyaday Ilaahyo Ilaahay ka sokow? Uuna yiri: waad nazahantahay, igumana habboona inaan iraahdo waxaanan xaq u lahayn. Haddaan irina waad ogaan lahayd, waxaadna og tahay waxa naftayda ku sugan, aniguse ma ogi waxa naftaada ku sugan. Adiga unbaa ah Kan waxa maqan og(116)." Waxaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Aayadaha soddon iyo kow iyo soddon ee Suuratu Tawbah noogu sheegay: **"Wa ith qaalati Al Yuhuudu Cuzayrun ibnu Allaahi wa qaalati Al Nnasaaraa Al Masiixu ibnu Allaahi thaalika qawluhum bi afwaahihim yudaahi'uuna qawla allathiina min qablu**

qaatalahumu Allaahu anna yu'fakuuna(30)**Ittakhathuu axbaarahum wa ruhbaanahum arbaaban min duuni Allaahi wa Al Masiixa ibna Maryama wa maa umiruu illaa li yacbuduu Ilaahan Waaxidan laa ilaaha illaa Huwa Subxaanahu cammaa yushrikuuna**(31)**."** Aayadaha macnohoodu waxaa weeye: "Waxay dhaheen yuhuudii: Cuzayr waa wiil Ilaah dhalay, krishtaankuna waxay yiraahdeen: Ciise waa wiil Ilaah dhalay. Kaasina waa hadalkooda oo ay afka ka yiraahdeen, waxay shabbahaan, oo ku dayanayaa, kuwii horay u gaaloobay hadalkoodii. Ilaah ha laayo, ee xaggee loo leexin(30)Waxay ka yeesheen culimadoodii iyo suufiyadoodii Ilaahyo Ilaahay ka sokow, iyo Ciise ina Maryama (oo isagana Ilaah ayay ka dhigteen), waxaan cibaadada Ilaahay lama farin. Ilaah mooyee Ilaah kalena ma jiro, waana ka nasahanyahay waxay la wadaajiyeen(31)." Marka dadka krishtaanka ah, iyo kuwa ah faricii Nabi Israa'iil, oo loo yaqaan yuhuud, in kastoo ay muslimiinta ku leeyihiin isku Ilaah ayaan caabudnaa, hadana, sida Aayadahaas noo sheegeen, muslin ma ah ee waa gaalo, haddayan ka tawbad keenin oo soo islaaminna, waa gaalo, ayagoo Ilaah, Subxaanahu wa Tacaalaa, shariik u yeelay, oo caabudaddii uu keligiis lahaa cid kale la wadaajiyay.

Kitaabka Injiilka

Waxaa Imaam Ibn Kathiir uu Kitaabkiisa Qisasu Al Anbiyaa'i noogu warinayaa inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Unzilati Al Ttawraatu calaa Muusaa fii sitti layaalin khalawna min shahri Ramadaana. Wa Nazala Al Zzabuuru calaa Daa'uuda fii ithnatay casharata laylatin khalat min shahri Ramadaana, wa thaalika bacda AI Tawraati bi arbaca mi'atin sanatin wa ithnayni wa thamaaniina sanatin. Wa unzila Al Injiilu calaa Ciisaa ibnu Maryama fii thamaaniya casharatin khalat min shahri Ramadaana, bacda Al Zzabuuri bi alfi caamin wa khamsiina caaman. Wa unzila Al Furqaanu calaa Muxammadin, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallama, fii arbaci wa cishriina min shahri Ramadaana. "**Xadiith Macnihiisu waxaa weeye: "Tawraadda waxaa Nabi Muuse lagu soo dejiyay markay lix iyo labaatan habeen ka gudbeen bisha Ramadaan; Kitaabka Zabuur waxaa lagu soo dejiyay Nabi Daa'uud markay bisha Ramadaan labo iyo toban habeen ka gudbeen, afar boqol iyo labo iyo sideetan sano Tawraad ka bacdi; Nabi Ciisana waxaa Injiilka lagu soo dejiyay markay sideed iyo toban habeen ka gudbeen bisha Ramadaan, kun iyo konton sano soo dejinta Zabuur ka bacdi. Quraankana waxaa lagu soo dejiyay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhim wa Sallam, afar iyo labaatanka bisha Ramadaan"
Waxaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Aayadda boqol iyo toban ee Suuratu Al Maa'idah noogu sheegay inuu Nabi Ciise Kitaabka injiil baray, kaddib markii uu ku soo dejiyay, wuxuuna yiri: **"Wa ith callamtuka Al Kitaaba wa al xikmata wa Al Tawraata wa Al Injiila**(110)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Iyo markaan ku baray Kitaabka iyo Xigmada iyo Tawreedda iyo Injiilka(110)." Injiilkii Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Nabigiise Ciise ina Maryama ku soo dejiyay, namuunad lagama hayo, mana

ah kitaabka la yiraahdo Bible ee dadka krishtaanka ah ay haystaan. Kitaabkaas waxaa ka haray, inta la hubo, inta Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Quraanka noogu sheegay inuu Kitaabkaas ku qornaa. Sababta ayan namuunad uga harin waxaa weeye in culummadii yuhuudda iyo krishtaanku xukunkii ku dhignaa Injiilka oo ayan ku dhaqankiisa dooneyn, way beddeli jireen, ayagoo eraygaasba kitaabka ka tirtiraya, ama intay tirtiraan mid ay doonayaan ku beddelah, ama si ujeedadii loo soo dejiyay mid ka duwan ku fasirah. Kitaabka Bible-ka waxaa dhigay dad magacdoodu boggiisa koowaad ku dhiganyihiin. Inay sidaas tahay Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, ayaa Aayado badan oo Quraanka ka mid ah noogu sheegay, ayna ka mid tahay Aayadda kow iyo afartan ee Suuratu Al Maa'idah, oo tiri: **"Yuxarrifuuna Al Kalima min bacdi mawaadicihi**(41)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Waxayna ka leexiyaan Kalimooyinka meelaheeda (dhabta ah)(41)."

Lifaaqa saddexaad ee ku qoran bogga saddex boqol saddex iyo soddon ee Kitaabka The Holy Qur-'an ee lagu daabacay Boqortooyada Sucuudiga ahna macnaha Quraanka oo afka ingiriiska lagu tarjumay, waxaan ka akhrninaynaa: "inuusan Bible-ka hadda ay krishtaanku kitaab ahaan u haystaan uusan ahayn Injiilkii Nabi Ciise lagu soo dejiyay. Kitaanbkaan ay hadda haystaan, oo la kala yiraahdo Cahdiga Jadiidka ah (New Testament) iyo Cahdiga Qadiimka ah (Old Testament) midkoodna Ijiilkii ma aha. Cahdiga Jadiidka ah wuxuu ka kooban yahay afar qaybood oo ay kala qoreen afar nin, mid walbana uu qoray hadallo uu ka warinayo Nabi Ciise. Goortey dhigeen lama yaqaan, waxaa uun la helay markay ka soo wareegatay qiyaas laba boqol oo sano marka Nabi Ciise samada loo qaaaday. Afartaas nin waxaa la kala oran jiray Mathhew, Mark, Luke iyo John. Waxaa afartaas qaybood raaca, oo uu cahdiga Jadiidka ahi ka kooban yahay waraaqo, loo maleynayo inuu dhigay Luke, kuna saabsab hormarka kaniisadda, kow iyo labaatan warqadood oo uu dhigay St.Paul kaniisado iyo dad kala duwan iyo qayb loo maleynayo inuu dhigay St. John, lana yiraahdo Kitaabkii Waxyiga."

Nabi Ciise, sida Anbiyadii Nabi Muuse ka dambeysay ee reer Banii Israa'iil oo idil, wuxuu ku taagnaa Shareecada Kitaabka Tawraadda. Kitaabka Injiil wuxuu ka koobnaa inta badan wacthi iyo waano, iyo in yar oo sharciyo wax looga beddelay middi adkayd ee reer Banii Israa'iil. Tusaale ahaan: Shareecada reer Banii Israa'iil qofkii qof dilah xukunkiisu wuxuu ahaa qisaas oo ah in loo dilo, diyana lagama oggolayn. Shareecada Nabi Ciise qofkii qof dila, qisaas ma lahayn oo waxaa laga qaadayay diyo. Taas ayaa u sabab ah in dad badan oo krishtaan ah ay xukunka qisaasta uga soo horjeedaan. Shareecada Islaamka, oo Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, lagu soo dejiyay, dadka waa loogu naxariistay, oo waxaa la kala doorsiiyay qisaas, diyo qaadashadeed iyo cafin buuxda, oo labada laga cafiyo.

Sidee u ekaa Ciise, Calayhissalaamu

Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dhawr goor ayuu Nabi Ciise, Calayhissalaam, arkay, oo qaarna wuxuu ku arkay indhihiisa, qaama riyo ayuu ku arkay, wayna wada hadleen. Marka tilmaanta aan ka haysanno

muuqaalka Nabi Ciise, waxaa na siiyay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Nabigeennu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, habeenka la dheelmiyay, sida uu wariyay Al Bukhaarii, waana Xadiithkiisa saddex kun iyo afar boqol iyo toddoba iyo soddon inuu Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Laylata usriya bii ra'aytu Muusaa wa ithaa huwa rajulun darbun rajulun ka annahu min rijaali shanuu'ata. Wa ra'aytu Ciisaa, fa ithaa huwa rajulun rabcatun, axmaru, ka annamaa khraja min diimaasin."** "Habeenki la i dheelmiyay waxaan arkay oo la kulmay Muuse: waa nin dheer, timihiisuna ayan jilicsanayn, oo u eg ragga Shanuu'ah (oo ah qabiil Carbeed oo aan aad u caddayn). Waxaan kaloo la kulmay Ciise: waa nin dhererkiisu meel dhexaad yahay, guduudan (aad u cad, oo Carabtu qofka aad u cad, caddaantiisana guduud la cabsiiyey waxay tiraahdaa axmar, oo ah guduudan) sidii isagoo markaas qolka lagu qubaysto kasoo baxay." Wuxuu kaloo Al Bukhaarii ibnu Cabbaas, Allaha raalli ka wada noqdee, ka wariyay inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Ra'aytu Ciisaa wa Muusaa wa Ibraahiima, fa ammaa Ciisaa fa axmaru jacdun cariidu al sadri. Wa ammaa Muusaa fa aadamu jasiimun sabdhun, ka annahu min rijaali al Zudh-dhi."** Xadiithkaan oo ah midka saddex kun iyo afar boqol iyo sideed iyo soddon ee Al Bukhaarii macnihiisu waxaa weeye: "Waxaan arkay Ciise iyo Muuse iyo Ibraahiim. Ciise waa guduudan yahay, timihiisuna waa laablaaban yihiin, laabtiisuna way ballaaran tahay. Muusese dhiiggiisu ma furna (wuxuu u egyahay dhoobada, oo afka Carabiga udmu la yiraahdo) waana jir wayn yahay, timo jilicsan sida isagoo u dhashay ragga qabiilka al Zudh-dhi." Wuxuu kaloo Al Bukhaarii wariyay, waana Xadiithkiisa saddex kun iyo afar boqol iyo kow iyo afartan, inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Baynamaa anaa naa'imun adhuufu bi Al Kacbati, fa ithaa rajulun aadamu sabdha al shacri yuhaadaa bayna rajulayni yandhifu ra'sahu maa'an-aw yuhaariqu ra'sahu maa'an-Fa qultu: "Man haathaa?" Qaaluu: "Ibnu Maryama."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Anigoo hurda oo Kacbada ku dhawaafaya ayaa waxaan arkay (isagoo isaguna dhawaafaya) nin laba nin oo kale u dhexeeyah, timo jilicsan, aayarna u socda, madixiisana ay biyo ka da'ayaan. Markaas ayaan waxaan iri: "Kani waa kee?" waxay yiraahdeen: "Kan waa Al Masiix ina Maryama."

Samadaa loo qaaday Nabi Ciise, Calayhissalaamu

Markii Nabi Ciise, Calayhissalaamu, la soo diray, wuxuu reer Banii Israa'iil u keenay Diinta Islaamka ah ee suuban, oo sahalka ah, cadaaladdana ku dhisan, kana hor imaaneysa caabudidda intii Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, ka sokeysa, kuna dhisan shareeco daahir ah, xagga cunidda, cabidda, guurka, kasbidda maalka iyo guud ahaanba nolosha adduunkaan. Intuusan Ciise Diinta Islaamka keenin, yuhuuddu waxay lahayd culummo aqoonta Diintu ayaga ku kooban tahay, markaasey qofkii wax weydiiya waxay ka qaadan jireen lacag, waxayna u sheegi jireen siduu qofkaasi wax u jecel yahay, gaar ahaan dadka xukunka haya iyo kuwaa maalka leh. Diinta Ciise keenay waxay noqotay mid

dadka oo idil simaysa, oo ay sharciga hortiisa isku mid ku yihiin, lacagna aan lagu qaadanayn, oo uusan Ciise qofna ijaar ka qaadanayn. Markaas ayay culumadii yuhuuddu, oo aragtay in meeshay wax ka heli jireen ka awdmayso, ayay waxay laaluusheen madaxdii Dawladda Quddus, oo Romaanka ahaa, oo ay yiraahdeen Ciise ha la dilo. Nin reer Banii Israa'iil ah ayaa askartii Dawladda usoo hoggaamiyay gurigii uu Ciise, Calayhissalaamu, joogay. Intayan askartu irridda ka soo gelin, ayaa ayagoo dadka la fadhiyay ay u jeedaan, ayaa Ciise waxaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, inta saqafka qolkaas kor u furay, Ciise halkaas ka saaray, oo halkaas Samada ah ayuu ku nool yahay ilaa maantadaan aan joogno. Nabi Muxammadna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuuba ku soo arkay, Nabi Ciise, habeenkii la dheelmiyay, Samada Labaad, halkaas oo uu Malag Jibriil isku baray, oo ay isku salaameen. Waxaa kaloo u daliil ah, inuu Nabi Ciise, Calayhissalaamu, wali samada ku nool yahay, ilaa maanta oo uusan dhiman, Aayadda boqol sagaal iyo konton ee Suuratu Al Nisaa'i, oo uu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, noogu sheegay: **"Wa in min ahli al Kitaabi illaa la yu'minanna bihi qabla mawtihi**(159)**".** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Ehelu Kitaab kasta wuu rumeyn Ciise, geeridiisa ka hor(159)." Taas macneheedu waxaa weeye inuu Ciise, Calayhissalaamu, wali Samada sidiisii ugu nool yahay, oo markuu halkaas kasoo dego aakhiro zamaanka, intaan adduunyadaan la rogin, dadka ehelu kitaabka ah oo waagaas jooga way rumayn doonaan inuu Nabi Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, soo diray yahay, uuna yahay addoon Ilaahay. Markaas ayay wada rumaynayaan. Markaas kaddib ayuu geerida xaqqa ahayd dhiman doonaa. Tan iyo haddase samada ayuu ku nool yahay, oo ma dhiman. Waxaa markaas, Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, nin reer Banii Israa'iil ah, u ekeysiiyay oo siiyay suuraddii Nabi Ciise, Caleyhissalaam. Markay askartii qolka soo gashay, ayaa ninkii hoggaaminayay, oo Ciise yiqiin, ayaa wuxuu yiri: "Waa kaas Ciise". Markaas ayaa ninkii Ciise loo ekeysiiyay intay askartii waday, ayaa la sulbay, oo ninkaas meydkiisu wuxuu warnaa, sida la yiri, toddoba maalmood.

Sababtaas ayaa dadka krishtaanka ahi yuhuudda u neceb yihiin, ayagoo aaminsan inay sabab u ahaayeen dilka Ciise, oo ay ayagu Ilaah ahaan u caabudaan. Sidaas inay wax u dheceen, waxaa nooga warramay Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, wuxuuna Aayadaha boqol toddoba iyo konton iyo boqol sideed iyo konton ee Suuratu Al Nisaa' ku yiri: **"Wa qawlihim innaa qatalnaa Al Masiixa Ciisaa Ibna Maryama Rasuula Allaahi wa maa qataluuhu wa maa salabuuhu wa laakin shubbiha lahum wa inna allathiina ikhtalafuu fiihi la fii shakin minhu maa lahum bihi min cilmin illaa ittibaaca al th-thanni wa maa qataluuhu yaqiinan**(157)**Bal rafacahu Allaahu Ilayhi waa kaana Allaahu Caziizan Xakiiman**(158)**."** Aayadaha macnohoodu waxaa weeye: "Iyo hadalkoodii ahaa annagaa dilnay Al Masiixa Ciise ina Maryama, Rasuulkii Ilaahay ahaa, mana ayan dilin, mana ayan warin, laakiin waa loo shabbahay (ekeysiiyay). Kuwii isku khilaafay Ciise waxay kaga suganyihiin shaki, wax cilmi ahna uma laha, oo aan ahayn raacid male, dhab ahaanna mayan dilin(157)Saas ma ahee, ee Illahay Xaggiisuu kor ugu qaaday, Ilaahayna waa adkaade Falsan(158)." Ilaahay, Subxaanahu wa

Tacaalaa, ayaa wuxuu noo sheegayaa in, kuwa ku andacoonaya inay Ciise dileen, inaya yaqiin iyo hubaal ahaan ayan diline, ee Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, xaggiisa sare kor ugu qaaday. Marka Ciise, Caleyhissalaam, Samada loo qaaday waxay ahayd habeenkii laba iyo labaatan ee bisha Ramadaan, habeenka sabtida ah ee sabtidu soo geleyso, sida laga wariyay Calii bin Abii Dhaalib, Wajigiisa Alla Karaameeyo, Raallina ka noqdee, asagoo laftiisuna habeenkaas oo kale dhintay, markay bisha Soonqaad laba iyo labaatan ahayd.

Marka Samada loo qaaday Ciise wuxuu jiray boqol iyo labaatan sano, oo wuxuu Al Daarqudhnii ku wariyay kitaabkiisa Al Kabiiru Xadiith ay ragga wariyay ay yihiin thiqqo lagu kalsoonyahay, inay Caa'isha tiri: "Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu intuu xanuunsanaa xanuunka lagu oofsaday, Faadhimah ku yiri: **"Inna Jibriila kaana yucaaridunii Al Qur'aana fii kulli caamin marratan, wa annahu caaradanii bi Al Quraani al caama marratayni, wa akhbaranii annahu lam yak**un **Nabiyyun illaa caasha nisfa allathii qablahu. Wa akhbaranii anna Ciisaa bin Maryama caasha cishriina wa mi'ata sanatin. Wa laa araanii illaa thaahiban calaa ra' si al sittiina."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Jibriil wuxuu i bari jiray Quraanka soo degay oo idil sanadkiiba mar, iina dhegeysan jiray. Sanadkaanna wuxuu Quraanka i baray iina dhegeystay laba jeer, wuxuuna ii sheegay inuusan ahaanin Nabi ee waa Illaa kan noolaa (oo cumrigiisu ahaa) nuska intuu noolaa Nabiga ka horreeyey. Wuxuuna ii sheegay (waa Jibriile) inuu Ciise ina Maryama noolaa boqol iyo labaatan sano. Umana jeedo waxaan ahayn inaan anigu ku baxayo bilowga lixdanka". Wuxuuna Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam adduunkaan faaruqay isagoo saddex iyo lixdan jir ah. Xadiithkaan waxaan kasoo qaadannay kitaabka Al Zarqaanii uu ku sharxayo Al Mawaahibu Al Laduniyyah ee Al Qasdhalaanii. Wararka oranaya in Ciise ina Maryama Samada loo qaaday isagoo saddex iyo soddon jir ah, kuna dhigan kutubbada muslimiinta qaarkood, siday ibnu Jariir iyo ghayrkiisba u yiraahdeen, kuma salaysna Xadiith sugan, waxaase laga soo qaatay kutubbada Ehelu Kitaabka.

Diinta Krishtaanka

Diinta Krishtaanka la yiraahdo waxaa hindisay Ibliis iyo nin yuhuudi ah oo la oran jiray Shawl, kaddibna la bixi doona Paul, kuna dhashay magaalada arliga Falasdhiin ku taalla oo la yiraahdo Dharsuus, oo aan Nabi Ciise aragba. Wuxuu ahaa nin xaasid ah, Nabi Ciisena ku xasday Nabinnimada, dadka muslimiinta ah oo Nabiga rumeeyana Roomaanka ku dacweyn jiray si loo dilo ama loo xabbiso. Shawl haweenka uma tegi jirin, oo sidaas ayuu ragga raacay kula dardaarmay inayan guursan, halkaas ayayna ka bilaabatay inayan wadaadada krishtaanka qaarkood, waana kuwa katoolikada ah, guursan. Muslimiinta Ciise raacsanaa, waxay kow iyo sideetan sano Sama u qaadidda Ciise kaddib ku taagnaayeen Diinta Islaamka, ayna Qiblada xaggeeda u tukanayaan bisha Ramadaanna ay soomayeen. Kaddibna waxaa ayaga iyo yuhuudda dhexmaray dagaallo. Yuhuudana waxaa ku jiray nin geesi ah, lana

yiraahdo Buuluus, oo asxaabta Nabi Ciise rag badan ka dilay, kaddibna uu yuhuudda ku yiri: "Hadduu Xaqqu Ciise la jiro, annagu waan ku gaalownay, Naarta ayaanna geleynnaa, ayagana waan baadiyeynayaa si ay Naarta ku galaan." Markaas ayuu faras uu lahaa oo la oran jiray Al Cuqaab, intuu faylaha gooyey, oo uu madaxa ciid isaga shubay, ayuu iska dhigay nin shallaayey, si uu kalsoonida Muslimiinta ku kasbo. Waana qiso dheer oo aan qaybtaan dambe kasoo qaadannay Tafsiirka Al Imaamu Al Baghawii, markuu sharxayo Aayadda soddonaad ee Suuratu Tawbah. Runtana Rabbi ayaa og.

Ninkaas Paul la yiraahdo ayaa diinta krishtaanka aasaasay iyo kaniisaddeedaba. Kaddib markuu sanadka miilaadigu ahaa saddex boqol shan iyo labaatan ayaa waxaa magaalada Nicea (waana xarafka c oo ku xiga a iyo b ee ma aha cayn soomaali) kukulmay saddex boqol oo wadaadada madaxda kaniisadaha krishtaanka ah iyo boqorka Roma ee magaciisu ahaa Constantine, waxayna dejiyeen oo ay ku heshiiyeen oo ay dhaliyeen caqiidada diinta krishtaanka ee oranaysa inay saddex ilaah jiraan, oo kala ah ilaaha aabaha ah iyo ilaaha wiilkiisa ah iyo ilaaha ruuxu al quduska ah. Waxaa saddex ilaah ku sheeg ayaguna caabudi jiray masaaridii hore waxayna kala ahaayeen: (Kow) Osiris oo ay ku magacaabeen ilaaha aabaha ah iyo (Laba) Isis oo ay yiraahdeen waa ilaaha hooyada ah iyo (Saddex) Xuuris oo ay yiraahdeen waa ilaaha ah wiilka ilaahay oo ay labadaasu dhaleen. Waxaa ayaguna saddex ilaah caabudi jiray reer Baabil, sidaan kusoo aragnay markaan qisada Nabi Ibraahiim kasoo warrannay. Paul intuu Al Iskandariyyah yimid ee arliga Masar ayuu caqiidadaas kasoo qaatay. Wuxuu majuusta dabka caabudda ee iiraan ka soo qaatay caqiidada ilaah inta dhinta saddex maalmood kaddib soo noolaanaya, oo waaba ayada krishtaanku yiraahdaan in Ciise ina Maryama marka la dilay oo uu dhintay saddex maalmood kaddib uu hadana soo noolaaday, tanoo ah ubad dhexaadka caqiidadooda iyo ciiddooda ugu waynba oo la yiraahdo Resurrection (dib usoo noolaashaha) iyo Eastern ama Pasqua. Waxay kaloo majuusta kasoo qaateen khamrada marka la cabbo oo uu wadaadkoodu siiyo ahna qayb ka mid ah diinta krishtaanka, ay yiraahdaan waxay noqoneysaa dhiigga Ciise, iyo rootiga markuu intuu wadaadkoodu siiyo ay cunaan ay yiraahdaan wuxuu noqonayaa hilibka Ciise, labadaan damboo la isku yiraahdo comunion ama comunione. Marka diinta krishtaanku ma ah diin Samada Ilaahay kasoo dejiyay ee waa khuraafaat laga soo uruuriyay dalalka asnaamta laga caabudi jiray oo uu isku keenay ninkaas yuhuudiga ah ee la yiraahdo Paul si uu dadka u baadiyeeyo. Paul wuxuu tegay Roma halkaaso lagu xabbisay, sababtuna ay tahay oinay roomaanku boqorkooda ilaah ahaan u caabudi jireen, isaguna uu halkaas geeyey ilaah boqorka la tartama. Intuu xabbiska ku jiray waraaquhu dalalkuu soo maray u dhigi jray dadka iska barteen waxay ka mid yihiin maanta kitaabkay krishtaanku haystaan oo la yiraahdo Bible ama Bibbia, waxaana la yiraahdaa baabkay ku jiraan Waraqaha ama The epistles ama the Letters.

Kasoo degidda Samada ee Nabi Ciise

Adduunkaan dhammaatkiisa, ka hor intaan la gaddin, oo uusan qiyaamuhu dhicin, Nabi Ciise, Calayhissalaamu, Samada ayuu ka soo deganayaa, adduunkaan ayuu hawl ka qabanayaa, kaddibna waa dhimanayaa. Waxaa Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Aayadda boqol sagaal iyo kontan ee Suuratu Al Nisaa'i noogu sheegay, inuu Ciise soo degan doono, markaas ay dadkoo idil Nabinnimadiisa rumayn doonan, wuxuuna yiri: **"Wa in min ahli Al Kitaabi illaa la yu'minanna bihi qabla mawtihi wa Yawma Al Qiyaamati yakuunu calayhim shahiidan**(159)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Ehelu Kitaab kasta wuu rumayn Ciise, geeridiisa ka hor, Maalinta Qiyaamane wuxuu ku noqon korkooda Markhaati(159)." Nabi Ciise, Calayhissalaamu, wuxuu ku soo degayaa minaaradda bari oo cad ee Masjidka maanta la yiraahdo Al Masjid Al Amawii, ee ku yaal magaalada Dimishiq, caasimadda dalka Suuriya. Miinaaraddas waxaa magaceeda maanta la yiraahdaa "Minaaraddii Ciise". Minaaraddu waa meesha korreysa oo uu istaago qofga aathaamaya, oo Salaadda dad ugu yeeraya.

Wuxuu ibnu Kathiir Kitaabkiisa Al Nihaayatu fi al Fitani wal Malaaximi, Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka wariyay, waana Xadiithka Al Nuwaasu bin Simcaan, inuu yiri: "ith bacatba Allaabu Al Masiixa ibna Maryama, fa yanzilu cinda al minaarati al baydaa' i sharqiyyi Dimashqa fii mahruuthatayni, waadican kaffayhi calaa ajnixati Malakayni, ithaa dha'adha'a ra'sahu qadhara, wa ithaa rafacahu taxaddara minhu jummaanun ka al lu'lu'i, wa laa yaxillu li kaafirin yajidu riixa nafsihi illaa maata, wa nafasuhu yantahii xaythu yantahii dbarfuhu." Xadiithkaan oo uu wariyay Imaam Muslim, kuna wariyay Kitaabu al fitani, baabka thikru al dajjaali, ahna Xadiithka toddoba kun iyo labo boqol iyo sagaal iyo sagaashanka, macnihiisu waxaa weeye: "Wuxuu ku soo degi doonaa minaaradda cad ee Bariga xigtah ee Dimishiq isagoo xiran labo maro oo lagu guduudiyay dhiinka dhirta la yiraahdo waras, gacnihiisuna ku tiirsanyihiin garbaha laba Malag, oo markuu madaxiisa foorariyo biyo ayaa ka tifqaya, hadduu kor u qaadana biyuhu ka da'ayaan sida xabbado luul ah. Gaal kasta oo ay carafta neeftiisu gaartana waa dhimanayaa, neeftiisuna waxay gaartaa meesha araggiisu gaaro." Wuxuu Ciise, Calayhissalaamu, Masaajidkaas kusoo deganayaa ayadoo Iqaamada Salaadda lagu dhawaaqay, markaas ayaa waxaa lagu leeyahay: "Imaamkii muslimiintow, Ruuxii Ilaahayow, hormar." (oo imaam noqo oo dadka Salaadda tuji). Markaas ayuu wuxuu leeyahay:

"Adigu hormar, maxaa yeelay adigaa Salaadda laguu aqiimay".

Waxaa xusid mudan in Minaaraddaas lagu dhisay lacag laga qaaday krishtaankii degganaa magaaladdas Dimishiq, kaddib markay minaaraddi ka horreysey ay gubeen, ayagoo dab qabadsiiyay. Minaaradda cusub waxaa laga dhisay dhagax cad, markuu sanadka Hijradu ahaa toddoba boqol kow iyo afartan. Marka uu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Caleyhi Wasallam, asxaabtiisa, iyo annagaba, noo sheegayo inuu Ciise ku soo degan doono minaaradda cad ee Masjidka Dimishiq ku yaal, masjidkaasba ma jiro oo

lamaba dhisin. Nabi Ciise, Caleyhissalaam, markuu soo dego ilaa uu ka dhinto, isagaa Imaam u ahaanaya, oo tujinaya Ummadda Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Wuxuu jejebinayaa krishtada, wuxuu dilayaa doofaarka. Markaas uu soo degto, Ciise Nabi ma aha ee waa nin muslin ah oo ummadda Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam ka tirsan, oo shareecadiisana raacsan, oo waaba isaga Imaamka Masjidkaas gadaashiisa ku tukanaya, oo imaam loo yahay, Nabina nin caadi ah imaam uma noqdo. Tan kalena, Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasalla, isagaa ah midka Anbiyada iyo Rusushaba lagu gunaanaday, oo Nabi kale kamaba dambeeyo. Markaas kaddib ayaa adduunkaan dhammaanayaa.

Waxaa Muslim Cabdu Allaahi bin Camr ka wariyay inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Yakhruju al Dajjaalu fii ummatii fa yamkuthu arbaciina yawman aw arbaciina shahran aw arbaciina caaman. Fa yabcathu Allaahu Ciisaa bin Maryama, ka annahu Curwatu binu Mascuudin. Fa yadhlubuhu fa yuhlikuhu. Thummaa yamkuthu al nnaasu sabca siniina laysa bayna ithnayni cadaawatun. Thumma yursilu riixan baaridatan min qibali al Sh-shaami, fa laa yabqaa calaa wajhi al ardi axadun fii qalbihi mithqaalu tharratin min khayrin aw iimaanin illaa qabadathu, xattaa law anna axadakum dakhala fii kabadi jabalin la dakhalathu calayhi xattaa taqbidahu."** Qaala: samicnaa min Rasuuli Allaahi, Sallallaahu Calayhi Wasallama qaala: **"Fa yabqaa shiraaru al naasi fii khiffafi al dhayri wa axlaami al sibaaci, laa yacrifuuna macruufan wa laa yunkiruuna munkaran. Fa yamath-thaluhum al shaydhaanu fa yaquulu: "Alaa tastaxyuuna?" Fa yaquuluuna: "Famaa ta'murunaa?" Fa ya'muruhum bi cibaadati al awthaani, wa hum fii thaalika daarrun rizquhum, xasanun cayshuhum. Thumma yunfakhu fii Al Suuri, falaa yabqaa axadun illaa asghaa liitan wa rafaca liitan."** Qaala: **"Wa awwalu man yasmacahu rajulun yaluudhu xawda ibilihi."** Qaala: **"Fa yuscaqu, wa yuscaqu al nnaasu. Thumma yursilu Allaahu"** -aw qaala- **" yunzilu Allaahu madharan ka annahu al dhallu aw al thillu"** -Nucmaanu al shaakku- **"Fa yanbatu minhu ajsaadu al naasi. Thumma yunfakhu fiihi marratan ukhraa, fa ithaa hum qiyaamun yanthuruuna. Thumma yuqaalu: "Yaa ayyuhaa al nnaasu halummuu ilaa Rabbikum "Wa qifuuhum innahum mas'uuluuna". Thumma yuqaalu: "akhrijuu mina Al Nnaari . " Fa yuqaalu: "Min kam?" Fa yuqaalu: "Min kulli alfin tiscuma'atin wa tiscun wa tiscuuna." Qaala: "Wa thaalika yawmu "Yajcalu al wildanu shiiban", wa "Yawma yukshafo can saaqin".** Xadiithkaan oo ah midka toddoba kun iyo saddex boqol iyo toddoba ee saxiix Muslim, macnihiisu waxaa weeye: "Waxaa soo bixi doona Dajaalka, kaasoo Ummaddeyda ku dhex jiri doona afartan (maalmood, ama afartan bilood, ama afartan sano). Markaas ayaa Ilaahay Ciise ina Maryama soo dirayaa, isagoo aad mooddo (oo u eg) Curwah bin Mascuud. Markaas ayuu inta raadiyo dilayaa. Markaas kaddib dadku waxay ahaanayaan toddoba sano ayadoo aan laba ka mid ahna colaadi dhex marin. Markaas ayaa Ilaahay wuxuu soo

dirayaa dabayl qabaw oo xagga Shaam ka timid. Markaas ayuusan adduunka korkiisa ku harayn qof uurkiisa dhibic khayr ah ama iimaan ah ku jirtoh, oo dabayshaas ayaa dilaysa, oo haddii uu midkiin galo buur uurkeeda, way uga soo dab a geleysaa oo ay nafta ka qabaneysaa". Waxaan maqlay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo oranaya: "Waxaa markaas soo haraya dadka intiisa xumayd, oo leh fudaydkii shimbiraha iyo sabir darrada iyo turid la'aanta dugaagga, samaantana aan aqoonsanayn, xumaantana aan diidayn. Markaas ayaa shaydhaan taliye u noqonayaa, wuxuuna ku leeyahay: "Miyeydaan xishooneyn?" Markaas ayay leeyihiin: "Maxaad na fareysaa?" Markaas ayuu farayaa inay asnaam caabudaan, ayagoo inta waxaas socdaan oo idil rizqigu waasac u yahay, nolol fiicanna ku nool. Markaas ayaa buunka la afuufayaa. Markaas ayaa la wada dhimanayaa. Cid maqasha (buunka) waxaa ugu horreeya nin dhoobo ka dhisanaya darka (barkad) uu geeliisa ka waraabin lahaa. Markaas ayuu dhimanayaa oo dadka kalena ay dhimanayaan. Markaas ayaa Ilaahay soo dejinayaa roob ama shux (waa roob khafiif ah sida xagaayada oo kale), ama sida harka oo kale ah (halkaas wariyaha Xadiithka ayaa shakiyay midkuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, roobkaas ku tilmnaamay). Roobkaas ayaa waxaa ku soo dhalanaya dadka jirkooda (waa dadka dhintay oo idil). Markaas ayaa buunka mar kale la afuufayaa. Markaas ayaa dadku soo wada istaagayaa oo ay wax fiirinayaan. Markaas ayaa waxaa la leeyahay: "Dadow, soo baxa, Rabbigeen ayaan aadeynnaa. "Wa qifuuhum innahum mas'uuluuna" (oo ah Aayadda afar iyo labaatanaad ee Suuratu Al Saafaat) macneheeduna yahay: "Joojiyana, waxbaa la weydiine", iyo "Yawma yukshafo can saaqin", oo ah Aayadda labo iyo afartanaad ee Suuratu Al Qalami, macneheeduna uu yahay: "Maalinta dhudhunka la faydi doono".

Guursashada, dhalidda, dhimashada iyo qabriga Nabi Ciise,

Nabi Ciise, Calayhissalaamu, markuu samada kasoo degto wuxuu guursanayaa haweeney u dhalatay qabiilka Carbeed ee la yiraahdo Juthaam (waa tha dhibic kor ku leh oo cayn ka horreysa), caruurna wuu dhalayaa. Kaddib wuu dhimanayaa, waxaan lagu duugayaa, siduu Imaam Al Nawawii Tahthiibu Al Asmaa'i wa al lughaati ugu wariyay, iyo ghayrkiisba, qolka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ee Al Madiinah Al Munawwarah. Labada caalin oo sharxay kitaabka fiqiga ee Al Imaamu Al Ghazaalii ee cinwaankiisu yahay Al Wajiizu fii fiqhi Al Imaami Al Sh-shaaficii ayna daabacday Shirkatu Daaru Al Arqam bin Abii Al Arqam ee Bayruut dalka Lubnaan, wuxuu mujalladka labaad Kitaabka Nikaaxa bogga shanaad ku yiraahdeen: "waxaa dhab ahaan la yiri inay sababtuu Ciise Calayhissalaamu u guursan waayey ay ahayd fasaadka ku dhacay haweenka reer Banii Israa'iil ee zamankiisa, oo uu markaas ka dhex heli waayay haweeney suuban oo la noolaanshihiisa u qalanta, ayadoo Ciise la so diray waqti uu reer Bani Israa'iil burbur ku dhacay."

Intuu Ciise noolaanayo soo degashada kaddib

Al Bayhaqii wuxuu kitaabka Al Bacthu wa Al Nushuuru ku wariyay Xadiithkaan, inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: "Inna Ciisaa yamkuthu fii al ardi arbaciina sanatan." Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Ciise wuxuu arliga joogayaa afartan sano." Waxaa jira Axaadiith badan, oo dariiqyo kala duwan lagu wariyay, uuna Xadiithkaani ka mid yahay, uuna wariyay Abuu Daa'uud, inuu Ciise afartan sano arligaan joogayo. Waxaa Axaadiithtaas ka mid ah midkuu Al Dhabraanii Abuu Hurayrah ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: "Yanzilu Ciisaa ibnu Maryama fa yamkuthu fii al naasi arbaciina sanatan." Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Wuu soo degayaa Ciise ina Maryama, markaasuu wuxuu dadka dhex joogayaa afartan sano." Wuxuu Axmad kitaabka Al Zuhdu Abuu Hurayrah uga wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: "Yalbathu Ciisaa ibnu Maryama fii al ardi arbaciina sanatin, law yaquulu lil Badhxaa'i silii casalan la saalat." Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Wuxuu Ciise ina Maryama arliga joogayaa afartan sano, oo hadduu ku yiraahdo Al Badhxaa'a (00 ah waadiga Makkah Al Mukarramah) malab socda keen (meeshay waadiyadu markuu roob da'o ay biyo ka keenaan) uu keeni lahaa." Wuxuu kaloo Axmad Musnadkiisa Caa'ishah uga wariyay inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Xadiithka Dajjaalka ku yiri: "Fa yanzilu Ciisaa ibnu Maryama fa yaqtuluhu. Thumma yamkuthu Ciisaa fii al ardi arbaciina sanatan, imaaman cadlan wa xakaman muqsidhan." Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Markaasaa waxaa soo degaya Ciise ina Maryama, markaasuu dilayaa (Dajjaalka, wuxuuna ku dilayaa albaabka magaalada ku taalla Falasdhiin ee la yiraahdo Ludd). Kaddib wuxuu Ciise arliga dhexdiisa ku nagaanayaa afartan sano, isagoo ah imaam caadil ah iyo xaakim garsoore ah."

Dagaalka wayn ee muslimiinta iyo roomaanka gaalada ah iyo furashada Al Qisdhandhiiniyyah oo ah Istanbuul

Wuxuu Imaam Axmad wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Tusaalixuuna al rruuma sulxan aaminan, wa taghaaruuna antum wa hum caduwwan min waraa'ihim, fa taslimuuna wa taghnimuuna. Thumma tanziluuna bi marajin thii tuluulin. Fa yaquumu al rrajulu mina al ruumi, fa yarfaco al ssaliiba wa yaquulu: "Al aghlabu al ssaliibu". Fa yaquumu ilayhi rajulun mina al muslimiina fa yaqtuluhu. Fa cinda thaalika taghduru al ruumu wa takuunu al malaaximu. Fa yajmacuuna lakum fa ya'tuunakum fii thamaaniina ghaayatan, maca kulli ghaayatin cashratu aalaafin."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Waxaad sulux iyo heshiis la geleysaan ruumka (oo ah dadka Yurub, Ameerika, Australia iyo New Zealand degah oo gaalada ah, oo dhammaantood asalkooda ay ka yimaadeen Yurub tahay), ahna heshiis

nabadeed. Markaasaad waxaad qahreysaan (oo intaad la dagaallantaan wadajirkiinnu aad ka adkaaneysaan) ayaga cadawgooda, oo gadaashooda ah. Markaasaad nabad geleysaan, aadna ghaniimeysaneysaan. Kaddib waxaad degeysaan dhul ballaaran oo waasac oo caws iyo dhir miiran ah (oo ay ciidanka fardaha iyo daabadaha kale u daaqo), taagaag iyo buuro badanna leh. Markaasaa waxaa istaagaya nin ruumka ka mid ab, markaasuu krishto kor u qaadayaa, wuxuuna leeyahay: "Krishtada ayaa xoog badan, cid walbana ka adkaaneysa, oo aan laga adkaan karin." Markaasaa waxaa u kacay nin muslimiinta ka mid ah, oo dilaya. Markay taasi dhacdo, ayay ruumku heshiiskii khayaanayaan oo jebinayaan. Markaasaa waxaa dhacaya al malaaximu, oo ah dagaal aad u wayn oo dad aad u fara badani ku le'daan (oo al malaaximu waa jamcu malxamah, oo ah kawaanka xoolaha lagu gawraco). Markaasey isu kiin aruursanayaan (waa dawladaha gaalada ah, oo ay isku kiin gaashaanbuursanayaan). Markaasey waxay idiin imaanayaan ayagoo sita sideetan calan, oo calan walba ay la socoto toban kun (oo askari)." Waxaa kaloo Xadiithka wariyay Al Bukhaarii oo lafthigiisa inta dambe ee Xadiithku yahay: **"Fa ya'tuunakum taxta thamaaniina ghaayatan, kullu ghaayatin ithnaa cashara alfan."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Markaasey idiin imaanayaan ayagoo hoos socda sideetan calan, waana calan dagaal, calan kastana uu ka kooban yahay laba iyo toban kun (oo askari)" . Al Bukhaarii wuxuu kitaabka Al Jizyati wa Al Muwaadacati, ahna Xadiithkiisa saddex kun boqol iyo lix iyo toddobaatan ku wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri isagoo tilmaamaya calaamadaha Saacadda: **"Wa al ssaadisatu hudnatun takuunu baynakum wa bayna Banii Al Asfari, fa yusiiruuna ilaykum fii thamaaniina ghaayatan, taxta kulla ghaayatin ithnaa cashara alfan. Wa fusdhaadhu al muslimiina yawma'ithin fii ardin yuqaalo lahaa Al Ghuudhatu fii madiinatin yuqaalu lahaa Dimashqu."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Calaamadda lixaadna waa heshiis nabadeed oo ahaan doona adinka iyo reer Banuu Al Asfari (Waxaa Banuu Al Afar la yiraahdaa roomaanka oo ah dadka Yurub dega, meelo iyo qaarado kaleba ha uga haajiraane, looguna bixiyay magacaas oo macnihiisu yahay qabiilka uu dhalay oo ku abtirsada midka midabkiisu hurdiga yahay, ama qabiilka hurdiga ah. Aabaha ay dadkaasi ku abtirsadaan waa Cays bin Isxaaq, uuna dhalay Nabi Isxaaq bin Ibraahiim Al Khaliilu, Calayhimussalaamu, ahaana mataanka Nabi Yacquub, Yacquub hortiisna soo axay oo dhashay, Yacuuqbna uu ciribtiisa ku joogo, oo Yacquub wuxuu ka yimid caqab oo ah ciribta, midabkiisuna hurdi ahaa, lana oran jiray Al Asfaru, midka hurdiga ah, siduu imaamka Al Maawardii ugu wariyay kitaabkiisa Aclaamu Al Nubuwwati, bogga shan iyo lixdan. Caysuu wuxuu guursaday ina adeertiis Nasmah, oo uu dhalay Nabi Ismaaciil, Calayhissalaamu, waxayna u dhashay laba wiil oo midkoodna la yiraahdo Ruum, oo ay roomaanku ku abtirsadaan, kan kalena Faaris, oo ah aabaha ay iiraaniyiintu ku abtirsadaan, oo sidaasba Faaris loo yiri. Dadka gaalada ah ee Yurub degah ma cadcadda ee waa hurdi, oo waxaa cad caanaha: ma caano ayay u egyihiin? Waa maya, waxaase midabka caanaha leh Carabta. Marku Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam,

wuxuu ka hadlayo caddaan ku tilmaamayo, sida biyaha xawdkiisa maalinta qiyaame, wuxuu yiraahdaa **"abyada mina al llabani"** oo macnihiisu yahay: "oo caanaha ka cad." Yaase Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uga aqoon roon? wuxuuna ku magacaabay Banuu Al Asfar. Runtana Rabbi ayaa og). Markaasey dagaal idiinku imaanayaan ayagoo sideetan calan sita, calan kastana ay hoostiisa ku sugan yihiin labo iyo toban kun (oo askari). Maalintaas xarunta ay ciidammada muslimiintu deggan yihiin waxay ku taalla arli la yiraahdo Al Ghuudhatu, kuna dhex jirta degmada la yiraahdo Dimashqu (oo ah magaalo madaxda dalka Siiriya)." Xadiithka waxaa kaloo wariyay Axmad (2/174 iyo 6/25), Abuu Daauud iyo ibnu Maajah.

Heshiiskaasi wuxuu ahaan karaa midka Ururka Qarammada Midoobay, oo ay Dawladaha muslinka iyo kuwa Carabta ah iyo kuwa arligoo idil xubin ka yihiin, ayna wada saxiixeen heshiis inaan dagaal la isku qaadin oo nabad lagu wada noolaado. Sidoo kale heshiisyada ay Jaamacadda Dawladaha Carabtu Qarammada Midoobay iyo ururrada Yurub iyo gaashaanbuurta Commonwealth iyo kuwa la midka ah la saxiixatay. Sidoo kale heshiisyada uu ururka Dawladaha Islaamka ahi la saxiixday ururradaas oo idil. Ama heshiisyo mustaqbalkaba la kala dhigan doono. Tan suubanna Allaha na waafajiyo.

Khaa'innimada krishtaanka

Ilaahay, Cazza wa Jalla, Quraanka ayuu noogu sheegay inay gaaladu cadawga muslimiinta yihiin. Marka, nin cadawgiis jecel oo la saaxiib ah oo la tashanaya, oo madax ka dhiganaya oo u hoggaansamaya, isagoo doonaya dilkaaga iyo dilka wiilkaaga iyo fara xumaynta gabadhaada iyo hooyadaa, iyo inaad silic iyo saxariir ku noolaataan, ayagoo guryihii iyo dalkiinnaa idinka soo saaray, xeryo qaxooti ku takooran, kuna silicsan, waa daallin doqon ah, khilaafay amarka Ilaahay, iyo Quraanka iyo amarka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Wuxuu Ilaahay, Cazza wa Jalla, Aayadda boqol iyo kow ee Suuratu Al Nisaa'i ku yiri: **"Inna al kaafiriina kaanuu lakum caduwwan mubiinan."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Gaaladu waxay idiin yihiin cadaw cad."

Wuxuu Cazza wa Jalla Aayadaha shan iyo konton iyo lix iyo konton ee Suuratu Al Anfaali ku yiri: **"Inna sharra al ddawwaabi cinda Allaahi allathiina kafaruu fahum laa yu'minuuna**(55)**Allathiina caahadtta minhum thumma yanquduuna cahdahum fii kulli marratin wa hum laa yattaquuna**(56)**."** Aayadaha macnohoodu waxaa weeye: "Daabadaha dhulka ku kor socda waxaa ugu shar badan Ilaahay agtiisa kuwa gaaloobay. Kuwaasna ma ay rumeynayaan, oo iimaan la imaan mayaan(55)Kuwaasna waa kuwa haddaad cahdi iyo heshiis la gashid mar kasta burinaya, ayagoo aan Ilaahay uga baqayn burinta cahdigooda(56)."

Wuxuu Cazza wa Jalla Aayadaha labo iyo toban iyo labo iyo soddon iyo saddex iyo soddon ee Suuratu Tawbah ku yiri: **"Wa in nakathuu aymaanahum min bacdi cahdihim wa dhacanuu fii Diinikum fa qaatiluu a'immata al kufri innahum laa aymaana lahum lacallahum**

yantahuuna(12)**."** Aayyadda macneheedu waxaa weeye: "Markayse buriyaan cahdiga iyo heshiiskooda, ayna duraaan Diintiinna, dila madaxda gaalada, kuwaasoo aan diin lahayn iyo cahdi midna. Markaas ayaa dhici karta inay xumaanta ka joogsadaane(12)."

Aayadaha laba iyo soddonaad iyo saddex iyo soddonaadna ee isla Suuratu Tawbah waxay leeyihiin: **"Yuriiduuna an yudhfi'uu nuura Allaahi bi afwaahihim wa ya'baa Allaahu illaa an yutimma nuuraHu wa law kariha al kaafiruuna**(32)**Huwa Allathii arsala Rasuulahu bi al hudaa wa Diini al Xaqqi li yuth-hirahu calaa al ddiini kullihi wa law kariha al kaafiruuna**(33)**."** Aayadaha macnohoodu waxaa weeye: "Gaaladu waxay doonayaan inay ku damiyaan Nuurka Ilaahay (oo ah Quraanka, oo intay beeniyaan ay doonayaan in la iska tuuro) afafkooda, Ilaahayna waa diiday waxaan ahayn inuu Nuurkiisa dhammaystiro mooyee, taas gaaladu haba necbaadaane(32)Ilaahay waa Midka soo diray Rasuulkiisa, hanuunna la soo diray iyo Diinta runta ah, (oo ah Islaamka) si uu uga kormariyo diimaha kale dhammaantood, gaaladu taas haba kahdaane(33)."

Krishtaanku waa beenaalayaal

Krishtaanku waxay yiraahdeen Ilaahay wiil ayuu dhalay. Yuduuduna waxay tiri Ilaahay wiil ayuu dhalay. Ilaahayna, Cazza wa Jalla, wuxuu yiri waa beenlowyaal, wuxuuna Aayadda soddonaad ee Suuratu Tawbah ku yiri: **"Wa qaalati al yahuudu Cuzayrun ibnu Allaahi, wa qaalati al nasaaraa Al Masiixu ibnu Allaahi. Thaalika qawluhum bi afwaahihim. Yudaahi'uuna qawla allathiina kafaruu min qablu. Qaatalahumu Allaahu annaa yu'fakuuna**(30)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Yuhuudna waxay tiri Cuzayr waa wiilka Ilaahay. Krishtaankuna waxay yirahdeen Al Masiixu Ciisaa waa wiilka Ilaahay. Oraahoodaasu waa hadalkooda ay afafkooda ka yiraahdeen, waxayna ku dayanayaan oo uu hadalkoodu la mid yahay kuwii ayaga hortood gaaloobay hadalkooda. Ilaahay wuu lacnaday, siday xaqqa uga leexanayaan kadiib marka xujooyinka lagu soo oogay(30)."

Ilaahay Cazza wa Jalla wuxuu Aayadaha boqol iyo konton iyo kow iyo konto iyo labo ee Suuratu Al Ssaaffaati ku sheegay inay beenlowyaal yihiin: **"Alaa innahum min ifkihim la yaquuluuna**(151)**Walada Allaahu wa innahum la kaathibuuna**(152)**."** Aayadaha macnohoodu waxaa weeye: "Taasi waa been abuurashadoodii ay oranayeen(151)Ilaahay waa dhalay, waana beenlowyaal(152)."

Wuxuu Ilaahay Cazza waJalla Aayadda boqol iyo shanaad ee Suuratu Al Naxli noogu sheegay inay gaaladu beenlowyaal yihiin, wuxuuna yiri: **"Innamaa yaftarii al kathiba allathiina laa yu'minuuna bi Aayaati Allaahi, wa uulaa'ika humu al kaathibuuna**(105)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Waxaa beenta abuura kuwa aan Aayaatka Ilaahay rumaynayn, kuwaas weeyana beenlowyaalku(105)."

Marka, muslimow, sidee baad u rumeysaneysaa qof Ilaahii abuurayba uu yiri waa beenlowyaal? Qofka rumaysta wuu ku dagmayaa, kuna khasaarayaa.

I1aahay waa naga reebay gargaarsiga krishtaanka

Ilaahay, Cazza wa Jalla, wuxuu muslimiinta ka reebay inay gaalada wali ka dhigtaan, oo ay gargaar weydiistaan, ay saaxiibbo la noqdaan, ay sirta muslimiinta u sheegaan, ay madax ka dhigtaan ay u hoggaansan yihiin. Qofka taas yeelana Diinta Islaamka dibadda ayuu ka yahay, oo muslin ma ah ee waa gaal. Wuxuu Ilaahay Cazza wa Jalla Aayadda sideed iyo labaatnaad ee Suuratu Aali Cimraana ku yiri: **"Laa yattakhithi al mu'minuuna al kaafiriina awliyaa'a min duuni al mu'miniina. Wa man yafcal thaalika fa lays a mina Allaahi fii shay'in**(28)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Yeeyan mu'miniintu ka yeelan (oo yeeyan warka muslimiinta siin iyo sida looga adkaan karaba) gaalada sokeeyey, mu'miniinta ka sokow. Qofka taas falana Ilaahay Diintiisa dhexdeeda waxba kama ah(28)." Wuxuu Ilaahay, Tabaaraka wa Tacaalaa, Aayadda kow iyo afartanaad ee Suuratu Al Maa'idah ku yiri: **"Yaa ayyuhaa Al Rrasuulu laa yaxzunka allathiina yusaaricuuna fii al kufri mina allathiina qaaluu aamannaa bi afwaahihim, wa lam t'umin quluubuhum, wa mina allathiina haaduu sammaacuuna lit kathibi, sammaacuuna li qawmin aakhariina, lam ya'tuuka yuxarrifuuna al Kalima min bacdi mawaadicihi, yaquuluuna in uutiitum haathaa fa khuthuuhu, wa in lam tu'tawhu fa axtharuu. Wa man yuridi Allaahu fitnatahu fa lan tamlika lahu mina Allaahi shay'an. Ulaa'ika allathiina lam yuridi Allaahu an yudhahhira quluubahum. Lahum fii al ddunyaa khizyun wa lahum fii Al Aakhirati cathaabun cathiimun**(41)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Rasuulkaanow, yeeyan ku tiiraanyenin kuwa ku degdegaya gaalnimada iyo u hogaansanaanta gaalada, ahna kuwa afafkooda ka leh waan rumaynnay, quluubtooduse ayan rumayn, kuwaasoo ah munaafaqiinta, iyo kuwa yuhuudoobay, beentana maqlaya, hadalkaagana u dhegeysanaya inay u geeyaan rag aan adiga kuu imaan, waana jawaasiis., waxayna ka leexinayaan kalimooyinka meeshooda dhabta ah, waxayna leeyihiin: "hadduu Muxammad, Sallaa Allaahu Calyhi Wasallam, idiinku fatwoodo sidaad dooneysaan ka qaata. Hadduuse , Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, taas idin siin waayo, ka digtoonaada. Qofkuu Ilaahay doonayo inuu gaaleeyo, adigu waxba uma hanan kartid oo amarka Ilaahay kama aad celin kartid. Kuwaasi waa kuwo uusan Ilaahay doonayn inuu quluubtooda daahiriyo, waxayna leeyihiin adduunka dhexdiisana dulli, Aakhirana cathaab wayn(41)."

Kuwa krishtaanka iyo yuhuudda wali ka dhigtah, Diinta Islaamka way ka bexeen, siduu Ilaahay, Cazza wa Jalla, ugu yiri Aayadaha konton iyo kow iyo sideetan iyo kow ee Suuratu Al Maa'idah: **"Yaa ayyuhaa allathiina aamanuu laa tattakhithuu al yahuuda wa al nnasaaraa awliyaa'a. Bacduhum awliyaa'u bacdin. Wa man yatawallahum minkum fa innahu minhum. Inaa Allaaha laa yahdii al qawma al thaalimiina**(51)**.** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Kuwiinna iimaanka la helayow, waana muslimiinta, ha ka yeelanina yuhuudda iyo krishtaanka gargaarayaal iyo sokeeye. Ayaga ayaa isku ah sokeeye, oo isku gargaara colaadda muslimiinta. Markaas midkiinna sokeeye ka dhigtah, oo taladooda ku waafaqa uguna

gargaara, ayaguu ka mid yahay, (oo sidaas ayuu Diinta Islaamka uga baxay, laguna qaadayaa xukunka krishtaanka iyo yuhuudda, siduu Al Qurdhubii u yiri: "Tacaalaa wuxuu caddeeyey in qofkaas xukunkiisu yahay xukunka krishtaanka iyo yuhuudda, xukunkaasoo ka reebaya inuu qof murtadka ah oo diinta ka noqday uu qof muslin ah dhaxlo, xukunkaanna waa jirayaa ilaa yawmu al qiyaamah." Wuxuu kaloo yiri: "kuwa gaalada krishtaanka ah iyo yuhuudda wali ka dhigta waxay Ilaahay u khilaafeen iyo Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, siday ayaguba u khilaafeen. Sidaas ayuu uga mid noqday. Qofka gaalada jecel wuxuu jecelyahay oo uu u bogay waxay ku taagan yihiin, oo ah caqiidadooda, hadduu caqiidadooda jecelyahayna waa gaal muruxsan, waana in markaas la colaadiyaa siday waajib u tahay in ayaga la colaadiyo. Waxaana waajib u noqonaysa oo uu gelayaa naarta siday ayagaba waajib ugu noqotay. Sidaasuu ayaga uga mid noqday." Qofkaas waxaa laga furaya haweentiisa, caruurtana waa laga qaadanayaa, markuu dhintana la dhaxli mayo, salaadda janaazada lagu tukan mayo, qubuuraha muslimiintana lagu aasi mayo). Aayadda kow iyo sideetanaadna ee Suuratu Al Maa'idah waxay leedahay:

"Wa law kaanuu yu'minuuna bi Allaahi wa AI Nabiyyi wa maa unzila ilayhi maa ittakhathuuhum awliyaa'a, wa laakinna kathiiran minhum faasiquuna(81)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Hadday yihiin kuwa rumaysan Ilaahay iyo Nabiga iyo waxa Nabiga lasgu soo dejiyay, oo ah Quraanka" kama ayan yeesheen yuhuudda iyo krishtaanka sokeeye. Laakiin in badan oo ayaga ka mid ahi waa faasiqiin, Diinta Islaamka uga baxay rumayn la'aantoodaas.(81)"

Wuxuu Ilaahy, Cazza wa Jalla, Aayadda boqol iyo saddex iyo tobnaad ee Suuratu Huud ku yiri: **"Wa laa tarkanuu ilaa allathiina thalamuu fa tamassakumu Al Nnaaru**(113)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Hana u iilanina xagga kuwa thaalimiinta ah, waana gaaladee, oo aad markaas Naari idin haleeshaaye(113)."

Wuxuu kaloo Ilaahay, Cazza wa Jalla, Aayadda boqol iyo sideed iyo toban ee Suuratu Aali Cimraan ku yiri: **"Ya ayyuhaa allathiina aamanu laa tattakhithuu bidhaanatan min duunikum**(118)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Kuwiinna rumeeyeyow, ha ka yeelanina saaxiib kuwa adinka idinka soo hara, oo ah gaalada(l18)."

Wuxuu Ilaahay Tacaalaa Aayadda sagaalaad ee Suuratu Al Mumtaxinah ku yiri: **"Innamaa yanhaakumu Allaahu cani allathiina qaataluukum fii al Ddiini wa akhrajuukum min diyaarikum wa thaaharuu calaa ikhraajikum an tawallawhum, wa man yatawwallahum fa ulaa'ika humu al th-thaalimuuna**(9)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Ilaahay wuxuu idinka reebayaa kuwa Diinta Islaamka daraadeed idinkula dagaallamay oo dalkiinnana idinka soo saaray iyo kuwa gacan ku siiyay oo ugu gargaaray in dalkiinna la idinka soo saaro inaad gargaarayaal iyo sokeeyey ka dhigataan oo aad xiriirisaan. Kuwa kuwaas sokeeye iyo gargaarayaal ka dhigtana waa daallimiin(9)."

Inta goor oo ay gaaladu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, heshiis nabadeed la dhigteen, kaddibna ay buriyeen oo ay soo weerareenna

way badan yihiin, kutubbada ayaana laga helayaa.
Sayyid Maxammad Cabdulle Xasan kuwa Amxaarada iyo gaalada Soomiliyada muslinka ah usoo gelisay, oo Soomaalida waxay ku faleen ku falay, wuxuu ka yiri waxaa ka mid ahaa, gabayga **Afbakayle** la yiraahdo. Abbakayle waa meel degmada Laas Caanood afartan mayl dhinaca Galbeed ka xigta, waana goobtii ugu horreysey oo ay darawiishta iyo ingiriis dagaal hubaysan isaga hor yimaadeen saddexda bisha Maajo ee kun iyo sagaal boqol iyo kow.

Xuseenow caqligu kaama baxo (Afbakayle)

Xussenow caqligu kaama baxo, idam Ilaahaye
Ha laguu aq balo duca san baan, kuu akhriyaaye
Ifkana waaya noo joog, nimaan aaminaad tahaye

Haddaad umaaddo waan kuu hubaa, ina uduu khayre
Asaxaabihii baad u tegi, udugga weynaaye
Irdihii jannada inaad ka geli, waa ogsoonahaye

Hawl kalana waa eray yaraan, kuu erganayaaye
Alla igama qaadow adaan, kala ilaaweynee
Eedaanka maqal waa Salaad, loo addimayaaye

Ilaahii abuurayba kuwii diiday, amarkiisa
Ambiyaalihii iyo kuwii, owliyada caayay
Asxaabtii dariiqada kuwii, awlaxa u qaaday

Ikhyaarkooda nimankii kufriga, ugu adeegaayey
Aan lagu igraahine kalgacal, ugu abraaraayey
Kuwii ubad nasaaraad noqdee, ferenji aaneystay

Nimankii Amxaara u kecee, Adarinuu guurey
oo Aw Cabbaas diley, dadkaan eedi kala gaarin
oo uunka kala fiijiyee, kala irdheysiiyey

Nimankii Amxaara u kecee, Adarinuu guurey
oo Mililikh aabe u yehee, u arrin qaadaayo
oo Xabashi eegi u noqdee, u ololaynaayey

lngiriiska nimankii wadee, nagu aseebaayey
Afbakayle nimankii kufriga, uraya noo keenay
Ee Oodagooyoiyo na dhigay, aydii Daratoole

Nimankii ikhwaankii jaree, aabiga u laayey
Ragga ehelukhayrkaa warmaha, kala ajoon waayey
Oo umal daraadiis girliga, ugu afuufaayey

ldilkoodba nimankii dagaal, iigu imanaayey
Nimankaan inkaaree madfaca, ololi ii haystay
Ee ubaxcaddaydii hartiga, oofta kaga joojay

Nimankii iniinaha ka dhigay, Ilig wixii joogay
Ee Eeraago iyo Batalo, igu uquumeeyey
Ee omoska Beerdhiga tukaha, igu ormaysiiyay

Nimankii ayaantii Gumburo, oboda ii dhiibay
Ardaashii Jidbaale i heshee, igu unuun goysey
Nimankii uluuf iyo uluuf, igu agoomeeyey

Nimankii adduunkaygii dhacay, ariyo geeliiba
Anigoo islaamaba, ii arxami waayay
Nimankaan Ilaahow lahaa, eyda iga doono

Abaalkayga nimankii ba'shee, ii istixayn waayey
Ahabtiyo ergeyntii kuwii, lagala ayn waayey
Nimankii ijaabada ka tegey, aakhiru sabanka

Nimankii iblays nagu diree, naga ajoon waayay
Nimankii arlada Eebahay, naga ugaareeyey
Nimankii awaaraha buska leh, nagu eryoonaayay

Nimankii abaartii Caleed, Bari na aadsiiyey
Argalkiyo rasaastii kuwii, nagu igbaaraayey
Ee urugadaan qabiyo ciil, igu abaadsiiyey

Nimankii ilmada iga qubee, oohin iiga keenay
Nimankaan ku alaaladay markii, uunku wada jiifay
Nimankii ajuurada cunee, iibka ii bixiyay

Nimankii intaas nagu falaan, na asaraareynin
Waxba yey addoomada Ilaah, nooga aargudine
Waxba yaan aduun layga siin, ilintidaydiiye

Utuntayda waa heli haddaan, iilka lay dhigine
Araraha intaan marahayey, igu arkaayaane
Maruun baan sidii aar libaax, oodda soo jebinne

Ashtakooda'aa iyo warqado, ku andacoodaaba
Mar haddaan shareecadu aqoon, nimanka Iidoora
Ashahaadadooiyo ma rabo, ina wallayntooda

Mar haddaan wadaad aayad diin, ila ekeynaynin

Amaan aniga lay oran karayn, tanu ahaan mayso
Allow yaa af lama daaliyee, iga asluubeysta.

Sayyid Maxammad Cabdille Xasan wuxuu kaloo gabayga **Dardaaran** la yiraahdo ku yiri, kaddib markii uu Ingiriis 1919 (waa kun iyo sagaal boqol iyo sagaal iyo toban) markii ugu horreysey taarikhda Afrika uu dayuurado dagaal kusoo kiciyay Xaruntii Darwaawiishta ee Taleex tiillay oo uu duqeeyey, dhulkana kasoo weeraray, Sayyid Mammad Cabdille Xasanna uu Koofur u guuray, ayuu gabaygaan tiriyay, wuxuuna yiri:

Dardaaran

Min daroofle aqal daahya weyn, dadab la heedaamay
Dermo iyo firaash lagu gam'iyo, daalam iyo googgo'
Aniga oo waxaan doonayaba, derajaday haysta

Iyo duni wixii nagaga lumay, dararkii Ceeldheero
Dab wax gubi dayuurado kufrigu, nagu dul gawdiidshey
Dumbuq subuca degalkaan ka kacay, dahab wixii yiillay

Dhakhal jabay wixii daar burburay, ama bukaar duugmay
Didibtii bannaanayd wixii, dad iyo maal jiifay
Diric iyo waxay shiikh dileen, ama duq waayeela

Maxajabad daboollayd wixii, gaal u dhukhuulaayey
Dabatoobka Iidoor wuxuu, darayey caarkiisa

Lo' durdura wixii deebla geel, nala ka sii daayey
Dullihii shareerraa wixii, daal na caga gooyey
Dirrowgii qabsaday reerkayga, dalankicii gaaray

Dulkuneefle kaan soo ag maro, duullaan ka hor geyska
Dan la'aan waxay nagu faleen, darab nijaaseedku

Doonyaha shammalka ah haddii, dakhalka loo laalo
Maruun baa dabaylahaa sidaa, kor u dandaanshaane
Oo doofaarradii ku jiray, daraxu caynshaaye

Dabro cudura duumo iyo furuq, waxa dadkii xaaqqay
Annagu diidi maynoo mar baa, Daayin non wacaye

Ninkiise tiisa loo deynayaa, haygu diirsado e
Kolna haddaan cid laga deynahayn, mowdka dabaqdiisa
Ninkii haatan nagu diganayow, dan iyo xeeshaa

Dangaraaradii nagu dhacdiyo, webi dabaashiisa
Inkastoo daleel nala dhigaan, docna nagu cayman
Duuflaalladii naga harow, dan iyo xeeshiinna

Doodna waxaan u leeyahay dadkeer, hadalka deyn waayey
Nimanyahow damiinnimada waa, lagu dulloobaaye
Dadku wuxuu jeclaystaa waxaan, duxi ka raacayne

Dagaalkii nasaarada anaa, daalib ku ahaayee
Dalka ma lihid anigaa ku iri, doora weynaha e
Daliilkii Rasuulkii anaa, doonayoo helaye

Anaa diiday maantuu lahaa, deeqan iga hooye
Diinkayga anigaan ku gadan, dabaqi naareede
Anaan labada daarood tan hore, derejo moodayne

Markay duushay gaaladu anaan, daabbaddu rarine
Goortay dareereen anaan, diiradduu qabane
Anigaan dariiqiyo waddada, dowga sii marine

Anaan doora weynow kufriga, daacadnuu geline
Ferenjiga dirayska leh anaan, diiradduu qabane
Sida doxorka Iidoora anaan, duudxammaal noqone

Doofaarka eyga ah anaan, daarihiis geline
Anigaan dillaalkiyo ardiga, duubiguu xirane
Anigaan dariiqada Alliyo, Diinta caasiyine

Daarood Ismaaciil ma oga, dowga loo qodiye
Waa wixii durbaan tumay markaan, dowga sii maraye
Waa wixii dayoy yiri intuu, soo dabbaaldegayee

Dadow maqal dabuubtaan ku iri, ama dan haw yeelan
Ama dhaha darooryiba jiryaye, doxorku yeelkiisa
Nin ragey dardaaran u tahaye, doqon ha moogaado

Daw lagama helo gaal haddaad, daawo dhigataane
Waa idin dagaayaa kufriga, aad u debcaysaane
Dirhankuu idiin qubahayaad, dib u go'aysaane

Marka hore dabkuu idinka dhigi, dumar sidiisiiye
Marka xigana daabaqadda yuu, idin dareensiine
Marka xiga dalkuu idinku oran, duunya dhaafsada e

Marka xiga dushuu idinka rari, sida dameeraaye
Mar haddaan dushii Adari iyo, Iimey dacal dhaafay

Maxaad igaga digataan berruu, siin la soo degiye.

Gabaygaan soo socdana, oo la yiraahdo Maqashiiya Uunka, wuxuu u dhiibay labada nin oo la kala oran jiray Cabdalla Shixiri iyo Xirsi Afdiir, oo aqoon dheer u lahaa afafka qalaad ee reer galbeedka, ummadaha shisheeyaha dhex markooda iyo Diinta Islaamkaba, wuxuuna yiri:

Maqashiiya uunka

Cabdalla maan qaboobiyo, Xirsi maakib laawow
Mid yar waxaad tiraahdaan, murtadiinta reer Hagar
Habaryoonis madasheeda, mariya weedha aan iri
Toljeclaha muraadkaygiyo, masaafadayda ula taga
Maqashiiya uunkaba, miyir inuu ku soo galo
Mid mid waxow tiraahdaan, nimanka mooradii furay
Mawaacidada Diinkii, ma wax leysku maagaa?!
Jahaadka moosinkii galay, ma wax laga maqnaadaa?!
Mushaarada beenihi, ma wax lagu mannaagaa?!
Loxodkii madoobaa, ma lays moogadeeyaa?!
Muufada cadaabeed, maw adkaysanaysaan?!
Gaal nin u midiidimay, maqaan naara inuu tegi
Kutubtaa u maragee, ma wax lagu murmaa baa?!
Mushrik inaad jeclaataan, amaad mudan ku sheegtaan
Haddaydnaan mujrim ahayn, masala maad u haysaan?!
Masala-gaabyadiinnaa, meel daran idiin dhigay
Muftiga waanadiisii, idinkaa ka maagtoo
Macbuudkii Rabbi ahaa, idinkaaba moogoo
Maxsharkiyo qiyaamaha, idinkaa munkirayoo
Muqfiradii Ilaahay, idinkaa ka maarmoo
Macaankii Firdowsana, idinkaa muraystoo
Muuminnimada laabtaa, idinkaa mantagayoo
Minadiinna gaalowday, idinkaa muquunshoo
Kufriga i mahoobbiyey, idinkow miciinoo
Makaankii shareecada, idinkaa matamiyoo
Muslinkiyo qusuusidda, idinkaa makalaayoo
Maalkii agoomeed, idinkaa malhabayoo
Masxafkiyo Quraankii, idinkaa maljadayoo
Waxse mowtigiin galay , ama meleg idiin yimi
Markaad Maxammadkiinnii, malcuun uri ka raacdeen!
Mariyoo macneeyaye, mid kaleeto wuxuu yahay
Waxaan maqallay ferenjigu, inuu miiri idin qoray!
Waxaan maqallay maalkii, inuu idinka meersaday!
Waxaan maqallay ooryaha, mid san inaad ka weydeen!
Waxaan maqallay madaxdiinna, in midiidin laga dhigay!
Aan miis yar mooyee, Maydho geel la siinayn!
Waxaan maqallay maahyahow, magaciin inuu ba'ay

Intaasoo masiibaa, waxa igala maad badan
Maska iyo abeesada, magta aad ka bixiseen!
Aanad midigta fidinayn, aar hadduu ku miciyayn!

Gabayyadaan waxaa kasoo qaadannay kitaabka Diiwaanka Gabayadii Sayyid Maxamad Cabdulle Xasan, ayna daabacday Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare ee Soomaaliya, ururuntii koowaad, uuna uruuriyey Sheekh Jaamac Cumar Ciise.
Dadka maanta Amxaaro la yiraahdo waa dad Carab reer Yaman ah, una dhashay qabiilka la yiraahdo Ximyar, taariikhda ay tirsatana waa taariikhda Ximyar, oo amxaaro waa Ximyar oo la is daba mariyay. Dadka Tigriinya la yiraahdo ayaguna waa Carab.

Jaasuus

Jaasuus waxaa la yiraahdo qofka baara sirta qof kale, sirtaas uu helayna u geynaya qof kale si qofkaas uu kasoo qaaday wax loogu yeelleeyo, oo lagu dhibaateeyo. Taxassus-na waxaa la yiraahdaa markuu sirta qofkaas kale uu raadinayo inuu isagu ogaado, uusanse cid kale u geyneyn. Jaasuusnimadu ma bannaaana, qofka ku kacana wuxuu diiday amarka Ilaahay iyo Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Ilaahay, Tabaaraka wa Tacaalaa, wuxuu Aayadda labo iyo tobnaad ee Suuratu Al Xujuraati ku yiri: **"Wa laa tajassasuu**(12)**"**. Oo macneheedu yahay: "Hana is jaasuusina". Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa la wariyay inuu yiri: **"Wa laa tajassasuu"**, oo ah: "Hana is jaasuusina." Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu u tabaabusheysanayey inuu Makkah ku duulo markay ahayd sanadka sideedaad ee Hijrada, wuxuu Ilaahay Tacaalaa ka baryay inuu reer Makkah ka indha tiro kana dhega tiro khabarkiisa, si uu si kedis ah beledkooda ugu dul tago, wuxuuna yiri: **"Allaahumma khuthi al cuyuuna wa al akhbaara can Qurayshin xattaa nabghattuhaa fii bilaadihaa."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Ilaahayow, Quraysh indhohooda iyo akhbaartaba ka qaad inaan usoo soconno si aan beledkooda si kedis ah ugu dul tagno." Ilaahayna waa ka yeelay. Markaasaa nin asxaabtiisa ka mid ah, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaa wuxuu warqad u dhigay reer Makkah, isagoo u sheegaya inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, soo hayo, ayaguna ayan awood u lahayn inay iska celiyaan ciidankiisa. Ninkaasu wuxuu warqadda ugu dhiibay haweeney Makkah u socta, wuxuuna ku siiyay lacag ijaarkeeda ah. Markaasuu Sayyidinaa Jibriil, Calayhissalaamu, arrinkaas Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u sheegay. Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ka daba diray rag asxaabtiisa ka mid ah inay warqaddaas kasoo qaadaan, ayna ku gaari doonaan meesha la yiraahdo al Khulayqah. Nabigu, Sallaa Alaahu Calayhi Wasallam, wuxuu asxaabtiisaas ku amray in hadday haweentaasu warqadda u dhiibto ay ka qaataan, ayadan iska daayaan, ayna ka horwareegaan inay meeshay u socotay aado, hadday u diidana ay dilaan, kaddibna ay warqadda kasoo qaataan. Markay meeshuu Nabigu, Sallaa

Allaahu Calayhi Wasallam, u magacaabay uga daba tageen, ayay inkirtay inay warqad siddo, markaasuu Calii bin Abii Dhaalib, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo raggaas ka mid ahaa, wuxuu ku yiri: "Ilaahay ayaan ku dhaartay inaan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, been loo sheegin, annagana aan been naloo sheegin, ee ama warqadda ayaad soo bixineysaa ama dharka ayaan kaa dhigaynnaa." Markay aragtay siday uga dhab tahay, ayay waxay tiri: "iga sii jeeso." Markaasuu kasii jeestay. Markaasey intay timaha madexeeda furfurtay ay dhexdooda warqaddii kasoo bixisay. Markay warqadda ka qaateenna jidkeeda ayay ka wareegeen. Markii warqadda Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, loo keenay, wuxuu u yeeray ninkii dhigay oo intuu warqadda tusay ayuu wuxuu weydiiyay inuu isagu dhigay iyo waxa ku xambaaray. Markuu ninku qirtay, sheegeyna waxa ku xambaaray, ayuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, sheegay inuu ninkaasi runta sheegay. Markaasu Cumar, Allaha raalli ka noqdee, wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, i daa aan qoorta ka gooyee, isagoo uu ninku munaafaq noqday." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Innahu qad shahida Badran"** , oo macneheedu yahay: "Maya, maxaa yeelay wuxuu goob joog ka ahaa oo ka qayb galay duullaanka Badr." Culummadu, ayna ka mid yihiin Maalik iyo Axmad, waxay yiraahdeen inay sababtuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Cumar ugu diiday inuu dilo ay ahayd inuu ninkaasi Badr ka qayb galay , ayanna ahayn muslinnimadiisa. Sidaas ayay waxay yiraahdeen in waxa jaasuuska dilidda ka ka reebi kara ay tahay inuu Badr ka qayb galay, sidaas daraadeedna qofkii aan Badr ka qayb gellin ay tahay in la dilo. Zamankaanna ma noola qof Badr ka qayb galay . Ninkaas ayuu Ilaahay Tacaalaa kusoo dejiyay Aayadaha kow ilaa saddex ee Suuratu Al Mumtaxinah, kana bilaabanaya: **"Yaa ayyuhaa allathiina aamanuu laa tattakhithuu caduwwii wa caduwwakum awliyaa'a**(1)**"**, oo macneheedu yahay: "Kuwa xaqqa rumeeyow, ha ka dhigannina cadawgeyga iyo cadawgiinnaba -oo ah gaalada- sokeeye(1)." Taasi waa markuu jaasuusku muslin yahay. Hadduuse jaasuusku gaal yahay labo iskuma khilaafsana inay diliddiisu waajib tahay, ayadoo uu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, jaasuus gaal ah dilay. Wuxuu Al Bukhaarii Xadiithkiisa saddex kun iyo kow iyo konton Salamah bin Al Akwac ka wariyay inuu aabihiis yiri: "Waxaa Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo safar ku jira -waana duullaanka Hawaazin ee kan Makkah ku xigay- u yimid nin gaal ah. Markaasuu asxaabtiisa la fariistay oo uu la sheekeystay, kaddibna uu baxsaday. Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Adhlubuuhu wa aqtuluuhu"**, oo macnehiisu yahay: "Raadiya oo ka daba taga, kaddibna dila." Markaasaan dilay, wuxuu sitayna la i siiyay -waana faraskiisa, iyo wuxuu wataybay." Waxaa kaloo Xadiithka wariyay Muslim, Abuu Daauud iyo ghayrkoodba. Al Bukhaarii wuxuu kaloo Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka wariyay inuu yiri: **"Iyyaakum wa al thanna, fa inna al thanna akthabu al xadiithi, wa laa taxassasuu, wa laa tajassasuu."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "iska ilaaliya malada, maxaa yeelay maladu waa warka ugu xun, hana is baarina, hana is

jaasuusina." Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu caddeeyey inuusan jaasuusku mu'min ahayn, wuxuuna yiri: **"Yaa macshara man aslama bi lisaanihi wa lam yafid al iimaanu ilaa qalbihi! Laa tu'thuu al muslimiina, wa laa tattabicuu cawraatihim. Fa innahu man yattabic cawrata akhiihi al muslimi, yattabici Allaahu cawratuhu. Wa man yattabici Allaahu cawratuhu yafdaxuhu wa law fii jawfi raxlihi."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Dadkiinna carrabkooda ka islaamayow, iimaankuna uusan qalbigooda gelinow! Muslimiinta ha dhibina, sirtoodana ha raadraacina oo goobina, oo kan sirta walaalkiisa muslinka ah raad raaca, si uu u kashifo si dhibaato loogu gaarsiiyo, Ilaahay ayaa iasguna sirtiisa raad raaca. Qofkuu Ilaahay sirtiisa raad raacana, wuu fadeexeynaa, xattaa gurigiisa dhexdiisa." Waxaa wariyay Al Tarmathii iyo Ibnu Maajah.

Abuu Al Farj bin Al Jawziyyi wuxuu kitaabkiisa Bustaanu Al Waacithiina wa Riyyaadu Al Ssaamiciina, laguna daabacay Daaru Al Manaari ee Al Qaahirah bogga laba boqol afar iyo saddon ku wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"man mashaa fii ifshaa'i caybin aw kashfi cawratin li muslimin kaana awwalu khudhwatin yakhdhuuhaa yadacuhaa Allaahu fii al nnaari, wa kashafa Allaahu cawratuhu yawma al qiyaamati calaa ru'uusi al ash-haadi thumma yu'maru bihi ilaa al nnaari."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "qofka u dhaqaaqa inuu faafiyo ceebta ama kashafo oo muujiyo cawrada iyo wuxuu qarsanyo qof muslin ah, tillaabada ugu horreysa oo uu ku tillaabsado maalinta qiyaame wuxuu Ilaahay ku gelinayaa naarta, Ilaahayna wuxuu u kashifayaa oo daboolka ka qaadayaa cawraadkiisa iyo wuxuu qarsanayay maalinta qiyaame inta dad oo maalintaas maxsharka goob joogga ka ah, kaddibna waxaa la amrayaa in naarta la geliyo."

Khayaanidda Soomaaliya

Waxaan goobjoog ahaa markuu Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre, Allaha u naxariistee, waraaqaha aqoonsiga ka qabanayey Danjirihii u dambeeyey ee mareykanka, magaciisuna ahaa Bishop. Markaas anigu waxaan ahay Agaasimaha Guud ee Agaasinka Guud ee Yurub iyo Ameerika ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Soomaaliya. Waxaa kaloo goob joog ahaa Danjire Axmad Maxammad Aadan "Qaybe", oo dhulbahante u dhashay, oo markaas ah Wasiirka Arrimaha Dibadda ee Soomaaliya. Waxaa kaloo ayaguna goob joog ahaa Xoghayaha Guud ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Soomaaliya Al Xaajji Doktoor Cabdu Allaahi Xaaji Cabdu Al Rraxmaan oo uu awoowe u yahay Sayyid Maxammad Cabdulle Xasan, kaddibna noqday Wasiirka Arrimaha Dibadda. Waxaa kaloo ayaguna goob joog ahaa wiil uu Madaxweynuhu dhalay oo isaga xoghaye u ahaa, iyo nin ka socday Waaxda Arrimaha Dibadda ee Madaxtooyada iyo nin ka socday Waaxda Habmaamuuska ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Soomaaliya. Intaan Danjirahaas Madaxweynaha loo soo gelin, ayuu wuxuu Madaxweynuhu annaga nagu yiri: "Waan ogahay sababta midkaan loo soo diraye soo geliya."

Danjirahaas iyo gargaarayaalkiisaba, sida ninka wakiilka uga ah Soomaaliya Wasaaradda Gaashaandhigga mareykanka ee Pentagon, ninka u qaabilsan nabadgelyada safaaraddooda, ninka u qaabilsan USAID oo yiraahda gargaar ayaan bixinnaa, iyo midka u qaabilsan USIS oo wardoonka ku leg leh, intaasba isla mar ayaa laga soo beddelay Safaraadda mareykanka ee Liberia.
Shaqaalahaas middoodd waxayba ahayd haweenta Danjire Bishop.
Wargeysyada adduunkuna waxay qoreen in dagaalka sokeeyey ee lagu hoobtay ee ka dhacay dalkaas Liberia uu ka dambeeyey Danjirahaas maraykanka Bishop iyo ciidankiisa. Dadka dalkaas oo qaxootiga noqday waxay qayb wayn ahaayeen muslimiin. Markaasuu marka loo soo geliyay ayuu Madaxweynuhu wuxuu ilaa labaatan daqiiqo ka wareysanayey, xaaladda Liberia, iyo madaxdooda oo uu mid mid u magacaabay. Markaas waxay ahayd bisha Oktoobar ee kun iyo sagaal boqol iyo sideed iyo sagaashan. Xarbiga Soomaaliyana wuxuu bilowday saddex bilood kaddib, bisha Janaayo ee kun iyo sagaal boqol iyo sagaashanka .. Kuwa kuwaas gargaar iyo hiil weydiisanaya way sirmeen waxayna la mid yihiin kuwa Naarta Jahannama ku jira oo markay yiraahdaan ha nala waraabiyo, biyo kulul oo karkaraya oo xiidmaha jara la cabsiiyo, wajigana ka shiila.

Khayaanidda Falashiin

Waxa ka socda Falasdhiin, oo afar ama ka badan malyuun oo falasdhiniyyiinna ah loogu diiday inay dalkooda dib ugu noqdaan, kuwa degganna laga soo saarayo si xoog ah, ama guryohooda oo lacag badan looga gadanayo, ujeedooyinka ay dawladaha krishtaanku ka leeyihiin waxaa ka mid ah inayan Carabta Muslimiinta ahi tarmin iyo inay ayagu qabsadaan magaalada Muqaddaska ah ee Quddus, ayagoo aan dagaal toos ah u gelin oo aan ciidammo gayn. Waxay rabaan inay ku galaan ayagoo is huwinaya magaca heshiisiinta yuhuudda iyo muslimiinta, ama xiranba dharka Qarammada Midoobay. Miisaaniyadda Hay'adda la yiraahdo United Nations Agency for the Palestinian Refugees waxaa boqolkiiba in la mid sideetan ama ka badan bixisa Dawladda Mareykanka, markay doonaanna way joojinayaan. Waxay doonayaa inay Quddus ku galaan ayagoo labbisan dharka ciidammada heshiisiinta, ayagoo leh waxaan kala dhex geleynnaa yuhuudda iyo Carabta, oo ay sidaas ciidammadooda ku geliyaan, ayagoo uusan ninna uga dhiman, kaddibna ayba fara maroorsadaan. Waxay kaloo doonayaa inay Masjidu Al Aqsaa kaniisad ka dhigaan oo ay krishto suraan, halkaasna, markay ku xoogeystaan, ay Makkah Al Mukarramah iyo Al Madiinah Al Munawwarah uga duulaan, Kacbadana ay dumiyaan, siday hadda ka horba isugu dayeen, ayse ku khasaareen. Madaxda Carabtuna ma mooga waxay dawladaha krishtaanka ahi abaabulayaan, ayaguna qorshe la'aan ma aha, Ilaahayna, Tabaaraka wa Tacaalaa, muslimiinta ayuu la jiraa. Tan Ilaahay ayayna noqoneysaa!

Khayaanidda Bosniya

Sanadka kun iyo sagaal boqol iyo kow iyo sagaashanka waxaan ku noolaa magaalada Vienna, caasimadda dalka Austria, anigoo ahaa Danjiraha Dawladaha Jaamacadda Carabta ee Qarammada Midoobey. Markuu dagaalka Bosniya bilowday qaxooti badan ayaa Austriya iyo Majar soo galay. Xoghayaha Jaamacadda Dawladaha Carabtu wuxuu ergay ahaan iigu dirsaday inaan wada hadallo la yeesho Dawladda Majar, oo Dawladaha Carabta maal weydiisatay ay ku xannaaneyso qaxootigaas muslimka ah oo Bosniya uga yimid, aanna xeryaha tago dadka lagu hayo oo qaxootiga laftooda wareysto. Warbixintaan ugu qorayna waxaa kusoo baxay Qaraar Jaamacadda Dawladaha Carabta , oo lagu gaaray heer Wasiir Arrimo dibadeed. Wargeysyada Yurub waxay wax badan wariyeen inay sababta dagaalkaas muslimiinta lagu laynayo ay tahay inayan dooneyn inay Yurub ka dhisnaato oo ka jirto dawlad muslin ah. Madaxda sidaas yiri waxaa ka mid ahaa Wasiirka Koowaad ee lngiriiska iyo Madaxa Kanisadda Rooma. Magaaladaan degganahay kama foga xuduudda Bosniya, markaasey labada dhinacda oo Bosniya ku dagaallamaya, markay u baahan yihiin inay hub soo gataan, ama daawo ama badeecado kaleba, waxay yimaadaan Austriya. Halkaas ayaan ama Xafiiskeyga ama Masjidka waxaan kula kulmay rag ka mid ahaa madaxda dagaalyahanka Bosniya. Waxyaalkay noo sheegeen waxaa ka mid ahaa, aanna sir ahayn oo la wada ogaa, inay dawldaha krishtaanka ahi maalin walba hubka serbiyiinta dayuurado ugu gayn jireen. Waxay kaloo yiraahdeen: "Maalin walba waxaa timaadda ugu yaraan dayuurad weyn oo dalalka gaalada ka timaadda, ayna la socdaan wadaaddo krishtaan ah, oo cunno iyo dhar iyo kitubbadooda sita. Markaasay caruurta agoonta ah ee Muslimiinta la laayey, xeryahana ku jira ayay kutubbadood u qaybiyaan, ayna ku dadaalaan inay krishtaamiyaan. Waxay caruurta baraan heeso lagu ammaanayo Ciise, waxayna siiyaan nacnac iyo wax macaan oo Ciise ku kor masawiran yahay, kuna dhigan yahay". Waxay kaloo yiraahdeen: "Markay ergooyinka Qarammada Midoobay noogu yimaadaan xarumaha ay ciidammadeennu fadhiyaan, ayagoo leh waxaan abuubulaynna heshiis labada dhinac dhex mara, markay naga gaddoomaan, oo ay nus saacad naga sii maqan yihiin, waxaa na garaaca dayuuradaha serbiyiinta krishtaanka ah, waxaana xarumeheenna, oo sir ahaa, u sheega ergooyinka Qarammada Midoobay. Kaddib waan barannay sirtooda, markaasaan markay naga gaddoomaan guurnaa oo aan degnaa meel ayan ogayn. Markaasey markay dayuuraduhu yimaadaan waxay duqeeyaan meel cidla ah."

Xeryaha qaxootiga Qarammada Midoobay

Markay gaaladu dal islaan ah weerarto, raggu wuxuu u kacayaa la dagaallankooda. Inta dagaalku socdo ayaa waxaa imaanaya Hay'adaha Qarammada Midoobay, sida midda qaxootiga u qaabilsan. Waxaa kaloo yimaada ururrada isku sheegay inay dawladaha ka madax bannaan yihiin sida

Care, Save the Children Fund, World Vision, Doctors without borders, iyo waxa la wada midka ah. Markaase waxaa qaataan caruurta iyo haweenka oo ay xeryo xun intay u dhisaan halkaas ku silciyaan, kuna saxariiriyaan, sidaan ku aragnay Soomaaliya, Afganistaan, Bosniya, Kosovo, Chechniya, Falasdhiin iyo kuwa la midka ahba. Ujeedada gaaladu waxaa weeye inuu qoysku dumo, ragga la laayo, inta noolna ayan haweenkooda la nooleyn, oo ayan sidaas caruur ku dhalin. Ujeedooyinka xaryaha qaxootiga waxaa ka mid ah hor istaagidda taranka muslimiinta, iyo silcinta intooda tabarta yar oo ay gaajo iyo cudurro u le'daan. Gaaladu caruur badan ma dhalaan, oo waa bakhiillo, oo ma doonayaan inay cunnada la qaybsadaan oo la cunaan. Markay caruurtoodu sideed iyo tban gaaraanna wiil iyo gabar tuu doono ha ahaadaane guryohooda way ka saaraan oo waxay ku yiraahdaan inay waxay ku noolaan lahaayeen shaqaystaan, ayna guryo ijaartaan cunnadoodana ayagu gataan. Muslimiintuna si xoog ayay u tarmeysaa. Qorshohoodu waa taas ka hortegiddeeda. Xeryaha qaxootiga caruurta gaartana waxay u dhintaan, in badani, gaajo, cudur iyo silic. Qarammada Midoobey waxaa sheegtay sanadka kun iyo sagaal boqol iyo labo iyo sagaashanka inay caruurta Soomaaliya oo shan sano aan gaarin ay ka dhinteen lixdiiba mid ama shantiiba mid, taasoo dhacday marka horeba oo ay musiibadu Soomaaliya ku habsatay. Waxaa sidaas ku le'day ayay Qarammada Midoobey yiraahdeen hal fac oo Soomaali ah. Caruurtuna waa mustaqbalka dal kasta. Dawladaha krishtaanka ahi waxay doonayaan inay dadka muslimiinta ah, sida Soomaalida, Falasdhiiniyiinta, Bosniyiinta iyo kuwa la mid ahba inay dalkooda ka saaraan, ayaguna ay dalka ka dhaxlaan oo kala wareegaan. Sidoo kale waxayan oggolayn in qof cilmi leh ama diinta yaqaanna ama oran karaba anigaa arligaan iska leh kusoo noqdo, hadduu kusoo noqdana waa la dilayaa, oo siday soomaalidu tiraahdo mas madaxa ayaa laga dilaa.

Saacaddu kici mayso jeer uu Ciise dilo Dajjaalka, nuurkuna ka adkaado gudcurka

Wuxuu Muslim wariyay (waana Xadiithkiisa toddoba kun laba boqol iyo toddoba) inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Laa taquumu Al Ssaacato xattaa yanzila al ruumu bi Al Acmaaqi aw bi Daabiqa, fa yakhruju ilayhim jayshun mina Al Madiinati min khiyaari ahli al ardi. Fa ithaa tasaaffuu qaalat al rruumu: "Khalluu baynanaa wa bayna allathiina sabaw minnaa nuqaatiluhum." Fa yaquulu al muslimuuna: "Wa Allaahi laa nukhallii baynakum wa bayna ikhwaaninaa." Fa yuqaatiluunahum. Fa yahzamu thulthun, laa yatuubu Allaahu calayhim abadan. Wa yuqtalu thulthun, hum afdaalu al sh-shuhadaa'i cinda Allaahi. Wa yaftatixu al th-thulthu, laa yuftanuuna abadan. Fa yaftaxuuna Al Qisdhandhiiniyyah. Fa baynamaa yaqtasimuuna al ghanaa'ima, qad callaquu suyuufahum bi al zaytuuni ith saaxa fiihim al shaydhaanu: "anna Al Masiixa qad khaalafakum fii ahliikum." Fa yakhrujuuna, wa thaaka baadhilun. Fa ithaa jaa'aw Al Sh-shaama kharaja. Fa baynamaa yacidduuna li**

al qitaali, wa yusaawwuuna al sufuufa ith uqiimati Al Ssalaatu. Fa nazala Ciisaa ibnu Maryama, fa ammahum. Fa ithaa ra'aahu caduwwa Allaahi thaaba kamaa yathuubu al milxu fii al maa'i. Fa law tarakahu la anthaaba xatta yahlika. Walaakin yaqtuluhu Allaahu bi yadihi. Fa yuriihim damahu fii xarbatihi." Xadiithka , oo ay ayaguna wariyeen Al Xaakim (4/482) iyo Al Hindi oo ku wariyay Kanzu Al Cummaali, macnihiisu waxaa weeye: "Saacaddu kici mayso jeer ay roomaanku kusoo degaan (waana ciidammadooda oo dagaalka muslimiinta usoo kacay) Al Acmaaqu ama Daabiqa, (oo ah laba meelood oo u dhow magaalada Xalab oo Dimishiq waqooyiga ka xigtah, badda cadna aan ka fogayn, ee arliga Siiriya). Markaasaa waxaa ciidammadaas (gaalada) usoo baxaya ciidan ka yimid Al Madiinah, kana kooban oo ka mid ah kuwa ugu khayr badan arliga waagaas. Markaasey markay labada ciidan dagaal u saftaan, ayay roomaanku waxay leeyihhiin: "isaga kaaya dhex baxa annaga iyo kuwa dadkeenna soo qafaashay waan la dagaallameynaaye." Markaasey muslimiintu waxay leeyihiin: "wa Allaahi inaanan isaga kiin dhex baxayn adinka iyo walaaleheen." Markaasaa la dagaallamayaa. Markaasaa dalool (oo ah meel marka ciidanka muslimiinta saddex meelood loo qaybiyo) baqaneysaa oo ay dhabarka jeedineysaa, kuwaasoo uusan Ilaahay tawbaddooda ebedkiis aqbalayn. Daloolna waa la dilayaa, kuwaasoo ah kuwa ugu sarreeya shuhadaada Ilaahay agtiisa. Daloolka soo haray ayaa gaalada jebinaya oo ka adkaanaya, kuwaasoo aan ebedkood dambe la fitneyneyn. Markaas kaddib ayaa waxay furanayaan Qisdhandhiiniyyah (oo ah magaalada hadda la yiraahdo Istanbuul oo ku taalla dalka Turkiga, gaaladuna ay qabsan doonaan mustaqbalka soo socda).

Markaasey ayagoo qaybsanaya ghanaa'imka, seefohooduna ay geedaha zaytuunka u suran yihiin (waana geedka Quraanka Kariimka ah dhawr meelood uga xusan, lagana miirto saliidda cunnada lagu karsado oo qiimaha badan, aanna ahayn geedka ay soomaalidu zaytuun u taqaanno, kanoo afka Carabiga lagu yiraahdo jawwaafah), ayaa waxaa ka dhex qayliyay shaydhaan oo yiri: "War hooy! Waxaa hubaal ah inuu Al Masiixu -waa Dajaalkee, lacnadda Ilaahay korkiisa ga ahaatee-uu ehelkiinna -waana haweenka iyo caruurtooda ay Al Madiinah uga soo tageen- idiin daba maray." Markaasey soo baxayaan. Shaydhaanku wuxuu yirina waa been. Markaasey markay Shaam yimaadaan (waana caasimadda Dimishiq ah, oo Shaam magaaladaas iyo dalkaba waa la yiraahdaa), ayuu Dajjaalku soo baxayaa. Markaasey ayagoo dagaalka isu diyaarinaya, safafkoodana simaya, ayaa waxaa la iqaamay Salaadda. Markaasaa waxaa soo deganaya Ciise ina Maryama. Markaasuu Salaadda imaam ugu noqonayaa oo tujinayaa. Markaasuu markuu cadawga Ilaahay Dajjaalku Ciise arko ayuu dhalaalayaa, siday milixdu biyaha ugu dhex dhalaasho oo kale. Markaas hadday iska dayn lahaayeen, wuu wada dhalaali lahaa, ilaa uu ka dhinto. Laakiin wuxuu Ilaahay ku dilayaa gacantiisa (waa gacanta Ciisee). Markaasuu wuxuu Ciise muslimiinta tusayaa dhiggiisa oo ku yaalla warankiisa. "

Carabnimada Ciise, Calayhissalaamu

Ciise, Calayhissalaamu, markuu soo dego iyo inta ka dambeysaba ma aha Nabi, ayadoo uusan Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Nabi ka dambeyn, uuna ahaa kan Anbiyada lagu gunaanaday. Ciise markaan waa nin muslim ah oo suuban, kuna taagan shareecada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Hadday marka sidaas ay tahay, uuna Ciise Carabta muslimiinta ah oo Shaam iyo Jaziirada Carabta deggan, afartan sano imaam iyo hoggaamiye u ahaanayo, shareecada Nabi Muxammadna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ay afka Carabiga ku dhigantahay, ayadoo ay Quraanka Kariimka ah iyo Sunnaduba af Carabi ku dhigan yihiin, uuna imaam u yahay Carabta, waa inuu isaguna Carab yahay, afkiisuna afka Carabiga yahay. Waxaaba Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Aayadda afaraad ee Suuratu Ibraahiim ku yiri: **"Wa maa arsalnaa min Rasuulin illaa bi lisaani qawmihi li yubayyina lahum**(4)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Rasuulna kuma aanan dirin waxaan ahayn afka dadkiisa si uu ugu caddeeyo (waxaa loo soo dejiyay)(4)." Maryama bintu Cimraana, Nabi Ciise hooyadiis, Calayissalaamu, waxay ku abtirsataa Nabi Isxaaq ina Nabi Ibraahiim, Calayhimussalaamu. Carabtuna waxay ku abtirsataa Nabi Ismaaciil ina Nabi Ibraahiim, Calayhimussalaamo, oo ah Isxaaq walaalkiis ay isku aabe yihiin. Ma dhici kartaa, marka, inay laba nin oo walaalo isku aabe ah ay laba qabiil kala yihiin? Jawaabtuna waa maya. Runtana Rabbi ayaa og.

Yaraanta Carabta zamankaas

Imaam Muslim Xadiithkiisa dheer ee uu ka wariyay Al Nuwaasu bin Simcaanu ee ku saabsan Dajjaalka, wuxuu ku yiri in markuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, arrinkaan uga warramayey, markuu meel dhexe marayo, ay saxaabiyada magaceedu yahay Ummu Shariik Ghaziyyah ibnata Al Caskar Al Qurashiyyah ay tiri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, maalintaas Carabi meeday?" Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: "Hum qaliilun, wa julluhum bi Bayti Al Maqdisi, wa imaamuhum rajulun saalixun.' Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Maalintaas, oo ah markuu Dajjaalku soo baxayo Ciisana uu dilayo, Carabtu way yaryihiin tiro ahaan, intooda badanna waxay joogaan Baytul Maqdis, imaamkooduna, waana imaamka Salaaddooda iyo hogaamiyohoodaba, waa nin suuban."

Kharaabidda hubka, isgaarsiinta iyo gaadiidka zamankaan

Zamankaas uu Ciise Samada kasoo degayo oo uu Dajjaalka dilayo, sida Axaadiithta aan soo aragnay iyo kuwa kaloo badanba na tusayaan, waxay wada tilmaamayaan inuu hubka zamankaan aan joogno, sida qoriga ama buntukha, bastooladda, madfaca, gantaallada, tankiyada, bambooyinka caadiga ah iyo kuwa atoomikadaba, dayuuradaha wax duqeeya, maraakiibta

dagaalka iyo wixii la mid ahba, uu faadayo oo uu wada kharaabayo. Taas ayaana u sabab ah inay ciidammada zamankaas, sidaan Axaadiithta kusoo aragna, ay seefo ku dagaalayaan, Ciisena uu Daijaalka waran ku dilayo, uu isha u fiyow ka gelinayo .. Runtana Rabbi ayaa og. Tawfiiqdana Allaha na waafajiyo. Sidoo kale, waxaa isaguna kharaabaya oo aan la adeegsan doonin gaadiidka zamankaan, sidaa baabuurta, dayuuradaha, treennada, iyo waxa la midka ahba, ayadoo ay Axaadiithtaas saxiixeynka ku sugan ay sheegayaan in waagaas gaadiid ahaan fardo iyo daabbado kale oo xoolo ah la fuuli doono. Sidoo kale waxaa u kharaabaya oo aan la isticmaali doonin qalabka is gaarsiinta, sida taleefoonka, taarka, fax, radiyo, televisioonka kompiuutar iyo wixii la mid ahba, oo sidaan son aragnay markuu shaydhaan kala dhex qeyliyay ayagoo Istanbuul jooga inuu Daijaalku caruurtooda u daba maray, taasoona been ah, taleefoon uma ay an son dirin Al Madiinah Al Munawwarah, ee intay fardohooda fuuleen ayay xaggeeda usoo kicitimeen.
Sidaas ayuu kitaabka Ciise ina Maryama ku dhammaaday wa al xamdu li Allaahi Rabbi al caalamiina, wa Sallaa Allaahu calaa Sayyidinaa wa Mawlaanaa Muxammadin wa calaa Aalihi wa saxbihi ajmaciina wa man tabicahum bi ixsaanin ilaa Yawmi Al Diini wa sallim tasliiman kathiiran.
Al Qasdhalaanii wuxuu yiri: "Wuxuu ibnu Caadil ku xusay tafsiirkiisa inuu Jibriil, Calayhissalaamu, Ciisana kusoo degay toban goor."

(Labo iyo labaatan) Nabi Ilyaas

Nabi Ilyaas, Calayhissalaamu, oo loo diray dadka dega Bacalbak ee Lubnaan iyo Siiriya**.** Ibnu Kathiir wuxuu kitaabkiisa Qisasu Al Anbiyaa'i ku yiri: "waa Ilyaas Al Nashbii ibnu Yaasiin bin Finxaas bin Al Cayzaar bin Haaruun (Nabi Haaruun). Waxaa kaloo la yiri waa Ilyaas bin Al Caazir bin Al Cayzaar bin Haaruun bin Cimraana. Waxaana loo diray Bacalbak ee galbeedka Dimishiq, oo markaasuu ugu yeeray inay Ilaahay keli ah caabudaan oo ay ka tagaan sanamkay caabudi jireen oo la oran jiray Baclan, siduu Ilaahay Tacaalaa noogu sheegay boqol saddex iyo labaatan ilaa boqol lix iyo labaatan ee Suuratu Al Ssaaffaat: **"Wa inna Ilyaasa la mina Al Mursaliina**(123)**Ith qaala li qawmihi alaa tattaquuna**(124)**A tadcuuna baclan wa tatharuuna Axsana al khaaliqiina**(125) **Allaaha Rabbakum wa Rabba aa'baa'ikumu al awwaliina(126)."** Aayadaha macnohoodu waxaa weeye: "Ilyaasna wuxuu ka mid ahaa Rususha(123)Wuxuuna qawmkiisa ku yiri: "miyaydnaan Ilaahay ka dhawrsanayn?"(124)Ma waxaad caabudaysaan Baclan oo aad ka tegeysaan kan ugu fiican inta la yiraahdo waxbay abuuraan, Ilaahay keli ah ayaana wax abuura?"(125)Ilaahay waa adinka Rabbigiin iyo Rabbiga aabayaalkiinnii horeba(126)." Markaasay dadkiisu diideen ayna damceen inay dilaanba.
Markaasuu god buur ku yaalla ku cararay oo uga dhuuntay.
Gobolka Balcalbak oo maanta ka tirsan Suuriya iyo Lubnaan waxaaba sidaas loogu bixiyay ayagoo waagii hore halkaas sanamka Baclan lagu caabudi jiray.
Ilyaas qabrigiisu wuxuu ku yaalla meel aan ka fogayn degmada Al Karak oo boqortooyada Urdun, aanna ka fogayn qabriga Nuux, siduu ugu wariyay juzka koowaad ee kitaabkiisa Masaaliku al absaari fii mamaaliki ak amsaari ibnu Al

Fadl Al Cumarii, Ibnu Fadlu Allaahi Axmad bin Yaxyaa bin Fadku Allaahi Al Cumarii, oo dhashay sanadka toddoba boqol ee Hijriga lana oofsaday sanadka Hijriga ah ee toddoba boqol iyo sagaal iyo afartanka, una dhiganta kun saddex boqol iyo kow ilaa kun saddex boqol sagaalk iyo afartan miilaadiga ah bogga laba boqol shan iyo toban.

(Saddex iyo labaatan) Nabi Al-Yasac

Nabi Al-Yasac, Calayhissalaamu. Ibnu Kathiir wuxuu yiri: "Muxammad bin Isxaaq wuxuu yiri: "magaciisu waa Al Yasac bin Akh-dhuub, wuxuuna ku xigay Nabi Ilyaas, uuna ku taagnaa shareecadiisa ilaa uu Ilaahay ka oofsaday." Ibnu Casaakir wuxuu kitaabkiisa taariikhda ku yiri: "Al Yasac waa Al Asbaadhu bin Cadiyyi bin Shuutlam bin Afraayiim bin Yuusuf bin Yacquub bin Isxaaq bin Ibraahiim Al Khaliil. Waxaana la yiri inuu ahaa ina adeerka Nabi Ilyaas Calayhumussalaamu."

(Afar iyo labaatan) Nabi Yuunus

Nabi Yuunus bin Mattaa, Calayhissalaamu, waxaa loo diray dadka degi jiray Niinawaa ee waqooyiga Ciraaq oo boqol kun oo qof tiro ahaan ka badnaa. Waxaa dadka degganaa Niinaawaa oo loo diray ka mid ahaa Caddaas oo Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, hortiisa ku islaamay oo raacay markuu Al Dhaa'if tegey. Al Qurdhubii wuxuu tafsiirkiisa ku yiri: "dadka loo diray waxay caabudi jireen asnaam, markaasuu caabudidda Ilaahay ugu yeeray iyo diinta islaamka, uuna ugu yeerayay sagaal sano. Markaasay ka diideen, isaguna uu ka quustay inay islaamaan. Markaasaa loo waxyooday inuu u sheego inay cathaabi kusoo degi doonto saddex maalmood dabadeed. Markaasuu u sheegay. Markaasay waxay yiraahdeen: "isagu waa nin aan been sheegin ee fiiriya oo hadduu idinla joogo oo uu dhexdiinna ku sugnaado waxba idinku dhici mayaan, hadduuse idinka guuro oo idinka tago markaas cathaabta ayaa soo deganaysa oo shaki kuma jiro." Markaasay markay habeen noqotay uu Yuunus jiscin qaatay, uuna dhexdooda ka baxay oo ka guuray. Markaasay markay waabariisteen oo ay waayeen, ayay tawbad keeneen, ayna Ilaahay baryeen, ayna soo wada bannaan bexeen ayagoo dhar duug ah wada xiran, ayna caruurta iyo hooyooyinkood kala geeyeen si ay isugu booyaan, oo loo wada booyo kuwa dadka ah iyo xoolahaba, waxay xaq darro ku qaateenna ay dadkii lahaa u celiyeen. Ibnu Cabbaas wuxuu yiri: "waxaa soo hoosaasisay daruur guduud ku jiro oo usoo dhowaatay ilaa ay kulaylkeeda garbahooda ka dareemeen. Markaasuu Ilaahay tawbaddooda aqbalay oo uu cathaabta ka joojiyay, waxayna ahaayeen ummadda keli ah oo tawbaddooda la aqbalay kaddib markay cathaabta indhohooda ku arkeen." Waa intaas warka Al Qurdhubii. Nabi Yuunus waxaa kaloo la yiraahdaa Thaa Al Nnuuni, siduu Al Nawawii ugu wariyay Tahthiicu Al Asmaa'i wa Al Lughaati. Nabi Yuunus idinka Ilaahay la'aantiis ayuu Niinawaa iyo deegaanka loo diray ka baxay markaasaa waxaa lagu xabbisay nimiri badeed calooshiisa. Nabi Yuunus wuxuu ku duugan yahay siduu Al Cumari u wariyay tuulada la yiraahdo

Xalxuula oo u dhexeysa Baytu Al Maqdis iyo magaalada Al Khaliilu ee arliga Falasdhiin, waxaana ka kor dhisan qubbad iyo dhismo, uuna Al Cumari sheegay inuu soo booqday bisha Thuu Al Xijjah ee sanadka toddoba boqol shan iyo afartan.

Tiirka shanaad waa rumaynta Maalinta Aakhiro

Qaybta shanaad ee iimaanka waa inaad rumaysid Maalinta Aakhiro in marka dadka oo idil uu dhinto, qabriga lagu wareysan doono, kaddibna uu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, dadka soo wada nooleyn doono, la soo wada shirin doono, oo markaas qof walba wixii uu ku hadlay iyo wixii uu falay intuu adduunkaan ku noolaa lagula xisaabtami doono, markaas kaddibna dadka laba daarood loo kala wadi doono, kuwaasoo kala ah Janno iyo Naar. Iyo inaad rumaysid waxa Maalintaas ku saabsan oo idil. Bani Aadan oo dhan meesha Maalintaas lagu shirin doono waa Baytu Al Maqdis ee dhulka Falasdhiin.

Tiirka lixaad waa rumaynta Qadarka, khayrkiisa iyo sharkiisaba.

Qaybta lixaad ee iimaanku waa inaad rumeysaa Qadarka, khayrkiisa iyo sharkiisaba.

Arkaanu Al Islaami/Tiirarka islaamka

Tirarka islaamku waa shan tiir sida ku cad Xadiithka Al Bukhaarii oo soo socda.
Al Bukhaarii wuxuu Cumar ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri**: "Al Islaamu an tash-hada an laa ilaaha illaa Allaahu wa anna Muxammadan Rasuulu Allaahi , Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wa tuqiima al ssalaata, wa tu'tii al zzakaata, wa tasuuma ramadaana, wa taxujja Al Bayta, ini istadhacta ilayhi sabiilan."**

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Islaamku waa

(Kow) inaad ka markhaati kacdaa inuusan jirin ilaah aan Ilaahay ahayn iyo inuu Nabi Muxammad, Rasuulka Ilaahay yahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.
(Laba) Inaad shanta salaadood oogtaa,
(Saddex) Inaad zakadana bixisaa.
(Afar) Inaad bisha ramadaanna soontaa.
(Shan) Inaad Baytkana u xajjidaa haddaad tegi kartid."

Sidaasuu noogu dhammaaday kitaabka arkaanu al iimaani wa al xamdu li Allaahi Rabbi al caalamiina wa Sallaa Allaahu calaa Sayyidinaa wa Mawlaanaa wa Shafiicanaa Muxammadin wa calaa Aalihi wa Saxbihi wa Sallam tasliiman kathiiran.

Dr. Xasanweli Sheekh Xuseen Cismaan wuxuu ku dashay Gaalkacyo degmadaasoo uu aabihiis qaalli ka ahaa, dayrtii la magac baxday Hoobaaq. Hoobaaq waa beel daaqsiin ah oo ka mid ah dooxada Golol, halkaasoo ay eedi ku kala gaartay labada qabiil ee Cumar Maxamuud iyo Sacad dayrtaas, eedaasoo bilaabatay 1943 socotayna ilaa 1944. Xasanweli wuxuu u dhashay Shiikhaal Looboge, oo ah Quraysh, ayagoo ah ubadka Abuu Bakar Al Ssddiiqu, Saaxiibka iyo ina adeerka iyo soddogga Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Looboge aabihiis Fiqi Cumar wuxuu ku noolaa Boqortooyada Harar siday u warisay tirada lix boqol iyo sagaal iyo afartan ee wargeyska dalka Sucuudiga kasoo baxa ee la yiraahdo Al Muslimuuna, soona baxay maalinta Jimce ee toddobada bisha Rabiicu al Awwal ee sanadka Hijriga ah ee kun iyo afar boqol iyo sideed iyo toban, una dhigantah kow iyo tobanka bisha Luulyo ee sanadka kun iyo sagaal boqol iyo toddoba iyo sagaashanka, boggiisa tobanaad. Yuusuf Cabdu Al Raxmaan Shiikh oo maqaaladaas qoray wuxuu ku yiri: "Kaddib markay saliibiyiinta krishtaanka ahi ay gacanta ku dhigeen Bayti Al Maqdis, dhammaadka qarniga shan iyo tobnaad ee Miilaadiga ah iyo dhammaadka kan shanaad ee Hijriga, ayna ku sugnaadeen Shaam, ayna gacanta ku dhigeen Khaliiju Al Caqabah ee ku dara Badda Cas, ayay krishtaanku waxay raadiyeen cid ay is gaashaanbuursadaan, oo Badda Cas xagga koofureed uga goysa. Markaasey waxay heleen xabshada krishtaanka ah oo ay markaas gaashaanbuur la noqdeen, ayna kula heshiiyeen inay iska kaashadaan la dagaallanka islaamka iyo muslimiintaba, kuna gaaray taas inay xabashadu kusoo duusho oo ay qabsato Boqortooyada Islaamka ee Harar, taasoo gogol dhig u noqoneysa ku duulidda Xijaaz iyo duminta Kacbada la Sharfay. Sidaas ayayna ku heshiiyeen. Markaasey xabashadu waxay kusoo duushay Harar, waxaana usoo baxay oo ka hortegey Al Shiikh Abaadir oo soomaalidu u taqaanno Fiqi Cumar, ahna aabaha dhalay Aw Qudhub. Markaasuu Amiir Cumar bin Shamsu Al Ddiin (oo ah Fiqi Cumar) si xun u jebiyay oo ka adkaaday. Markaasey xabshadu waxay ka gargaar iyo gurmad dalbeen gaashaanbuurtooda krishtaanka ah. Qaylo dhaankoodaas waxaa kasoo jawaabay Richard the Lion-heart oo ahaa boqorka ingiriiska, ahaana maareeyaha hawlaha ka socday bariga dhexe "Bariga Carabta". Richard wuxuu soo diray ciidammadiisa ka kooban burtuqiis iyo talyaani, si ay xabashada ugu gargaaraan. Ciidammadaani waxay gacanta ku dhigeen oo qabsadeen dekadaha ay Harar lahayd oo ah Zaylac iyo Barbara iyo Bulaxaar, kuwaanoo hadda ku yaalla gobolka waqooyi ee Jamhuuriyada Soomaaliya. Ciidammadaasu waxay soo gaareen ilaa dusha magaalada Harar. Markaasey Imaarada Makkah Al Mukarramah iyo Yaman ayay waxay Harar usoo direen ciidammo gurmad ah. Sidaas ayay ciidammada Islaamku uga adkaadeen kuwa krishtaanka ah, uusanna krishtaamiinta Shaam uga laaban hal askariba ha ahaadee, ayadoo dhammaantood lagu laayey inta u dhexeysa Harar iyo Muqdisho iyo Barbara. Muqdisho waxay Harar usoo dirtay gurmad ahaan fardo iyo hub." Xasanweli wuxuu 1970 ka qalin jebiyay Jaamacadda Bologna ee dalka Talyaaniga halkaasoo uu ku bartay takhtarnimada xoolaha. Kaddib wuxuu noqday macallin Dugsiga Sare ee Xasan Barsane ee Muqdisho,

Macallin Kulliyada Daawada Xoolaha ee Jaamacadda Qaranka Soomaaliyeed, Xildhibaan Golaha Shacbiga Qaranka ee Soomaaliya, Danjiraha Soomaaliya ee Dawlado Yurub ah, kaddibna wuxuu ku wareegay Jaamacadda Dawladaha Carabta, uuna noqday Danjireheeda Kenya, iyo Danjireheeda Qarammada Midoobay ee Vienna. Kaddib wuxuu soo degay USA, wuxuuna noqday Macallin Dugsiga Sare ee English High School ee Boston, Baare Shareecada Islaamka ee Islamic Legal Studies Program ee Harvard Law School ee Harvard University ee Cambridge. Siirada Ibnu Hishaam ayuu soomaali ku tarjumay 180 cajaloodna ku duubay. Kaddib wuxuu ilaa sideed sano ka ahaa imaam masjidyada xabsiyada ku yaalla gobolka Massachusetts oo ay Boston caasimadda u tahay ee dalka maraykanka, halkaasoo uu dadka xabbisan ku salaadana tujin jiray, barina jiray diinta islaamka, hortiisana ay ku islaameen khalqi badan oo rag iyo dumarba leh, uuna shahaadada xaqqa ah u mariyay, mahaddana Ilaahay ayaa iska leh.